GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA

اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور

Independent Constitutional Review
and Implementation Commission

# MAXDARQORAALKA

## CUTUBKA 1AAD:

## BAAQA JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

KULAMADA 12AAD, 13AAD, 14AAD IYO 15AAD


**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA
IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)


FEBRAAYO 2024

## Tusmo:

**Gogoldhig** ..... 5

**CUTUBKA 1AAD: BAAQA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA** ..... 6

**Kulanka 12aad:** ..... 6

Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe" ..... 6
Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf. ..... 6
Sen. Said Abdi Hussein: ..... 8
1) Sen. Zamzam Ibraahim Ali: ..... 10
2) Xil. Sahra Abdullahi Igal: ..... 10
3) Sen. Seredo Mohamed Hassan: ..... 10
4) Xil. Suhur Haji Ulusow: ..... 12
5) Xil. Abdirashid Mohamed Hidig: ..... 13
6) Xil. Guled Bihi Abdi: ..... 15
7) Xil. Zamzam Muhumed Omar: ..... 16
8) Xil. Axmed Cabdi Kooshin: ..... 19
9) Sen. Abdihakim Moallim Ahmed: ..... 21
10) Xil. Abdirisak Aadam Warsame "Xusul": ..... 23
11) Xil. Ifrah Mohamed Awad: ..... 25
12) Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed: ..... 26
13) Xil Zaynab Mohamed Amir: ..... 27
14) Xil. Ismail Eid Mohamed ..... 29
15) Xil. Salah Sharif Sayid Ali: ..... 31
16) Xil. Asha Kos Mohamud Omar: ..... 34
17) Xil. Mahdi Mohamed Gulaid: ..... 35
18) Xil. Adar Ali Mohamed: ..... 39
19) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan: ..... 40
20) Xil. Lul Ibrahim Omar: ..... 42
21) Xil. Ilyaas Sh. Axmed: ..... 43
22) Xil. Dahabo Susow Mohamud: ..... 46
23) Xil. Abdiqani Ismail Said. ..... 46
24) Xil. Nasro Mahdi Carraale ..... 47

**Kulanka 13aad:** ..... 49

Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow: ..... 49
1) Xil. Mahad Cabdalle Cawad: ..... 50
2) Xil. Mohamed Harun Abdillahi: ..... 52
3) Xil. Mohamed Adam Moalim Ali: ..... 54
4) Xil. Bashiir Abdi Mohamed Mohamud: ..... 55
5) Sen. Abdiweli Mohamed Ibrahim: ..... 56
6) Xil. Omar Ali Abdi ..... 57
7) Xil. Dahir Amin Jeesow: ..... 59

8) Xil. Abdirahman Mohamed Hussein: 60
9) Xil. Abdi Ibrahim Warsame Qowdhan: 62
10) Xil Sareda Mohamed Abdalle: 64
11) Xil. Mohamed Abukar Abdi: 65
12) Sen. Zamzam Dahir Mohamud: 67
13) Xil. Ahmed Osman Dirie: 68
14) Xil: Mohamed Muhumed Mohamed: 69
15) Xil. Hassan Abdi Ismail: 72
16) Sen. Mohamed Abdi Osman: 74
17) Xil. Faaiza Mohamed Jeyte: 75
18) Xil. Dr. Elmi Mohamud Nur: 76
19) Xil. Abdirisaq Abdullahi Moallim: 78
20) Xil. Dr. Mohamed Sheikh Ahmed Mohamed: 80
21) Xil. Adan Mohamed Ali: 83
22) Xil. Nur Ahmed Dirie: 84
23) Xil. Mohamud Abdirahman Omar: 86

**Kulanka 14aad: 88**

Xil. Sh. Adan Mohamed Nur “Madoobe” – Guddoomiyaha Golaha Shacabka 88
1) Sen. Saynab Ismail Mohamed: 88
2) Xil. Mohamed Abdi Mohamed: 90
3) Sen. Leila Ahmed Ismail 91
4) Xil. Sharif Sh. Ahmed: 92
5) Xil. Mohame Sheikh Noor Osman: 94
6) Sen. Fartun Abdulkadir Karamo: 96
7) Xil. Abdirisak Hagi Abdi: 98
8) Sen. Zamzam Abdullah Ahmed: 99
9) Xil. Abdirahman Abdishakuur Warsame. 101
10) Sen. Zamzam Ibrahim Ali: 104
11) Xil. Abdirashid Mohamed Duale: 104
12) Xil. Abdullahi Farah Mire: 106
13) Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu: 109
14) Sen. Deqa Hassan Hussein: 112
15) Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed 114
16) Xil. Sharif Mohamed Abdalla: 115
17) Sen. Ilyas Badal Gaboose: 117
18) Xil. Mohamed Adan Mohamed: 117
19) Xil Mohamed Kerow Mohamed: 119
20) Xil. Omar Yusuf Galadid: 121
21) Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud: 123
22) Xil. Mohamed Deeq Barre Omar: 125
23) Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud: 128
Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur “Madoobe” 130

**Kulanka 15aad:** 131
Xil. Sheikh Adan Mohamed Nur "Madoobe" – Guddoomiyaha Golaha Shacabka 131
Sen. Sareedo Mohamed Hassan: 131
Xil. Fowzia Yusuf H. Adan: 132
Xil. Mohamed Deeq Barre Omar: 132
1) Xil. Mohamud Abdulkadir Haji "Jeego": 133
2) Xil. Mohamed Abdilaahi Kayse: 134
3) Xil. Hassan Hurre Ugaas: 135
4) Xil. Mukhtar Mohamed Guled: 137
5) Sen. Seynab Ismail Mohamed: 141
6) Xil. Abdulasis Mohamed Mohamud QAMBI: 141
7) Xil. Mohamed Ali Hassan: 144
8) Xil. Yusuf Geele Ugaas: 146
9) Xil. Mohamed Adam Dini: 148
10) Sen. Prof. Dr. Osman Mohamud Mohamed: 150
11) Xil. Jama Mohamed Askar: 153
12) Xil. Yasin Abdullahi Mohamud: 156
13) Xil. Omar Ali Isak "Balash": 157
14) Xil. Aweys Mohamed Omar: 159
15) Xil. Abdiqaadir Omar Moalim: 161
16) Xil. Abdullahi Hassan Roble: 163
17) Xil. Cabduqaadir Cabdiraxmaan Dhure: 165
Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" - Guddoomiyaha Golaha Shacabka 167

## Gogoldhig

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) waxa uu diyaariyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dasuurka Federaalka Ku-meel-gaarka ah. Kaddibna waxaa ansixiyey Guddiga La-socodka iyo Hirgelinta Dasuurka ee BFS. GMDHD markii uu diyaarinayey soojeedinta wax ka-beddelka waxa uu latashiyo ballaaran la sameeyey qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin culummada, ururrada bulshada rayidka, dhallinyarada, haweenka iyo wakiillada dawlad goboleedyada. Waxa kale oo guddigu aruuriyey ra'yiga dadweyne farabadan oo ku kala sugan dalka gudihiisa iyo dibaddiisa iyada oo la isticmaalayo bogga guddigu ku leeyahay internetka. Guddigu waxa uu tixgeliyey fikradaha dhammaan dadkii ka qaybqaatay wadatashiyada. Wadatashiyadaas waxaa iska kaashaday hay'adaha u xilsaaran dastuurka sida GMDHD, Guddiga La-socodka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

Cutubka 1aad oo ka kooban sagaal qodob waxa uu nidaaminayaa arrimo muhiim u ah dawladnimada oo ay ka mid yihiin: Diinta, Dalka, Mabaadii'da Asaasiga ah, Calanka, Astaanta Qaranka, Sarreynta Sharciga, Afka Rasmiga ah, Xudduudaha iyo Jinsiyadda Muwaadinka.

Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya ayaa loo soo gudbiyey Soojeedinta Wax Ka-beddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad iyo warbixin faahfaahsan oo la socotay soojeedinta. Golayaasha Baarlamaanka ayaa billaabay ka doodista soojeedinta wax ka-beddelka dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad ee Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah.

Maxdarqoraalka hortiinna yaalla waxaa laga diyaariyey doodaha xildhibaannada labada gole ay ka yeesheen Cutubka 1aad ee Soojeedinta Wax Ka-beddelka Dastuurka. Xildhibaannadu afar kulan ayey ku soojeediyeen fikirkooda oo ay ugu dul istaageen qodob qodob iyo faqrad faqrad iyaga oo sameeyey soojeedinno iskugu jira ku celin asalka dastuurka, siiqo toosin, soojeedin meesha ka saaris. Madxadqoraalka hoose waa hadalkii xildhibaannada oo sidoodii loo qoray iyada oo aan wax isbeddel ah lagu sameyn. Waxaa kale oo doodda xildhibaannada laga diyaariyey falanqeyn baaxad leh oo ku saabsan soojeedinnadoodii oo si gooni ah xubnaha labada gole loola wadaagayo. GMDHD waxa ay dib-u-eegis iyo isbeddel ku sameeyeen soojeedinta wax ka-beddelka qodobbada iyo faqrooyinka Cutubka 1aad iyaga oo tixgelin siiyey fikradihii xubnaha labada gole iyo latashiyadii qaybaha kala duwan ee bulshada.

**Taariikh:** Febraayo 14, 2024

| | | |
|---|---|---|
| Kalfadhiga: | 4aad | |
| Kulankii: | 12aad ee Wadajirka Labada Aqal | |
| Goobta: | Villa Hargeysa | |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: | 152 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: | 28 Sanator |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:06 a.m | |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:30 p.m | |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" | |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansixinta Ajendaha.
(3) Dibu-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka doodista soojeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 1aad: Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Qodobbada 1aad ilaa 9aad).

## CUTUBKA 1AAD: BAAQA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Kulanka 12aad:**
**Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe"**
Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdullilaahi Rabbilcaalamiin, wabihii nacstaciinu calaa umuuruduniyaa waddiin, wasallaahu calaa sayidinaa Maxamedin wasallam. Aayada quraanka kariimka ah Alle ha inagu anfaco. Xildhibaannada sharafta leh iyo sanatarrada waad salaamantihiin. Marka hore ajandaha noo ansaxiya idinkoo aad u mahadsan. Aadbaad u mahadsantihiin.

Ee shirku wuu inoo furanyahay. Waxaan rabaa arrin yar oo lagamamaarmaan noqotay, ee darraad shirkeennii ugu danbeeyay waxa jiray, su'aalaat ee ay soo jeediyeen xildhibaanno qaar ah oo maaragtay, jawaabtii ee anigoon, maaragtay salaadduna waa na dhaafaysay, baarlamaankii waa la xiray, markiina looma sheegin; laakiin, waxay codsadeen su'alaadkaas ilaa sagaal su'aalood maaraktay iyadoon laga jawaabin laga tegay, markaa waxay u soo sheegteen maaragytay guddigii iyo ayagaba arrintaasay codsadeen, marka intaan ajandaha la guda gelin, su'aalaha waa u qoranyihiin, guddoomiyaha guddiga, ayaa su'aalaadkaas ka jawaabaya kaddibbaan ajandeheenna galaynaa idinkoo aad u mahadsan. Guddoomiyaha guddiga ugu yeer; ha u jawaabo xildhibaannadii su'aashoodu taagnayd.

**Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf.**
Mahadsanid guddoomiye. Ee mudanayaasha sharafta leh waa idin salaamay, salaan kaddib, ee waxaan ku soconnaa sidii qorshuhu inoo ahaa oo shantiriska inoogu caddayd, ee waxaanse

rabaa inaan kulankii kan ka horreeyay ee marxaladda koobaad ku saabsanaa, ee aan warbixinta iyo soo jeedimaha wax ka beddelka aannu ku soo bandhignay, ayaa dhowr su'aalood oo aan rabaa inaan si degdega anoo wakhtiga luminin u dul maro.

Ee sagaal xildhibaan baa baa aaraah halkan ka soojeedisay oo qaarkood su'aalo na waydiiyeen, xildhibaan ee Cabdullaahi Maxamed Caliyaa ugu horreeyay ee isagu afkaaro muhiim ah ayuu soo jeediyay; laakiin, su'aal ee toos ah inama waydiin. Ee sanatar

**Cabdixakiin Macallin Axmed:** ee wuxuu nawaydiiyay, su'aal la xiriirta xildhibaanku waa inuu, waxa uu soojeediyey laftirkiisu, xildhbaanku waa inuu heli karo fursad labaad ee markii tobandaqiiqo kuma filnee waa inuu fursad labaad helikaro. Arrinkaas ee

Habraaca oo ah ee nidaamka aan isticmaalayno ama xeer hoosaadka aan adeegsanayno markaa dooda dib u- eegista Dastruurka aan ku jirno wuxuu jidaynayaa inuu xildhbaanku, hadba shintiriska doodda ku qoran ee qodobo mucayina ee maalintaas ajendaha looga hadlayo inuu 10 daqiiqo leeyahay, taas macneheeda maaha cutubkiiba inay 10 daqiiqo tahay; laakiin, maalintaas inta ajendaha ku jirto ayuu 10 leeyahay. Haddii guddoonku u arko si waafaqsan habraaca wakhti dheeri ah la siiyana awoodda guddoonka ayey ka mid tahay.

Ee waxaa kaloo **Sen. Cabdixakiin Macallin Axmed,** na waydiiyay su'aal la xiriirta sida soojeedimaha ee ay ku imaan karaan soojeedimaha oo hadda na horyaalla markii xildhibaanku rabo ama xildhbaanno rabaan in ay wax ka beddelaan

Isbddeladaas xildhibaannadu waa soo jeedin karaan marka la gaaro ee marxaladda Saddexaad si waafaqsan qodobka 5 faqradda 3 ee habraaca marka lix dalool hal dalool oo 45 xildhibaan oo Golaha Shacabka u dhiganta iyo lix dalool hal dalool Aqalka sare oo u dhiganta 9 senator, waxay soojeedinkaraan soojeedimaha hadba ay rabaan, ee nidaamka loo marayo soojeedimahaas habraaca ayey ku caddahay.

**Ee Xil. Cabdi Axmed Kooshin**: isagu wakhtiga ayuu dhaliilay inuu yaraan karo, ee arrinkaasna dabcan waa su'aalaha soo noqnoqonayay, su'aalaha ugu badan. Arrinka 10 daqiiqo inay yartahayna waa ka hadliyay. arrinkaas marka shintiriska iyo wakhtiga oo kooban la xiriira, waxaan isleeyahay guddoonka iyo Golaha si guud ayaa xal loogu heli karaa wakhti mucayina oo inaan doodan ku soo dhamayno aan ku khasbanahay ma jirto, hadaba sida ay nala gasho ayaa lagu soo gabogabayn doonaa.

**Xil. Cabdirisaaq Xusul:** waxa uu ka hadlay asagu maqaamka caasimadda Muqdisho oo aan doodeediisa la gaadhin, waxaan filayaa doodda mantay oo cutubka 1aad oo qodobka koobaad ilaa qodobka 9aad su'aashiisu halkaa ay dhici doonto ee dooddii maalin hore kama mid ahayn. Marka su'aashiisa waxaan filaayaa inuu mantay ama ku soo ceshan doono ama jaawabeheeda maantay iyo su'aalaheedaba la wajihi doono.

**Xil. Cabdiraxmaan Cagaweyne**: isagu su'aal inama wayddiin, talooyin muhiim ayuu soo jeediyey.

**Xil. Yuusuf Gamadiid**: habraaca ayuu su'aalo inaga waydiiyey sida codayntu ay u dhicidoonto iyo arrimaha mabaa'diida cutubka kobaad ku qoran oo qodobka 132 wax-ka beddelkooda uu ayuu wax ka baddalkooda la xiriira ayuu wax naga waydiiyay, iyadana ee cutubka koobaad ee manta dooddoodu furantahay, ayay ka mid noqonaysaa dooddii maalin hore kama mid ahayn. Arrimaha wax ka baddalka mabaadii'da la xiriira cutubka koobaad dhan inuu mabaadii' yahay in qodobka saddexaaday mabaadii'du ku koobantahay. Su'aasha xildhibaanka waxaan umalaynayaa iyaduna doodad maanta furan oo ka doodista ee, wax ka beddelka dastuurka manta furan cutubka koobaad halkaas ayay dhicidoontaa.

**Xil. Maxamed Abubakor**: asaga wakhtiga in la kordhiyo ayuu soo jeediyey.
**Xil. Suge:** isag su'aal inama wayddiin talooyin ayuu asagana soo jeediyey.
Ee waxaan filaayaa, inaan dul maray. Si aan wakhtiga uga faa'iidaysanno, waxaan u yeerayaa sanater Siciid Cawke, si cutubka ee ajandeheenna maantay oo ah ee ee, inaan billawno marxaladda labaad oo qorsheheedu yahay, cutubka koobaad inaan ka billawno qodobka koobaad ilaa qodobka sagaalaad. Sanater Siciid Cawke horay imaw. Qodobka koowaad ilaa qodobka sagaalaad oo maantay ajandaha 14ka bisha Feebarwari sanater Siciid Cawkaa inoo dulmari doona kaddibna ee waxaan billaaban doonnaa, waxaan filaa inaan ku soo afmeernay, ee marxaladdii koobaad ee dooddii maalin hore qabyada naga ahayd inaan halkaas ku soo afmeernay.

Ee marxaladda labaadna ay manta inoo bilaabmanayso. Cutubka koobaadna inooga billaabmayso.waad mahadsantihiin.

**Sen. Said Abdi Hussein:**
Guddoomiye ii ogolow, inaan manta shaqada inoo taalla ee guddigayagu soo gaadhsiiyay baarlamaanka aan guud mar ku sameeyo anigoo wakhtigana ilaalinaya. Een sida qorsheheennu ahaa maanta oo Arbaca ah, waa maalin muhiima. Waa maalintii aynnu u madlanayn inaan dhegaysanno aragtiyaha iyo afkaaraha xildhibaannaada ee ku aaddan cutubka koobaad oo ka kooban sagaal qodob.

Cutubka kobaad oo aad ugu muhiim ah haybta Dowladdimada Soomaaliya oo nidaaminaya arrimaha ay ka midka yihiin: diinta, dalka, sifooyinka muhiimka ah, mabaadii'da asaasiga ah, calanka, saraynta dastruuka, afka rasmiga ah, xuduudaha, jinsiyadda muwaadinka iyo caasimadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya waxaa inta badan qodobadaasi lagu sameeyey toosin oo sidii markii hore u qornaa ayaa ama laga sii faahfaahiyey ama fahanka looga sii dhowaaday.

Cutubka kobaad waxa uu ka koobanyahay 9qodob sidii uu asalka dastruukaba ahaa. 9 kii ayuu haddana ka koobanyahay, waxaa toosin lagu sameeyey dhammaan qodobbada iyo 21 farqadood.
Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyey 9 farqadood oo cusub oo aan ku jirin asalkii hore ee dastuurka, sidoo kale waxaa la tiray 2 farqadood oo ku jiray asalkii dastruuka.

Axkaamta lagu soo kordhiyey waxaa ka mid ah, oo aan markii hore ku jirin reebidda diin cayga, u hogaansanaanta dastuurka iyo xeerarka dalka, daryeelka iyo ilaalinta horumarka afka Soomaaliga iyo suugaantiisa.

Ee buugga idin horyaalla ee kafarkiisa ay ku qorantahay, soojeedimaha wax ka beddelka cutubbada 1, 2, 3 iyo 4 aad ee dastuurka ku meelgaarka ah, marka la gaadho beyjka saddexaad ama bogga saddexaad, wuxuu u kala qaybsanyahay saddex qaybood, qaybta baasha bidix waxaa ku qoran asalkii dastuurka ku meelgaadhka ah. Qaybta dhexda waxaa ku dhigan soojeedimaha wax ka baddelka dastuurka uu soo diyaariyay Guddiga Madaxa Bannaan uuna ku raacay Guddiga la Socodka Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya idin horkeenay. Baasha midig waxaa ku qoran faallo, faalladaas oo aannu ugutalagalnay meelaha isbeddelku ka dhacay ama farqadaha soo siyaaday, in faallo uu helo qofku u faahfaahinaysa, maxaa kellifay is beddelkaas ama maxaa kellifay in la soo siyaadiyo farqaddaas?

Anigoo aaminsan inaa dhammaantiin soo wada akhrideen oo ka dheregsantihiin, waxaan maanta filanaynaa waa inaa nagu dartaan aragtiyihiinna oon anaguna noodgaraysanno. Ma filanayno su'aalo badan in hadday ka maarmiwaydo, meelo aannu faahfaahin ka bixinayno mooyaane aanu rejaynaynnaa, qof walba aragtidiisa ee kii nagu taageeraya soo jeedimahaan soojeedinnay, kii aragti kaduwan qabaa, inuu maanta halkan ka muujiyo oogu aannu dhegaysanno anagoo kaalmaysanaynna, Guddiga Madaxa Bannaan ee uu goddoomiye Abukaate Burhaan hoggaaminayo. Dhammaan waxaan qabandoonnaa maxdarka, anagoo duubaynna, qoraynna een si aannu hadhow ugu soo darno een nuqulka kama dambayska ah.

Waad mahadsantihiin.

Guddoomiye Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe": Xildhibaannada sharafta leh waad salaamantihiin mar labaad. Aad iyo aad baan idiinka mahadcelinayaa sida looga soo hadlay. Waxaan rabaa inaan idin ogaysiiyo, horta maanta waxa nala jooga een qaybaha bulshada oo aad muhiim u ah. Guddi matalaayo culumo awdiinta Soomaaliyeed iyo bulshada rayisdka shakhsiyaad matalaayo oo muhiim ah oo nala dhegeysanaayo; maadaama, dastuurkii Soomaaliyeed masiirkii ummadda laga hadlaayo. Dastuurka xataa marmar waxaa jiraysa, mabaadii'diiniya in laga hadlaayo. Qodobbadeenna horayba waa ku jireen waad ogtihiin, in bulshada rayidka ah maaragtay si, yacni shacabka Soomaaliyeed u gaarsiiyaan yacni ka warqabka iyo lahaanshaha dastuurka lagu shaqaynaayo ayagaasna waa ku sharafnay, waa nala joogaan. Maalmo aan dhegaysi siindoonno ayaa jira, maaragtay dad badan keeni doonno. Waxaan kale rabaa xildhibaannada ee idinka oo runtii aad iyo aad u mahadsan ee dadka barabagaando badan yaa suuqa la gelinayaa, oo la sheegayoo la leeyahay dastuurka waa lala cararay intaa lagala baxayaa. Walaalayaal, wax lala cararayaa ma jiraan. Dadkii xaqa u lahaa oo ummadda Soomaaliyeed u soo wakiilatay baa gaxcanta kuhaya.

Dooddeenaan bilaabanaynnaa, ee xildhibaankasta tobanka daqiiqo oo dastuurka maaragtay xeer hoosaadka wada dhigaayaan yaa doodad la siinayaa, maantana waxaa laga hadlayaa ee cutubka koowaat oo qodobkiisa koowaad ilaa 9aad aa laga hadlaa maanta. Maanta isagaa laga hadlaa, shirka ku xiga asagaa laga hadlaa, shirka saddexaadna kaasaa laga hadlaa. Sagaalkaas qodob ee ilaa ma aragtay ee koowaad ilaa sagaalaad. Ee dastuurka intiisa kale hadda ha u gudbin. Dooddeenna waxay ku fadhidaa cutubka koobaad oo qodobbadiisa koowaad ilaa sagaalaad, waana tobandaqiiqo xildhibaankastaa ha galo nuxurka abbaara idinkoo aad u mahadsan marka shirku waa inoo furanyahay. Dadka xildhibaannada is qoray maaragtay habdhawraha iyo waxaan u daynayaa xog hayaha. Xildhibaannada ha is qoreen, si deggen ha loo hadlo. Tobanka daqiiqo markay dhammaaysto is qora qofkastana xaq waa helidoonaa insha

Allaahu,. Wakhtigahaddii ciriiri nagu noqdo, maalinkale ku darsankarnaa dhibmalaha, shaqada ugu wayn oon hayno waa maaragtay ummadda inoo soo wakiishay tii ugu nuxursanaa baan maanta gacanta ku haynnaa marka waa lays qorayaa ani qof ma siinaayo, waxaa bixinaaya maaraktay ee xildhibaankasta ha is qoro idinkoo aad u mahadsan.

**1) Sen. Zamzam Ibraahim Ali:**
Bismilaahi raxmaani raxiim een madaxda sharafta leh iyo xildhibaanada sharafta leh,wakiilada ururada bulshda, culima udiinka, hawl wadeennada guddiga labadiisi qaybood dhammaan waxaa idinku salaamayaa marlabaad salaanta islaamka marlabaad Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

Maanta waa maalin taariikhi ah een oo aan ka shaqaynayno masiirka ummadda Soomaaliyeed, sharaf bay nootahay marka xigta maanta waxaan Senatarrada iyo xildhibaannada ragga ah idinla wadaagaynaa, maanta inaa ahmiyad gaar ah siiyaan gabdhaha, haddii aad isku hardiyo jirteen makarafoonka maanta annagaa isku hardinayna makarafoonka , haddii Allaha awooddaleh yiraahdo; waayo, waxaa nooga aaddan qodob muhiim ah oo aan in muddo ah inta bannaanka ula taagnayn aan nidhaahno gabdhihii soomaaliyeed kootadoodii 30% aan wax ku rabnaa,maanta fursada aan haysano oo ah waa Dastruurkii oo furan aan aragtideena si mug iyo miisaan leh u muujino. Marka aad iyo aad baa umahadsantihiin. Waxaan idinka rajaynana Senatarada iyo Xildhibaannada sharafta leh in aad gabdhihiina garab iyo gaashaan u noqotaan awalna waad u ahaydeen, iyaguna way idiin ahaayeen. Marka sidaas daraadeed maanta dareen gaara nagu jiro, maanta waxaa rabnaa inaan muujinno taariikh; maxaayeelay, markii gabdhaha culayso badan lakulmaan waxaa aan dhihi jirnay haddba guddigii loosaaro ee hawshaan wadday intaa utagnaa waxaan oran jirnay: saas baa wax urabnaa, anagoo fursaddaan qaaliga ah ka faa'iidaysanayna gabdhahayaga sharafta leh maanta waxaa rajaynaynaah, in hadda wacdaro meeshaan laga dhigo, aad iyo aad baa umahadsantihiin.

**2) Xil. Sahra Abdullahi Igal:**
Guddoonka labada aqal iyo xildhibaanada sharafta leh salaan kaddib, sida habdhawre Samsam oo ah habdhawraha aqalka sare ay sheegtay kaliya halkaan waxaa usoo istaagay, inaan satan gareeyo waxaan leenahay dastuur la qoray ee lagu shaqeeyo ee larabo haddeertaan inta lafuray, in labeddalo ama siiqada halla hala hagaajiyo ama ereyada hala hagaajiyo ama wax halagu daro ama halaga dhimo een waqtigeedii; madaama, aan hadda ku jirno waxaan jeclaystay, inaan anagana doorkeennii kudarno. Kuraasta hadda aan ku fadhinno waxaan ku fadhinaa heshiis rag. Dastruurkuna waxa uu qorayaa in ay simanyihiin ama xuquuqda ummadda Soomaaliyeed ay u simanyihiin. Si Dastuurka noo qoran looga dhabeeyo waxaan rabnaa inaad ka dhabaysaan kuraastaan ku fadhinno in ay tahay mid anagu aan leenahay oo la ogyahay oo aan heshiis rag aan ahayn oo dastruurka si toos ah loogu qoro 30% inaan leenahay. waa mahadsantihiin.

**3) Sen. Seredo Mohamed Hassan:**
Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Axamdulillaahi Rabbilcaalamiin. Wasalaatu wasalaamu calaa rasuullillaah. Horta manta waxaan ku faraxsanahay waa markii koobaad aan gole shacab soo hor istaago oo aan baarlamaanka Soomaaliyeed aan golahan waa markii iigu horraysay ee aan halkan soo istaago, ee waxaan ku faraxsanahay in dastruurkii uu noo qalanyahay oo uu maanta noo furanyahay waa maalin taariikhiya. Dastruurkaan buuggaan Xasan Sheekh Maxamuud oo madaxwaynaha dawladda fadaraalka ah ma laha, Xamsoo raysalwasaaraha ah malaha, madaxwayne istayd jooga malaha, shacabka Soomaaliyeed baa iska leh anagaana masuul uga

ah. Taas aad baan ugu faraxsanahay waana mabd'a aasaasiya in aan ka shaqayno wixii Soomaali u xun aan ka saarno wixii Soomaali u roon aan u qaadno.

Een waxaan galaayaa qodobka maantayto haweenku ay ku soo midoobeen in dhammaantayo aannu ka hadalno, waxaan tegayaa oo **Qodobka 3(5)** waxay oranaysaa waxaa ku qoran, haweenku waa inay ka mid noqdaan, dhammaan saddexda laamood ee hayadaha dawladda iyo guddiyada madaxa bannaan ee heer fadaraal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose si wax ku ool ah lana sugo, gaar ahaan jagooyinka laysu doorto iyo kuwa la isu magacaabo. Waxaan isku raacnay inaan naloogu baddalo sidatan: haweenku waa inay ka mid noqdaan, dhammaan saddexda laamood ee hayadaha dawladda iyo guddiyada madaxa bannaan ee heer fadaraal iyo heer dawlad goboleediyo dawladaha hoose, uguyaraan 30% ugu badnaan maaha ugu yaraan waaye. Gaar ahaan jagooyinka laysu doorto iyo kuwa laysu magacaabo.

Haddaba intaas marka aannu niri, waxaan leeyahay, een in haweenka la siiyo 30% u xiran, mabaadii' asaasiya ee mabda' nololeed ah weeye. Sida aad u jeeddaanna, mabaadii'dii asaasiga ahayd buu ku dhex jiraa, iyadoo loo arkay inuu yahay mabda' asaasiya baa meeshaan lagu soo daray. Waa mabda' asaasiya oo xuquuqda aadanaha ka mida, dastuurkuna uu runtii ixtiraamay.

Waxaan walaalayaalow, idin leenahay ragoow, sanatarrada iyo xildhibaannada raga ah waxaan leeyahay, mara aannu idinwaydiinno su'aasha ah, waar ilma adeerayaalow, idinkoon awoodin maxaad afar ugu deggantihiin ood afar u guursataan oo aad masnaa wasulaasa wa rubaac kulligiin u xafidsantihiin? Waxaad noogu jawaabtaan waar waan idiin hiilinaynaayoo, haweenkii baa tiradii ka batay. Haddaad ogtihiin in aannu idinka badannahay 70% ma rabnee waa idin ixtiraamaynnaa waa idin jecelnehee 30% noo ogolaada. Waxaa ku jirta inaan 30% helo xuquuqdaydii waxbarashaa ku jirta. Waxbarashada iskoolaadka marka aad aragtaanb ee iskoolka la tago, haddeertaan 10kii kaalmood ee ugu sarraysay shan gabdhood baa kaalinta koowaad gashay. Siyaasdadda haddii caddaalad la iga siinaayo 70% anaa noqon lahaa; laakiin, haddaad u fiirsataan dastuurka sida uu ugu qornaa dastuurku wuxuu oranayaa, haweenku waa inay ka mid noqdaan. Ka mid noqoshadaas yaa i siinaaya? Ma madaxwayne istayt oo soo qoraaya oo gabar ah baa jirta? Mayee, nin baan waydiisanaayaa. Ma oday beeleed wax laga dhegaystoo gabaraa jirta? Maya, nin baan waydiisanayaa. Ma raysalwasaara baa jirtoon waydiisanaayaa? Maya, nin baan waydiisanaayaa. Ma madaxwaynefadaraal ah baa jira oon waydiisanaayo? Maya, nin baan waydiisanaayaa; sidaa awgeed, waxaan doonayaa, maantayto in naloogu hiiliyo 30% inay noo xirnaato. Taas waxaan uga gudbayaa

Qodobka 8aad waxaan codsanaynaa, in qodobka siddeedaad faqraddiisa afraad, waxaan codsanaynnaa in qoidobka siddeedaad faqraddiisa 4aad oo ku qornayd, sooi jeedinta wax ka baddelka dastuurka ee laga tiray, in lagu sooceliyo taasoo u qornayd sidatan: ilma kasta oo uu dhalo aabbe amaay dhasho hooyo Soomaaliyeed, xaqbuu wuxuu u leeyahay inuu helo jiniyadda Soomaaliyeed. Haddaba si waafaqsan heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda carruurta 1989kii lagu heshiiyay, Soomaaliyana aan filaayo 2015 inaan saxiixnay baan u malaynayaa, wuxuu farayaa in ilmaha islamarka uu dhasho la diiwaangaliyo wuxuuna xaq u leeyahay magac wuxuu xaq u leeyahay inuu jinsiyadda helo. Soomaaliya waa qayb Soomaaliya qayb bay ka tahay heshiiskaas.

Waxaan leeyahay een Jasaa'ir, Masar, Maqrib, Tuunis een waddamo Carbeed weeye dhammaan dastuurkoodu waxuu qorayaa, in ilmaha gabadhu ay dhasho uu jinsiyadda qaadan karo.

Haddaba anagu ma oranayno isirkiisaa la badalayaa oo ma oranayo ilmihii ina ayihiisii ma is baddalaayo ilmuhu qofkiisiibuu ahaanayaa. Ilmaha ninka Soomaaliga ah uu gabadha Amxaarada ah ama Kiiniyaanka uu ka dhalo waa Soomaali! Aabbihii iyo hooyadiina Soomaali ma wada ahee ogow. Ilmaha anigu aan dhalo marka, why buusan Soomaali u noqonaynin? Xaggee ku korsanayaa ilmahayga? Xaggee baan la aadayaa? Ma waxaan ku khasbanaanayaa calankaygii inaan ilmahaygii kala hoos baxo oon waddankale la aadoon jinsiyadkale qaato? Hihaano weeye Ilaahay subxaanahu wa tacaalaa aayadda Quraanka ugu caddaaladda badani waxay oranaysaa: manyacmal misqaala darratin khayran yarah. Waman yacmal misqaala darratin sharran yara. Diinta waan u simannahay caddaalad baannu ku doonaynaa arrintaas. Shawaabta waan u simannahay, ciqaabta waa u simannahay, jannada waan u simannahay, naarta waan u simannahay. Xuquuqda islaamiga ah ee mabaadii'da haddaan u simannahay, waa inaan u sinnaanaa in aan annaga. Ilmahaygu waa inuu helo jinsiyadda Soomaaliyeed. Aad baa u mahadsantihiin.

**4) Xil. Suhur Haji Ulusow:**
Bismilaahi Raxmaani Raxiim guddoonka sharafta leh, dhammaan golaha shacabka labadiisa aqal sida lasoojeediyay maanta waxaa inoo furan dastuurka, waxaa ku mahadsan madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya dastuurka waa muwaadin xaq uu uleeyahay, waa xuquuqda muwaadinka inuu kashaqeeyo dastuurkiisa ama u codeeyo, maanta waxaa ina horyaal dastuurkii sida aad lasocotaan codkaa soo jeedinay ee ah in gabdhaha lasiiyo maanta oo dastuurka loogu qoro 30% sida hadda aan kujoogno 20% sida sannadkii hore lagu soodaray 30% waxaa nasiyay raggii xukuumadda noogu jirey ee idinkoo kale ahaa, raggaas kama duwane maantana waxaa larabaa, in dastuurka lagu qoro haddii oo xildhibaanada isku raacaan waxaa rajaynaynaa inaa codsigeena ogolaataan madaama gabdhaha Soomaaliyeed halkaan aan ujoogno inb gabar walba Soomaaliyeed hesho xuquuqda uu Ilaahay siiyey, een baaqa

- Qodobka 3(5) Waxaan soo jeedinaynaa in lagu qoro ugu yaraan 30% haddii naloo ogolaadana 30% in lagu tartami karo la'ano, Ilaahay ayaa anaga nasiiyay 50% anaga 30 baaba idinka codsanay soomaahan marka waxaan soojeedinaynaa "Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose ugu yaraan 30%gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo" micnaha waxaa waaye, qofkii raba inuu kabadsado 70% qofkii looyaraynayana inuusan kayaraan 30% een in institution-ka lanoogu qoro een dawlado badan ayaa sameeya le'anow, maanta inaan barino ma ahan bulshada waa badanahay in naloo aqoonsado minorce inaan nahay 30% baan rabnaa sababtoo ah dhaqanka ayaa kanahay manyorsi, markii wax nalaga rabo namber 1 baa nahay, laakiin markaa waxrabno gadaal aa nahay, een haddii ladhaho qaaraan baa larabaa waxaa lagu oranayaa oo namber 1 baa tahayoo ninkaaga xooluu haystaayoo waa inaa xoolo keentaa, markaa berri odaygii utagnana waxaa nala oran, adiga gabar baa tahayoo anaga nama matalayside waa inaa gadaal martaa.

  Marka si arrintaa looga baxo waa in nin walba gabar buu dhalay. gabar baa ladhalatay, gabar buu qabaa, maahan muhiimadaydu inaan kursiga ku soonoqdo; laakiin, waa in

gabdhuhu mar walba ka muuqdaan siyaasadda dalka, marka idinkoonan maanta buuqeenna iyo sawaxankeenna noo eegin waxaa rabnaa arrintaas, in nalala meel mariyo, xildhibaano waa noo baahantihiin waa idiin baahanahay siyaasadda waa la isku baahanyahay haddii kale waxay tagaysaa gabdhuhu 68 gabdhood inayba codayn ee dastuurka gacanta ka taagtaan hadhawna kuwa imanaya referendam ka samaynaya ma u codaynayaan; waayo, anaga banaanka ka istaagnay, waa in dastuurka naloo ogolaada 30% in naloo qoro, waa isqoraysaa xildhibaan marka muxuu ahaa 30% ayaan maanta u baahanahay oo idiinka fadhinnaa waakaasaa een

- **Qodobka 8(4)** shacabka iyo jinsiyada waxaa naloosheegay in, laga tiray qaybtaan guddiga waxay uga tireen ma garanayno meel ay ku qorantahay ma jirto yacni aniga haddaa cunug jabaaniysa dhalo wuxuu xaq uleeyahay, inaa aniga jinsiyadayda uu qaato wiilka Soomaaliga murkuu naag Marookaana gursado oo Marooko guur u aaday, ilmahaas intee lagu sheegaa? Isaga xaq wuxuu u leeyahay in jinsiyadda Soomaali la siiyo; laakiin, gabdho badan ayaa ku xayiran oo ilma ajaaniba dhalay oo baasabooradii uwaayeen oo maalin walba anaga nasoowacayaan oo dhahaayaan, xildhibaan wiilkayga waa hore ayaa nin Masar ah oo inta jooga iga dhalay ama nin ma aragtay oo wadankale ah iga dhalay, ninkii faro kumahaayo cunuggii in Passport la isiiyo waaye waa la iidiiday marka taasna waxaa u arkayaa godob laga galaayo gabdhaha, marka waa in gabdhaha iyo wiilasha noqdaan isku xaquuq gabdhu waxay xaq uleedahay waa in wiilku yeeshaa oo laabada lakala bixin li'anhoo, wiilka Baraak obamaba gabar baa dhashay, wiil maa dhalay? Waa maya, dee hooyo Maraykan ah iyo aabbe Afrikaan ah, jinsiyad Maraykanana wuu qaatay.

  Anaga waddamaadas baa tagnay jinsiyad kalaa nala siiyay all jinsiyada kale baa sidatiin ma cidbaa idinku faquuqda? Anaga gabdhaha waxay xaq uleeyihiin hadday nin kasta guursadaan gabadha waa inay jinsiyad Soomaali ah cunuggeeda u hesho waaye, marka waa mahadsantihiin sidaa attention-kiina isiiseen. Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu.

**5) Xil. Abdirashid Mohamed Hidig:**

Ee bismismillaahi Raxmaani Raxiim mudane guddoomiye waad mahadsantahay iyo mudanayaasha dhammaantood. Marka ugu horeyso waxaan, sakingareynayaa gabdhihii halkan ka hadlay, ee soojeediyey in kotadooda la caddeeyo, ma aqaan sida ee isku dabooleyso qof iyo cod iyo konto; lakiin, kontada ey codsadeen, in la taageero. Anigo shaq anigo shaqsiyan waan taageyrayaa. Waxaana leeyahay kontadaas gabdhaha haloo qoro. Ee inkastoo sanatarada ey sheegtay arrin muhiim ah, marka afarta iyo sodonkaa kala badalaneenaa.

Taana waa inaad saxiixdaan gabdhahana waa inee saxiixan. Ah ah ah ee intaa, intaa markii laga tago, intaa markii laga tago mudanayaal maantay arrimaha ina horyaal Waa muhim. Waan salaamayaa culimada Soomaaliyed soodhowaada. Ee mudane guddoomiye ma lii maqlaa hada maxaa qaldan. Salamucalekum hada ma iimaqlaa. Aniga cidii imaqliweysaa dee cidna maqli meyse ee maa wax kale noo shegtaan. Een mudane gudoomiye maantay waa maalin taarikhiya, een waxbadan oo dadka Soomaaliyed ey sugayaan ey yaalan halkan. Waxaan rabaa in aan inyar aan tabto, dhowr qodob.

Qodobka koowaad cutubkiisa koobaad faqradda saddexaad, gobonnima iyo midnimada Jamcuuriyadda Fadaraa Soomaaliya, waa laguma xad gudbaan. Waa sax; laakiin, mudane guddoomiye Jamuuriyadda Fadaraalka marka la yidhaahdo waa in kooban. Inta federaalka ka baxsan, xaggay aadaysaa? Mase lagu xadgudbi karaa? Illeen qodobkaan wuxuu koobay inta fadaraalka ah. Guddiga waxaan rabaa, arrintaa inay nootgareeyuaan.

Arrinta kale oo aan is leeyahay waa lagama maarmaan aragtidayda qodobka labaad ee qodobka saddexaad ee meelayaryar oy ka mid tahay faqradda 4aad,

- **Qodobka 3 (4)** dastuurka Soomaaliya wuxuu dhiirrigelinayaa xaquuqda aadanaha, meeshaas ka horraysa waxaa ku qoran, talinta sharciga. Meeshaa waxaan dhihilahaa hala geliyo "sarreynta sharciga". Waa toosin. – yaah- kadanbana saasaa ku qoran. Qaybta ay baddaleen xataa saasaa ku qoran. Ka ay baddaleen haddaad fiirisidna talintaa ku qoran. Marka sarraynta ha lagu beddelo.

  Qodobka kale oon is leeyahay waa lagama maarmaan, waxaa waaye qodobka lixaad. Mudane guddoomiye iyo mudanayaal waxaan ka hadlaynaa qodobka uu leeyahay, Calanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya sida lagu muujiyay qaybta A ee jadwalka koowaad waa laydi buluug furan oo ay dhexda kagataal, xiddig  cad oo shan gees ah, marka meesha aan uga jeedo waxay tahay, calanka astaamaha lagu sheegay waa sax; laakiin, calankaa waxaa iskaleh Jamhuuriyadda Soomaaliya, jamhuuriyadda federaalka markuu federal noqday waddanku, waxa weeye waa calankii; laakiin, haddana qaybna waa la biximayaa qaybna waa la soo gelinayaa. Halkaasna way u baahantahay in la caddeeyo.

  Qodobka 7aad dhulka Jamhuuriyadda Faderaalka ee Soomaaliya gobonnimada Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya, waxay ka koobantahay dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya marlabaad isla tii baa soo noqonaysa inta aan federaalka ahayn xagee ayey adaysaa?

- **Qodobka 8aad:** ee ku saabsan jinsiyadda mudane guddoomiye qodobkaan meelo badan buu soo maray buuq badan buu soo maray ee si aadaa loo siyaasadeeyay, markaa aniga waxaan soo jeedinayaa, in asalkiisii lagu celiyo. Inkastoon su'aal ka qabo nuqulka dastuurka ee ay isticmaaleen guddigaan laftirkooda bekoos, dastuurku nuqullo badan buu soo maray oo kala duduwan. Nuqulka ay isticmaaleen ee ay sixitaanka ku samaynayaan inuu yahay kii saxda ahaa iyo in kale. Laakiin, qodobkaani wuxuu u qorraa,qofkasta oo asalkiisu Soomaali yahay waa Soomaali.
  Haddii looga jeedo, in Jamuuriyadda Fadaraalka ee Soomaaliya kaliya la yiraahdo sida hadda uu u qoranyahay, waxaa meesha ka baxaya deegaanno badan oo Soomaaliyeed iyo dad badan oo Soomaaliyeed. taasina waxay keenaysaa, in dadka Soomaaliyeed kala qeybsamo, deegaanno Soomaaliyeedna ay bannanka ka istagaan. Sidaasi darted waxaan soojeedinaynaa in faqradaasi sideeday ahayd loogu celiyo oo la yiraadhaahdo "Qof kasta oo asalkiisu Soomaali yahay waa Soomaali"
  yaah? Ee qodobka sagaalaad oo ah, 8aad waa ka baxay. Yaah? Qodobka siddeedaadaa jinsiyadda ah. Haa, waa ka baxay  sagaalaadaan tegay. Haa, 8aad waa waa ka baxay, waxaan uga baxay qodobkaas in la geeyo halkaas. Haddii la yidhasahdo Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, jamuuriyadda inta federaalka ee Soomaaliyaa laga hadlayaa

inta aan federaalka ku jirin banaankay uga baxayaan. Haddii dadka qaar ka baqayaan Soomaali badan oo aan federaalka hadda ku jirin oo bannaanka joogta oo laga yaabo in ay maajooratiga ka badanyihiin inta gudaha federaalka ku jirta oo ay ka baqayaan inay codeeyaan dadkaasi, waxaan xaqiijinaynaa inay codaynayaan,  haddii xitaa derbiga Miksiko iyo Maraykanka u dhexeeya laga dhiso, inay codeeyaan ayaan xaqiijindoonnaa haddii Alle yidhaahdo.

Sidaasi darted ee caqabadaas yarta ah oo isbaaradaa yarta ah oo laysku deyayo waxaan soojeedinaynaa in laga daayo. Qodobkaa marlabaad haddii sidan lagu ansixiyo dastuurkan, wuxuu si toosa bannaanka ugu saarayaa Soomaaliland oo aan hadda u taagan bannaanka, haddii sidaa ay tahay lagu ansixiyo maantana si toosa ayaa loo aqoonsanayaa inay madax bannaantahay oo aanay ka mid ahayn; sidaasi darted, waxaan soo jeedinayaa in ee laga daayo.

- **Qodobka 9aad** ee caasimadda  mudane guddoomiy iyo mudanayaal, marar badan waxaa la yidhaahdaa caasimadda waxa loo rarayaa faqraddaas , caasimadda waxa loo rarayaa faqraddaas aniga waxaan soojeedinaya, caasimadda  in raritaanka horta meelaha kale loo rarayo lagadaayo oo go’aan laga gaadho oo la sheego caasimadda iyo sida ay tahay.  Hadda sida ay u qorantahayna in wax laga beddelo; sababtoo ah waxaa la yidhi ee: Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waa Muqdisho, ani waxaan qabaa in la yidhaahdo: “Magalamadaxda Jamhuuriyadda Soomaaliya waa Muqdisho” haddii la yidhaahdo magaalamadaxda jamhuuriyadda federaalka inta aan federaalka ahayn caasimad uma noqonayso. Sidaasi darted waa caasimaddii qaranka. Jamuuriyadda waaye dadka Soomaaliyeed jamuuriyadda ha lagu qoro. Waa mahadsantiin.

**6) Xil. Guled Bihi Abdi:**

Ee bismillaahi Raxmaani Raxiim.  Mala I maqlayaa? Ee bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mahadsanid mudane guddoomiye.  Xildhibaannada sharafta leh, warbaahinta, ciidamada amaanka iyo bahda saxaafadda waxaan idinku salaamayaa, salaamucalaykum waraxmatulllaahi wa barakaatu.

Ee runtii maanta waa maalin wayn. Waa maalin shacabka iyo qaranka Soomaaliyeed ku wayn. Maalin aan is leeyahay nasiibka iyo wakhhtiga inoo hiliyay inanu goobjoog ahaano todobaataneeyo sano kaddib in arrimhi masiiriga ahaa aynu wax kabaddal ku samayno ama aynu ka doodno. Haa, malaymaqlayaa imika? Ee waayay waxaan gelidoonaa doodayda. inshaAllaah waan soo koobayaa haddii Alle yidhaa.

Ugu horrayn guddoomiye arrinta whakhtiga ayaan rabaa inaan ku yar noqdo, arrinta wakhtiga sida laga dhawaajiyay een toban minit sida xeer hoosaadku qabo, maantoo keliyana 80 xildhibaan baa is qoray. 80 xildhibaan haddaynu 10 ku dhufanno waxay ka dhigantay 800 oo mini too taqriiban 14, 15 saacadood noqonaya. 15 saacadood manta diyaar ma u nahay? Xirfaddii iyo xeeladdii mudane guddoomiye aynu arrintaa ku maamulilahayn, maanta  waa laynaga rabaa waanaimtixaan ina horyaalla.

- **Qodobka 1aad** ee cutubka 1aad qodobka 1aad wuxuu leeyahay: Jamhuuriyadda Soomaaliya, asalka dastuurka ku meelgaadhka ah waa sida ku qoran. Soojeedinta wax ka baddelkana waxaa lagu qoray, Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya. Ee asalka

ayaa u baahan inaynu is waydiinno, sidii xildhibaankii markii dhowayd halkantaagnaa xildhibaan Xiddig uu lahaa, dastuurka la tixraacayaa waa kee? haddii ka la tixraacayaa uu yahay kan Golaha Shacabka yaalla ee xildhibaannada loo qaybiyay 2012kii Ogost 1deedii la ansixiyay hadduu yahay waxaa ku taalla, Jamhuuriyadda Fadaraarka Soomaaliya. Kuma taallo Jamuuriyadda Soomaaliya. Markaa just waxaan rabnaa arrintaa bal in naloo caddeeyo dastuurka la tixracayo.

- Labada een **qodobka 8**aad Shacabka iyo jinsiyadda een waxay ahayd kolka hore, shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed; laakiin, waxaa la yidhi: shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, maxaa Soomaalinimadii looga cararayaa? *That is the question.* Soomaaliyeed bay ahayd in lagu qoraa iskamay iman. Macno ballaadhan oo falsafiya oo xanbaarsan taariikh ummadeed, jiritaan iyo gobannimay ahayd. Maxay tahay baahida keentay, maxay tahay baahida keentay in Soomaaliyeed laga cararo? Iyadoynu ognahay gobolka iyo dunida wax aka socda geopolitics, iyadoo aan ognahay in Gabilay, Garbaharay iyo Boosaaso in la sheeganayo inaynu inagu hadda ka cararno Soomaaliyeed waxaan is leeyahay, arrintaasi ee inaguun meelka dhac inaguma ahee, waa lumin dhaxalkii awowaaad.

  Waxaan is leeyahay arrintaa ha laga waantoobo si gaara, malaayiinta Soomaalida ah oo ay ka mid yihiin, boqolaalka kun ee qofeen matalo. Waa dad reer guuraaya, dadka reer **guuraagana** meel walbaa *home* u ah, meelwalbaa guri u ah. Jiilaalkii xaggay joogaan Gugiina xagganay joogaan. Cidda o dhanaysa lixbilood baad halkan joogtaa lixna halkaasaad joogtaa oo xaq uma lihid. Ciddaasaa la iska rabaa.

  Maxaynu inagu dadka u kala qaybinaynaa? Maxaynu qaybta u inaynu kala qaybinno u rabnaa? Anuu waxaan is leeyahay arrintaasi, arrin innaga ina qabata maaha. Waa arrin ceeb ku ah, inaynnu dastuurkeenna sidaa ku qoranno. Sigaara dadkaynu leenahay Soomaalinimada aynu ka sheeganaynno, waxaa ku jira qodobka lixaad ee Datuurka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka hadlaya astaanta iyo heesta calanka, Ilaahay naxariistii janno ha ka waraabiyee Xuseen Aw Faarax Dubbad iyon Cabdillaahi Qarshe ayaa midna sameeyay midna qaaday, waa summadda ama haybsooca jiritaankeena. Dadkaynnu ka saaraynno maanta Soomaalinimada dadkaasaa ka mid ah. Halkanna degganaa halkanna degganaa. Waxaan is leeyahay arrintaasi, arrin qadaf ku ah weeye. Aad iyo aad baa u mahadsantihiin.

**7) Xil. Zamzam Muhumed Omar:**

Awalan salaamullaahi calaykum wa raxmatullaahi tacaalaa wa barakaat. Guddoonka een labada aqal, xildhibaannada iyo sanatarrada waxaan idinku salaamayaa salaalta islaanka, salaamullaahi calaykum wa raxmatullaahi tacaalaa wa barakaat.

Maanta waa maalin taariikhi ah oo la dhammaystiridoono, dastuurkii ku meelgaadhka ah oo aannu uga nasiib badannashay baarlamaannadii hore oo baarlamaanka koowaad. Maanta waa maalintii aanu u hiilin lahayn qof kasta oo Soomaali ah inuu leeyahay hantida keliyaata uu ku helayo xuquuqdiisa dastuuriga ah. '*Thank you*' xuquuqdiisa dastuuriga ah.

Waxaan rabaa marka hore inaan u mahadceliyo guddi Madaxabannan ee Dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Guddiga dib u eegista iyo la-socodka Dastuurka. Waxay soo diyaariyeen laba arrin oo kala ah: warbxin dhammeystiran sidookale wax ka baddalka dastuurka. Waxay gaadheen dedaal, waxay dedaalgaliyeen oo ay xigsadeen 80 dastuur oo ay kala leeyihiin dalal badan oo federaal u badan.

Waxaad ka garanaysaa baaxadda ay leedahay oo ay ku soo koobeen warbixinno iyo soojeedin baarlamaankii hore ee ku saabsanaa dib u eegista dastuurka, sidoo kale guddigu waxa uu baadhis ku sameeyay, heeshiisyadii golaha wadatashiga waxay ku sameeyeen heeshiisyadii golaha wadatashiga, heshiisyadaasoo ah oy ku dhisanyihiin in nlagu daro, wixii lagu heshiiyay. Lixdii heshiis 2018kii ilaa iyo kii hadda oo si afgarad ah lagu soo dhammeeyay.

Waxaa maanta isugu kaaya keenay qodobbada 63 oo dastuuri ah iyo qodobka 71aad oo labada aqalba ay ku wada shaqayndoonaan dastuurinas tahay qofkastoo xildhibaan ah ama sanatar ah oo horyaalla.

Waxaan rabaa mudane xildhibaanayaal, mudanayaal, cutubka koowaad q**odobkiisa 1aad**: waxaa ku qoran Jamhuuriyadda Soomaaliya halkan buugga aynu inagu haysanno waxaa ku qoran, Jamuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya. Halkiisii hore maadaama ay ku qorantahay Jamuuriyadda Soomaaliya ay kan danbee lagu soo cusboonaysiiyay ay leeyihiin anagaa keennay Jamuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, xagee laga keenay Jamhuuriyadda kan? Kan xaggee laga keenay ee cutubka koowaaed faqraddiisa Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xalka ay ka keeneen waan waydiinaynaa guddiga dastuurka.

Sidoo kale een waxay ku qoreen, Soomaaliya Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, Soomaaliya jamuuriyadda fadaraalka ah ee muslin ah lehna gobonnimo ku salaysan caddaalad iyo sarrayn sharciya, diinteenna maadaama dad muslin nahay, shareecaa soo hoos gelikarta marka muslim la leeyahay; waxaan soo jeedinayaa, in diinteenna lagu saleeyo sunni.

Een sidoo kale q**odobka 2(3):** waxay ku soo dareen oon iyaguna aad ugu hanbalyaynayaa sida guud eey wax u soo qoreen marka hore iyo mar labaadba waxaan leeyahay, si quruxbadan baad wax u soo qorteen. Waxa reebban bay soo qoreen waxa reebban cayda diinta Islaamka karaahideeda iyo waxkasta oo wax udhimaya xushmadda arrimaha diinta islaamka, qof kastoo diinta islaamka, lala tiigsandoono xeerarka Jamhuuriyadda. Waxaan soo jeedin lahaa inay ku "Jamhuuriyadda Federaalka" waayo, jamhuuriyad baa ku qoran Fadsaraalka Soomaaliy, markaa hala raaciyo. Labadii qodob ee hore waxa inoogu jiray Fadaraalka Soomaaliya maaddama kuwii ka horreeyayba lagu caddeeyay federaalka ha lagu qoro.

Sidoo kale waxaan **qodobka 4aad** lama soo saarikaro xeer aan waafaqsanayn shareecada islaamka iyo maqaasideeda. Waan soo dhowaynayaa ereyga xeerka; waayo, inta badan koonfiyuus dadku waxay ka qaadi jireen sharci, qaanuun iyo wixii lamida, markaa iyadalafteedana waxaan leeyahay, ereyga xeer ee aadisticmaasheen , aad baan u soo dhowaynayaa.

Qodobka 4 sarraynta dastuurka waxay yidhaahdeen Cidkasta oo hay'adaha dowladda ururrada siyasadeed iyo ururrada bulshada waajib ku ah oo ay ugu hoggaansamaan ku dhaqanka, ilaalinta halkaa halaga dhigo waa aniga aragtidayda.

Een waxaan rabaa maarta si waaqica inaan u hadlo; maadaamoo, waxani ay yihiin masiir een q**odobka 5(1)**: Afka rasmiga ah af Soomaaligu waa May iyo Maxaad tiri, afka rasmigee Jamuuriyadda Fadaraalka ee Soomaaliya waa af Carabiga waana luuqadda labaad. Waa sax, Quraankeennaa ku soo arooray af Carabiga; laakiin marka si waaqica aan u hadlayno, haayadaheenna, dawladda sidookale qoraallada inta ugu badani waxay kuvsoo baxaan waa '*intarnational language' oo language'* baynnu isticmaalnaa; maadaama afkii Carabiga ah aynu kaga badannahay language-ka aniguu ma lihi af Carabiga meesha ha laga saarto; because, markastaba af Carabiga waynu ku salaysannahay. Ee waxaan soojedinlahaa ingiliishka haddiiba la isticmaalayo oo uu ku badanyahayay oo dastuurkii ilanoo furay, ingiliisha ha lagu soo daro. Waa aniga aragtidayda.

Een heesta qaranka Soomaaliya ee waxaa sheegay xildhibaan Guuleed, Xuseen Aw Faarax Dubbad, ayaa sameeyay waxaa laxanka iyo codkaba lahaa Cabdillaahi Qarshe 1960kii een nin odaya oo xildhibaana baa halkan soo istaagay wuxuu yidhi: "Dawlad goboleedadu waxay yeelankaraan calan iyo astaan gaar u ah; balse, ma yeelankaraan hees astaan u ah" Waxaan ku leeyahay, Soomaalilaand ha ku soo gabanine, Ogaadeen iyo kililka shanaaed in laga soo baxo fadaar ma diidayee, fadaraalka haan isugu imaanno. Kaftan bay iga tahay.

Jinsiyadda, jinsiyadda waa iga gabaggabo waa soo fadhiisanayaa, jinsiyadda, kama tagayo waxaan nis leeyahay ku soo gabaggabee jinsiyadda jinsiyadu waa saddex jinsiyaddu ma waxay noqonaysaa oo l;aga dhigayaa maysan ku qeexin. Ma waxa laga dhigayaa dhiigga oo qofku aniga abkaygu tusaala ahaanookale, hadda faamilka aan anigu ka dhashay Carabahasy ku badanyihiin markuu Soomaaliya yimaaddo wuxuu I waydiinayaa jinsiyaddiisii ama baasaboorkiisii ma wuxuu ku qaadanayaa abkiisa mise wuxuu ku qaadanayaa een in lagu daro qaxoonti oo sida waddamada imika markaynu tagno aynu aadno, waxay ku qaataan qaxoonti mise waxa qaadanaya qofka Soomaal;iga ah ee Xamar ku dhashay? Sidii imika maalin dhowaydtoole waxaa dhacday, *National id* waa lagu wareeray. National id yaa qaadanaya? Shanta Soomaaliye, anigu waxaan xildhibaanm u ahay ka Jabuuti jooga waxaan xildhibaan u ahay ka killilka shanaad jooga, waxaan xildhibaan u ahay,ka Kiiniya jooga. Markaa national id sidii loogu wareeray, buu jinsiyaddana loogu wareeray. Markaa waxaan soo jeedinayaa, in xeer oo ah uu ku salaysanyahay dhiigga; waayo, dhiiggu waa abka anigu aan ku abtirsado, abtirsiintaanuu jinsigu soo galayaa.

Maqaamka magaalada Muqdisho, anigu maadaama gobolka Banaadir laygu doortay maqaamka magaalada Muqdishaan aad uga hadlayaa. Waxaan leeyahay qaladaadka ay sameeyeen waxaa ka mid ah: halkan waxay ku qoreen q**odobka 9(1)**: magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya waa Muqdisho ok haddana waxaa la ii sii raaciyay een maqaamka magaalamadaxdu leedahay, matalaadeeda waxaa lagu xeerinayaa cutubka shanaad ee dastuuriga ok waxaan idinkla rabnaa haddii halkan aad ku qorteen, magaala madaxda caasimaddu waa Muqdisho why cutubka shanaad la ii geynayaa oo halkan maqaamka caasimaddu leedahay, why looga hadliwaayay? Misa waxa weeyaan een saynu rabno aynu yeelno? Waar waxaan waa masiir ummadeed weeyaan, maqaamka magaalada Muqdisho inuu cutubka koobaad ku salaysnaadaana waan ku qasbannahay. Calankii baa la sheegay,

summaddii baa la sheegay, heestii baa la sheegay, xuquuqdiibaa la sheegay, diintii baa la sheegay ma qoraal idinku saad rabtaan aad u qoraysaan buu noqonayaa? Waxaan soo jeedinayaa, min fadlikum in maqaamka magaalada Muqdisho ay ku caddaato cutubka koowaad. Haddaysan ku caddaanaynna afartan cutub eed noo keenteen, cutubka shanaad soo raacioya, si maqaamka magaalada Muqdisho aanu uga hadalno.

Intaa marka laga yimaaddo waxaan ku soo gabaggabaynayaa arrinta haweenka. Waxa la yidhi: "Geeloow soco soco maalintaad ciin daaqdaa laguu yaabaa" wallaahi Soomaali waa cajiib, waxaweeye waxay yidhaahdeen, een faqqradda qodobka saddexaad: haweenku waa waa inay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee haayadaha dawliga iyo guddiyada madaxa bannaan ee heer fadaraal, heer dawlad goboleed iyo dawladda hoose, in si wax ku ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isu doortayb iyo kuwa laysku magacaabo. Waxaan rabaa anaga guddiga gabadh baa noogu jirta aanu soo doirsannay, in ay soo xusto 30% hadda 329ka xildhibaan 20% iyo malaha dhibco yar 5 baa ii raacaya. Kii kan ka horreeyayna wuxuu ahaa 26% maxaa ii diidaya aniga waar illeen adiga iyo anigu ilaahay waa run 100 iyo 50, ana 50 buu iga dhigay adna100 buu kaa dhigay, waan ogolahay qof iimaan leh baan ahay, qof islaamaan ahay waan ku yaqiinsanahay, inaan kaa danbeeyo waan ku ogolahay diintaydaa ifaraysa, aniga maxaa ii diiday il;een madaxwayne kulamaan doorane kulamaan cararine, in aniga maqaamkaygii anigoo aan lahaa?

Waar anigu waan ku dhalay, waan kuu dhaxay, waan kula dhashay, sidaad wax u barataan wax u bartay aqoontaad leedahaan leeyahay, aragtidaad ku hadlayso mid ka fog baan leeyahay, fishinkaad leedahay, mid ka fog baan leeyahay igamana aqoon badnid igamana karti badnid. Haddaan kuu dhaaminba inaan ahay hooyo habaysa wax hagaajinaysa inaan ku dheerahay oon kaaga tanaasul badanahay. Gabadhu waxbay isku xejisaa waxa bay haysaa, waxbay toosisaa. Why aad aniga ii leedahay 30% laygu soo qeexi la'yahay.

Nuuxoow, waxba ha taataaban tani waa taayadii maanta. Maalintii la is taataabanayay maaha waanan soo gabaggabaynayaa raalli ahaw. Aadaa u mahadsantahay anigoo ku ixriraamaya, waan soo gabaggabaynayaa qodobkii u danbeyaan marayaaye ha la igu tixgeliyo.

Waar niyow, waxaan rabaa annaga hadda maadaamadasdtuurkii la furay laba maaddo labadaba; in dastuurkan sidiisa loo celiyo iyo in dumarka 30% lama taabtaan isaga, waar xaq waxaan kaaga leeyahay 40% baan xaq u leeyahay 50% xaq u leeyahay. Waxba ima dheeri; laakiin, halkanaan waxaan doono kaa qorayaa why? Gabadhii intaan wax u dhiibnay miiskeeda la qaaday la hoos geliyay? Miyaad iga karti badantahay mise iga cod dheertahay? Ma yeelayo qodobkan waa, in 30% lagu soo qeexaa. Haddaan lagu soo qeexaynin, buuggan waa la qaadayaa, halkii laga keenaa la celinayaa. Dalkaan dastuurka ma leh, Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya Xasan Sh. Maxamuud, baarlamaan ma leh; qofkastoo Soomaaliyaan leeyahay. Xuquuqdayda aan helo.m

**8) Xil. Axmed Cabdi Kooshin:**

Bismilaah waxaan salaamayaa Guddoonka labada aqal waxaan salaamayaa xildhibaanada golaha shacabka waxaan jeclaan lahaa manta waa maalin taariikhi ah inaan is dhagaysano doodaha masiirigaa ee aynu ka hadlaynana in la note garaysto intaanan guda galin doodaan waxaan rabaa inaan gadaal ulaabto dawlad dhiskii soomaaliya midowga labadii gobol wixii loogu yeeri jirey waqooyi iyo koonfur gun dhigna u haa waxa manta loogu yeero

soomaaliya,Soomaaliya waxaysoo martay intaa xoriyada qaadanay tariikh Dastuur sameyn ah lagasoo bilaawo ilaa xoriyadii  dastuurkii 1960, dastuurkii 1979, dastuurkii 1990 la diyaariyay Dastuurki 2012kii oo aynu hada haysano iyo labo axdi oo Soomaalina kuheshiisay,carto 2000 iyo axdigii 2004 ee federalisimka waxay kaloo soomartay nidaam dimuquraadi ah oo bilow ah,kalitalisnimo iyo burbur  soo gaaray dawladnimadii Soomaaliyeed,dagaalo sokeeye oo bulshada kala kaxeeyay halkaa markay marayso waxaa is abaabulay indheergarad soomaaliyeed waxayna horkeeneen dastuur loogu magic daray kumeel gaadh iyagoo og daruufaha ay Soomaaliya kujirto,waxay ka tageen waxkastoo ay u arkeen in ay umada sii kala kaxayn karto waxay tilmaameen sida loodhamasytirayo macnaheeduna ahaa markii Soomaali isku kalsoonaato isna aaminto in dastuurka sidiisaba la dhamaystiro tilmaamaha ay inoo sheegeen waxay ku cadyihiin jadwalka C,D ee dastuurka ugu horay waxaan rabaa inaan dood yara galiyo habraaca manta ina horyaala ama  Doodda dastuurku maraacsantahay sida nidaamka dastuurka KMG ah inoogu qoranyahay, markaad eegto bogga 6aad ee faalada lasooraaciyay habraaca wax-kabedelka Dastuurka waxuu Guddigu isticmalayaa Qodobbada 133aad iyo Qodobbada 134aad ee Dastuurka wuxuna intentionaly katagay Qodobka 132(1)(2) ee tilmamamysa mabaadiida aasaasigaa  in lataabankarin mabad'iida guud ee asaasiga ah inta lagujiro muddo xileedka Baarlamaanka haddaan hadaba dooda guda galo.

- **Qodobbada cutubka 1(3):** wuxuu ka koobanyahay 9 qodob  waxaa dhammaan wax kabdal iyo toosin lagu sameeyay qodobada iyo 21 firqadood ee uu ka koobanyahay waxaa lagu soo daray 9 firqadood oo cusub waxaa la tiray 2 firqadood ee kujiray asalkii Dastuurka tani waxay kutusaysaa in wax kabadal iyo kaabis balaadhan lagu sameeyay cutubka 1aad haddaan qodobada aan dooda ka qabo isyara dul taago firqada 2aad ee cutubka 1aad wuxu  qeexayaa alle kasokow awooda shacabkaa iskaleh, hadaan sikale udhigo shacabku wuxuu soodoortay golayaal shacab oo matala danta shacabka soomaaliyeed sidaa dateed waxan qabaa  in qodobkan lagu muujiyo cidda shacabka Soomaaliyeed kumatasha danahood in ay yihiin Goleyaasha shacabka iyo Aqalka sare siday hadda ugu qorantahayna ma ahan waa very fake ka turjumaysa shacabka umada Soomaaliyeed cida ay usoo wakiisheen inay danohooda kashaqayso in lagu cadeeyo .

- **Qodobka3 (7):** Dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hantiqaran oo ay shacabka Jamhuuriyaddu wada leyihiin waxana mas'uul ka ah dowladda Federaalka,dhibaatooyinka hadda taagan in bada lagado iyo dhibaatooyinka socda dhammaantood waxay soo hoos galayaan qodobka, waxaanse aaminsanahay in lagudaro "hantida dowladdu leedahay ee gayiga Soomaaliyed lama wareejinkaro lama iibinkaro cid aan Soomaali ahayna ma intifaacsan karto waxaana masuul ka ah oo ansixinaya Golayaasha shacabku soo doorteen".

- **Qodobka 4(2): Saraynta dastuurka maxkamada dastuuriga intaa arkayay goob kasta iyo meel kasta waxaa kuqoran maxkamad dastuuri ah la aas aasi doono 20 sannadood baynu sugaynaa waxaanay kutaalaa qodobka CD intaan dastuurka dhammaystirkiisa lagaarin in lasameeyo maxkamada dastuurigaa kuma taalo diyaarna looma ahan  in lasuubiyo waxa la isku wareerinayo oo qodobkaan meesha losoo galinayo maba arko anigu hadduuna ahayn mid munaasib ah.**

- **Qodobka 8(1):** Soomaaliyeed bay ahayd waxaa laga dhigay Soomaaliya, waxaan takiidinayaa Guuleed Biixi siduu usoo jeediyay waliba waxaan ka naxay siiqada markii wax labadalayay sharaxaada la raaciyey marka la tixgaliyey,tixgalin gaara lasiiyey dalalka aynu dariska nahay waaba kuwa korka inaga haysta markaa sharaxaadaas waxaan u arkaa inaanay ahayn mid kuhaboon in laga bixiyo laakiin waxaan aaminsanahay in eraygii Soomaaliyeed lagu soo celiyo,farqada 8aad ee isla qodobkaas,Diidmada, laalista iyo kaqaadista jinsiyada laguma xirikaro asbaabo siyaasadeed, firqadaa waa lasaaray dastuurka wuxuuna damaanad qadayaa kutakrifal awodeed,oon wada ognahay inay ka jirto Soomaaliya,wuxuu reebay hebel baa is necebnahay iyo hebel ma arki karo inloogala laabto jinsiyada, shaqsi ahaan waxaa usoo taagnaa ruux Soomaaliyeed oo wadan shisheeye jooga oo Passport laga kansalay isagoo iyadoo xitaa sidan ugu qorantahay dastuurka yacni xad gudubka jiraa ma jiri karaa ayay tusaysaa sidaa darted xuquuqda jinsiyadeed ee muwaadinka in layiraahdo sidaan baa lagu soo saarayaa waxaan u arkaa inay tahay wax uqalmin umada Soomaaliyeed sidaa darted waa in faqradda laga saaray lasooceliyo oo lasii adkeeyo xoojiyo oo qofka soomaaliga ah qof ay kala argti duwanyihiin jisiyada kalalaaban karin.

- **Qodobka 9aad:** waa Meeqaamka iyo Matalaada Muqdisho waxaan laqabaa sidii dadkii hore laqabaa maxaa caasimadda maqaamkeeda loogu raray cutubka 5aad? waa qaab dhismeedka dawladda iyo wada xaajoodka dawlada federalka iyo kuwa xubnaha ka ah dee xubinba kama ahan meeqaamkeedii maynu cadayn matalaadeedii maynaan sheegin waxba islamaynaan qaadan maxaa markaa loogu raray cutubka 5aad? Baa meesha taal waxaan maqli jirey oo soomaalidu tiraahdaa timir laf baa kujirta hadaan meqaamka iyo matalaada caasumada lacadayn waxaa si sibiq yar lagu duudsiinayaa dadka tirade badan ee degaan ahaan kasoo jeeda caasumada Soomaaliyeed maxaa diidaya inta aan la gaarin cutubka 5aad in laga dooddo xulashooyinka lasoo jeediyay ama lala yimaado xulasho kaloo loo arko inay munaasib tahay ?maxaa gadaal loogu dhigayaa caasumada muqdisho,waxaan aaminsanahay inay naga istaahisho mawqifkeeda in lacadeeyo matalaadeedana lacadeeyo, ugu danbayntii waxaan tallo yar usoo jeedinayaa guddida iyo Guddoonka shalay mudane guddoomiye waxaan kadoodnay shintiriska oo 20 xildhibaan ka hadleen in waqtigeedu aad uyar yahay waxba laga masooqaadin,waxaan horay uga doodnay habraaca hadal haynta wayn dhaliyey talooyinkii iyo tusaalooyinki lasoojeediyay marna lamaqaadan,waxaan kutallin lahaa guddiga iyo guddoonka haddaanay usoojeedin inay dhagaystaan ixtiraamaan dimuquraadiyada iyo doodaha inaan xildhibaanada la daalin 4cutubna indhaqso la inoogu keeno si aan u ansixino wabilaahi tawfiiq.

**9) Sen. Abdihakim Moallim Ahmed:**

bismilaahi raxmaani raxiim alxamdulilaah wasalaatu wasaalamu calaa rasuulilaah Mudane guddoomiye xildhibaanada sharafta leh marka hore aad baan ugu mahadcelinayaa labada guddi baarlamaanka iyo kan dastuurka labada guddi ee kashaqaynayay dastuurka iyo shaqada ay sooqabteen hawlaha ay nasoo gaarsiiyeen aad bay ugu mahadsanyihiin iyo dhammaan intii kasoo shaqaysay ee ku lug lahaa anigu dhawr mulaaxado qodobada qaar ayaan maraan akhriyey iga so baxbaxeen markaa waxaan rabaa inaan iskor taago si toos ah u aado qodobada halkaan kuqoran,horta si guud Waxan soojeedinayaa dastuurka ama Dasatiirta adduunka inta badan qodobka mabadii'da kahadlaya ayaa lasoo hormariyaa,

Qodobka 2aad ee mabadii'da qeexaya lasoo hormariyo oo mabaadiida la qeexo marka hore kadib loogudbo wixii kale mulaaxadaadkayga.

- **Qodobka 1(1)**: Soomaaliya in dowladdamadani tahay in laqeexo meeshaan lagu sheego,waad ogtihiin aduunka isdibtaad iyo digtaytarnimo iyo milatari afganbi wax kuqabsada ayaa aad ubadan markaa mar walba waa lasheegaa dawlada waa la sheegaa madaninimadeeda farqada 2aad ee isla qodobkaan waxaa rabaa ama kan 1aad xitaa in lasoogaliyoo laqeexo nidaamka xukunkeennu waa jamhuuri inaga nidaaka jamhuurigaana waa kan sheegaya dee qaabka la isku dooranayo iyo qaabka xukunka lagu imanayo laba dariiqo oo uu qabo qeexa oo midna ay tahay madaxwaynaha doorashadiisa inay kutimaado shacabku toos usoodoortaan haayadihiisa baarlamaankana toos shacabku usoodoorto ama inuu baarlamaanka uu soodoorto shacabku then madaxwaynaha uu baarlamaanku doorto,madaxwaynaha si cad waxaa loogu qeexaa iyadoo la tilmaamayo ra'isu jamhuuriya ladhahaa marka nidaamkaas jamhuurigaa waaye inaan qaadano nidaam ahaan in laqeexo nimadaamka xukunka dalka in laqeexaa aad bay muhiim utahay labadaan farqo kii larabo hala galiyo ama farqo madaxbannaan laga dhigo laakiin waa in lagu qeexaa nidaamka dalkeennu inuu yahay Jamhuuri taana waxaa rabay inaan ka xuso qodobka 1aad madaninimada iyo jamhuuriga aad bay muhiim uyihiin.

- **Qodobka 3(3)**: Jamhuuriyada federalka Soomaaliya waxay kudhisantahay mabda'a aasaasigaa ee Nidaamka awood qeybsiga federaaligaa, nidaamka awood qaybsiga maxaa laga wadaa? Ma 4.5 laga wada mise awooddii iyo dowladnimadii Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay kudhisantahay mabadii'da aasasiga ah iyo daadajinta qaybinta ee awood qeybsiga fedaraaliga ah, waxan soojedinayaa in laga dhigo daadajinta awoodda si uusan ugu muuqan nidaamka 4.5.

- **Qodobka 3(7)**: dhulka bada hawada iyo khayraadka dabiicigaa waa hanta qaran oo ay shacabka jamhuuriyada federalku wada leeyihiin markaa aniga meeshaa waxan qabaa in shacabka lagu badalo Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

- **Qodobka 3(5):** wuxuu kahadlayaa haweenka ayuu kahadlayaa waatii gabdhaha hadda ay ka hadlayeen anigu dee abu banaat baan ahay oo gabdhaa ijooga gabdhahaygaan kafakarayaa laftigooda anigoon gabdhaha arkin siiqo kabadal midaan ayagu hadda tarxiyeen oo kootada ah ayaa ila muuqataa in lagu sugo xuquuqdooda dastuurka dariiqadaas waxa weeyaan hadda golaha shacabka waxaa kujiraan umalaynayaa 53 aqalka sarana waa 14 matalan nidaam baa jira oo qaab loogu xiro gabdhaha oo loosiiyo kuraas gaar ah oo si gaar ah gabdhuhu ugu tartamaan Kenya oo daris nala ah 49 kursi ayaa looxiraa gabdhaha oo kabadalan kuraasta raggu kutartamayaanoo sigaaray ugu tartamaan waxayna kuyimaadaan nidaamka kowtiga wadankaas laga isticmaalo ayay kuyimaadaan, koonti walba waxaa laga soo doortaa hal kursi oo gabar ah oo lagu tarmaa jira markaa si lamid ah Waxan soojedinlahaa, 18 Gobol ee dalka gobol walba ladhigo 3kurso golaha shacabka ah oo ay sigaar ah ugu tartamaan dumarka,meeshaana 54 kursi ayay noqonaysaa oo kuraastoodu uxirantahay baa imaanaysa nidaamka iyo dastuurkana sifiican uwaafaqaysa maadaama hadda sidii xidig halkaan ka dhawaajinayay ay xataa kootada 30% dastuurki si loogaliyo madaama doorasho qof iyo cod ah lagalinayo sibay

xoogaa rakito utahay laakiin tani waxay sugaysaa kuraas gaara oo gabdhuhu kutartamayaan oo gabdhuhu iyagu ay leeyihiin iyagoo madaxbanaan dee kuwii raggu kutaryamayeen oo kaleetana inay qayb ka noqdaan oo gabadhii rabtaa katartami karto ayay haddana Aqalka sarena ilaa 9 kursi oola dhigayo state yada isagana iyadoo la isku fiirinayo soomaalida iyo siday wax ufiirin jireen ayaa ikhtiraacaygu yahay iyadana in lageeyo oo gabdhuhuna iyagana kutartamaan mukhtaracaas gabdhaha kootadooda ama nisbadooda baarlamaanka iyo mushaarakadooda lagu sugayo waliba ilaalinayana kifaa'ada iyo in marka latartamo gabdhuhu tartamaan gabar uqalanta oo kursiga qaadan karta oo tartami kartaa bardu kusoobaxaysa aqoonteeda iyo kartideeda uleh inay kursigii qaadato marka arragtida waxaan soo jeedinayaa in laqaato systemkaas,nidaamkaas laqaato laakiin gabdhaha lasugo mushaarakadooda iyo kaqayb galgooda siyaasada gaar ahaan baarlamaanka.

- **Qodobka 4(3):**waxaa kuqoran maxkamadda dastuurigaa ayuu kahadlayaa oo go'aamada iyo khilaafsan dastuurka iyo sharciga waxaa burinaaya qodobka dhahaaya Maxkamadda Dastuuriga, aniga waxaa qabaa maadaama maxkamad dastuuriya dalka kadhisnayn aana la ogayn xiligii ay dhismayso inaanay muuqanin in firaaq jirin hawshaas inta maxkamadda dastuurigaa kadhismayso baarlamaanka Soomaaliya la awood siiyo waad ogtihiin haddaa go'aamo la gaaray haddaa qaraara soobaxaan haddaa meel walba wax dhacaan waxay ubaahantahay in dastuurkii cid bursay ubaahantahay oo tiraahda waxaani sax ma ahan marka jiha rasmi ah say uyeelato madaama aysan maxkamad dastuuriga ahayd dhisnayn inta maxkamadda dastuuriga laga dhisayo waa inay shaqadaas baarlamaanka soomaaliya labadiisa aqal inay qaataan baa soo jeedinaa.

- **Qodobka 5(2)**: waxan toosiyay qaabka kalimaadka looqoray dawlada soojeedinayaa in latoosiyo siiqada ama laga dhigo "dowladda Federaalka Soomaaliya waxay daryeelaysaa, ilalinaysaa islamarkaana hormarinaysaa afsoomaaliga sidaas in loo toosiyo".

- **Qodobka 6(3):** Heesta Qaranka waxaa layiri waa qoloba calankeedu baa lagu qoray waxaan rabaa in heeska lawada qoro isaga dhan dastuurka lagu sugo mirihiisu intay ka kakoobanyihiin bilawgiisa ilaa dhammaadkiisa in dastuurka lagu sheego oo heeska sifiican oo dhamaysitiran li anow aniga qolaba calankeedu waa waxaan rabaan gadaal karaacsan karaa markaa haddaa qolaba calankeedu mesha kuqorto marka heestoo fuul ah oo dhammaystiran in dastuurka lasoo galiyaa taana waa iga mukhtara

- **Qodobka 8(3)**:waxaa kuqoran qofka muwaadinka ah ee jamhuuriyada federalka soomaaliya wuxuu qaadan karaa jinsiyad dal marka meeshaas inagu soomaali baa nahay dalkaliya jinsiyad kama qaadanee dalal in laga dhigo weeye haddi kaleeto way qaybaysaa hal dal baa kuqoran markaa dalal in layiraahdo baan qabaa, intaasaa kusoo koobayaa waa mahadsantihiin shukran.

**10) Xil. Abdirisak Aadam Warsame "Xusul":**

Ee guddoonka labada aqaliyo xildhibaannada labada aqal, martida noo joogta ee bulshada rayidka iyo culuma awdiinka ka socota, guddiyada Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka iyo guddiga Dastuurka ee Baarlamaanka labadiisa aqal ay leeyihiin dhammaan bahda

meesha joogta, asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatu. Salaaqn kaddib, waxaan u mahadcelinaayaa guddiyada ka soo shaqeeyay dastuurkaan oo runtii, markaad akhriso aad daremeeyso, in luuqadda qaanuned ay adeegsadeen ay aad u sarayso si ficanna usoo turxaan bixiyeen.

Intaa kaddib waxaan rabaa inaan toos u galo dooddayda, cutubka koowaad **Qodobkiisa 3 (5)**: Ee haweenka xildhibaanada ay halkaan ka soojeediyeen waxaan rabaa inaan ku sakan gareeyo kuna taagero, in codsiga ay soojeediyeen loo tixgaliyo oo koontada farsamo kasto haku timaadee la caddeeyo waxa ay leyihiin, si berritoole aan garabka loogu riixin.

***Ee*** tan xigta **qodobka 5** ee isla cutubka aan hadda ku jirno, waxa uu ka hadlaya afka rasmiga ah ee dalkeennu leeyahay kan kowaad iyo kan labaadba, runtiina Soomaalidu waxay daganyaihiin deeganno kala duwan, lahjado kala duwana way ku hadlaan oo ka badan labo lahjadood. Halkaanna waxa ku qoran labo lahjad oo kaliya lahjooyinka kalana ee deegaannada Soomaaliyeed looga hadlo ama ummad kamid ah ummadda Soomaaliyeed ee gayiga Soomaaliyeed deggan ay ku hadlaan iyaga xaggee looga tagay? Waa waa iga su'aal. Tusaale haddan usoo qaatana deegaannada iyo dadka aan aniga matalo MAAYNA kuma hadlaan MAXAA TIRINA kuma hadlaan, XAA TIRI ay ku hadlaan, waxa aan ka hadleenana waa dastuur ummadeed, dastuur ummadeedna lahjad laguma qoro ama afguri haddii marka lahjad la qorayo, waxaan soojeedinaya oo lagama maarman ay noqoto, in la yiraahdo afka rasmiga ah, afka Soomaaligu waa MAAY, MAXAA TIRI, iyo XAA TIRI.

**Ee runtiina** waxa boogaadinaya soona dhoweynayaa isla qodobka 5(2) ee lasoo kordhiyay ee guddiga soo kordhiyeen oo dhahaya Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay daryeeshaa ilaalisaa isla markaana hormarisay afka Soomaaliga suuaganta in la yiraahda "afka soomaaliga sugaantisa iyo lahjadihisa kala duwan". Oo meeshaas lahjadaha kaladuwan si kooban loogu sheego.

- **Qodobka 6aad**: isgagana oo ka hadlaaya Calanka iyo astaanta qaranka, astaanta qaranka halkaanay noogu tilmaamantahay waxyabaha ay ka koobantahay; hasa ahaatee, lama isticmaalo; maxaa yeeley, qaybaha ugu danbeeya marka aad fiiriso ee bayjka 9aad qaybtan ugu horeeysa faqradda u danbeysa, diilinta hoose ee dastuurka ee dushiisa ku taala, wuxuu sheegaya dilin cad ay ku qofalantahay, yacni markii laga so sheekeeeyo calankii iyo shabeelkii iyo warankii iyo caleemihii waxa ku qofilan layiri diillin cad sidii nuqulkii hore ku jirta nuqulka dambeyana wuxuu qorayaa maydhax cad; laakin, lama isticmaalo marka fiiriso dastuurka baalka u danbeya kan ka horeeya, ee jadwalka qaybta 'B' astaanta kutaala dilinta waa hurdi, marka sida darted, in la beddelo oo dastuurka siduu u qoranyahay iyo sawirka ku yaala ay is qaataan.

  Sidoo kale manhajka Wasaaradda Waxbarashadu ay samaysay, cilmiga bulshada fasalka 4aad casharka ugu horreeya ee ka hadlaaya astaanta isaguna ardayga Soomaaliyeed manhajku wuxuu baraayaa uu dalkeena iney hurdi tahay waana kaa sawirkiisa idiin muuqda, in iyadana manhajka laga saxo isla markana Wasaaradda Waxbarashadu ay markey manhajka samayneyso ay raacdo dastuurka iyo shurucda kale ee dalka. Sidoo kale heesta qaranka, intaanan heesta gelin xataa warqadda oo guddoomiyaha guddigu nooso gudbiyay uu noogu soo gudbiyay laftirkeeda haddaad

fiirisaan, waxa dilintu ay noqoneysaa iyaduna sidoo kale hurdi. Sidoo kale heesta Qaranka Soomaaliyed ee casharka 3aad ee ka ah heesta qaranka manhajka cilmiga ulshada, casharkiisa 3aad fasalka 4aad waxa kutaalla "Soomaaliyeey tooso" ardaygana taasaa la baraa, in iyadana la waafajiyo Dastuurka Qaranka sidoo kaleeto.

- **Qodobka 7(4):** Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa layiri: waxa laga so qaatay dastuurkii 60kii, dastuur cusub ayaa halkaan yaalla; sida darteed haddii la rabo hala so raro; laakiin, waxaan rabaa inaysan majhuul ahaanin in ay meeshaan ku caddaato wixii dastuurkii 60kii uu ka qabay, si qofka dastuurka akhriyaba uu u ogaado ee xududaha Jamhuuriyaddu ay leedahay.

  **S**idoo kale waddamanka xuduuadaha nala leh waala qorey, hasa ahaate bedka Soomaaliya meeshaas waa ka maqanyahay, beddhuleedka aan ku fadhino, waa in iyadana lagu caddeeyo sidoo kalana xuduudaha waddamada aan la leenahay halkan ku xusan, in iyaguna waddan walba xuduudda aan la leenahay dhirir keeda inta uu la egyahaay iyadana aan ognahay, oo ay u caddahay si jiilka dambe aan uga tagno dhaxal ay difaacan karaan.

- **Qodobka 9aad:** isagana oo ka hadlaayay caasimadda dalka oon maalin dhowayd aan taabtay, sababta aan maalin dhowayd aan u taabtay waxay ahayd waxkale ma ahayn anigoo og, in laga hadlayay mabaadii'da guud ee dastuurka in halkani intaan naloosoo gubinin muddo yar ka hor ay ku qorneyd xulashooyinka ku yaalla warbixinta ee nuqulka warbixinta ee naloo dhiibay oo saddex ah halkaanna laga soo reebay, waxaan guddiga waydiin lahaa maxaa looga soo reebay? Sababtu maxay tahay? waaxana rabnaaa sabab maangal ah oo sheegaysa in mataladdii iyo maqaamkii caasimadda Muqdisho loogu raray Cutubka 5aad anagoo og qaab ay isku qaban karaan cutubka 5aad iyo casimadda mataladeeda, in aysan jirin inay halkaas noo caddeeyan anagana aan ku qanacno bulshada aan matalnana ay ku qanci karto. Aadaa u mahadsantihiin. Salaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatu.

**11) Xil. Ifrah Mohamed Awad:**

Salaamu calaykum. Guddoonka, xildhibaanada, senterada, een guddiga dastuurka ee madaxa banaan,een bulshada rayidka ah een

- **Qodobka 6(3) C**alanka iyo Astaanta Qaranka: Calanka waa lagu wareersan yahay midabkiisa hadda hadaad isku fiiriso Guddoonka calanka horyaalo iyo midka darbiga ku dhegan shaqo iskuma laha, laba ayay kala yihiin, Dastuurka waxaa lagu qoray inuu "light blue" uu yahay, balaguusa ayaa kala ah dad waxaaa arkeysaa baluug rasiina tiq ah wata waxaad arkeysaa "light blue" oo 10 nuuc ah. Markaa waxaa soojeedin lahaa guddidu inay meesha ay ku qorantahay astanta qaranka in calanka kalarkiisa saxda ah lagu sawiro ka turjumaua calanka Soomaaliya, midabkiisa saxdaana waa midka darbiga ku dhagan, si markaas ay ubartaan dhalinta 30ka sano ee dagaalka intaa uu socday dhashay si ay ubartaan midabka saxdaa uu leeyahay .siday senatarda iyo xildhibaanada gabdhahaa ee iga horeeyay soo jeediyeen

- **Qodobka 3aad faqradiisa5aad:** Mabadii'dada aasaasiga, Haweenka waa iney kamid noqdaan dhamaan 3da hay'adaha ee dawladda iyo gudiyada madaxabannaan ee heer

federal heer dawlad goboled iyo dawladaha hoose si wax-ku-ool ah. een Adduunka majirto meel dastuur ama xeer ha ahaado loogu qoro si wax-ku-ool ah, sababto ah wax cad maaha sidaas si lamid ah xaq baan uleenahay wadanka xuquuq baan ku leenahay, gabdhuhu wax badan bay kasoo qabteen 30kii sano ee dagalku socday, aad baa waxaa loo bartay doorka ay dumarku leeyihiin. Marka waxaan soojeedineynaa iney "Haweenka kamid noqdaan dhammaan 3da laamood ee hay'adaha dawlada iyo guddiyada madaxabanaan ee heer federal heer dawlad goboled iyo dawladaha hoose ugu yaraan 30 % gaar ahaan jagooyinka leysku doorto iyo kuwa leysku magacaabo".

Sidaan wada ognahy Golaha Wasiirrada tirada dumarka ay ka joogaan waa tiro iska cayiman, Agaasimayaasha wasaradaha dawlada fedaraalka Soomaaliya dhamaanteed hal gabar kuma jirto, waxaa aad loogu soo celceliyaa boqolkiiba 50 ayaa nahay, 50 waxaa nahay marka magta la bixinayo ayaa ragana ladhahaa waa 100 dumarkana 50 xuquuqda xaga Illahey waynu kasimanahay, caqliga aad leedihiin baynu leenahay, kartida wax ku qaban kartaan baynu leenahy, Waxaa caddeyn idinkugu filan 30kii sano ee Soomaaliya burburasaneyd hooya intiinaba meesha fadhiyo soo saartay, waxa laga yabaa iney agoonimo kusoo korisay ama aabahood kaga tagay marka rageena xushmad baanu ugu bahanahay inaan la galin gogortan anagu waxaanu soo wadnaa Golaha shacabka iyo aqalka sare u soo wadnaa xeerka, dastuurku intuu socdo waxaan rabnaa 2da gole iney ansixiyaan xeerka, si uu xeer u noqdo sababto ah leys maba aamini karo haddii laga baxo heerkan doorasho xili la gali doono Illaah baa og xeerkaas, wuxuu ka hadlaa sidaa aan ugu qeyb qadaneyno xisbiyada.

Cutubkaan 1aad qaabkaa danbe aan usoo qornay siiqada in loo badalaa qabnaa Midka jinsiyada heshiiska xuquuqda caruurta ee 1989kii la ansixiyay soomaaliya na ay ka midka tahay heshiiskaas ilma kasta ee ku dhasha wadanka Somaliya oo aabihi ama hooyadii ay tahay soomaali xaq wuxuu uleyahay sharciga ay heystaan walidkii inuu helo, Guddiga soojeedintii loo jeediyay iyo faaladii ayuu kamid ahaa waa laga tirtiray lagumana soo darin, waxaan rabnaa dasturka in lagu caddeeyo sababto ah hooyada soomaaliyeeed xuquuq bey leedahy marka xuquuqdaasi in laduudsiiyo maaha.

**12) Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed:**

**Bismillaahi raxmaani raxiim** al xamdulilaah wasalaatu wasalaamu calaa sharafil ambiyaa wal mursaliin amaa bacd. Ee waxaan salaamaya awalan guddoonka labada gole, hawl wadeenada, culimada, een martida inoojoogta, haddii ale oranaayo wariyayaasha, bahda saxaafadda, dhammaantiin asalaamu calaykum intaa kaddib.

"Daanyeerna laas waa qotaa doox hadduu taga'e
Daymo carruureedna ways daba gurguurtaane
Dundumaan halkii lagu ogaa doorsan abidkeedee"
ayuu dhawr iyo lixdankii yiri Maxamed Suldaan Timacadde"
Daanyeerna laas waa qotaa doox hadduu taga'e
Daymo carruureedna ways daba gurguurtaane
Wuxuun bay sameeyaan carruurtu. Dundumaan halkii lagu ogaa doorsan abidkeedee. Dundumadu wayso meel uun bay qotontaa.

Waayahay waxaan leeyahay halkaynu taagnayn lixdankii inaynu dib uga sii dhacno oo barigaa ummad Soomaaliyeed iyo shan Soomaaliyeed baaba loo baaqayee aynu manta haddana sii go'gono waa ayaandarro inoo taala weeye.

"Sabantagayiyo mid soosocdiyo
saaka waxa jooga
saddexdaa wakhtaa xaal aduun lagu sifeeyaa
waxa saadanbeetiyo berrina waa lasugayaa
soonoqod majiro shalay wixii saarifee tagay
mar haday kuseegtoo arrini sibiq yar kuudhaafto
Allow maan sidaa falo majiro waxay samaysaa
waxay taladu kuu suubantahay subaxaad joogtaa

Een waqtigu waa saddexdaas waxa ugu qaalisana waa waqtiga. waqti tagay iyo wixii laga bartay mid soo socda iyo waxa loogaga hortagayo. Waxa jooga oo manta oo distoorkan ina horyaala oo kale ah. Allaahu musalli calaa Muxamed. Halkan waxaan ku hayaa intaasi wayska arartaydiiye een

- **Qodobka 6aad:** Oo kahadlaya astaanta qaranka waxaa gaashaanka buluugga ah gaashanka dahabıga ah iyo xidigta buluugga ah dusheeda waxaa ku sameeysan 5 geeys, labaduba xukuumadda carbeed beey ku magacaabantahay, 2bada gees ee hareeraha ah umasocdo, een 3da u dhaxeeysa labada hareerood, 3daba waxa ku yaalla saliib baa ku yaalo u fiirsada hortiinnuu yaallaaye waxaan oran lahaa halloofiirsado halkaas astaantaa halaga dabatago oo hala saxo. Een wabillaahi intaas halkaa aan kud ku. Haa, haa, waad wada aragtaan baan filayaa. Waa haysataan waa ku taallaa. Meeshaa weliba.

  Waxaa igu soo baraarujıyay khayr Alle hasiiye nin qurbaha kunool baa igu soo baraarujiyay oo Maxamed Xirsi Guuleed layiraahdo.

  Een xagga iyadana laga hadlayay jinsiyadaha qodabkii uu sanatarkii waxaan leeyahay Xildhibaan. Xıdıg ka shanqarıyay ee ahaa cid kasta oo uu asalkiisa Soomaali yahay waa Soomaal ayaan waafaqayaa oo xoojınayaana, waxaan kaloo xoojınayaa 60kii Soomaaliya dastuur beey sameeysatay, dastuurka Soomaali wayn oo dhan ayuu kahadlayay intii markaa haddii aynu maanta laga sooguuro oo la yidhaahdo waynagan isa sii yar yareynaynee, ee inta xadbeenaadka ka soo kasoo hooyseeysa halagu qeexo, halagu soo aruuriyo Soomaalinmada, himiladeenıi weeyneed ee Soomaalinimada meesha waa kabaxeysaa, marka waxaan leeyahay halagu bineeyo ha lagu bineeyodastuurkii 60kıı halkay ka taagneed. Taasi wayga taas

  Maqaamka Muqdıshana dee mudduu nagu rafanayay, barı hore in laga shaqeeyaa bay aheyde ıyadana, waxa Qodabka 9aad kujıra isagana waxaan leeyahay hawshıısa hala dadajıyo. Waan idinku badiyee raalli ahaada. Waan xanuunsanahay waan iska dagdagayaaye wa Billaahi tawfiiq. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatu.

13) **Xil Zaynab Mohamed Amir:**

Waxaa laga hadlay dasturka laga hadlay horta qolooyinkan dasturka soo hagaajisay waa salaamaya aniga ma amaanayo laakiin salaan u jeedinayaa sida qodobada u socdaan ammaan uma jeedinayo dad badan ayaa amaanay laakiin aniga ammaan kama dhex arko ee Waxaan rabaa inaan ka hadlo qodobka sheegayo afka la rabo in lagu hadlaayo,haddeer

waxaan arkayey dad baa is qabqabsanayey anagu waxaa nahay Soomaali waxaa nahay dad muslim ah,oo diinta islaamka ku salaysan ayaa nahay ani aan ahaan nee anigu waxaan jeclahay in luuqata laga dhigo af soomaali, aan magac kale loo bixinin waa inaan la dhicin MAAY iyo MAXAA TIRI oo la dhahaa af soomaali. Waxaa ku xiga carabi qofkasta luuqad buu ku hadlaa laakiin waxaa ka qurux badan oo in aan la isku qab qabsanin oo luuqadu af soomali ahaato.

Kaw Waxaan ka hadlayaa haweenka waxba yaan la isoo eegin hadda manta haweenka waa ogolahay ee waxaa jiro waxaan u sheegayaa haweenka .maalintii la aassaasey , dagaalkii sokeeye dabadeed 2000 gabdhaha waxaa nala siiyay 25 xubnood, waxay ahaayeen 12% kheyr allah ha siiye gabdho soomaaliyeed oo sifil soosayate u badanyihiin oo hada hal gabadh nala fadhita oo la yiraa duniya carshan oo joogto gabdhahaas dagaalamay, 30%, soddonka waxaa la bilaabay labadii kunaa la bilaabay. Hadda maaha, soddonka hadda maaha gabdhaha dhallinyaradee soddonka hadda ordaya maaha, horaa loo bilaabay soddonkaan

Marka waxa dhacaan inii sheegayaa marka anaga hadda raga qosqoslayoo gabdhaha waa fiicanyihiin, cod kama sugayno Sababtaan idiin sheegayaa aan codka uga sugaynin xildhibaannadii hadda u dambeesay ee 2012kii baarlamaankii 10aad waxaan ahayn 74 gabdhood iyo 13 senator, waxaan ahayn sideetan iyo ka badan. Waxaa dhacay xildhibaannadii hadda u danbaysay koobiyo tobanka oo wadartoodu tahay sideetan iyo ka badan, waxaan markii u dambeesay gobalo aan gabadh laga soo dooran ayaa jiro oo la boobay oo xoog looga qaatay,, hadana waxay na lee yihiin waad calaacalaysiin . Walaalayaalow waar anaga siyaasiyiinan nahay calaacal naguma jiro. Anaga siyaasiyiin ayaa nahay cod ayaan leenahay anaga , dhowr iyo konton iyo lixdanaan nahay,, codkeena waan diidi karnaa waana kaga hor imaan karnaa raga. Ani waxaan diiday gabar xildhibaanad ah oo siyaasada, dhallinyaradaan u sheegayaa hadda soo galay, hadda kabacdi anigu waxaan umalaynayaa xaalkaygu waa bariga dhexe e

Gabadhaha hadda soo galaan la hadlayaa, siyaasadda sidaa ma aha. Siyaasadda sidaa ma aha in seeflabood la noqdo ma aha. Waxa waaye karti baa la rabaa Ninka waa la qaabilaa. madax sarra ayaa qaabisho, laakiin anaka nalama qaabilo nalooma yeedho ragga waxay raggii waxay iska haystaa jiraan kuwa lacag haysto iyo kuwa af miishaaro ah meelohooda soo boobo, anaga waan iska fadhinaa uun meelahanaan iska fadhinaa wax, wax noo oggol oo na raba ma jirto. Maalintii dhawayd ee aad u tagteen ani ma tegin. Maalintii ay madaxwaynaha loo tagay gabdha wuxuu ku yiri: “labaatan waaye, labaatanaa leedihiin sida hadda ku fadhidaanuu yiri, laakiin waxaa loo baahan yahay dadaal, laakiin waxaa loo baahan yahay dadaal” dadaalka maxay tahay? Muu yiraahdo ama madaxdu may tiraahdo: “Gabdhaha Soomaaliyeed waa soo halgameen, hooyadii maalintii dagaalka dhacay iyadaa ubadkeeda korinaysay, ubadka ayadaa korisay, hooyadii shaahay karinaysay, shidaal bay iibinaysay” waa la ogyahay kartidanada iyo karaamadaan leenahay! Nalama ogalo. Raggana ma ogolo, gabdhaha ragga dhahaya “Raggow noo hiiliya” ku ka ogoli majirto haddaba ha doonina. ani kursigayga dirqi ayaan kusoo baxay wiil ayaa i daba galay oo dhahay islaantaan meesha halaga qaado in badan ayay meesha joogtaye, laakiin waxaan kusoo baxay kartidayda iyo shaqada aan qabto, gabdhow run ayaan idiin sheegayaa Gabdhow ani runaan idiin saheegayaa run ayaan idiin sheegayaa. Waxa ku jirta guddiga guddiga dastuurka gabar baa ku jirta oo hadda na soo eegaysa

**Qodobkii qodobka maxay ahayd saddexaad faqraddiisa shanaad yaah, waxa la yiri; laguma caddaynin waxa la yiri:** "Gabdhaha hala qaybsadaan maamul gabaleedyada, gabdhaha hala qaybsadaan federaalka yaa la yiri; laakiin, lama oran 30% halaga dhigo". Ani hadda waxaan qabaa hadaad tiraahdaan, hays jilcininaan leeyahay hadaad tiraahdaan: : "waar aniga siyaasiyeen nahay qarashaa haysannaa. Lacag waala helaa waa ogtihiin lacag waala helaa.lacag baan heleenaa anagaa is daafaacayna" dhaha; rag baan cod ka rabnaa hayhaata hayhaata ma jirto. Marka aniga waxaan rabaa, marka aniga waxaan rabaa gabdhaha Soomaaliyeed ee way I maqlaysaa Duniyo waxaan ragbaa warka inay fidiso ee civil society-ga gaarsiiso.

Waa u jeeddaa baryada naga dhacaysa. Walaalayaalowda naga dhacaya waad maqlayseen baarlamaanka gabdhihii Soomaaliyeed calaacalka naga baxaya waa arkayseen. Waxaan rabnaa gabdhihii civil society-ga inay nasoo garab istaagaan. Ayaga haayadaha ku jiro, ayagaa naga il baxsan. Ayagaa meelkasta galo. Waxaan rabaa gabadhaha inay la garab istaago.
Waxaan leeyahay aqoonyahannada gabdhaha Soomaaliyeed, hadda aniga aqoon waxaa u malaynayaa waa naguyartahaan u malaynayaa. Waxaan maqlayay aqoon gabdha halagu qaato wiilbaa yiri. Aqoon iyo tartan ha galaanoo jaamacadaha ha lagu qaato! Waar qaar waxa nagu jira magacooda qorikarin anaa runta idiinsheegayee. Gabdhahannaga raggana waxa jira kuwo aan wax qorin oo qabiil ku yimid. 4.5 baa laguyimid meeshaan. Anagu waxaan leenahay gabdhahannagaaba boqolkiiba gabdhayaryaroo jaacabado ka soo baxayoo qurqurux badan baaba nagu jira. Oo hadda hadday wax noqonkaraan noqonaya.

Wasiirrada nalama siiyo. Wasiir ku xigeen ma qaataan. lacag nalama siiyo. Maamul goboleedyada, haddaan baxo anigu gobolkayga tago ninka xildhibaanka ah lacaguu sii xanbaarsan anna kumi ma wato. Sideen marka aan ula qaybsadaa maxay ahayd raga wax ula qaybsadaa? Marka gabdhihiinaa meesha fadhfadhiyee quruxda badanow, wax la yiraahdo kala saraynna gabdhaha ma jirto. Manta waxaan arkayay laba gabdhoodoo sanatarrada la yiri waxay yihiin: "Guddoomiyayaashii sanatarrada waaye iyo habdhorayaashii" meeshaan waxaa loo baahanyahay waaya-arag, waaya- aragaa loo baahanyahay. Gabar shalay baarlamaanka soo gashay kama hadlikartaba. Wixii aan dhib soo marnay maba ogidinba waxaan dhib soo marnay. Marka waxaan leeyahay guddoomiye ani hadaa aa idiidaysaan waan iska baxayaa Ihaah abarkiisoo saacadahaygiina waaba gabaabsi baaba ku jiraa, aniga gabaabsi baaba ku jiraa, guddoomiye haddaad I diiddeena waan ka dhaadhacayaa. Gabdhohoow, noolaada. Anuu haddaan xildhibaan noqdana waa khayr hadaan noqonaynna waa soo dhergay anigi intii tamartay ah macasalaama.

**14) Xil. Ismail Eid Mohamed**

Waayahay bismilaah alxamdulilaah wasalaatu wasalamu calaa rasuulilaah amaa Bacad. Ee mahadsanid mudane guddoomiye. Marka hore waxaan rabaa inaan umahaceliyo ee guddiga labadiisa qaybood ee qaybta uu hoggaaminayo abukaate Burhaan iyo qaybta Xuseen Idiow hoggaaminayo sida horay loo sheegay waa maalin aad ufarxad badan, qofkastoo Soomaaliyeed oo fursad uhelay inuu maanta dastuurkii ummaddaan Soomaaliyeed wax ka hagaajiyo,

Waxaan rabaa in bulshada iyo culimada soomaaliyeedna aan tilmaamo iney fursad u tahay waayo inbadan oo da'yarta soomaliyeed ah waxaa shaki laga galiyay dastuurkoodii inaanu diinta waa faqsaneyn oo uu ka hor imanayo culimadii arinkaa ka hadleysay maanta waxay jaanis u haystaan in dastuurkaas wax ka saxaan, haday xidhibaannada soo dhexmarinayaan afkaartodii iyo haddii ayagu toos u keenayaanba, waxaan qabaa inay jaaanis u tahay gudigana waxaan uga mahadcelinayaa,, anigu waxaan fiiriyay dhammaan afarta cutub meel kasta oo kalmada shareeco ku qorneyd waxay ku badaleen xeer, waana wax aad u wanaagsan  waana wax aad u wanaagsan waayo' Ilaahay subxaana watacaalaa kitaabkiisa ayaa sharci ah Shareecada waxay dhahaan wixii ilaahay adoomadiisa u jideeyay oo caqaa'id iyo axkaam ah baa sharci loo yanqaanaa wixii intaa ka soo hara ee ay dadku sameystaan xeer buu iska noqonayaa.

Xeerku mar diinta wuu waafaqi karaa marna wuu khilaafi karaa, marka xeerku haddii aan diinta khilaafsaneyn dhibaato kuma jirto. Culimadaan rabaa iney aad ula socdaan arinkaasi oo ay nagu baraarujiyaan wixii ay dareemaan.

**Qodobka 1(1)** waxaa ku qoran soomaaliya waa Jamuuriyad Federaali ah oo muslim ah lehna gobonimo ku saleysan caddaalad iyo sarreynta sharciga. Halkaa sidii xildhibaanadii hore waxaan la qabaa inaan muslim nahay waa la ogyahay waxaan dunida kaga duwanahay waa inaan sunni nahay in kalmadaa sunni la raaciyo oo layiraahdo "Somaaliya waa Jamuuriyad Federaali ah oo muslim sunni ah" in la dhaho ayaan qabaa waxayna noqon doontaa wax inoo gaar ah oo aan aduunyada kaga duwanahy ayay noqoneysaa, dadka qaar waxa ay raacinayaan shaafici waa la raacin karaa waa run dhamaanteen shaafici baan nahay laakiin shaafici waa madhab oo qof bani'aadam ah dajiyay, waxna ku saxnaan karo waxna ku qaldanaan karo, laakiin shareecada inaan sunni raacino oo  muslim nahay baan waxa asal ah oo la isku raacsanyahay ah.

**Qodobka 2(1)** waxaa ku qoran islaamku waa diinta dalka Jamuuriyadda Fadeeraalka Soomaaliya halkaana waxaan raacin lahaa in lagu daro "Islaamku waa diinta, dalka iyo dadka Jamuuriyada Federaalka ee Soomaaliya" oo dadkana la raaciyo oo aan dalka kaliya laga dhigin, sabab too ah waxaa diinta qaadanaya ee muslimka noqonaya dalka ma ahane waa dadka, marka ay qaataan ayuu dalka isagana dal islaam noqonayaa.

**Qodobka 5aad:** oo ka hadlaya afafka dastuurkii hore waxaa ku qornaa afafka rasmiga ah kan hadda waxaa lagu qoray afka rasmiga ah, afafka waa laga baddalay oo jamac ah afkaa loo baddalay, hadana laba luuqadood baa la qoray luuqadda soomaaliga waa tan rasmiga ah ta labaadna waxaa lagu tilmaamay tan carabiga ah,  afkana waa la qoray afafkana waa laga tagay, aniga waxaan qabaa in sidii hore lagu celiyo afafka la dhoho isla siiqadii hore afka rasmiga ha ee Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa MAAY iyo MAXAA TIRI**,** af carabiguna waa luuqada labaad oo sidiisa loo daayo ayaan qabaa, sida xildhibaan xusul sheegayayna afguriyo badan baa jiro,    maxaa, maxaa dhahday iyo kamid yihiin kuwaasna waxaan qabaa faqradaan cusub ee lagu soo kordhiyay oo ah in dowladda fedaraalku ma'suul ka tahay hormarinta afafka in lagu qeexo afguriyadana ay hormariso dowladdu ay mas'uul ka tahay hormarinta oo lagu daro, laakiin labada lahjadood israacistoodii baa afsoomaligu ka dhalanayaa sidiisaana u arkaa iney sax ku tahay.

**Qodobka 7(3)** iyo faqrado kale aan soo dhaafayba waxaa kujira dowladda federaalka iyo dowlad gobaledyada ayaa qoran, halkaana waxaan dhihi lahaa in laga  dhigo "maamul gobaleed loo badalo".

**Qodobka 8aad**: waxaad moodaa qeybtiisa 1aad ineyna aad u caddeyn waxaa qoran shacbiga Jamuuriyada Fereraalka Soomaaliya waa mid lamana kala qeybin karo, wuxuuna ka koobanyahay dhammaan muwaadiniinta, qeybtaan dambe waxaad moodaa inuu madmadow ku jiro lama kala qeybin karo waxa uu ka koobanyahy dhammaan muwaadiniita micnaha qeyb baa ka dhiman ma dhameystirna in siiqadaas dib ugu laabtaan baan qabaa.

**Qodobka 8(1)**: muwaaddinka Jamuuriyadda Federaalka soomaliya wuxuu qaadan karaa jinsiyada dal kale, dal kale halka layiri waxaan qabaa in la qeexo dal kale unbaa la yiri ma hal dal buu ka qaadan karaa ma labuu ka qaadan karaa iney cadaato ayaan qabaa.

**Qodobkan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** oo xildhibaano badan halkaan soo istaagay hadal ka keeneen,  waxaan qabaa aragtideydunu ila tahay waa run xuquuqda ummadda Soomaaliyeed meelkasta ay joogaan inaaan difaacno aan ka hadalno way fiicantahay, laakiin mararka qaar anagoo ummaddii soomaaliyeed difaaceyno in ummadda Jamuuriyadda ku nool xuquuqdoodii la dayaco naftirkeeda ma qabo, waxaa hadda laga hadlayo ee halkaan loo fadhiyo waa dadka Jamuuuriyadda ku noolaa, xuquuq bey leeyihiin sida ummadda soomaliyeed ee meelaha kale ku nool xuquuq u leeyihiiin, markaa waan qabaa dadkan Jamuuriyada inaan xuquuqdoodii la duudsiin, waayo qodobkaan 8aad iyo qodobkaan kale waxaad arkeysaa ee xuduudaha qeexayo wey iska hor imanayaan inagoo ummadda soomaaliyeed meel kasta  oo ay joogaan xuquuqdooda ilaalineyna haddana waxaan qabaa in umada Jamuuriyadu xaqeedu ilaalshanaaado qofka ka maqan Jamuuriyada ee aan labada midiibay ku jirina in xeer jinsiyada qaabka uu ku qaadan karo loo sameeyo ayaan qabaa laakiin, aan Jamuuriyadii loo baabin ummad kale oo meel kale xuquuq kuhaysata

**Qodobka 9aad**: magaalomadaxda Jamuuriyadda federaalka Sooomaaliya waa muqdisho waan ku raacsanahay, laakiin waan jeclaan lahaa inaan waxba la rarin maqaamka muqdisho waxa uu noqonayo ma caasimad federaalku maamulayo in araagtiyada kala duwan  uu ee guddigu ka qoray halkaan lagu qoro aana la fogeyn baan qabaa, waayo muqdisho inbadan baa xaalkeeda laga meeraysanayay dastuurkuna maanta waa uu furanyahay maanta maalin ay kaga wanaagsantahay malaha waa magaalo dun wanaagsan in badan dadkana haysey waan in xaqeediina in la siiyo waan qabaa.

**15) Xil. Salah Sharif Sayid Ali:**

Mahadsanid guddoomiye.  Bismilaah Alxamdulilaahi wasalaati wasalaami calaa ashrafil mursaliin wa imaami mutaqiin sayidinaa Maxamedin wacalaa aalihi wasaxbihii ajmaciina amaa bacad. Guddoonka  labadiisa gole, xildhibaanada, guddiga labadooda qayb iyo culima udiinka iyo bahda saxaafada iyo bulshada qaybaheeda dhammaan asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu , bacda salaam.

Maanta waa maalin taariikh wayn kuleh ummadda Soomaaliyeed meel walbooy joogaan. Waa maalin aan u taaganahay in aayaha ummadda Soomaaliyeed oo gayiga Soomaaliyeed

ku nool, inaan jiheyno. Waa fursad aad u qiimo badan oo ay tahay in waajibkii Ilaahay nasaaray aan kaga gudano, markaa Ilaahi nawaajafiyaa ku mahadsan; kaddib xildhibaanada waqtigii hore nama waydiinaayo kan soosocdana saas oo kale; laakiin, waxaa rabnaa hadda inaan ummadda Soomaaliyeed si fiican ugu shaqayno, si mustaqbalka aaya fiican ay ugu noolaadaan oo wiilasha iyo gabdhah soosocda mustaqbalkooda hagno. Kaddib mudane guddoomiye, waxaan rabaa qodobada qaar inaan wax ka taabto sida asxaabti iga horeeyay tilmaameen

- Qodobka 1aad faqraddiisa 1aad: waxay leedahay Soomaaliya waa jamhuuriyad federal ah oo muslim ah lehna gobonnimo ku salaysan caddaalad iyo saraynta sharciga, siday sheegeen xildhibaanadii iga horaysay, waxaan rabnaa in lagu daro in qodobkaan soomaali muslim sunni ah in 100% shacabkaan Soomaaliyeed ay yihiin muslim sunni ah oon mad-hab kale wadanka ka jirin. Saasoo kale waxaan rabnaa, in lagu daro shaafici ah. Shaafici ah waxyaabo badan ayey daaweynaysaa, wadankaan culumaduna waa inala joogtaa khayr Allaha siiyee waxaa inala jooga sheekh Cali Wajiisi, culima badan ayaa fadhiya culimadu waxay isku raacsan yihiin Soomaaliyeed in wadanka mad-habtiisu inay tahay shaafici. Cid diidan malaha, madaahiibta kale, macnaheedana mahan in madaahibta kale khaldanyihiin waa saxsanyihiin. Laakiin, ummaddaan Soomaaliyeed is qabqabsiga, khilaafkiyo dhibaatada kajirta oo diimeed, khilaafka la abuuraayo u dhammaado sida wadamada caalamka yihiin,waxaa waaye hadda wadanka Sucuudiga mad habtiisa Xanaabila waaye,saasoo kale Malaysiya Shaafici waaye mahad-hab kale lagama ogola, saasoo kale anagoo ixtiraamayna madaahibta kale oo wanaagooda iyo khayr kooda sheegayna si ummaddaan khilaafkooda u yaraado. Mudane guddoomiye Waxaan codsanaynaa in lagu daro qodobkan "muslim sunni ah oo shaafici ah".shaafici ma ahan hal qof waa madaraso waaye.

- **Qodobka 2(1):** waa in lagu daraa kalmadda dadka laga dhigaa "Islaamku waa diinta, dalka iyo dadka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya".Waxaan bogaadinayaa qodobka 2aad faqraddiisa 3aad oo ay hadda guddigu ku soo dareen, waxaa reebban cayda diinta islaamka, marna karaahiyadeeda iyo wax kastoo wax udhimaya xushmadda arrimaha diinta islaamka. Waa qodob aad umuhiima oo ka ilaalinaya in diinta lagu ciciyaaro.

- **Qodobka 3aad faqraddiisa 5aad** maamooyin keenu waxay dhaheen waxaan rabnaa 30%, waan ku raacsanahay in xaqooda la siiyo oo lasoo dhaweeyo aadaa uqabnaa; laakiin, waxaan is leehay waa isku yareeyeen, waxaa ba la dhahay qof iyo cod hadduu dastuurku ku salaysan yahay qof iyo cod, dadka Soomaaliyeedna boqolkiiba 60 gabdho yihiin idinku maa is dooranaynin ma idinkaa kala shakisan? Meesha ay ka toosi la'adahay waa maxay? Gabdhuhu waa inay isku kalsoonaadaan, waagii hore hadduu oday wax magacaabi jiray ama dawlad gobaleed hadda waxaan u soconnaa qof iyo cod. Markaa qof iyo codka waa inay ku kalsoonaadaan, xuquuq doodana la siiyo oola soo dhoweeyo ayaa damacsanahay soo dhawaata. Tan kale mudane Guddoomiye

- **Qodobka 5aad faqraddiisa 1aad :** wuxuu leeyahay afka Soomaaliya (MAAY IYO MAXAATIRI) waa afka rasmiga ee Jamhuuriyada federaalka Soomaaliya, afka Carabiguna waa luuqadda labaad. Mudane guddoomiye qodobkaan dastuuri waaye

waxaa hadda naloo qaybiyay dastuurka jamhuuriyada Federalka Soomaaliya wax kabadalkiisa, cusubta 1,2,3 waxaan ognahay mudane guddoomiye af maayga waa la qoray waxaa waaye baydhabo ayaa lagu soo daah furay guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Madaxweynaha koonfur galbeed ayaa soo daahfuray, haddana meel uu ku qoranyahay iyo dastuurka naloo soo gudbiyey waxaan codsanaynaa hadda kadibna waxyaabah la keenaayo golaha shacabka waa in nuqul kamida afka MAAY lagu soo daro.tankale afka soomaaliga sida la sheegay waa MAY iyo MAXAA; laakin, lahjado badan ayaa jiro haddii maxaa tiri ay tahay maxaa tiri iyo xaa tiri tahay af maygana waxaa jira  May dhartii,May tiri,may dhartii wuu badanyahay waxaa jira maxaaw afk ladhahaayo markaa waxaa rabnaa kuwa asalka ah ee maay iyo maxaa tiri waa in la qoraa. reer maxaana waxooda isku soo celceshtaan reer mayna sidoo kale isku soo ceshtaan, Mudane guddoomiye.

- **Qodobka 6aad**: wuxuu tilmamaamaa calanka iyo astaanta qaranka, calanka sida la sheegay waa in midabkiisa la ilaaliyo. Calanka waa inuu noqon mid qof walba maro iska tolanayo, oo noqdaa mid ka turjmayo qaranimada, maaddaama aan nahay bulsho 100% muslim ah,  in calanka  lagu soo daraa wax ka turjumaaya diinta islaamka. Tusaale ahaan adduunku wuxuu uqaybsamaa muslin iyo non muslim.  Dadka muslimku waxay caan ku yihiin bisha ama hilaal dadka aan muslimka ahayna waxay caan kuyihiin saliib, markaa waxaan rajaynaynaa in bisha lagu soo dari karo, waxaa kale oo lagu soo dari karaa tawxiidka Laa Ilaaha Ila ALlaah, Wax islaamnimada ka turjumayaa calankeena inuu ka muuqdo in lagu soo daro ayaan rajaynaynaa.
- **Qodobka 8aad**: wuxuu ka sheekaynayaa jinsiyadaha. Walaalayaal, anaga xildhibaanaan nahay inta waxaan ku matalaynaa dadka degan Jamhuuriyad Federaalka Soomaaliya, ayaan halkaan ku matalooynaa; laakin, haddaa sheegano jabuuti baa maxaa ladhahay u joognaa Ethiopian ujoognaa, Kenya ujoognaa wax macquula ma ahan,taas waxay xaqooda duudsiinaysaa,shacabkii jamhuuriyadaan ku noolaa markaa waxaan rabnaa in jinsiyadda Soomaaliyeed loo ogolaado dadka ku dhex nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Laakiin Walaalaheena kale waxay inagu lee yihiin xushmo iyo karaamo haday u baahanyihiin "double citizenship" waan sii naynaa.

- **Qodobka 8aad faqradda 2aad** : wuxuu ka sheekaynayaa qofku inuu qaadan karo "double citizen ship". Waxaan soojeedinaynaa jagooyinka ugu sarsareeya sida: madaxweynaha, guddoomiyaha baarlamaanka iyo R/Wasaaraha in qof aan dhalashada Soomaaliyeed haysan uusan u tartami karin; waayo, caqabad badanaa ka dhalanaysa laba dal ayuu u shaqaynayaa. Si loola xisaabtamo qodobkan waxaa loo fulin laa yahay wadankaasaa diidaaya, waxaan codsanaynaa dadka ugu sarreeya inaan la siin dhalasho kale, qofka tartamaya in lagu xujeeyo Soomali dhalasho deedda kaliya inuu haysto.

  **Qodobka 9aad**: Magaalada Muqdisho caasimadeena waaye, haddii codka la furo waxaan aamin sanahay inuu qof ashraaf ihi ku soo bixidoono, hadda kahorna wuu ahaan jiray markaa bahasha ha la isku furu qof iyo cod ha ahaato.dadkaan doorashada ku imaanaya ha dhammaado sidii hadda ka hor Maxamed Shariif Caydaruus usoo baxay ayaa waxaa rajaynaynaah doorashada soo socota inay dhici doonto. Aad baa u mahadsantihiin wasalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuh.

**16) Xil. Asha Kos Mohamud Omar:**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Mahadsanid guddoomiye. Guddoonka Baarlamaanka Faderaalka Soomaaliya, xubnaha labada gole, gudiga labada guddi ee dastuurka, martisharafta, ururrada bulshada rayidka ah iyo culuma awdiinka, miidiyaha iyo hawlwadeennada galab wanaagsan dhammaantiin.

Een waxa sharaf iyo karaamo noo ah manta inaan ka hadalaynoon u golo joogno Dastuurkii Jamuuriyadda Faderaalka Soomaaliya dooddiisii. Waa Ilaahay mahaddii anigo oo marxalado badan oo dastuurku soo maray ka mid ahaa oy iisuurto galiwaayeen inaan manta anoo ku jira baarlamaanka 11aad aan dooddiisii dabarkiina hore aan uga furnay maantana aan u golo joogno dooddiisa.

**Qodobka 3(5):** Haddaan gudagalo cutubka koowaad een firiq qodob een cutubka koowaad qodobkiisa saddexaad intaanan gelin waxaan su'aal waydiinayaa labada guddoomiye guddi iyo guddigooda; guddiga inkastoy gabdhuhu ku yaryihiin; laakiin, waxaan u dirsannay laba gabdhood oo miisaan iyo culays ku leh gabdhaha Soomaaliyeed. Marka waxaan leeyahay gabdhihii Soomaaliyeed ee noogu jirayow,miyaad ilduufteen mise waa laydinna codeeyay? Su'aashaan waydiinayaa guddiga waxayn tahay: maxaad loogu soo dari waayay waad qorteen waxa waxbaad ku soo dardarteen; laakiin, dhammaystirka maxaad u raaciwaydeen? Kaasoo ah: ugu yaraan 30% ugu badbnaana waannu leenahay. Ugu yaraan markaan leeyahay waa meesha ugu yar. Todobaada 70ka hadhayna ragga waan kula tartamayaa. Horta saas u ogaada. Marka haddaan soo gudagalo sida uu u qoranyahay, Waxay yidhaahdeen guddigu: "haweenku waa inay kamid noqdaan dhamaan saddexda laamood ee haayadaha dowlada iyo guddiyada madaxbanaan heer faderaal iyo heer maamul gobol heer dowlad goboleed, anigu maamul goboleed baan odhan lahaa iyo dawladaha hoose si wax ku oola"

Walaalayaal siyaasaddu ma gasho si wax ku oola iyo , hala xuso iyo wax hala siiyo, siyaasadi ma gasho. War dawlana warqad buu ku qoran yahay. Dastuurkaan waa dastuurkii Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya, haweenka Soomaaliyeedna waxay ka mid yihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed. Markaa sidaa daraadeed mar haddaad intaa soo qorteen waxaan cod buuxa ku leenahay, haddaanu nahay haweenka ku jira labada gole waa in lagu daraa ugu yaraan 30%, loona civil society-ga civil society-ga sidan: "Haweenku waa inay kamid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee haayadaha dowlada iyo guddiyada madaxabanaan ee heer faderaal, heer dowlad goboleed iyo dawladaha hoose ugu yaraan 30% gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo".

Waalalayaalow anagu ragga soomaaliyeed idinma baryaynee waa arrin dastuuriya in lagu daro idinka dan bay idiin tahay anagana dan bay noo tahay. Suudhka iyo quruxda aad hortayadu ku fadhidiin gabar baad kala timaaddeen iskamaynu imanin. Guryahaan inii galaynaa, bangiyadaa layniga xidhanayaa waxkasta oo noogu suurta galaaya in aan tan ku helno ayaan ku samaynaynnaa. Dastuurka qaranka hadaan lagu darin 30%, 67 gabdhood banaankaas istaagayaan waxna ansixin maayaan, waanan ku dagaalamaynaa ilaahayna waa nagu garab galayaa Inshaa Allaah.

- Takale haddii aan laga hadlin, waa laga hadlaya **Qodobka 8aad:** Haday guddigu ka il duufeen waxaan leenahay intaa meesha ku qoray ee lagu soo qoray sharciga xuquuqda caruurta 1989 ee waafaqsan dawladu ee anaguna ka mid nahay kaa halagu soo dabaqo.

- **Qodobka 9aad**: qodobka sagaalaad bismillaahi raxmaani raxiim waxay yidhaahdeen qodobka sagaalaad: Magaala madaxda Jamhuuriyad Federaalka Soomaaliya waa muqdisho, la iskuma diidana, maqaamka magaala madaxda soomaaliyeed waaxaa go'aan looga gaadhi doonaa dib-u-eegista dastuurka. Qodobkan sagaalaad buu ku qoran yahay dib-u-eegista dastuurkana waan ku guda jinaa maxaa dib loogu dhigay ee loo gu raray cutub aan afarta cutub ee aan ka shaqaynayno ahayn oo cutubka shanaad layidhaahdo, maxaa dib loogu dhigay?

  **Ilma adeerayaalow, waxa la yidhi: "Habeenkii sacabka lam tumo haddaan xeeladi ku jirin".** Waa in la caddeeyaa sababta loogu dhigay dib? Afar milyan ama saddex milyan oo soomaaliyeed in xuquuq dooda mar walba la duudsiiyo illaa baalamaankii 9, kii10 ilaa kan 11 soomaaliyeey la idinka yeeli maayo? Guddiyoow dib iskugu noqda doodan afarta cutub laga doodayo halgu soo daro doodeeda maqaamka muqdisho iyo ka hadalkeesa. Maxaa lagu diidan yahay! Anagu waxaannu ugu hadlaynaa gabdho Soomaaliyeed baan nahay. Anigu ilaa 12kii ilaa manta intaan baarlamaanka ku jiray Muqdishaa laygu doortay. Markaa ma mar haddaan anigu xildhibaan ka tirsan ahay dadka Muqdisho lagu soo doorto, muwaaddin Soomaaliyeedna aan ahay, waxna aan ka bartay, dhexjoogo kuna dhalay waxaan leenahay Xuquuqda Muqdisho ay leedahay caasimadda qaranku, waa inuu dastuurkan dooddiisa lagu daraa iskuna raacaan xildhibaanada Soomaaliyeed. Maanta magaca iyo martabaddaa dastuurkaan aan kaga shaqaynayno waxaa kamida maqaamka Muqdisho oo aynu meel saarno. Wasalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatu. Guddigana su'aashaydii aan waydiiyay jawaabteeda waan ka rabaa. Salaamu calaykum.

**17) Xil. Mahdi Mohamed Gulaid:**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Wasalaatu wasalaamu calaa Rasuulillaah sayidinaa Maxamed wacalaa Aalihii wasaxbihii wasallam. Aynu is maqalno xildhibaannada sharafta leh ee baarlamaanka. Waan salaamayaa dhammaan xildhibaannada labada aqal iyo shir guddoonkaba. Ee waxa kaloon, run ahaantii sida fiican iyo af Soomaaliga ay ku soo qoreen aan uga habnalyaynayaa labada guddi oo ay ka muuqato in shaqo wanaagsan in ay ay qabteen.

Ugu horrayn waan akhriyay khaasatan cutrubkan uguhorreeya hadday noqaoto warbixinta iyo hadday noqoto ee qodobada dastuurkaba.

Waxaan soojeedin lahaa marka u horaysa in dastuurka lagu daro bilowgiisa intaan qodobka 1aad loo galin, waxa la yidhaa (Pramble of constitution) ama hordhaca ama araarta dastuurka. Oo dastuurka bilmatal qodobkiisa 1aad waa baaqa baa la yidhi wuxuu ka hadlayaa Jamuuriyadda Faderaalka Soomaaliya iyo waxay tahay buu u abtirinayaa; laakiin, ummaddu inay hadasho Pramble-ku ama hordhucu ama Araartu dadkuu u hadlaa oo waxa uu sawir ka bixiyaa, muwaadiniinta guud ee uu dastuurku een ka hadlayo waa ummadda oo hadlaysa.hadaad dasaatiirta kale aragtaan waxay yidhaahdaan: we the

people; haddaan Soomaaliya ka ka soo qaadno waa: Federal Republic Of Somalia. Markaa Pramble-ka ama hordhaca oo laba baaragaraaf saddex baaragaraafna wuu noqon karaa, ee in lagu daro looyarana waa ku jiraan labada guddib, wixii kale gacanana diyaar baanu la nahay inaanu ka bixinno.

- **Waxaan u imanayaa qodobka 1aad oo qeexaya Soomaaliya waa jamuuriyad fadaraal ah oo muslin ah.** Waxaan la qabaa een xildhibaanadii halkan ka hadlay in ayn **muslim sunni** sii raacinno. Ee; waayo, waa arkaysaan sida ay Afrika khaasatan ugu fidayso qaybta kale oo aynu islaannimada guud wadaagnaa. Markaa si loo xadido anigu waxaan adkayn lahaa in sunni la raaciyo. Muslim ah baarakad sunni ah.

- **Ee qodobka labaad waan uga** hambalyeynayaa labada guddiba, inay kala saaraan xeer iyo sharci. Dhowaan markii golahani uu soo saaray maalintii 1dii bisha, dhacdadii dhac dhacday ayaa xeer u ah taynnu soo saarnay. Waxa layidhi mayee sharcibaad soo saarikartaan. Dood badan baa looyarada dhexdooda ka jirtay. Markaa in sharci iyo xeer la kala saaroo sharcigu uu yahay maa ansala Laah, xeerkuna wixii ama baarlamaan soo saaro ama ha'yadaha kale ay yihiin ee ka farcama.

- **Qodobka 3aad ee waxaa uu ka hadlayaa diinta Islaamka markuu ka sii hadlayo** Nabi Muxammad marka sida qoraalka Muxammad fiican baad u qorteen ee hingaaddii Carabiga ee uu ahaa; laakiin, "Nebi" ma nabibaa mise waa "Nebi" ma een ee bii ay baa mise waa een ii bii ay taana inaad saxdaan baan jeclaan lahaa.

- **Qodobka 2aad** ee islaamku waa diinta een een ka hadlaya in Soomaaliya ay tahay dad muslima oo diinta Islaamku ay tahay diinta dalka, anigu waxaan odhan lahaa dalka istayt marka lakala saaro, molto fiidhiyow kontanshan waxa uu istaytka u yaqaannaa een 1933 ama qaran ama dal ama dawlad waxa uu u yaqaannaa khaasatan inayihiin dad inuu dhulkaa ku noolyahay bermenen bebyulayshan dhifayridh teriteri dhul inuu jiro xuduud geferments xukuumad ama ee inay jirto iyo awood ay xidhiidh kula yeelatiyo iyo macaamil dalalka kale. Markaa diinta dalka haddii diinta uu dalku leeyahay, diinta dhulkaa leh ee dawladdu ma leh, dadkiina maleh, taa macnaheedu waxay tahay dawladdu awood fulineed ama ay ku hora mariso ama ay ku meelmariso maleh. Markaa Waxaan soo koobi lahaa inaan idhaahdo, Soomaaliya waa dad, diinta islaamku waa diinta, dalka, dadka iyo dawladda". Haddaan dawladoo kaliya lagu koobayn oo sideedii hore ah. Haddii kale waxaa iman doonta dawlad tiraahda diinta dee dalkaa lehe dadka dalka ku dhaqanow, cibaadaysta; laakiin, "secular" gefermanti ah oo cilmaani ah, oo marka dastuurkeenanu uu sii xoogaysto ee dawladnimadu xoogaysataba sharcigu waa xoogaysanayaa. Markaa muranka sharci baa imana si aan taa meesha uga saarno diinta dalka dadka iyo dawlada ayaa islaamku yahay ayaa wada koobi lahayd baan oran lahaa.

- **Qodobka 3(1)**: anigu caddaaladda bulshada waxaan idin odan lahaa ha ka saarina Soomaaliya waxaa halkaa kala geeyey caddaalad. Caddaaladda bulshaduna macnayow fara badan bay ku e fadhidaa. Waa lagayaabaa in qodob ee cutubka kale oo ka hadlaya xuquuqaha ay ku jirto ama meelakalaba ay ku jirto; laakiin, mabaadii'ada guud iyo cutubka xuquuquhu way is caawiyaanoo way is kabana. Hadhow haddii maxkamad dastuuriya ama doodo sharci yimaaddaanna in halkanna qodob aad ka soo qaadato

cutubyada gaarka u khiseeyana aad ka soo qaadataa way ku anfacaysaa ama maxkamadaha ha noqdaan ama garyaqaannada iyo looyarrada ha noqdaane.

- **Ee qodobka saddexaad faqraddiisa afraad,** waxyaabo dhawra bay sheegaysaayoo anigu waxaan ku soodaray karti iyo hufnaan. Halka hufnaanta waa sheegteen; laakiin, waxyaabaha lagu karti in lagudaraana way fiicnaan lahaydoo kombintansigu waa wax aad u wayn, marbaynu gaadhidoonnaa inshaa Allaahu dadka kartidooda iyo aqoontooda lagu xusho waana halka aynnu u soconno ee aynu gaadhidoonno.

- Qodobka 3aad faqraddiisa todobaad dhulka, badda, hawada iyo khayraadka dabiiciga ahi waa hanti qaran; waxaana masuul ka ah Dawladda Fadaraalka Soomaaliya. Anuu waxaan ka saaray, soo jeedin lahaa in laga saaro "Oo ay shacabka jamhuuriyaddu wada leeyihiin". Anuu waxaan aamin sanahay dhulka iyo iyo dalka iyo iyo deegaanka inay dawladdu leedahay. dawladuna xuquuq ku siiso muwaaddinka Soomaaliyeed, habka uu ku lahaanayaana hab sharciyad leh tahay; laakiin, dhulka Shacabkaa leh haddii aanu nidhaahno, dawladdii waxyaabihii danaha guud ahaa way ku adkaan doonaan oo dhulkii shacasbka Soomaaliyeed uu lahaado. Shacabkuna wuu sii kalabaxbaxayaayoo nin walbana goofkiisuu sheegan doonaa. Marka waa inaan dhulka dawladda u u xilsaarnaa ay leedahay dastuurka ay ku caddahay duni badan baana sidaas ah.

- **Qodobka 4aad** sarraynta dastuurka **faqradda labaad** oo aydun kaga hadasheen een ururrada dhowr wax baad faqradda afraad aad tirinaysaan waxaan ku soo daray "ururradda iyo xisbiyada siyaasadeed" Waayo, marka ururradda la sameeyo xisbiyaa loo gudbidoonaa, markaa xisbiyadu inay ku jirtaana o waa ay fiican tahay. Waxaa kaloon een dood ka qabaa oon ku ku xoojinlahaa talinta sharciga iyo sarraynta sharcigu inay kala kala saaranyiinoo, talinta sharcigu sideeda qodobka ay ugu jirto ay ku jirto; waayo,talinta sharcigu waa "Rule of law" saraynta sharciguna waa "suprme of law" ama "constitution".

- **Qodobka 5aad faqradda koobaad** luqadda mise luuqadda ma luqad baa mise waa luuqad? Anuu heesahuun baa in lagu luuqeeyo aynu aynu dee maqli jirnay hebelow, heestaa ku luuqee iyo hebel fanaan hebel baa kuluuqaynaaya. Markaa anigu "luqadda" baan oran lahaa ee luuqadda ma aha. Taana waa mulaaxado kale oo aan ma aragtay ii muuqatay.

**Een qodobka faqraddiisa labaad waxay leedahay:** Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa, marka uu luqadda aad ka hadlayseen, anigu waxaan odhann lahaa waajib si uu u noqdo maandhaantari borofishan baa la yidhaa waa in ay daryeeshaa; waa in ay daryeeshaa waxay ku waajibinaysaa dawladda in af Soomaaligii ay daryeesho. Waxaan ku soo kordhiyay qodobkaa shanaad faqrad saddexaad oo aan leeyahay: Baarlamaanka federaalka Soomaaliya ayaa soo saaraaya xeer gaar ah oo lagu dabaqaayo daryeelka horumarinta iyo dhowrista afka Soomaaliga", markaa xeerkaa gaarka ah ee baarlamaankani soo saarayo ayaa xukuumaddana ku waajibinaaya oo haddaad aragteen dunida waxay leeyihiin macaa macaahiid ama institution-no jaamacadaha qayb ka ah oo afka iyo dhaqanka iyo luqadda iyo barashadooda iyo hirgalintooda ee aad iyo aad uga shaqeeya. Sidaad ogtihiinna Soomaaliya waxay ka mid tahay ama af Soomaaligu wadamada lu luqadoodu uu sii dabar go'ayo. Imika tartan baa ku jira waddamadee baa afkoodu uu sii jirikaraa? Taa macneheedu waxay tahay

dhaqankooda iyo taariikhdeedu sii jirikartaa wadamadeebaase ay suulaysaa? Markaa anigu qodobkaa saddexaad baan ku soo daray oo aan leeyahay xeer gaara baarlamaankani ha soo saaro dawladda ku waajibiya macaahiid haddaytahay xafiisyada dawladda hadday tahay jaamacadaha in machadyo luqadda af Soomaaliga lagu kobciyo lagu hormariyo lagu meelmariyo ay sameeyaan.

- **Qodobka 5aad** in lagu soo kordhiyo faqrad cusub oo u dhigan "Baarlamaanka federaalka ayaa soo saaraya xeer gaar ah oo lagu dabaqaayo daryeelka horumarinta iyo dhowrista afka soomaaliga", markaa xeerkaa gaarka ee baarlamaanku soo saarayo ayaa dawladan ku waajibinaya "institution" macaahiiddda luqada af soomaaliga si gaara ah loogu kobciyo ay sameeyaan.

- **Qodobka todobo faqraddiisa saddex** dhulka Jamhuuriyadda so Faderaalka ee Soomaaliya anuu in la tiro waan waafaqsanahay. Qodobkaa sax waan idinku raacsanahay. Xuduudahaan u imanayaa qodobka todoba faqradda afar Xuduudaha Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya; horta xarfaha waxaan odhanlahaa ee halka ee bii cii ay ka tahay B,T,J,X, KH ka dhaha. Waxaan ku soo kordhiyay faqradda e foo xuduudeheenna waxaad tiraahdeen Waqooyi waa Gacanka Cadmeed ee Waqooyi Galbeed waa Jabuuti, Galbeedka Itoobiya Galbeedka waxaad tiraahdeen waa Itoobiya Koonfur Galbeed Keeniya. Koonfur Bari Badwaynta Hindiya; waayo, kiiskii maxkamadda ee ICJ inoo xukuntay doodda inoo dhaxaysay waxay ahayd equidistance line iyo maradian line, marka laga qaado "straight line" inay noqoto oo ay ku doodayeen. Imika maabkeennu sida uu u yaallaa waa sidaa. Markaa badweynta Hindiya waxaynu laba dhinac baynu kaga naalnaa Bariga iyo Koonfur Bari. Marka waxaan ku soo kordhiyay faqrad shanaad oo ah koonfur Bari ee Badwaynta Hindiya.
- **Qodobka 7(4)**: ee xuduudaha waxaan soojeedinayaa in xarfaha in laga dhigo B,T,J, waxaan sidoo kale ku soo dari lahaa faqradda cusub oo u dhigan "Koofur Bari: Badweynta Hindiya", waayo kiiskii ICJ noo xukuntay doodda inoo dhaxaysay waxay ahayd "equidistance line" iyo "maradian line", marka laga qaado inay "straight line" noqoto. Markaa badweynta hindiya laba dhinac baan kaga naalaa Bariga iyo Koonfur bari.

- **Qodobkaa 8aad faqraddiisa labaad,** jinsiyadda Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya ama waa Muwaadiniinta jinsiyadda ee ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed waxaan is leeyahay sharciga jinsiyada wuxuu u baahanyahaya, in maalin gaara loo asteeyo oo laga doodo. Milil korkii lama dhayo anigu haddaanu nahayn Xukuumaddii hore Fadaraalka Soomaaliya, waannu ku heshiin waynay waana la isla meel dhigiwaayay in la qeexo yaa Soomaali ah? Haddaadu tagto sharcigeennii 60kii, wuxuu leeyahay: "Soomaaligu waa qofkasta oo Soomaaliya waana dhiig" sida aragyiyaha laatiinka a aad ku sheegteen oo ka soo jeeda baa ah Soomaali. Sida uu ku helayo qodobka ee saddex ayaa wuxuu sheegayaa laba sidee lagu helayaa inuu aabbihii yahay, inuu ku dhashay, inuu u dhashay. Arrinta markaa jinsiyaddu ma aha wax maalin iyo laba iyo qayb aragti ka mida dood lagaga bixikarayo. Maalin gaara haddaynu u astayno jinsiyadda waxay ila tahay naynu lafa gurikarno. Baarlamaanku aad buu aragtiyahaa ugu kala duwanaan karaa, baarlamaanbadanna waa ay ka guuxaysaa. Ee qodobka sagaalaad baa ii hadhay waan ,wax ku darsan ,lahaa; markaa anigu waxaan taageersanahay xildhibaannada soo jeediyay sidii hore ee uu u qornaa ee ahaa ee: dawladda Soomaaliyeed in ay tahay sida saxda ah haddii aan kow jinsiyadda

muwaadiniintana lama odhanin waxa la yidhi: "Jinsiyadda Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya" markaa ma Jamhuuriyaddaa jinsiyad yeelanaysa? Mise muwaadinkaa jinsiyad yeelanaya? Qodobka qudhiisa siday guddidu u soo qortay markaad eegtaan, iyadoon anigu ayidsanahay jinsiyadda Soomaaliyeed waa mid qudh ah in loo daayo; marka. taa doodeeda anigu maalinta danbana waan ku soo noqonayaayoo dood gaaraan ka gelidoonaa hadduu Ilaahay yidhaahdo.

- **Qodobka 9aad baan ugu danbaysiinayaa;** taa iga raalli ahaw dee baarlamaankaaba ii fasaxay haygu dabataagnaane! Xildhibaannadaa yidhi: "Ha socdo" ma ogtahay? Yaa! Haa guddoomiyuhu hay fasaxo. Guddoomiye waad mahadsantahay. Waad mahadsantahay guddoomiye.
-
- Waayahay qodobka sagaalaad anigu waxaan ka mid ahay, xildhibaannada baladkaan Xamar ah lagu soo doorto. Xildhibaan Xusul iyo xildhibaanada kale anigaa kaga sii xaqle. Xildhibaanadaan ka mida ahay marka Meeqaamka magaalada Xamar in la caddeeyo waa sax. magaalamadaxda Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya waa Muqdisho waan ayidsanahay si fiican baana u soo dhigteen.
- Maqaamka magaa magaalamadaxdu leedahay iyo matalaadeeda waxaa lagu xeerinayaa cutubka 5aad falsafada ka danbaysa iyo aragtida ka danbaysaa maxay tahay? Guddiyeey, noomaydaan sheegin. Haddii aanuu maaragtay, hadalka wax ku jirin maxaa habeenkii sacabka loo tumaa baa la yidhiye? Buugga sharaxaada hadaad eegtaan waxay guddigu ku soo sheegtay bogga ciddii sidataa 20aad waxay yidhaahdeen: "Maqaamka caasimadda golaha wadatashiga qaran wuxuu ku darsaday hawlihiisa shaqo inuu ka go'aan gaadho maqaamka caasimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya isla markaasna heshiis heshiiskiisii doorashooyinka ee golaha wada tashi qaran wuxuu tilmaamayaa in matalaada xubnaha Aqalka sare ee gobolka Banaadir lagu qeexi doono maqaamka caasimada sida ku cad dastuurka KMG. Sidoo kale heshiiskii golaha wada tashigu wuxuu iftiimiyey, in degmooyinka gobolka Banaadir ay yeelanayaan golayaal deegaan oo ay soo dooranayaan dadka deegaanka si toosa ah, bisha Juun 30 keeda. Markaa maqaamka caasimada yaan dib loo riixine imikay ku fiican tahay in laga dooddo oo meel la saaro walaalayaalow. Weliba waxaan idiinku sii daraa, kalfadhiga shanaad iyo mawjado siyaasadeed baa kaca. Nimankan beesha lixaad la yidhaahdaana, shuruudo badan iyo waxay la soo baxaan xiniinyo hore oonay lahayn. Inkulusuf bolatikis iyo waxyaaba kalay kahadlaan. Waar manta meel aynu saarno maqaamka caasimadaan idinleeyahay. Waad mahadsantihiin. Wasalaamu calaykum wa raxmatullaahi wa barakaatu.

**18) Xil. Adar Ali Mohamed:**

Mudane Guddoomiye,iyo xildhibaanada sharafta leh ee labada aqal,warbaahinta, hawl wadeenada iyo marti sharafta ururrada bulshada iyo guddiga madax banana ee dastuurka Salaamu calaykum, bacda salaam, Maxay ahayd way soo noqotay 30%kii waa la diiday si wax ku ool ah waa la diiday waa inuu caddaadaa

- **Qodobka 3aad faqradiisa 5aad** Waxaan taageeraynayaa hadalkay ka hadleen Sen. Sareedo iyo Xil.Caasha-koos sida quruxda badan ee uga hadleen mida kaleetoo, ilmaha sideedii hore halagu soo celiyo iyadana sidaasaa leeyahay guddigana waa soo dadaalyay

waa mahadsanyihiin ayaan leeyahay. Haddaayayto Waxaa la dhahay gobolkasta 3 saddex kursi oo gabdhoo hala dhigo hana kutartamaan aa ladhahay markaa goballadana waa 18 gobal 3 kursi oo gabdhood markii ladhigana wuxuu noqonayaa 54. Hadda kahor qiimayn aan samaynay 94 degmo waaye 275 markii looqaybiyo wixayi noqonayaan 2.92 noqonayaan haddii 3 loo qaybiyana gabdhaha waxay helaayaan xubnohoodii saxda ahay hadda kahor 2016kii sidaa ogtihiin 30% waa lagu dagaalamay waxay noqotay inay haweenka helaan 24.5% waxay noqotay 82 xubnood hadda waxaa nagu dhacay Dib dhacaa nagu dhacay hada waxaan haysanaa 20%, markaa sidaas aawadeed waa in lagu qoraa dastuurka 30% oo ay noqotaa lama taabtaan. Qaraar baan ka soo saraynaa; laakiin, hadda waxaa leenahay dastuurka halagu soodaro 30% waxaan haysanaa 20% wax la aqbali karo maaha haweenka Soomaaliyeed waad ka war qabtiin. Waa haween markii ay magaalada Muqdisho baaba'day ee dawladdii ka baxday waa haweenki lagu soo mooday ee wax badan ka qabtay; sidaas aawadeed, waxaan leeyahay haweenka 30% inay helaan xaq ayay uleeyihin iyo kabadan.

- **Qodobka 9aad:** Waxaan leeyahay maqaamka magaalada Muqdisho maxaa loo diidaa baarlamaankii 10aad waan ogayn dooda ugu badnayd baa ka timid hadeertana baarlamaankii 11aad in la geeyey cutubka shanaad ma aqbalayno. Waxaan leenahay meeshiisii ha lagu soo cesho cutubka koowaad ha lagu soo cesho. Taasi waa xad gudub afar malyan ku dhowaad xuquuq dooda lama duudsiin karo. Qodobka maqaamka magaalada Muqdisho iyo Caasimadda meesheeda halagu soo celiyo, waxaan u sheegaynaa labada guddi arrinkaas waa kufududaateen, waxaa idin leeyahay booskeedii ha lagu soo cesho idinkoo aad u mahadsan. Mana aqbalayno in la geeyo cutubka shanaad mana oggolaanayno inuu dib u dhac danbe lagu rido. Markaa sidaa aawadeed waxaan idinka codsanayaa inaad ku soo dartiin.Waa mahadsantihiin.

**19) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan:**

- **Qodobka 1(1):**
- Bismillaah. Alxamdulillaah, wasalaatu wasalaamu calaa ashrafal mursaliin, sayidinaa Muxamadin wacalaa aalihii wasaxbihii ajmacamiin.
- Mudane guddoomiye, xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka Jamuuriyadda Faderaalka Soomaaliya, waxaan idinku salaamayaa salaanta isalaanka asalaamu calaykum. Een waxaan rabaa een in xoogaa lays dhegaysto idinkoo aad u mahadsan.
-
- Een waxaan rabaa een cutubka koobaad markaan ka hadlo een waxaan soo jeediyay in lagu daro, sunni. Waa sax in shareecada, dawladda Soomaaliya ay tahay muslim sunni ah; marka in la muujiyaa way fiicantahay si loo ogaado si aan madaahiib kale meeshaan loogu fidin. Een.

- **Qodobka 1(3):** qodobka koowaad een farqadiisa saddexaad bayjka saddexaad, wuxuu leeyahay: "Alle subxaanahu watacaalaa ka sokow, een ka sokoow awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh, shacabka" marka ereygaas awoodda een gobonnimada dalka waxaa iska lee shacabka, waxaan uga baahannahay guddiga labada guddiin fasiraad dheeraada inay nooga bixiyaan si aannu u fahanno

- Qodobka 2(3): Qodobka labaad faqradiisa saddexaad ee bayjka shanaad wuxuu leeyahay: "Waxaa reebban cayda diinta islaamka waa sax karaahiyadeeda" waan fahmiwaayay waxa loola jeedo karaahiyadeeda, markaa een ereygaa haddii la helikaro af Soomaali ka fudud am aka fiican in la raadiyo oo ah: Waxaa reebban cayda diinta islaamka waa sax karaahiyadeeda, markaa insha Allaah waxaan rabnaa iyadana in tafsiir kale loo raadiyo.

- Een qodobkaa labaad farqadiisa een afraad waxay leedahay asalka een waan ku raacsanahay wayna ku mahadsanyiin, guddiga siday u soo kala saareen sharciga iyo xeer een waxaa ku sii fiican in la dhaho xeer; waayo, sharci waxa waxaa jidaynkara ama insha Allaah waa ee Ilaahay subxaanahu watacaalaa ayaa sharci dejiye ah. Een hadda kaddib waxaan rabnaa, golahan naftigiisa hadda aan fadhino in loogu yeedho, hadda waxaan dhahaynay golaha shacabka ee golaha sharci dejinta. Markaa in la dhaho golaha xeerdajinta lafteeda wixii manta ka danbeeyo

- Waxyar aan is dhegaysanno. Haddii dee la caajisayna guddoomiye berri nooga dhig waan iska xiraynaaye, inoo xir. Haddiikale waxyar aan is dhegaysanno waa idin dhegaysanaynay manta dhan. Markaa in la dhaho golaha naftiisa la dhaho golaha xeer dejinta ee Jamuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya een marka la dhihi jiray golaha. Gabdho waxyar aan is dhegaysanno dee idinkaba waan idin dhegaysanaynay markaad hadlayseen! Waawareey! Markaa inshaa Allaah hadda kaddib waxaan dhahaynaa golaha xeersdejinta een markaan dhihi jirnay golaha sharci dejinta insha Allaah waxaan rabnaa inaan saas u badalno.

- Een qodobka ee saddexaad faqraddiisa afraad ee wuxuu lahaa: "Dastuurka Jamuuriyadda wuxuu ilaalinayaa xuquuqda een talinta sharciga" in talinta sharciga lagu soo daro ilaalinta ee sarraynta sharcigana in lagu daro aad bay u fiicantahay.
-
- **Qodobka 5(1)**: qodobka shanaad farqadiisa koobaad ee dhahaysa: "Af Soomaaligu" een af Soomaaligu waxa waaye qofka hadlaya ee sheegaya ee dhahay af Soomaaligu waa waxaan u maleeyay aragtidayda, inuu ahayn qof Soomaali ah; maadaama uu la hadlaayo qofkale ama qofku uu yahay ajanabi ama Soomaligu uu ka sheekaynayo Soomaaliga, waxa fiicnaan lahay in la dhaho een waa maay iyo maxaad tiri ama af Soomaaligu waa may iyo maxaad tiri. Waa daas meesha ka maqan iyada laftigeedu waa muhiim in af Soomaali ahaan loogu soo daro.
-
- **Qodobka 6(3)**: Een heesta calanka qodobka lixaad farqada saddexaad beyjka sagaalaad wuxuu ka hadlaayaa, heesta calanka ee mararka aa xafladaha tagtid waxaa arkaysaa, qofka ugu horreeya heesta uu qaado in lala qaado. Qolo markaa waxaa qolaa waxay qaadaysaa Soomaaliyeey toosoo, waxaa lalaqaadayaa, Soomaaliyeey toosoo inta la istaago. Marna waxaa arkaysaa iyadoo la qaado, qoloba calankeedu haddana inta la istaago haddana inta la istaagaa qolaba calankeeda laqaadayaa. Haddii mudane guddoomiye iyo labada guddi waxaan ka codsanaynnaa haddiiba la samaynayo heestya calanka ee laysku raaco qolaba calankeed, waxaan rabnaa sidii laga dhawaajiyay in ayadoo dhamnaystiran een lasoo lagu soo daro.

- Een waxaan rabaa kale inaan halkan kaga hadlo, qodobka todobaad farqadiisa koowaad, waxaa ka soo noqnoqday ereyga ah iyo iyo iyo isagana in maxaan ku iraa la saxo. Ee waxaa kaloo rabaa inaan, tayb erer badanaa ku jiray cutubka koowaad aa soo diyaariseen, een waxaa ku jira shan tayb erer. Een cutubka koowaad, markaad fiirisid jamhuuriyadda ee baaqa jamhuuriyadda sagaalka qodob si ka si kamid aa ku qoran haddana wuu sii socdaa ka mid ah, ah diiyaa ka maqan meesha in lagu soo daro,

- Ee qodobka farqada labaad bayjka saddexaad waxaa arkay waxaa qoran matalaadda dadwaynaha laba koma ku qoran iyada nafteeda in la saxo.

- Qodobka sideedaad markaa fiirisid farqada koiobaad beyj teen muwaaddinnimada sid muwaadiniinta, siday u qorantahay teb ereraa ku jira; in lasaxo; maadaama, waxani ay yihiin dastuur; dastuurkana eee inshaa Allaah uu noqonaayo ee ee dukuminti qofwalba uu akhrinaayo. Bayjka sideedaad markaad fiirisid jinsiyaddiisa way u qorantahay teeb ererka qaladaa ku jiro. Een markaa fiirisid een qodobka sagaalaad firqada koowaad fedaraalka, iyada nefteeda waxa ku jira teeb erer in teeb ereradaas la saxo.

- Qodobka sideedaad markaa fiirisid farqada koiobaad beyj teen muwaaddinnimada sid muwaadiniinta, siday u qorantahay teb ereraa ku jira; in lasaxo; maadaama, waxani ay yihiin dastuur; dastuurkana eee inshaa Allaah uu noqonaayo ee ee dukuminti qofwalba uu akhrinaayo. Bayjka sideedaad markaad fiirisid jinsiyaddiisa way u qorantahay teeb ererka qaladaa ku jiro. Een markaa fiirisid een qodobka sagaalaad firqada koowaad fedaraalka, iyada nefteeda waxa ku jira teeb erer in teeb ereradaas la saxo.

- **Qodobka 8(3)**: Jinsiyydiisa type error ayaa kujira waa in la saxaa oo laga dhigaa jinsiyadiisa.

- Waxaan soo jeedin lahaa laba talo, midda hore ay tahay: in xarfaha ka bilaabanaya xarfaha ,magacyada ah ee ka bilaabanaya xarfaha magacyada in kabitaal laga dhigo ama xaraf wayn laga dhigo. Waxaad arkaysaa meel fadaraalka ku qorantahay marna kabitaal ay tahay marna ismool leetar ay tahay, iyadoo la isu ekaysiiyo. Xarfaha diinta markaa aragtid marna waa kabitaal marna waa ismool. Markaa xarfaha ka bilaabanta magaca in kabitaal laga dhigo iyo in la sameeyo laba ama saddex qof oo ka saxda marwalba teeb ererkaa. Waayo, dukumintiga baarlamaanka loo soo gudbinaayo wuxuu ku fiicanyahay, in isagoo tafaftiran aan teeb erer ku jirin in la keeno. Aad iyo aad baad u mahadsantihiin. Salaamu calaykum wa raxmatullaahi wa barakaatu.

**20) Xil. Lul Ibrahim Omar:**

Bismilaah mahadsanid mudane guddoomiye. Dhammaan mudanayaal iyo marwooyin waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu bacda salaam.

Waxaan rabaa halkaan inaan wax yar ka iraahdo walaalayaal, waxaan ognahay haweenka Soomaaliyeed inay yihiin lafdhabarta Soomaaliyeed. Run ahaantii %60 kiiba waa haween in xaqooda la duudsiiyana yeelimayno, insha Allah haweenka waa hormuudka umadda Soomaaliyeed gaar ahaan iyo guud ahaanba waxaan soojeedineyaa aan codsaneyaa

cutubka 1aad qodobka 3aad mabaadi'da aasaasiga faqradiisa 5aad ee u qoran sidatan:haweenka waa in ay ka mid noqdaan dhammaan seddaxda laamood ay hay'adaha dowladda iyo guddiyada madaxabanaan ee heer federal, heer dowlad gobleed iyo dowladaha hoose. Si wax ku ool ah lana sugo gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo wax ku ool ah maxay noqon karaan? Macayinna waxay noqon karaan guryaha jooga waa noqon karaan marka siyaasada waa sad bursi run ahaantiio ragoow, sadka ha isku ekeeysiinee anagana aan idinla bursano. Wax noo ogolaada dee xaqna waa uleenahay; sababtoo ah, haween la'aantooda nolol majirto**.**

**Waxaan soo jeedinaynaa sida tan in naloogu qoro guddiga dhegihiina isiiya waxyar,** haweenka waa in ay ka mid noqdaan dhammaan seddaxda laamood ay hay'adaha dowladda iyo guddiyada madaxabanaan ee heer federal, heer dowlad gobleed iyo dowladaha hoose ugu yaraan, fiiri yaah maahan 30% waa ugu yaraan 30% gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo intaba.

Markaan u soo laabto haweenka idinkama liitaan raggoow, waxaa nala yiraahdaa, diintaan waxba idiin ogolayn1 Diintu waxbay nasiisay. Nolosha waan ka wada simannahay. Waxaad xaq u leedihiin ayaan xaq u leenahay. Hanaloo oggolaado insha Allaah.waxaan kaloo rabaa inaan ka hadlo.

- **Qodobka 8(4)** ee ku qorneed soojeedinta waxka-bedelka dastuurka ee laga tiray lagu soo celiyo taas oo u qorneed **"I**lmo kasto oo uu dhalo aabe ama hooyo waxa uu xaq u leeyahay in uu helo jinsiyadda soomaaliyeed" si waafaqsan hishiiska caalamga ah ee xaquuqda caruurta 1989 waxa uu farayaa in ilmo kasto isla marka uu dhasho la diiwaangaliyo waxa xaq u leeyahay magaca xaqa helidda jinsiyadda soomaaliya.

- Afka rasmiga Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, waa afka Soomaaliya MAAY iyo MAXAA TIRI, walalkey kheyr Allah siiyo maxaa tiri marka lagu reebo waxaa soo harayo xaa tiri wixii way isla socdaan maxaa markii laga reebo xaa tiri ayaa soo laabanaya, taas waxaa ka gancinayaa xildhibaan Kutun. Mida kale afka Carabiga waa luqadda labaad taasna leys kuma diidano. Maqaamka Muqdisho caasimada dalka Soomaaliyeed waa Muqadisho; laakiin, Muqdisho oo leysla leeyahay waaye; laakiin, haddii ay noqoto Muqdisho anagaaiska leh caasimadda ma noqon karto, waa in meel kale looraraa wabilaahi towfiiq. Wasalaamu cayalaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu.

- **Qodobka 9aad: Maqaamka Muqdisho** caasimada dalka soomaaliyeed waa mugadisho, laakiin Muqdisho oo leysla leeyahay laakiin haddii ay noqoto muqdisho anagaa iska leh caasimadda ma noqon karto waa in meel kale loo raraa.

**21) Xil. Ilyaas Sh. Axmed:**

Bismilaahi alxamdulilaahi rabil caalamiin. Wasalaatu wasalamo calaa sayidinaa Maxamed. Runtii marka hore waxaan rabaa inaan u mahadceliyo labada guddi oo runtii shaqo aad u wanaagsan soo qabtay xogbadanna soo diyaariyaya aniga macallin ayaan ahaan jiroo, mudda badan marka xogaa ardaynimada waa ku fiicnahay. Bal aan is dhegaysanno si fiican aan isku dhegaysano. Een toos baa rabaa inaan ugalo qodobbada waa midda koowaad qobdobka 1aad waxaa u kala qaadeen guddiga, Jamhuuriyadda iyo

qiyamkeeda, faqradda koowaad waxaa u kale qaadeen labo farqo awal markii hore waxa ay ahayd Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaal ah oo leh gobonnimo dimuqraadi ah oo ku dhisan matalaadda daweynaha oo loo dhanyahay oo ku saleysan nidaam axsaabta badan iyo caddaalad bulsho. labo faqro u kala qaadeen idinkoo u sababeeyay, in Jamhuuriyadda iyo qiyamkeeda iyo arrimaha kale oo ay muhiimka ay tahay. W aan idinku raacsanhay kaliya hal mid inaad sameeysaan, qeybta 1aad oo ah Jamhuuriyadda iyo qiyamkeeda oo aad ka dhigteen, Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah oo muslim ah leh gobonnimo kuna saleysan caddalad iyo sarreynta sharciga, ah in aad kusoo dartaan dimuqradi ah, dimuqraadi hoos ayaad soo dhigteen, marka ereyga dimuqraadi ah raacsiisaan qeybta Jamhuuriyadda iyo qiyamkeeda oo aad dhahdaan:"Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah dimuqraadi ah muslim ah". Ereygan muslim ah meel kale ayaan ugu hadli doonaa, wuuna soo laaban doonaa oo meel kalaa lagu shegay sheegay.

Ereygan Muslimka waxaa lagu beddelayaa oo asalka Dastuurka horeyna ahaa, qodobka kale ee diinta ayuu ku yaalaa in laga dhigo Islaam, sababta ay tahay Islaam ayaa masdarka ah, masdarkana ayaa asalka ah, culumadiina waa ay joogtaa, masdarka ayaa mustaqi minhu u ah oo laga soo dhanbalaa ee faacilka. Muslim markay tahay waa Aslama, Yaslimo Islaam waaye, Islaam in lagu celiyo waaye.

- **Qodobka (1)(2)**, oo u qorneyd "Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, asagoo awooddaas u isticmaalaya si toos ama si dadban, u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" waxaad sameyseen faqrad kale ayaad ku soo kordhiseen, oo ah in oo labo farqo ayaad ka dhigeen waxaan qabaa in laga maarmi karay, oo faqradii kale asalka lagu gaabsan karay, dastuurkana ereyadiisa iyo faqrooyiinkiisa intii la yareyn karo in la yareeyo, oo macnaha la isku raro, midna oggaada dastuurka sidiisaba waa rumuuz, wuxuu sheegaa "principles" waa wayn, waxa kale waxaa faahfaahiya xeerarka oo baarlamaanku sameynayo.
- sidaas daraadeed farqadaas waxaan u arkaa in laga maarmi karay farqada cusub ee aad soo kordhiseen ee ah, qof ama qayb kamid ah shacabka jamhuuriyada inay sheegato oo la wareegto xaqa lahaanshiyaha gobonnimada jamhuuriyada federaalka Soomaaliya ama isticmaalka si gaar ah hal farqo oo asalkii hore ee dastuurka aan haysanayn ayaa koobaya, marka taas inaa ku gaabsataan; balse, u samaysaan siiqa toosin un bay ahayd waa idiin soo jeedin lahaa.

- **Qodobka 2aad faqraddiisa2aad :** waxaad ka dhigteen "Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" kama qabo faalo, in meesha la leeyahay muslim laga dhigo "Islaam" diin aan ahayn diinteena laguma faafin karo dalkeena. Waa okey kala qaadista aad u sameeyseen ee farqada cusub soo kordhiseen, waxaa reebban cayda diinta islaama aad bay u wanaagsantahay, weliba waa nagu soo badanaysay ayaantaan diin cayga iyo ku xadgudubka iyo gabood falada ka dhanka ah markaa inaa farqo cusub u soo kordhiseen aad baa ugu mahadsantihiin.

- **Qodobka 3(7):** oo aad ka soo qaadeen cutubka 3aad qodobkiisa 43aad, "Dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti qaran oo ay shacabka Jamhuuriyaddu

wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya**"** waxaa rabi lahaa in lagu soo daro "wabiyada"**,** sababtoo ah wabiyada anaga na soo galaan oo daris nala ah, wabiga shabeelle dhowr "state" ayuu maraa laba "state", marka in ay noqoto "under the federal governmnet" maamulkeeda noqdo wabiyadaasi noqdaan, maaddaama wadan kale oo dalkeena ka baxsan oo qaariji ah ay ka imanayaan sida loola macaamilaya federaalka hoos yimaadaan wabiyadu, laakiin shacbiga soomaaliyeed wada leh haddan dhahno, waxaan u maleenaa in la igu qabsado, oo qolada Jubbaland ay dhahdo kaas anaguu na dhexmaraa, midkan Shabeelana ay Hirshabeelle iyo Koofur Galbeed anaga kaliya ayuu na dhex maraa, kama hadlayo lahaanshada waxaan ka hadlaa maamulka sidii dowladda federaalka loo hoos keeni lahaa.

- xeerkasta oo aad ku soo kordhiseen waa muhiim. Xeer kasta iyo go'aan kasta ama tallaabo maamul kasta oo ka soo baxda heer kasta oo haayadda hadwladda ah kana soo horjeedda, dastuurkaan wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan waxaana burinaysa maxkamadda dastuuriga, waxaan rabaa maxkamadaan dastuurigaa waa ku dhib mudanay waana la dhisi la'yahay, waxaan qabaa in la sameeyo maxkamadda "Supreme" la dhexgaliyo, oo awoodaha Maxkamadda Dastuuriga la raro la dhexgeeyo "supreme court", waana curfi jira oo bidca ma ahan, Kenya iyo USA ayaa sidaa ah, in Maxkamaddan Dastuuriga ah shaqooyinkeeda la dhexgaliyo "supreme court" waxay kaloo naga anfaceysaa Maxkamadda Dastuuriga ah, haddii qodobbo la isku qaban waayo baagamuuday noqonaysaa, ma meelbay iska oolaysa ileen shaqaa larabaa in laqabtee? Dhaqaaley qaadanaysaa, shaqaalay qaadanaysaa; sidaas daraadeed, maxkamadeena sare in lagu dhex daro .

- **Qodobka 8(3):** Guddiga aad ayaan ugu mahadcelinayaa cilmibaaris ayey soo sameeyeen, saddex hab ayaa jirta oo lagu qaadan karo jinsiyadda (1) inuu noqda qofkii ku dhashada Soomaaliya, canuga markuu ku dhasho wuxuu xaq u yeelanayaa dhalashada soomaaliya; (2) ama in la qaato labada waalid oo ubadkaa dhalay midkood haddii uu soomaali yahay, ubadkaasi waa soomaali (3) inaad ku timaado hannaan qaxooti waqti badan joogay, waa qaab iyo "criteria" adduunka ka jirta, marka saddexdaa kee qaadaneynaa, doodda halkaas bay naga jirtaa. Waxaa ila habboon sidii 1962 sharcigeenii Jinsiyadaha ee noo jiray in hadda kaa la cusbooneysiiyo oo xeer loo sameeyo, dood badan la galiyo oo halkaasi lagu bayaamiyo. Kenya haddii labada waalid mid ka mid ah yahay Kenyan yahay cunuga ku dhasha waa Kenya, Ethiopia waa sidaa oo kale, taas miyaan qaadanaa oo waalidka ayaa jaangoynaya, maya waxaan qaadanaynaa "by birth" markuu ku dhasho maan qaadanynaa, seddexdooda inta aan ka doodno oo wax isla gaarno ama dastuurka aan ku qorono ama xeerka jinsiyadaha oo hadda Wasaarada Arrimaha Gudaha ka shaqeyneyso halagu caddeeyo, intaas in aan kala doorano.

- **Qodobka 9aad:** Faqrad ayaa la soo kordhiyey oo ah "Maqaamka Magaalomadaxdu leedahay iyo matalaaddeeda waxaa lagu xeerinayaa cutubka 5aad ee Dastuurka", waxaan muhiim u arkaa inaan kala qaadano soojeedimaha guddiguna soo sameeyeen ayaguna jira, caasimaddu ma waxay noqoneysaa maamul goboleed, Maya, caasimaddu ma waxay noqoneysaa caasimad dowladda federaalka hoos timaado oo ayadu maamusho, maya, dowlad goboleed ayey noqoneysaa, caasimadda federaalkuna ku dhextaalo. Saddexdaa "option" ba waa jiraan, wadamada kala isticmaalo waan soo bandhigeen qofkii akhriyey

buugga, seddexdooda inaan kala doorano waayo doodda jirta, aniga doodda ah in ay noqoto maamul goboleed caasimadda federaalka ku dhextaala, shuruuc nidaaminaysana loo sameeyo, haddii lagu qorayo Cutubka 5aad ama Cutubkan lagu qorayo, intaas ayaan ka qabaa. Midda 2aad faqraddan meesha ku qoran aad soo kordhiseen macno kuma sugna, sidaa daraadeed faalada geeya waa war cilmi kuma jiro, si dastuurka nuxurkiisa noogu yaraado.

**22) Xil. Dahabo Susow Mohamud:**

Bismilaahi raxmaani raxiim hargab waa ihaya waana xabeebsanahay maqaylin karo inaan qayliyana waa rabaa raalli ahaada. Waxaa salaama guddoonka baladiisa gole, labada guddi, guddiga arrimaha bulshada oo goobta noo jooga, culima udiinka. Salaamu calaykum .

Inta badan qodobka aan maanta gabdhaha, ayaa ka soo hadlay, oo Cutubka 1aad qodobkiisa 3aad. Gabdhaha Soomaaliyeed waa gabdhaha samatabixiyey dalka, gabdhaha Soomaaliyeed waa gabdhihii dhagaxa dhiiga ka soodhaqay meesha la fadhiyo waxa nadiifiyay waa gabdhaha Soomaaliyeed. Ma aheen in manta nala yiraahdo fiiro gaar ah haloolahaado, anaga iyadoon la is jiid jiidayn gabdhaha Soomaaliyeed gabartii gobalada joogta,tan degmada joogta,tan tuulada joogta kuli 2020 ilaa hadda waxaa leenahay 30% hanala siiyo hadda hanala siiyo waa dhammaatay; dastuurka in lafuraa timid; madaama, dastuurka lafuray ma ahan waxaa codsanayno, 67 gadhood baa kufadhinaa golaha shacabka, 70% gabdhaha Soomaaliyeed ayaa sugaya, waxaa soo sheegno anaga anaga gabdhahaasaa nasugaaya, ma nihin gabdho iska socda markay golahaan fadhiyaan gaashaan baa naga danbeeya,waxaan leeyahay labada guddoon ma imaqlooysiin 30% ugu yaraan waa in lagu soodaraa dastuurka madaama uu furanyahay. Waxaa rabaa oo kale inaan ka faa'idaysto dastuurka madaama uu furanyahay waxaa idhibay ereyga 4.5 hadda wax shegaya maleh guddiga waxaa su'aal iga eg dastuurka waa lafuray haddii markii hore xal ahaa ma 4.5 kiibaa socda mise 5 beelood baa wax lagu qaybsanayaa? Wax ka hadlooya malahane su'aashaas waxaa waydiinaynaa dastuurka culimadii baa fadhida meesha 5 kanoqonayno oo kasoo galayno inay jawaabta nasiiso.

+ Gobolka Banaadir xaquu leeyahay 4malyan baa ku nool xaqna waa leeyihiin isagana inuu xaqiisa helo waajib waaye sida maamuladu xaq uleeyihiin. Intaas bas u soo istaagay su'aal aan culimada ka sugayo iyo mid guddiga aan ka sugayno.

**23) Xil. Abdiqani Ismail Said.**

Shir guddoonka iyo dhammaan xubnaha kale waa salaamantihiin. Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Waxaan ka bilaabaya

- Qodobka 2aadfaqradda 1aad :ee ka hadlaya diinta iyo dalka anigu waxaan soo jeedinayaa in lagu celiyo sidii hore oo ahayd "Islaamku waa Diinta Dawladda iyo dalka", halkaa la kala saaray xildhibaannada iyo qolada guddiga ha u fiirsadaan kala saaritaankaasi waxay keeneysaa in shacabkuna noqdaan dad muslim ah, dawladuna wax kale lagu dhaqo, aad halkaasi haloogu fiirsado qolada guddiga iyo culimada aad ha u eegaan. .Arrinkaasi waan ku celcelinayaa, waa meesha ugu muhiimsan ee halkan idin hortaala waxaa ku qoran ee sidii hore u qornaa waa: Islaamku waa diinta dawladda "iyo dalka" halagu kordhiyo; laakiin, sida loo kala saaray macnaheedu waxay noqoneysaa dadku muslim, dowladduna waxay doonto ayey noqon kartaa, cilmaani bay noqo kartaa

waxaan oran lahaa halugu kordhiyo masaadiirta islaamka, kitaabka quraan, sunada iyo "ijmaaca" halagu soo kordhiyo, taasina wax weyn bay ka tareysaa qolooyinka Garsoorka. Waxaan xildhibaannadii hore ku waafaqsanahay in laga dhigo Islaam, taana waa ku waafaqsanahay xildhibaanadii hore, markaad eegto

- **Qodobka 3aad faqraddiisa** 5 waa meesha manta dooddu ubadnaydee haweenkuna ay aadka uga hadlayeen halkaa aad haloogu fiirsado.habluhuna aad ha ugu fiirsadaan dastuurku xuquuq wuxuu siinayaa 30,40 kabadan meel lagu sheegay ma jirto dastuurka inan iyo inan. Madaxweyne ilaa meesha ugu hooseysa waa ka siman yahay, idinku ha isku koobina 30 iyo meel ka hooseysa, kuwa dastuurka qoraya waxaan leeyahay dastuurku yaan iska hor imanin, halka hore waxaad ku sheegeysaa halka dambe haka saarina. Hablaha xuquuqdooda hala ilaaliyo; laakiin, dastuurka halagu ilaaliyo. Meelay aduunka kaga qorantahay maleh dumarka maxay haloo xiro, dumarka ha tartamaan doorashada hasoogalaan xuquuqdooda ha helaan; laakiin, rag iyo dumar yaan la kala saarin.

  Madaxwaynahana u tartama. Hablaha ha oggaadaan waqtigii dumarka la xureeyey waa waqtigii Islaamku yimid aad u ogaada haddaad u fiirsataan ood ogaataan dhaqamada kale een muslimka ahayn hablahoodu duruuftay kunool yihiin sidaa manta umaydaan hadasheen. Taariikhda dib ugu noqda dumarka kale eega yaan la idin qaldin hooyada Soomaaliyeed meel dahabay kaga jirtaa umadda Soomaaliyeed. Maahan xuquuqdeedu inay halkaas soo fariisato oo kaliya wax kawayn baa la siiyaye hankiina hoos ha u soocelinina.

**Qoobka 8aad**: sidii xildhibaanadii hore ka dhawaajiyeen waa in si aad ah loogu fiirsadaa Soomaaliyeed buu ahaa, Soomaaliyeed ha lugu daayo. Yaanan laga dhigin Soomaaliya, weliba waxaa lagu xusay sharaxaadda markay sameynayeen qolada guddigu, iyagoo Soomaali loodanaynayo maahee iyadoo dawladdaha jaarka ah loo danaynayo. Qofoloow la soobaxo halkaa eeg waxaan ku waafaqsanahay xildhibaannadii iga horeeyey in arrinkaasi Soomaaliyeed lagu daayo oo aan laga dhigin Soomaaliya

**Qoobka 8aad faqradda** 4aad waalaga tagay halagu soo celiyo, oo sheegaya in qofka jinsiyadda looga qaadi Karin arrimo siyaasadeed. Ama hadda ha ahato ama berri ha ahaato. Qofka siyaasiga ah xuquuqdiisa kuma waayi karo hadal siyaasadeed, halagu soo celiyo. Jinsiyadda dhalasho ayaa inoo qoran waa dhiig haloo daayo intaasaa ku soo koobayaa waana mahadsantihiin

**24) Xil. Nasro Mahdi Carraale.**

Waa mahadsantahay mudane guddoomiye, xildhibaanada labada aqal, culimada udiinka, labada guddi dhammaan waxaan idinku salaamaya asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu.

Waxaan leeyahay maanta waa maalin wayn. Waa maalin qiimo iyo qadarin badan. Waa maalin dastuurkIi la akhrinayo runtii maanta ummadda Soomaaliyeed meel walboy joogto waxay u tahay wax fiican. Waxaan leeyahay waa maalintii qof walba xuquuqdii ka maqnayd uu helilahaa, waxaan rabaa ee rasggiinaan meesha fadhiyo, dumarka inaad u

ansixisoo oo aad dastuurka ku dartiin haddii Ilaahay yiraahdo xuquuqdooda. Ee ma aha baryo; sababtoo ah, dumarku xaq bay u leeyihiin. Waxa aad barateenay barteen, ee waxa aad taqaaniinay yaqaanniin. Marka waxaan leeyahay dumarka halla siiyo xaqooda.

Ee haddaan u soo laabto cutubka 1aad qodobkiisa 3aad maadadii maadadaastaantiga farqiga 5aad ee ku qor, qodobka saddexaad cutubka koowaadqodobka saddexaad mabaadii'da asaasiga faqradiisa 5aad ee u qoran sida tan: Haweenku waa inay ka mid noqdaan, dhammaan saddexda laamood ee hayadaha dawladda iyo guddiyada madaxa bannaan ee heer fadaraal heer dawad goboleed iyo dawladaha hoose si wax ku ool ah lana sugo gaar ahaan, jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo.

Waxaan si cad u codsanynaa, in lagu daro, waxaan si cad u codsanynaa, in lagu daro, ugu yaraan 30% waxaan soo jeedinaynaa sida naloogu daro: haweenka waa inay ka mid noqdaan haweenku waa in ay ka mid noqdaan, dhammaan saddexda laamood ee hey'adaha dawladda iyo kuwa mabaadii'da ee heer ferederaal iyo heer dowlad gobleed iyo dowladaha hoose ugu yaraan 30% gaar ahaan jagooyinka leysku magacaabo iyo kuwa laysku magacaabo.

**Cutubka 1aad qodobka 8aad** shacabka iyo jinsiyadaha, waxaan codsanayaa, in qodobka 8aad farqaddiisa 4aad ee ku qotoma soojeedinta waxka-bedelka dastuuska, in lagu qoro, in lagu soo celiyo taa soo u qornayd sidatan: ilma kasta oo uu dhalay aabbe ama dhalay hooyo, wuxuu xaq u leeyahay in uu helo jinsiyad Soomaaliyeed si waafaqsan heshiiska caalamig ah ee xuquuqda carruurrta 1989kii wuxuu farayaa, in ilmaha isla marka uu dhasho la diwaan galiyo; wuxuu xaq u leeyahay magacaabis, helitaanka jinsiyadda Soomaaliyeed. Waxay qaybtaa sida ay qab waxa ay qabto, waxay qayb ka tahayb ka tahay heshiiska . Marka waxaan leeyahay ee haweenka Soomaaliyeed maanta waxaan u taagannahay, in dastuurka lagu daro ee xuquuqda aan leheen hadduu Ilaahay yiraahdo. Wa Billaahi tawfiiq.

**Guddoomiye Sh. Aadan Madoobe:** marlabaad xildhibaannada sharafta leh iyosanatarrada waad salaamantihiin waana mahadsantihiin. Dood fiicanaa noo socotay waa maaragtay, wakhti badanaa la fadhiyay. Waxaa hadashay 4tii gabdhood oo si gaarka ah loo siiyay marka laga reebo 25 xildhibaannoiyo sanatarro isugu jira ayaa hadlay. Marka maanta fadhigu intuu inoo joogayaa ee wa Sabtigaan isku imaanaynnaa, waxaan ka codsanaynnaa xildhibaannada , dhakhsi inay u yimaaddaan si aan arriman iosaga dhammaynno. Fadhigeena maanta waa inoo xiranyahay. Salaamu calaykum.

**Taariikh:** Febraayo 17, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 13aad ee labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeysa |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: 153 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: 28 Sanator. |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:16 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:40 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Aqalka Sare Sen. Cali Shacbaan Ibraahim |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansaxinta Ajendaha.
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 1aad: Baaqa Jamhuuriyadda (Qobobka 1aad ilaa 9aad).

## Kulanka 13aad:

**Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow:**
Mudane Guddoomiye kulankii 14ka bisha ee maalintii Arbacda ee ku saabsanaa doodda wax-kabeddelka Dastuurka waxaa ka hadlay 25 mudane oo ka mid labada Aqal Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxay ahayd dood nuxur leh isla markaana ku fadhida matalaada aayaha shacabka Soomaaliyeed, Baarlamaanka Federaalka mas'uulka ka yahay sida ku xusan qodobka 61(1)(2)(3).

Mudane Guddoomiye, haddaad iga oggaalato waxaan abaarayaa arrimaha ugu muhiimsan, ayadoo mudnaanta la siinayo sida hadba soojeedimahaasi u soo noqnoqdeen, waxaan filayaa way inoo socon doontaa doodda cutubka 1aad ku aaddan, laakiin waxaan dulmarayaa arrimihii nuxurka lahaa maalintii 14bisha xildhaabanadu ka dhawaajiyeen.

Waxaa la soojeediyey in cutubka koobaad arar loo sameeyo, fikirkaasi muddo ayuu dhextibaaxayey labada Guddi, waxaan filayaa GMDHD ka hawlgaleen, laakiin laga soo gaadhsiinwaayey in la soo raaciyo soojeedimaha hadda idin horyaala, laakiin aan hubo in la soo raacin doono nuqulka kama danbaysta ah ee marxaladda saddexaad. Arrinka araarta la xidhiidha waxaan filayaa inuu xildhibaan Mahdi Guuleed ka dhawaajiyey, markaa arrinkaasi sidaas ayuu qorshihiisu yahay.

Qodobka labaad ee la xiriir arrimaha diinta, dalka iyo dowladda oo si is isku mid ugu jira Qodbka1aad, 2aad, 3aad (2) waxaan filayaa in dood dheer laga soojeediyey, ayadoo si isku milan looga hadlay umuuraha sida isku midka ah ugu gadaaman diinta, dalka iyo dowladda. Aragtiyo dhowr ah ayaa laga soojeediyey, aragtiyaha la soojeediyey waxaa ka mid ah qodobka haddii aad nuqulka eegto qodobka 1aad wuxuu uu dhiganyahay "Soomaaliya waa Jamhuuriyada Federaali ah oo muslim ah lehna gobanimo ku salaysan Caddaaladda iyo sarraynta sharciga", isla qodobka 2aad ee ciwaankiisu yahay Diinta Dalka, asalkiisu waxaa uu ahaa Dowladda iyo Diinta. Qodobka dib ayaa loo siiqeyey waxaan laga dhigay Islaamku waa diinta Dalka Jamhuuriyada Fedderaalka Soomaaliya, haddaad eegto isla qodobka 3aad oo mab'aadiid Aasaasiga ah faqradiisa labaad wuxuu u dhiganyahay "Jamhuuriyadda Fedderaalka Soomaaliya waa dal muslim ah oo ka mid ummaddaha Carabta iyo Afrikaanka", markaa haddii luuqa ahaa marka loo dhigo dadka ayaa muslim ah,  waxa muslim ah waa dadka, diinta magaceeduna waa diinta islamka, markaa waxaa la soojeediyey in sideedii hore lagu celiyo oo laga diinta dowladda, waxaa sidoo kale la soojiidayey in lagu camimo oo loo dhigo "Islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dowladda" intaba waa la soo jeediyey. Waxaan ku dhamaynaan dhamaynaynaa haddii doodu aan "chapter" marka aan wada dhamayno kaddib aan dood dib u furno sidaas miyay idinla tahay? Waayahay waad mahadsantihiin.

Habradhowraha Golaha Shacabka Xil. Maxamed Cabdullahi Xasan ayaa doodii halkii shalay ka sii waday:

1) **Xil. Mahad Cabdalle Cawad:**
   Marka hore waxaan u mahadcelinayaa Guddiga lasocodka iyo Guddiga Madaxbannaan ee farsama yaqaanada ah, la taliyaasha oo la shaqaynayey ee sharci yaqaanada ah iyo bulshada rayidka ah, waxaan ku bilaabayaa.

- **Qodobka 1aad:** Ciwaankiisa, oo Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ama Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Xildhibaanada sharafta leh dalkan aanu joogno oo Baarlamaankiisa labada aqal  maanta aan ku matalayno wuxuu abuurmay 1960[kii], wuxuu ku abuurbay "act union" ay ku midoobeen Gobaladii Waqooyi iyo Koofureed, magac baa loo bixiyey la yidhaahdo "Jamhuuriyadda Soomaaliyeed", "act union" waxa uu u qornaa in ay labadaas qaybood ku midoobeen magacaas Jamhuuriyadda Soomaaliyeed oo aan kala qaybsami karin "for ever" abid, ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ayaa horta  na midaysa, anigu reer koofur baan ahoo Soomaaliya nala yidhaahdaa, qolada kale ee waqooyina Soomaaliland ayaa la odhanayey, horta Soomaaliya markaad maqasho waa koofurtee ha la ogaado, haddaan anaguna ku soo koobayno iyo haddii aanu  dalkii midoobay ee Jamhuuriyada Soomaaliyeed aanu ka hadlayno. Sidaas awgeed waxaan Guddiga u soojeedinayaa in magacaas la ilaaliyo oo lagu ilaaliyo Jamhuuriyada Soomaaliyeed, haday Federaal tahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed in la yidhaahdo, laakiin haddii Soomaaliya la yidhaahdo anagaa Soomaali kala goynay, gacanteena ku kala goynay makhraati ha laga ahaado arrinkaasna anigu idin kulama jiro oo raali kama ihi, halkaa waxaan uuga baxayaa qodobka 1aad ciwaankiisa.

- **Qodobka 2aad**: Mar waxay u qornayd  diinta Islaamku waa Diinta Dawladda, marna waxaa laga dhigay dalka, waxaan qabaa in ay diinta dowladdana tahay, diinta dalkana tahay, diinta dadkana tahay, waxa laga hadlayaa waa diin, dad baa aamisan markaa in dadka, "dowladda iyo diintaba laga dhigo" ayaan qabaa oo aan la kala saarin, soojeedintaas

waxa weeyi hoosta ha laga xariiqo, fikirkii ahaa in "sunni" ha lagu daro ayadana waan wada qabnaa badankeenu waa la soo wada jeediyey intii horay u soo hadashay inta kalena inay nagu raacdo ayaan rajaynayaa in lagu daro diinta islaamka oo "sunni ah" arrintaasi waa muhiim. Horta ma qolo aan shaafici ahayn ayaa inagu jirta? waan shikiyee, qolyo cusub ayaa ina soo galee, haddii qolyo kale inagu jiraan ha lagu daayo, haddii kalena shaafici ayaan nahaye "shaafici ha lagu daro" hadda ma ogi waxaa dhici karta qolyo kale in ay dalka yimaadeen.

- **Qodobka 2(3):** Erayga la yidhaahdo "xeer" iyo erayga la yidhaahdo "sharci" waxa weeyi Baarlamaanadii la soo dhaafay dhib badan ayaan ku qabnay. Baarlamaanka aan joognana dhib badan ayaan ku qabnaa waan isku mid af-somali iyo af-carabi bay kala yihiin, marka hadda waxaa la soojeediyey meeshaas oo qodobka 2(3) meeshi sharci ku qornayd xeer ha loo beddelo ayaa la soojeediyey, sideentan meelood oo kale oo socotana sharci baa ku qoran, markaa arrinkaasi ma soconayo. Waa dhawayd waxaan ogayn xeer baan soo saarnay labada Aqal ah oo lagu difaacayey baddeena, Madaxwaynaha ayaan u gudbinay, markaan madaxwaynaha u gudbinay waxaan ku qornay xeer, Madaxwaynuhuna muxuu soo saaraa? Xeer buu isaguna soo saaraa si loo qoro ayaa la kasi waayey, waxaa halka lagu meelmarinayaa xeer, waxaana lagu meel marinayaa xeer waa socon wayday taasi, markaa waxaan qabaa walaalayaalow "confution" ha laga daayo meeshii uu "sharci" ku qornaa, sharcigiisa ku dhaafa. Xeer waxaa soo saara Madaxwaynaha, xeer Madaxwayne weeyi, sharcina waa qodobadan ku qoran Dastuurka ee lagu heshiiyey.

- **Qodobka 4aad:** waa hagaagsanyahay heer kasta oo dowladda ah ayaa lagu soo kordhiyey, waa hagaagsanyahay wax dhib ahna ma leh.

- **Qodobka 6aad:** Calanka iyo astaanta looga hadlayaa waa la sheegay, xildhaabano horana waa ka hadleen horteena waxaa ka muuqda intaas oo "colour" oo kala duwan oo calankii ah, waxaad arkaysaa 7qof oo 7calan oo "colour" kala duwan wata, caalamka "colour coding" ayaa la sameeyee, calankeenu waa "sky blue one" baa la yidhaahdaa. Waxaan soojeedin lahaa inuu noqdo "standard" oo hal nooc ah oo ah "sky blue" ama buluugga cirka inuu noqdo isagiiba waxa uu sii leeyahay 7 nuuc, markaa waa ka kobaad ee ugu khafiifsan in sidaas lagu qoro aad ayey u fiicnaan lahayd. Kalmadda lagu soo daray ee "bey-cad" markaan meesha ku arkay ayaa iigu horaysay waligay ma arag, dadkuna waxayna aqoon in ay sharci ka dhigtaan ma aha, markaa walayaalalow "bey-cad" naga daaya waa caddaan oo rasmi ah weeyaan laakiinse "bey-cad" anagu ma naqaano afkaas gobolka looga hadlo ma aqaano.

- **Qodobka 7aad:** way hagaajiyeen guddigu in ay "dhulka" ku beddelaan "Geyiga" waa saxsanyahay, sababtoo ah waa "territory" oo xayndaabka ayaa laga hadlayaa iyo kor, dhulka hoostiisa iyo hawada oo dhan laga hadalayaa, markaa Geyiga waa ku saxsanyahay.

- **Qodobka 8aad:** Walalyaalow waa "very sensitive" waxaa laga hadlayaa waa jinsiyadda, jinsiyadda, jinsiyadana kalmadihii "sensitive" ka ahaa ayaa soo galaya oo Soomaaliya, Soomaaliyeed arrimahaas lagu ciyaarayo, ciyaar ma galaan waa "very serious" weeyaan, waxaan qabaa, waxaa la yidhi "If it is not broken don't fixed" wuxu haddii uunsan jabnayn waxa weeyi waxba ha samayn, qodobkaasi siduu u qornaa oo uu noogu qornaa waxba kama ba'sana sidiisa noogu daaya, siduu ku qornaa sharci baa lagu diyaarin doonaa jinsiyadda,

laakiinse Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed noogu daaya, Soomaaliyadana aad la soo ordaysaan koofur bay tilmaamaysaaye hadduu dalku nagu balaadho oo aan rabno qaar inaan gowno ha lagu sii socdo, laakiinse naga daaya, sidii uu ugu qornaa Dastuurka oo horay loogu heshiiyey waa ku hagaagsanaa ee meeshiisa ku daaya.

- **Qodobka 8(3):** wuxuu qaadan karaa jinsiyadda "dalal kale" ayaa ka maqan "dal kale" ayaa ku qoran, haddii la mamnuucayo oo la leeyahay hal dal oo kaliya ayuu qaadan karaa waa gaar. Anigu 3 baan sitaa, markaa 2 kale yaa iga qaadaya, markaa "dalal kale" ha laga dhigo.

  Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin waxaan ugu mahadcelinayaa Guddoonka iyo xubnaha labada Aqal sida sharafta badan ee la isku dhagaysanayo oo dooddu ay u bilaamantay aad iyo aad ayaan uugu faraxsanahay waad mahadsantihii wasalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.

2) **Xil. Mohamed Harun Abdillahi:**
Mahadsanid Guddoomiye, xildhibaanada iyo senatarada sharafta leh waad salaamantihiin, intaa markaa ka imaado doodayda haddii aan u daadago.

**Qodobka 1** Sidaynu ognahay Soomaaliya waa Jamhuuriyad ku aasasantay midnimo labo Gobol oo waqooyi iyo koofur ahaa oo 1960kii xornimada qaatay, markaa waxaan qabaa in faqradda koobaad laga dhigo oo haybta Soomaaliya lagu caddeeyo in ay ka timid Jamhuuriyad ku asaasantay labada Gobol oo aan taariikhdaa la dafirin si cad loo caddeeyo, Soomaaligii oo hal af ah Maay iyo Maxaa tiri bay ku qornee, midnimadii yaanu meesha ka saarine taas ayaan qabaa faqradda kobaadba dib uu siiqaynsaan oo aad ku dartaan.

- **Qodobka 2(2):** dhowr xidhibaan oo horena ka hadleen ee diinta, sidaan ognahay "islaamku waa diinta dalkan" waa ta dadkan, waa inaan ku caddaynaa inuu yahay ka dowladda sidoo kale, yaynaanu "room" furin hadhow muran galin kara lagu kala saarayo dowladda iyo diinta, markaa waa inaynu saddexdaba is racino nidhaahnaa "islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dowladdaba" haddii aan laakiin nidhaano waa diinta dalka, hadhow waxaa iman karta dowladda cilmaaniya oo odhan karta anagu shuqul kuma lihin diinta islaamka ee dadku Allahooga ku caabudaan.

- **Qodobka 5(2):** siiqada u uu qoranyahay oo ah "dowladdu waxay horumarinaysaa afka iyo dhaqanka" in aynu amar ka dhigno ayaan anigu talo ahaan qabaa oo aan nidhaahno "waa inay horumarisaa" oo dowladda waajib laga dhigo, halka ay imika siiqada ay ku qorantahay ay tahay siiqo aan waxba waajibinayn in laga beddelo.

- **Qodobka 6(1):** oo ka hadlaya Astaanta iyo Calanka, haddii aan astaanta u imaado, Astaanta Soomaaliyeed ee aynu wada naqaano ma garan karo taariikhada la sameeyey, ma cado qofkii sameeyey, ma cado waxyaabaha ay u taagantahay, qofna kama jawaabi karo calaamadaha yaryar ee "++" ma odhan karo "cross", waxay u taaganyihiin, qofna kama jawaabi karo shabeelka labada daraf haysta oo ah xayawaanada duurka ku jira ka ugu dabeecada xun, midba mid raacin waxa uu taaganyahay ma dhaqanka Soomaalida ee ayna waxba ku heshiin baa laga wadaa, ma garan karo labo shabeel ayaa hareer kala haysta waxay u taaganyihiin, ma cadayn karo waynu soo gaadhnay, waynu sii wadnaa, waa qodobad kaliya ee aan waxba

laga beddelin, waa inaan si cad u sheegnaa astaan Soomaaliyeed  dhaqan ka hadlaysa, oo taariikh ka hadlaysa oo aynu garan karno waxay u taagantahay ama Ba'yda aynu ku noolnahay ka hadlaysa aynu ku bedelano, laakiin astaan aan garan karin ciddii keentay, aynaa garan karin waxyaabaha ay u taagantahay yanaan iska sii wadane, haddii Dastuur aynu samayno iyo haddii aynu axdi soo samaysanayba sideediibay u qornayd, markaa waxaan aamisanahay in lagu noqdo.

- **Isla qodobkaa 6(1):** Heesta calanka: hees calan ayaa halka la inoogu soo qoray inkastoo oo aan aaminsanahay in la dhamaystiro oo qofkasta hadhow ayaa gadaal wax laga gelin karaa, laakiin in la dhamaystiro.

  Laakiin heesteena calanku kama hadlayso taariikh, dhaqan, halgan ummadeed, hilaadin iyo wax aan mustaqabalka rajaynayno. Mid xigta dalkan iyo calanka midna uma ducaynayso, isla astaantii iyo sharaxaad calanka ee aan ku samaynay qodobka 6(1) oo "words" Soomaali ah uun bay dib inoogu celisay taas waxaan qabaa heestaasi ma buuxin hees shuruudo calan aan dib ugu noqono oo aynu samaysano hees calanoo dalka u ducaynsa, taariikhada iyo halganka Soomaaliyeed xanbaarsan, dhaqan ka hadlaysa waxaynu mustaqabal rajaynaynan dalkan inuu gaadhana sheegaysa, laakiin isla calankeenii waxaa modaa wali in heestu ay barasho ku jirto ay dib inoogu dhigayso calankeeni sidaas ayuu u eegyahay, markaa way naqaanaa calankeenu sida uu eegyahay, faqradda koobaad Dastruurka ay ku talaa in aynu isagii uun nidhaahno waa heestii calanka, markaa waxaan aamisanahay in hees calan oo taas ka gudo balaadhan runtii aan samaynsano.

- **Qodobka 7(3):** oo ka hadalaysa xudduudaha, mar labaad waxaan soo xiganaynaa Dastuur aan ka guurnay waa hore oo 1960kii ahaa, hadana Dastuur ayaan samaynaa. Dastuur, Dastuur la nasakhay soo xiganmaayee aynu si cad ugu qeexno xudduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa xudduudaha labadii Gobol ee midoobay, wali waxaad moodaa midowgaa iyo labadaa gobol in si loo quudhayn, markaa waxaa la soo xiganayaa dastuur isaguba soo xiganaya "act union" markaa si cad aan ugu sheegno oo aan nidhaahno "xudduudaha Jamhuuriyada Federaalku waa xuduudaha labadaa gobol ee midoobay 1960kii ay lahaayeen" oo aynu ka saarno xigashada Dastuurka.

- **Qodobka 8aad:** Jinisiyadda oo la moodo inuu dood badan abuurayo si fikir aan qabay qudhaydu wax iska beddelay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed  oo aad wax ka badasheen, hadda aad ka dhigteen Jamhuuriyadda Soomaaliya inaad sideedii hore ku soo celisaan,

- **Qodobka 8(4)** isla sidoo kale qodob aad ka saarteen faqradda 4aad qodobkaa jinisayada ma garanayo sabab looga saaray, Soomaalidu ku takrifalka awoodu waa iska badanyahay siyaasiyiinteenu wali mas'uuliyadaa ay ku aqbali karaan aragtiyo ka duwan iyo dad kala afkaara way adagtahay, markaa waxaa fududaan doonta in dad badan oo Soomaaliyeed oo "passport" haysta  dalka laga caydhiyo oo la yidhaahdo markay isku dhacaan kolba qolada siyaasada haysa in la yidhaahdo jinsiyadii ayaa lagala laabtay, inta danbi loo sameeyo. Markaa si cad aan qodobkaa jinsiyadda ugu caddayno "inaan lala laaban karin, laga qaadi karin asbaab siyaasadeed awgeed" sidiisa ha loogu soo celiyo uu yaalay Dastuurka KMG, isla sidoo kale in kastoo ay horay ugu jirin ha lagu caddeeyo jinsiyadda soomaaliga ah uu helayo qof kasta oo uu dhalo aabo Soomaaliyeed iyo hooyo Soomaaliyeed.

- Marar badan ayaan arkay "immigration" dumar Soomaaliyeed oo carruur dhalay aan Aabahood Soomaali ahayn oo dhibaato ka haysto oo dacwada ku jira oo qaarkood badan ilmihiina dalkii kale xuquuq ku lahayn isla kii Soomaaliya ee hooyadii ka soojeedayna waxba ku lahayn, Aabaha iyo Hooyada Soomaaliyeed, hooyadaaba la hubaaye yaynaan kala masuugine si cad ha loogu sheego Dastuurka oo xeer lala sugin "in jinsiyadda Soomaaliga xaq u leeyahay qofkasta oo u dhalay aabo ama hooyo soomaaliyeed" ciduu doono ee kale ha ka dhalo.

- Buugga warbixinta bogga 23 jaantuus ayaad ku samayseen Guddiga, jaantuuska waxaad ku sheegteen inuu ka koobanyahay 32 faqradooda, 9 faqradood oo cusub, 21 aad siiqayn iyo wax-kabeddel ku samayseen, 2 aydaan waxba ka beddelin, laakiin sida dhabta ah waxa uu ka koobanyahay 35 faqradood, markaa buugiina warbixinta bogga 23 inaad dib ugu noqotaan ayaan iyadana rajaynayaa waad mahadsantihiin.

3) **Xil. Mohamed Adam Moalim Ali:**
Haddaan toos u gudo galo qodobada aan ka qabo aragtida:

- **Qodobka 1(1)**: Soomaaliya waa Jamhuuriyada Federaal ah muslim ah, waxaan soojeedinayaa anigu sidii xildhbaanadii igu horeeyey ay dhaheen in lagu daro "sunni ah"

- **Qodobka 1(5)**: waxaan qabaa gobonimada, madaxbanaanida, midnimada qaranka iyo xuduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa laguma xadgudbaan, waxaan rabaa in lagu kordhiyo maaddaama aad ogtihiin Jamhuuriyaddu in ay Bad iyo Bari ay tahay iyo wabiyo oo baryahan xaaladii baddu taagnayd, maaddaama uu dastuurka "black iyo white "uu yahay in lagu cadadeeyo xuduudaha Bad iyo Bariga in lagu daro. "Midnimadda qaranka iyo xuduudaha Bad iyo Bariba ee Jahmhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa laguma xadgubaan.

- **Qodobka 2(1):** waxaan qabaa ayadana in lagu biiriyo sidii dadkii iga horeeyey ay sheegeen islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, markii horana waxaa qornaa islaamku waa diinta dawlada, meelo badan ayaa dadka laga soo galay markaa waxaa la rabaa ayada laftigeed in la caddeeyo oo aan si meelna lanooga soo gelin aan u qorno "islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dowladda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya" oo aan u dhamayno si ayna u dhicin dad gaar islam maahinee, jamhuuriyad iyo dadka ku dhex jira ayaa islaam ah.

- **Qodob 2(3):** in lagu biiriyo meesha ugu danbaysa waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyada, Jamhuuriyadee weeyi? In lagu daro **"**Federaalka Soomaaliya" in lana waafajiyo shareecada islaamka, maaddaama dalku dal muslim yahay. Inta badan waxaa reebban cayda diinta islaamka, karaahiyadda iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta islaamka. Qofkasta oo ku gafa islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyada, Jamhuuriyadee waaye? "Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed lana waafajiyo shareecada", maddaama uu dalku yahay dal muslim ah.

- **Qodobka 2(4):** waxa qoran, Lama soo saari karo xeerar, meeshii "sharciyada" oo dhan waxa lagu badalay "xeerar", waan qabaa, lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn Shareecada

Islaamka iyo maqaasiiddeeda, Waad ogtihiinoo Barlaamaanku xeer kaliya ma soo saaro Qaraaro ayuu mararka qaar soo saaraa, haddii Qaraar aan waafaqasanayn shareecada islaamka la soo saaro maxaan dhahaynaa? Waadna ogtihinoo dastuurka mar haddii wax laga beddelo nin walba waa xiganaa, kii "positive" ku xigta iyo kii "Negative" ku xigtaba, meeshaas waxaan rabaa maaddaama Barlaamanku soo saaro qaraaro ay ku jiraan in lagu kaabo **"lama soo saari karo xeer ama qaraar aan waafaqsanayn shareecada islaamka"**.

- **Qodobka 3(5):** qaabka ay u qorantahay waxaan rabaa in siiqada laga beddelo, meesha laga leeyahay dawlad goboleed ayaa qoran, dastuurka haddaa dib u sixid lagu samaynayaa, waxaan qabaa sida sharciga xeer loogu beddelay meelaha "dawlad goboleed" ku qoran tahay in lagu beddelo "maamulo goboleed" sababtoo ah dowladda waxaa la adeegsanayaa magac dowladeed, heshiisyaa lagu soo galay caalami ah, mararka qaarna waxaa laga yabaa in lagu soo gabado meelahaas, marka inaan caddayno sida loo kala sareeyo awoodaha dastuurkeenu waxbadan ayuu iska horkeenayaa in la qeexo dawlad goboleedka meeshaas lagu cadeeyo. hada waxa qoran **heer dawlad goboleed** "Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed ayaa qoran, marka meeshaas waxaan qabaa aragti ahaan, maamul goboleed in laga dhigo, iyo dawladaha hoose si wax-ku-ool ah lana suggo gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo" waxaan rabaa in siiqada laga badalo oo loo qoro, **si wax ku-ool ah oo waafaqsan shareecada islaamka ah dhamaan jagooyinka laysku doorto iyo kuwa laysku magacaabo,** meeshaas in siiqada qaabkaas la waafajiyo ayaan qabaa.

- **Qodobka 6(3)(5):** arrintii aan hadda sheegey maamulo goboleeyada, dowladda goboleeyada ku qoran labada farqaba hadaad fiirisaan in la waafajiyo ayaan rabaa oo hal "style" inay yeelato, la kala oggaado dowladnimada dowladda Federaalka loo daayo, wixii ka hooseeyana maamulo gobol oo isku tagay oo maamul goboleed la dhaho ayaan qabaa.

- **Qodobka 8(1)(4):** ayaan wax ka qabaa, waan qabaa aragtidii ahayd Soomaaliya ayaa la qoray. Faqradda 1aad waxaa qoran Soomaaliya, arrintaasi markaa Soomaaliyana maadaama ay Jamhuuriyada ay labo state tahay in la qeexo sida loo qoray, Soomaaliyeed siday marka hore u qornayd in loo qoro ayaan qabaa faqrada 1aad.

- **Faqradda 4aad:** oo gabigeedaba la tiray oo ahayd "Diidmada, laalista iyo ka-qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed" Guddigu qodobkana way ka tureen meeshaba. In qofka jinisiyadiisa looga qaadi karaa arrimo siyaasadeed, waa lakala aragti duwanaan karaa, waxyaalo siyaasadeed oo wixii dhici jiray oo hadaba qaarkood ay taaganyihiin, markaa waxaan qabaa qodobkaa sidiisaba qofka jinsiyadiisa ayuu ilaalinayey, in sidiisa loo soo celiyo oo aan laga tirin oo ay keenin "confusion" waad mahadsantihiin intaasaan aragti ahaan ku biirinayaa asalaamu caleykum.

4) **Xil. Bashiir Abdi Mohamed Mohamud:**
Bismilaahi raxmaani raxiim, salaamu calaykum waraxmatullaah, Guddoonka, labada Guddi, Xildhibaanada sharafta leh dhamaantiin waad salaamantihiin, salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, waxaan rabaa inaan aad usoo koobo su'aalaha aan waydiinaayo isla mar ahaantaana waxaan rabaa inaan ka hadlo arimo kaleeto.

- **Qodobka 1aad:** waan ku raacsanahay islaanimada.

- **Qodobka 1(3):** meesha ugu danbaysa odhanaysa qofkasta ku gafa diinta islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyada, inagu waxaan qabnaa qodobkaasi waa laba la celin waayey, waxaynu qabnaa xeerka ciqaabta oo si cad u tilmaamaya qofkii ku gafa diinta qodobada 313 iyo 314.

- **Qodobka 3(1):** waxaan fahmiwaayey kalmadda **"**maqaasiiddeeda" oo labada jeer u qoran "spelling" kala duwanyahay.

- **Qodobka 3(4): "**talinta sharciga" waxaan odhan lahaa ha loo daayo "sarraynta sharciga".
- **Qodobka 4(1):** uu isku soo labo noqnoqnayaa, in loo hogaansanaado kasokow shareecada islaamka, Dastuurka oo ah xeerka uugu sareeya Dalka, isaga ayaana hogaaminaya xukuumada heer kasta oo ay tahay qaybta labaadna isaga uunbay dib uugu noqonaysaa kaas waxaan odhan lahaa sidiisa ha lagu celiyo. Inta kale waxaan la qabaa waxa la sheegay. Tayda ayaan ku darsanayaa marka idinkoo raali ah:
  Ayaamihii doodu socotay dibbada ayaan ku maqnaa waxaan rabaa inaan ku darsado intaydii. waxaan ayidaa Gudoomiyuhu erayga uu ku dhawaaqay ee u lahaa "perception" waxaa jira arrinta in la dadajinayo la qabo, anigu waxaan ka mid ahaa qolada qabta eraygaas, inaan ka hadlo ayaan rabaa, waxaa shiray NCC ama guddoonka Gollaha Qaranka ee madaxwaynaasha waxay soo saareen waraaq dheer, warqadaa waxaan ka soo qaadaynaan 4 shay ee ugu muhiimsanaa oo ah Madaxwayne iyo Madaxwayne Ku-xigeen, labo xisbi, madaxwaynaasha "state" joogo oo lagu magaacabo hogaamiye ha loo bixiyo iyo hal Guddi oo u qaabilsanaan doono dhamaan doorashooyinka oo dhan afartaa ayaa ugu muhiimsanaa.

  10ka daqiiqo ee aan leeyahay inaan dhamaysto ayaan jecelaan lahaa, arrinta anigu aan ka hadlayo waxa weeyi waxaan ogaa tii hore ee ahayd habraaca la samaynayey, habraaca anigu waxaan ka qabay waxaan u gubiyey Xuseen Idow.
  Anigu mid kaliya ayaan ku soo gabogabaynaayaa, waxayn uu jeedno meesha ay u socdaan, waxaynu u jeedno inay waxba ka soo baxayn oo ay inoo muuqato dagdag lagu jira in lagu kala tagayo oo ay jiraan arrimo badan oo kale oo ka muhiimsan, waxaan odhan lahaa dagdagan inaga daaya si khalad ayuu ku socdaa, waxyaalo badan oo ummadda kala gaynaya inaan ku adkaysano waa laga wanaagsanyahay af jikaarkana waa dhib weeyaan, waad mahadsantihiin.

5) **Sen. Abdiweli Mohamed Ibrahim:**
   Mahadsanid guddoomiye, xildhibaanada labada aqal, guddiga madaxbanaan ee dib u eegista dastuurka, guddiga dib u eegista dastuurka iyo saxaafada, asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, bacda salaam. Mudane Guddoomiye hadaan u gudda galo doodayda.

- **Qodobka 1(1):** Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulshadeed, waxaa laga tagay eragya **caddaalada bulsheed"** oo ah

"social justice" oo aad uu qiimo badan taas daboolaysay baahi badan oo ka mid ah muuqaalka bulshada dhexdeeda "discrimination" waxyaalaha loo yaqaano, markaa mabaa'dii wayn oo caddaalad bulsheed ayaa laga tagay oo lagu bedleday kaliya caddaaladda oo ah "justice" caddaaladaha loo doonto maxkamadda ma aha, caddaaladda bulshada waxay ka mid tahay caddaaladaha "social justice", waa muhiimad asaasi ah oo qofka shaqsiga ah uu leeyahay bulshada uu ku dhex noolyahay muuqaal baa jiri kara "discrimination" iyo waxyaalaha qaarkood, intaan la gaarin cadaalada kahor, marka **cadaalad bulsho** oo ah erayga laga tagay waxaan qabaa inay muhiim tahay oo aan laga tagin.

- **Qodobka 1(2):** oo ka hadlaysa Allah SWT ka sokow awoodda oo dhan waxaa leh shacabka wuxuuna isticmaalayaa si toos ah, waxaa laga tagay "popular sovereignty" waxa yaalaha loo yaqaano oo ah awoodda wayn inay shacabku leeyihiin, waxaana la qaatay gobanimada "sovereignty" oo la qaatay Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) kasokow, awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh shacbiga, waxaan qabaa eraygaas tii hore inay tahay muhiim oo ku dhisnayd "popular sovereignty" markaas taas laga tagay "popular sovereignty" waxyaalaha loo yaqaano meesha laga masaxay oo la qaatay "sovereignty" marka taasna waxaan qabaa in sideedii loo daayo oo sidii hore ka fiicanayd oo ka miisan iyo mug waynayd.

- **Qodobka 2(1):** xildhibaano badan ka dhawaajiyeen waxaan qabaa "Islaamku waa diinta, dalka iyo dadka" in lagu daro.

- **Qodobka 3(1):** ayadana waxaa laga tagay caddaalad bulsheed oo ah "social justice" oo caddaalaha bulshadu u baahantahay in erayga miisaanka leh inaan laga tagin ayaan rabaa.

- **Qodobka 5(2):** sida ay u qorantahay Dawlada Soomaaliya waxay daryeesha, ilaalisaa, islamarkaana horumarisaa Af Soomaaliga, waxaan qabaa in lagu waajibiyo qodobkaas "waa inay" daryeesha, siiqadaa ayey ku fiicanyahay ayaa qabaa.

- **Qodobka 6(3):** qaybta dambe ee dastuurka waa in lagu daro dhammaan erayada heesta qaranka si aan loo beddelin.

- **Qodobka 3(7):** Dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga waa hantida qaran ee shicibka waxaa laga tagay wabiyadda, waad ogtihiin dalalka dariska ee "Ethiopia" iyo Masar waxay isku haystaan waa wabi, markaa hanti qaran haddaad ka tagteen wabiyada waa ina lagu soo daraa meshaa.

- **Qodobka 8(4):** Oo ka hadlaya jinsiyada waxa laga saaray faqrada 4aad, diidmada, laalista iyo ka qaadista jinsiyada laguama xiri karo asbaabo siyaasadeed. Way toosnayd in laga saaro ma ahayn, maaddaama ay dhici karto in wadanka qabsato xukuumadda arrimo siyaasadeed loo isticmaalo, qodobkaas muhiim weeyi in laga saaro ma qabo anigu waad mahadsantihiin.

6) **Xil. Omar Ali Abdi**
Bismilaahi raxmaani raxiim, Guddoomiyaha iyo labada aqal ee Baarlamaanka, sidoo kale Guddiyada kasoo shaqeeyay arintan, dhamaan qof walba iyo maqaamkiisa iyo mansabkiisaan ku salaamaa.

Ugu horeyn inta badi waxaad moodaa in laga wada hadlay  qodobbada ugu muhiimsanaa, sagaal qodob ayuu ahaa ku adkayn ayaan ugu laaban donaa ma jiraan waxyabo badan oo aan ka hadli doono, aniga aragti ahaan waxaan qabay gudiga saakay wixii maalin hore aan ka hadalnay inay maanta soo geliyeen iyo inaysan soo galin inan kala ogaano, iyo inay qateen isla maanta doodeena inan sii wadano wixii la soo galiyay doodaan iyo wixii aan lasoo gelina dib dambe 19ka bisha aan uga aragno, laakiin waxaad moodaa inaan u fududeynay in wixii dhan majhuul laga wada dhigo oo xildhibaan walba aragtidiisa iyo wixii uu qabay sigaar ah uusan uga arki karin. Waxaan rabaa inaan usii galo waxyaabaha aan rabay inan ka hadlo:

- **Qodobka 2 (3**): oo kahadlaaya diinta dalka waxaa ku jirta waxaa reebban cayda diinta islaamka karaahideeda iyo wax kasta oo wax udhimaya xushmada, arrimaha diinta islaamka qof kasta oo u gafa diinta islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerka Jumuuriyadda. Waxaan qabaa waxa la caayay ama loo gafay waa diinta islaamka ee in loola laabto isla diinta islaamka.

- **Qodobka 3 (1):** oo mabaadiida aasaasiga ah waxay leedahay dastuurka Soomaaliya waxaa saldhig u ah qur'aanka kariimka iyo sunada Nabigeena Muxammed (NNKH), wuxuuna ilaalinayaa maqaasida (ujeedoyinka) shareecada iyo caddaaladda bulshada.  Wax walba sida aan rabno oo wada cad waxay kuwada cadahay in diinta islaamka loola laabto marka qofkii diinta islaamka caaya ama wax udhima waxay ku wanaagsan tahay in waxa uu ka qabo in diinta islaamka loola tiigsado halkaasna lagu soo caddeeyo.

- **Qodobka 8(4):** Wuxuu ka hadlayaa shacabka iyo jinsiyadda, "diidmada laalista iyo ka qaadista jinsiyadda laguma xirikaro asbaabo siyaasadeed", waxaa moodaa haddii qodobka laga tago meesha waxaa ku qoran faqradaan in la tiray sabab loo tirayna ma naqaan iyaguna kuma aysan soo cadaynin, faqradan haddii aan la adkayn karin waxaan qabaa in halkeeda lagu dhaafo xildhibano iga horeyayna ay sidaas oo kale u soo sheegeen. Dastuurkan jiilal dambe ayuu sii jiri doonaa anagoo xilhayna iyo anagoo aan xilhaynba, waa sii jiri doonaa waxaa la rabaa qofka jinsiyadiisa qaab siyasadeed in aan looga qaadi karin iyo waxyaabo kale oo lamid ah, waxan qabaa faqradan adkayn ah xildhibaanadii iga horeeyay sidii ay sheegeen oo kale in halkiisa lagu dhaafo.

- **Qodobka 9aad**: magaalamadaxda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, qodobkan waxaa lagu sheegay in uu ku jiro cutubka 5aad marka waxaan u qaatay luuqada ciyaal xaafadeedka foos wareerin ayay dhahaan, maaddaama cutubka 5aad ugu tagayno sabab inta loo soo geliyay, waxaa moodaa ma kasbeyn baa ma ogi, maqaamka muqdisho iyo sida looga hadlaayo doodaha ku day miyaa ma fahmin, qodobka aan halkiisa ku dhaafno meshaas aan ogu tagno wixii dood iyo aragti aan ka qabnana halkaas aan isla gaarno.

- Waxaan rabaa inan kusoo gabagabeeyo Qodobka 4aad farqadiisa 2aad: sarreynta dastuurka. sharci kasta ama talaabo maamul oo ka soo horjeeda dastuurka, maxkamada dastuuriga ah ayaa awood u leh burinta sharcigaas ama talaabadaas maamul si waafaqsan dastuurka. Waxaan rabaa inaan talo ugu soojeediyo xildhibaanada labada gole halkaan waa sida uu ugu qornaa dastuurkii hore, kuwan hada soo beddelay ee gudigana waxba kama aysan bedelin, faqradaan waxaa lagu sameeyay toosin iyadoo si cad loo qeexayo in uu yahay waxba kama jiraan xeer kasta, go'aan kasta am talaabo maamul kasta oo ka soobaxa heer kasta dawladeed oo ka soo horjeeda dastuurka.

- Marka maaddaama aan wax laga beddelin 12 sano ku dhawaadna dastuurkii hore aan isticmaalaynay maxkamadii dastuuriga na aysan jirin halkaana ay ku caddayd, dastuurki hore isla dastuurkana aan sii gelin doono maxkamada dastuuri ahna aysan jirin waxaa moodaa in waxyaabo aan ka gaabinayno ay jiraan sida aan u dhameystirayno dastuurkan iyo aragtidiisa, waxan qabaa in aan u dhamystirno una dadajino maxkamada dastuuriga ah waa talo aan usoo jeedinaayo labada gole ee Baarlamaanka si ay u adkeyaan in la helo maxkamad dastuuri ah.

  Xildhibaan iga horeeyay oo saxiibkay ah ayaa wuxuu shaki galiyay astaanta heesta, midda calanka xitaa shabeelka labada dhinac ku dhagan, murtida heesta calanka xita wuxuu galiyay dood waxaa ka fududayd taas astaamaha soomaaliya u yaal oo dhan shaki ayaan ka qabaa dib aan isugu laabano inuu dhaho, wax walba sideedii ayay igula qurxoonyihiin halkaas marka ay joogto waad mahadsantihiin.

7) **Xil. Dahir Amin Jeesow:**
Mahadsanid Guddoomiye, aad ayaad u mahadsantihiin xildhibaanada sharafta leh, waa ii farxad in dastuurkii 2012 ilaa intaan aan kusoo shaqeynaynay ee wajibkii na saarnaa ahaa in aan dib-u-eegis ku samaynayno aan gudanayno waajibkii aan dhowr Baarlamaan oo soo maray udhaaranay oo aanan waxba ka qabanin aan nasiib u yeelano Baarlamaanka 11aad ee maanta in aan wax-kabadalno.

- **Qodobka 7(3)**: Ee nuqulka ay noo keeneen walalaheen ee cadanynaya xuduudaha Jamhuuriyada Soomaaliya waa xaduudihii ku astaysnaa dastuurkii 1960[kii], dadkii dastuurkaas qoray maanta wax ka nool inay jiraan ma umalaynaayo, maxay maanka ku haayeen, maxay jeclaayeen, maxay hiigsanayeen, waxay hiigsanaayeen wax la yiraahdo 5ta Soomaaliya xaduudaha ay dastuurka ku qoreen waxaa ku jirta Jamhuuriyadda walaleheen ee Jabuuti, waxaa ku jirtay “north east” waxaa ku jirtay kililka 5aad ee Soomaali galbeed loo yaqaano, dhulkaas ayaa ku jiray, suurtogal ma aha maanta in kililkii iyo deeganadaas aan sheegnay asbaababahooda Jamhuuriyadii markaas jirtay ay u burburtay inaan maanta dabada sii hayno oo aan dhahno Jabuuti ayaan Soomaaliya ka soodhigeynaa oo xuquuq ku yeelanayso dastuurkan, kililka 5aad ayaa xuquq ku yeelanaayo, “north east” ayaa xaquuq kuyeelanayso, sax ma aha wixii ay awoowayasheen maskaxda ku hayeen waan gaari weynay waxna waan gaarnay. Jamhuuriyadda Soomaaliya ama Soomaaliyeed waa Jamhuuriyadii labadii gobol ee xornimada qaatay haddii aan maanta jahwareerinayno oo anagoo sootaagan aan riyoonayno ee aan dastuurka ku qorayno 5tii Soomaaliya Jabuuti ay ka mid ahayd , Soomaali Galbeed ka mid ahayd, NFD ka mid ahayd haddii aan dastuurka ku qorayno anagoo saacadan joogno 2024 wax nagala sugaayo in aynan ahayn ayaan qabaa.

- **Qodobka 8(1):** Wuxuu ka hadlayaa Soomaaliya iyo soomaaliyeed. Soomaaliyeed waxay la mid tahay oo aan tusaale ugu soo qaadan karaa carabta, Jaamacadda Carabta, Sacuudi Carabiya, Imaaratul Carab, Kuwaytul Carab ayay lamid tahay. Soomaaliyana waxaa waaye Jamhuuriyadii isla qaadatay xoriyada labadii gobol, Soomaliyeed marka xaga hanaga joogto waxaa kamid ah kililka 5aad walaaleheen Jabuuti waxaa kamid ah “north east” halkaas hanaga joogaan waxa aan dastuurka u sameynayno waa in ay caddaato in ay tahay labadii gobol ee xoriyada qaatay 1960[kii] oo fikirkii ay awoowyasheen soo xanbaarsanayeen oo aan gaari waynay aan meel iskadhignaa waayo xaquqdooda xitaa maynan helaynin, maanta

Jabuuti xoriyad ka maqan maleh waa Jamuuriyad iyaduba na taageerto, NFD sidoo kale dowladihii ay la daganayeen ayay xuquuq ku yeesheen, xuquqdaas ay ku yeesheen iskama iman waa loo soo halgamay, Jamhuuriyadii Soomaaliya ayaa u burburtay daraadood marka inan maanta sii saarsanaano oo aan Jamhuuriyadeena marwalba u burburto oo dowldaha aan dariska nahay cunfi iyo naceyb ka sameysano aniga sax uma arko.

- **Qodobka 9aad:** Caasimadda ayuu ka hadlayaa, sabab ma jirto caasimadda loo raro cutubka 5aad, dad baa xaquuqdooda ku maqantahay, ayada ayaa xaquuqdeeda ku maqantahay, waxay tahay ayaan garan la' nahay, dadkeedi ayaan isdooran karin waxay ahayd isbarbardhig waba sameyseene oo waan arkaye inaad ku dhiiratiin oo aad ku soo dartiin cutubkan 4aad, haddana waan idinkula talinayaa inaad ku soo dartaan caasimadda maalin walba ayaan dhahnaa baarlamaanka soomaaliya ayaa soo saaraya, kii aan soo saari lahayn idinkaa soo qoray inaad ka reebtiin oo aad u reebtiin cutubka 5aad beri na waxaad dhihi doontaan cutubka 6aad ayaan u xawilnay, dabcan anaga waxaan qabnaa shaki ah in dibindaabyo kale caasimadda lagu sameynayo, caasimadana gedigeen waan u wada simanahay waa caasimad soomaliyeed, laakiin xaquuq baa ka maqane xuquudeeda iyo haybaddeeda inaan cadeyno oo aan ku qorno oo iyadana ka bilawno ayay ahayd .

- **Qodobka 3(5)** Walaalehey gabdhaha Soomaliyeed ee 30% u doodaayo aniga haddii la idin siinaayo ma diidani, laakiin waxaa idinka qurux badan idinkoo qaata nidaamka, "ul aan ul lagu jimeeya lahayn waa gaabataa ama waa dheeraataa" waxaan rabaa in aad isku jimaysaan gabdhaha Kenya sida ay "women rep" u yeesheen, marka ugu horeysa 50 meel aad naga dhigatiin markaad meel naga dhigataana aad nala tartantiin oo musharixiin noqotiin intii la dhihi lahaa gabdhaha Soomaliyeed 30 ayaa loo xiray ladhihi lahaa, tusaale ahaan maanta 30% la idin xiray 67 ayaad ka haysatiin labada aqal, waxayna ahayd 99 xildhibaan in aad haysataan, haddii maanta 50 xubnood intaad meel dhigataan gabdho wiilal ka qiimo badan ayaa jiree oo aad tartan gashiin, waxaan qabaa in aad guulaysanaysiin oo aad 100 kor u dhaafaysiin, laakiin haddii aad isku cabirtaan 30% xogaa in ay fiicnayn ayaan umalaynayaa. Oggaadana wiilka Soomaaliyeed iyo gabadha Soomaliyeed marka ay isla tartamayaan badanaa waxaa ladhahaa war gabadha siiya codka, wiilka ha uga hiilinina ayaa ladhaaa inta badan Soomaalida dhaqankeeda gabdhaha waa ixtiramaan, waxaa kaloo muhiim ah 60% ummadda Soomaaliyeed haween waaye, mar haddii aad idinka is dooranaynin waa nasiib daro idinku dhacdaye, hala sameeyo dhiirigelin gabdhaha iyaga ruuxooda in ay isu codeeyaan, 60 % haddii aad Soomaaliya ka tahay oo ayadan is dooranaynin ma helaysid kursigaaga dhiirogelinta kow gabdhaha Soomaliyeed halaga bilaawo in ay isdoortaan oo ay isu hiiliyaan aad ayaad u mahadsantihiin asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.

**8) Xil. Abdirahman Mohamed Hussein:**

Mudane Guddoomiye, Guddoonka labada aqal, fadhiga labada aqal, asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, marka hore Intaan faahfaahinta u gelin waxaan rabaa inan u mahadceliyo labada gudi shaqada ay soo qabteen oo ku saabsan wax-kabedelka dastuurka oo maalmahan aan u balansanayn cutubkiisa koowaad akhrintiisa

Waxaan kawada war haynaa inteeni katirsanayd Baarlamaankii 9aad, 10aad, kii 11aad ba guddiyada lasocodka dastuurka iyo dibu-eegsta dastuurkuba waa soo shaqeynayeen, intaas nasiib uma yeelan dadkii idinka horeeyay inay horkenaan golaha, waad kaga nasiib badan

tihiin midaas ayaan idin qirayaa, waxaan galayaa qodobada ay ilatahay in toosin iyo wax-kabbedel, wax ka dhimis iyo wax ku daris intaas lakeenay.

- **Qodobka 2(1)** oo ah islaamku waa diinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, kii hore ayaa igala quman aniga, uu koobnaay waana isku toosnaay waxyaabaha aan rabo in aan guddiga xasuusiyo waxaa waye, dastuurka waxaa la yiraahdaa waa in uu koobanyahay, tafaasiishu meelo kale ayay leedahay marki qodob la xusaayo waa in uu mujmal yahay si tafaasiisha loogu helo hadhow meshii la rabay haddii ay tafaasiishu inta soo aado dastuurku aad ayuu u badanayaa, marka waxaan qabaa in qodobkaas sidaas loo daayo sababta aan u leeyahayna waxay tahay qodobkii hore wuxuu qorayaa "Islaamku waa diinta dowlada", dowladu waxay ka kooban tahay dalka iyo dadka iyo waxa la yiraahdo siyaadada ama "sovereignty-ga" ama gobanimada. Warkii oo dhan meeshaas ku jiraa mar haddii aad dowladi ka hadashay waa dadka Soomaliyeed iyo dhulka Soomaaliyeed iyo dowladnimadii intaas isku yahay, macnaheeda marka wuu koobnaay macnihii wuu xanbaarsanaay oo ay saaxiibaday dad badan oo ka mid ah ay tafaasiiliyeen.

- **Qodobka 4aad**: Sarreynta Dastuurka faqrada koowaad sideeda ayaan ku qabaa. Faqradda 2aad waxay leedahay "cid kasta dhmamaan hay'adaha dowlada ururada siyaasadeed iyo ururudada bulshed waxaa waajib ku ah in ay u hoggaansamaan ku dhaqanka iyo ilaalinta dastuurka". faqradda koowaad ayaa sheegaysa sarreynta dastuurka, marka wax sabab ah oo tafaasiishaas loo geliyo ma fahmin in laga bixiyo ayaduna tafaasiil ka carar ayaan ahay, maaddaama sarreynta dastuurka uu qodobka kowaad ka hadlay oo uu sheegay in shuruucda kale ee dalka oo dhan ka sarreeyo sabab loo yiraahdo waa inay u hoggaansamaa "already" haddiiba uu ka sarreeyo waa u hoggaansamayaan waaye marka wixii tafaasiil ah waxay saaranyihiin meel kale.

- **Qodobka 5(1)** wuxuu ka hadlayaa afka rasmiga ah. Faqradda 1aad Maay iyo Maxaatiri inuu yahay ayuu sheegay xildhibaan saaxibkay maalin dhaweyd wuxuu yiri Xaatiri ayaa jirta, xaatiridu maxaatiri ayay kujirtaa.

- **Qodobka 5(2):** waxay leedahay dowladda federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa, ama **ay daryeelysaa** siday dad badan soo jeediyeen ilaalinta islamarkaana hormarisaa Af-soomaaliga iyo suugaanta qodobkaas, waa qodob akaademiyada afka soomaaliga in loo raro ay tahay qodob dastuur ah ma aha sharcigii akaademiyada lagu dhisi lahaa haloo raro, aragtidaas ayaan qabaa.

- **Qodobka 6aad**: Calanka iyo astaanta, ninka layiraahdo Maxamad Haaruun wax badan baan ku taageersanahay oo uu ka hadlay, wixii la idin diray waxay ahayeen wixii aan macno sameynaynin in macno loo yeelo, arimaha ku saabsan astaanta ruuxeeda sababta aad usoo sheegi waydeen waa war meesha ku jira, arrinta uu ka hadlay Guddomiye Mahad Cawad uu yiri "bey-cad", "bey cad" aniga haddii la ii sheego wax boor leh oo cad ayaan u qaanaa, bey dhulkeena boorka ayaa laga yiraahdaa marka waxaa layiraahdaa "fasaral maa'a bil maa'I", wax aad is lahayd sharax haddii aad sharaxaada ka khalado dhib keeda ayay leedahay, intaasna waxaan leeyahy halaga daayo, marka arinta aan rabo inaan halkan ka sheego, taas tafaasiisheeda ninkaas odayga ah ayaan ku raacsanahayoo, wixii la qurxin karo in la qurxiyo ayaa la idin diray. Heesta afka soomaliga ah haddii tii hore laga qurxin karo

heesta calanka hala qurxiyo, astanta haddii sidii hore laga qurxin karo waa la sheegay. Xildhibaanku si fiican ayuu u kaftamay wuxuu yiri shabeelku waa xayawaan aan cidna la macaamilin oo kaligiisa sida muuqata anagiibaa isla macaamili waynay, shabeelkii ayaan u eekaanay, marka maxaa diidaaya in aan u fikirno si fiican haddii aan xitaa xayawaan lagamaarmayn kuwa fiican oo aan dhaqato ayaa jira geela oo kale in laqaato oo ugu yaraan tolkeen ay farxaan qeyb kamid ah.

- **Qodobka 6(4)**: Waxaa kujirta bilad sharafta calanka heesta qaranka ee Jamhuuriyada iyo maamuuska ay mudanyihiin dadka mutaysta, waxaa xeer gaar ah ku soosaaraya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaan ka fahmay lama arko haddaan run sheego macnaheedu abaalmarinada Madaxweynayaasha bixiyaan maa laga wadaa, si kale in loo dhigo ayay ahayd waa fiicantahay, waayo haddaba waa la iska bixiyaa sabab loo bixiyeyna lama yaqaan in xeer laga sameeyo lakiin lama fahmi karo idinkoo raali ah, waxa ay tahay aad haloo jilciyo.

- **Qodobka 8 (4):** Waxaa layiri waa laga tagay, faqradaas waxay dhahayday “diidmada laalista iyo kaqaadista jinsiyada laguma xiri karo asbabo siyasadeed” qodobkaas aad iyo aad ayuu muhiim u yahay, inaan qofka muwaadinka ah ee Soomaaliyeed ee dhaladka ah muwaaddinnimadu jinsiyada marka hadhow la tago ayay tafaasiishu imaan doontaa, laakiin muwaadinimadu midna waa mid la kasbado midna waa mid loo dhasho, “qofka u dhashay in aan laga qaadi karin” in lagu qoro waa khasab sababo siyaasadeed waliba anaga waxaan ognahay, wadamada nagu xeeran oo carabta u badan dadka jinsiyada waa laga qaadaa isagoo muwaaddin ah ayaa jinsiyadu boqorka kala laabtaa, marka beri subax haddii la yiraahdo muwaaddin ma tihid baasaboor ma qaadan kartid magaalada iska dhexjoog, waa arrin kale oo cusub oo dhici karta arrinkaas halaga laabto

- **Qodobka 9aad:** Oo aad looga hadlay, oo magaalo madaxda ah saaxibaday qaarba ka dhawaajiay oo yiri magaalo madaxdi aaway, marka waxaan u qaatay nimankan soodiyaariyay, ma ogtahay marka muqaayada aad tagto “appetizers” ayaa lakeenaa kaddibna cuntada culus, marka afartaan cutub in ay “appetizers” yihiin caasimadu waa culustahay harfahaa la iskula dhagi doonaa marka ramadaanka kaddib ayaa laga dhigay ayaan is iri, sida la sheegay cutubka 5aad ayay ku jirtaa, marka mar haddiiba ay soo socoto waan sugaynaaye ciidda kaddib anagoo faxfaxsan hala keeno.

9) **Xil. Abdi Ibrahim Warsame Qowdhan:**
Waan salaamayaa guddoonka iyo xubnaha labada golle iyo marti sharafta iyo cid kasta oo madasha ku sugan, waan uga mahadcelinayaa labada guddi in ay inoo soo gudbiyeen hannaan aan in badan sugaynay in dastuurkeeni la dhameystiro waxna laga bedelo.

- **Qodobka 3(5)** Waxaan rabaa in aan ku bilaawo codsiyadii gabdhaha anigu gabdhaha 30% iyo kabadan waan u taageersanahay, sifada ay ku imaanayso iyo sida sharci looga dhigayo iyo xeerarka laga soo sarayo waa wax kale waana laga tashanayaa lakiin xaq bay uleeyihiin intaa iyo wax kabdan iyo in waliba carurtooduna jinsiyadaha loola ogolaado taasna xaq ayay u leeyihiin, marka waxkasta oo ay shareecadu u ogashahay oo xuquuqdaas siinaya waan u soodhaweynayaa.

Arrinta Jamhuuriyada waxaan  rabaa in aan ayido Guddoomiye Mahad Cawad shuruucdu waxay leedahay hab loo fasiro, dad aqoon uleh oo ka shaqeeya ayaa jira wax qof waliba meel isaga qaadan karo ma aha guddiyada, waxaan ka codsanayaa in ay fasiraadda sharciga dastuurka aynu qorayno ay ka baarandagaan anigoo bogaadinaya qaarkood in ay looyaro sare yihiin, haddana si fiican uwada sugaan fasiraadda sharciga ilaaliyaan magaca Jamhuuriyada, Mahad baan ku taagersanahay, Soomaaliya hadeer bay khatar ku jirtaa, waxay u baahantahay in loo sameeyo dastuur ilaalinaya in meelna laga soo galo, waxyaabaha ay cadawgeenu isticmaalayaana  oo ay Itoobiya damaca badda u isticmaalayso waxaa kamid ah, meeshaas kaas ayay ahaan jirtay, meeshaas sidaas ayay ahaan jirtay, waxeedii ayay la noqotay, bal fiiriya waxa “statements”ka ku qoran ee kasoo baxaya Abey Ahmed oo uu u isticmaalayo arinta badda, wax u fududayna noocaas oo gumaysiga iyo damaca u fududaynaya in ay dastuurkeena iyo shuruucdeena sameen kuyeeshaan, waa in laga ilaaliyaa wax hadda la isla oggolyahay maba jiraane waxaynu hada nimid aynu sideeda uwadano.

- **Qodobka1aad** ee Jamhuuriyada wax yaabaha loo fahmi la yahay waxaan  isleeyahay aragtidayda qodobadii baa midba meel jiraa,  Jamhuuriyadii wixii qeexi lahaa ee iyada caddeyn lahaa ayaa waxay ku xusan yihiin qodobka 8aad dhulkii iyo waxay ka koobnayd iyo xuduudihii iyo wixii oo dhan, waxaa kasoo soko maray sharciyadii, guddigu waxaan oran lahaa waa in ay israaciyaan Jamhuuriyada iyo dhulka ay  koobto iyo gayigeeda iyo nidaamkeedaas oo dhan dabaddeedna ay ku xijinaayn diinta dabadeedna ay ku xijiyaan dastuurka iyo shuruucda, marka waxaad arkaysaa 9ka qodob, dastuurkii iyo jinsiyadii in ay gayiga ka horeeyaan, marka waa la fahmi lahaa hadii ay u qoraantahay Jamhuuriyada sida qodobka 7aad ku qoran,  waxay ka koobantahay dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, gayiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo dhamaystiran bad, intaa intaa, kasoo noqo hadana dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya lama kala goyn karo, xuduudihii ayaa ka dambeeya waxaas oo dhan, xuduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa xuduudihii Dastuurkii 1960gii ee Soomaaliya, marka Jamhuuriyadii xaga hore laga fahmimaayo, haddii aan xuduuddii iyo intii ay ka koobnayd ku lifaaqnayn, Jamhuuriyadda iyo xuduudda iyo waxa ay ka koobantahay iyo gobonimadeeda in la isxijiyo, dabadeedna diinta loo gudbo, dabdeedna af soomaaliga loogudbo, shaciga iyo jinsiyadaha loo gudbo, haddii dastuurkii qabyada ahaa sidaa ku qornayd sidaa in aan uqaadano ma aha haddii sida ay isugu xigaan aan wax-kabeddeli karno wa inan ka beddelnaaa.

  Xaga diinta waxaan laqabaa saxiibaday oo yiri diintu waa in ay cadahay oo ay sunni tahay islamarkaana ay tahay shaafici, waxyaabaha ina wareeriyay ee Soomaaliya dadkeedii kala qeybiyey waxaa kamid ah mad-habadan qofwalba tuu jeclaystay iska aaday ee fasiraadaha kale la kala siiyay, hada madhaba waxay sheegaysaa in hilibka geela laga weyseysto, qofbaa ku shaqeynaya oo maalin walba weysaysanayo waxaa laga yabaa in uu hilib cuno weysada ku adkaato, markaas uu  hadhow shaaficiyo aadayaa, sidii aynu marba madhab ugu gudbaynay wexeeniba isla khalkhaleen, waxan qabaa shaaficiyaa dadku wada yahay in la wada aado oo laga shaqeeyo.

- **Qodobka 3(2)** oo Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa dal muslim ah oo kamid ah umadaha carabta iyo afrikaanka, carabta iyo afarikaanka in aan kamid nahay waxaa ka horeeya in aynu ka midnahay umadaha aduunka, oo kamid ah umadaha aduunka carabta iyo afrikaanka, in sidaa la yiraahdo ayan aniga ila qurxbadan aragtidayda.

- **Qodobka 9aad:** Arrinta magaalo madaxda, odowaa baan laqabaa waana lasheegay in ay muqdisho tahay shaki kumajiro maqaamkeeda waxaa lagaga doodayaa doodaha danbe waxaana loo ekaysinayaa caasimadaha caalamka, cidina yay caasimada gaar u xisaabsan, sida caasimadaha aduunku u egyhiin baa loo ekeysinayaa aad iyo aad ayaad umahadsantihiin.

10) **Xil Sareda Mohamed Abdalle:**
Guddoomiyaha waan salaamayaa, waxaan sheegi rabayba way iga wada dhumeen oo hortay ayaa la sheegay, Warka mabadinaayo "diinta dalka iyo dadka" inan saxo ayaan rabay waa la saxay waxaan maanta yaalin xitaa haddii aan arko inaan wax ka taabto ayaan rabaa, qodobbada kowaad labaad iyo sedexaad sidooda in loo daayo ayaan qabaa aanba lataabab, sababtoo ah siiqadaan iyo quruxdaan haddii la kala qaadqaado waxkale ayaa soobaxaayo .maanta astaanta 5ta soomaliyeeda ayaa xitaa wax laga sheegayay dad badan oo cadaw ahna waxay rabaan in aan waxaas sheegayno Jamhuuriyada federraalka soomaaliyeed siiqoyinkaan sida ay hada u qorantahay in loodaayo ayaan qabaa ,afafkana waxaa waaye Maay iyo Maaxaa tiri afka ma aha. Jinsiyadana arin adag waaye laakiin qofkii soomaaliya ku dhashay wuxuu xaquuq u leeyahay qof meel kale xaquuq kuleh in laga siiyo khalad waaye kolay taas wa la isugu noqonayaa, caasimada gadaal ayay aaday.

Haweenka soomaaliyeed ugu yaraan wa in 30 % loogu daraa warka maba badinaayi 47 ayaan usoo kacay dastuurka si jumlo ahaan inan oga hadlo inta usoo istaagay sida uu hada u qoranyahay wadamo badan oo "expert" laga keena qoray "bey-cad" iyo waxaas ayaa hada noloo qoroow haayaa waxaan diidanahay in geedkan lataabto intii ka khaldan siiqooyinka in laga saxo xuuquqaha fulinta kaliya iska hor imaanaaya kaliya in la saxuu uu baahn ,yahay sida uu hada u qoranyahay siiqo ahaantiisa looyaro ayaa qoray siiqooyinka looyaro ayaa yaqaano iyo xeel dheerayaal "expert" oo aduunka laga keenay ilaa "south Africa" ayaa laga keenay, wadama G8 laha keenay qof hada saan u qori kara malaha geedkaan yaan nalagu farafarynin hadii kale shabeelka astaanta qaranka shanta isku hayay shantaan hadii lawaayo iyo labadaan shabeel waan lunay farafaraynta badan geedkaan halaga daayo, ilaa aftida looga qaadaayo aniga waxaan qabaa inuu saan ahaado oo nuqulkii afka Maayga ahaa lagu soodaro ,wixii ka khaldan laga saxo nuqulka maayga lagu soodaro marka danbe ee la keenaayo oo la rabo in la mariyo baarlamaanka, wuxuu kadhiman yahay nuqulka afmaayga ah bes sida uu u qoranyahay dastuurkaan ok waaye haduu gudi doorasho yahay ,haduu dhalasho yahay ,haduu jamhuuriyad yahay, geedkaan xeel dheerayaal ayaa qoray ,xeer dheerayaasha ma laheli doono bilyan dollar ku baxday 10 sano ayaa ladaba taagnaa oo la qoraayay marna "Nairobi" marna aduunka mesha ugu danbeysa lala aadaya aniga gudigaasna waa kamid ahaa Gudoomiyoow waa saxanyahay geedkaan, wixii "error" ah lee laga bixiyo siiqooyinka hada qoran lama helayo ,sharciyada hada qoran dadkii qoray ma helayno sidaan ha loodaayo nuqulkii Maayga ahaana halagu soodaro, warka waaba igu bate waan ka baxay.

11) **Xil. Mohamed Abukar Abdi:**
Bismilaah asalaamu caleykum waraxmatullaahi Wabarakaatuhu een mahadsanid guddoomiye een xillibaanada sharafta leh labada guddiga iyo guud ahaan een galab wanagsan iyo isku soo noqod wanaagsan een weyba eed aanka faraxsana meylaa maalinkii labaad ini laka dooda dastuurka wax-kabadelka dastuurka baarlamaanka jamhuuriyadda soomaaliyeed usu anfadhiye ina laka hadala ee dabcan sida la sheegay dad badan ku hadali intii anku muhiimsanaayti hora lunku hadali laakiin meyba waajibe qofwalbo xildhibaan eh dadku usu matalow, iyo deegaanka usumatalow danoowshee ini usu mey re'eraayi marwalbo usu ka hadala ee sidi la sheegay dastuurke si ee qurux badan an qoreye dadkii haqore iiy qoboradii haqore iyo gudiyadii eed aan dadaaleen ee araktiidey lee kadarakore iyo sixid laakiin weywaa aaminsana mey le eraayi cutubyada ee saaxiibada badan la qabna caqli ka badan ma sheenaana laakiin wali ka daradaana le ka daradaana.

- **Qobobka 1aad** wel badan anu ka irow maleh ina mey la eraaye iin sheeg ada intii saaxiibada ereen maqaba ee wey qabee,

- **Qodobka 2(1)** wey la qabee sida la hajeedii "islaamka waa dadka diinta dadka iyo dowladda" ini laka dhika sida la hankooba melena lahanka tabna fursad kalana liin sameyna ini wax yaaba kalana hadhow laka fasirna markan qodobkaas labaad intaasaa ku qaba.

- **Qobobka 3(2)** ee weyba ku qabee sidi saaxiiba badan ha jeediyeen ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal muslim eh oo sunni eh ugu yaraan ini laka dara ee laqaba eeda shaafici haddii la ka dara mey la eraayay "problem" maka qaba laakin ugu yaraan dal muslim ah oo suuni ini laka dara, wadanka wey lasocotaan dhibaatooyinka ka jara oo fasiraada diinte laka sameey haaye dalkuun dhibaatada geega heysata fasir qaldan oo diinta laka sameeye haaya, dad si qaldan aan fasireen markun dhibaato weyn ka dhalati meyba waajibe ini la cadeey maaddaama fursad lan heli baarlamaanka inisu meyra eraaye ee ka dooda isla

- **Qodobka 3(3)** ee xafarka erow "Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya aa waxey ku dhisan tahy mabaa'di aasaasiga nidaamka awood qeybsiga fadaraalka" ee dabcan nidaam sida hata wal ka qeybsadaana nidaamka fadaraalka meywa waay dalkun mey leys tirina mey ka kooyahaaytee nidaamka beelaha wal laka qeysado hayta ilaa wadan kun tirakoob lanka sameeyow sida sax eh wal an qeybsadow dagma walba wali ka aaddan intii laka ogaadow ana mey hajeediye fade "ini awood qeybsada laka saleeya beelaha soomaaliyeed" meela mey la ari nidaamka fadaraalka, fadaraalka maaba laka qanacsan. fadaraalka dadkii an doodi jari reer koonfur galbeed haayeen fedaraal fadaana dadkii kun sagaal boqob afartameeyadii lahaaye unu hayni hata wey lenaa fadaraal ma fadaana sabtoo eh sida lin dhisi maka qanacsaniini is boob iyo ay xoog badan ey beeso qabo ka dhisimi goboladii yaa la shal xoogi markunhada wey noo teegantaa fadaraal mafadaana sidii hey laka noqooy ee ilaa markun dadkun soomaaliyeed lagu tiriyow dagmooyinka laka ogaaadoow wey fadaanee ini may la eraaye nidaamkaas beelaha soomaaliyeed ee laka weela laka sameeya.

- **Qodobka 5aad**: sida la ereyga af soomaaliga mey la qabe af Maay iyo Maxaa tiri ini usa eyi laakiin wey ila qurux badnaayti sidi marka hore haayi afka rasmiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, afsaamaaliga Maay iyo Maxaa tiri sida hata la ha jeediye waaye

afsaamaaliga qoraal ahaan nuuca uu hada u qoran yahy weyba ila habuuna sidii hurdhaan ini ku qurubadanta marka ini saas laka dhaafa yaa hajeediye lahaaye ee farqdda laha kordhiyi oo

- **Qodobka 5(2)** oo la eri dowladda Fedaraalka Soomaaliya waxey daryeeleysaa ilaalineysaa isla markaana hormarineysaa afsoomaaliga, waa dabcan "afafka iyo dhaqamada guud ahaan soomaaliya ku jara dhan ini la hormariyimeyi waana door hada xajey xildhibaan ka xillibaan odawaa in sheeg ani door isku lata wazaaradda waxbarashada macadka cilmiga fanka iyo sugaantan ee xeerer galo koraan meelaas ini laku adkeeya ini eta. isla saas oo kale weyba fade

- **Qodobka 8aad**: dabacan xoogaa sensitive yaa leta yaa la ari may ku hadalaase jinsiyadda iyo soomaalida ee mey aaminsanna arintaas ayada ah saaxiibada qaar hajeediyeen laqabe, soomaalida mey la era ee qoomiyada soomaalia laakiin soomaalida meel badan yaa dakti ee wadama badan yaa shal dagan ta wadankanna jamhuuriyadii tan eh xuriyadii wali usi haaye wal ogaadi labadii gobol waqooyi koorfurta haaye, dad soomaaliyeed qanacsan oo helahaaya xuquuqdiyoo kenya, itoobiya, jabuuri roogaan sabab una inta unka doodna maleh haani, una matalaani wal an weysanna yoo nabadgalyo aan weysanna yoo baahan dhamaan dohaayaan kuwaran markii lexdankii gowaoladaas ku mid haada la lahaayeen inta lahaka dari fadi geegiyooone meel bur'burtay meey haada fadeen mey la eraaye khawaarid iyo balaayi kontoraalaasa ani mey amin sana ee goboladaas soomaaliyeeed oo itoobiya kenya iyo jabuuti waaba dowlad buuxda oo soomaalinimada in laha naqa qeyb ku eh u, goboladaasi mey aminsana ini sidiyoo laka dhaafa inta una heysano hata luka shqaeeyo jamhuuriyadda federaalka soomaaliyeed laku shaqeeeye sidii lan hormarin fadi amni lanku weela fadi doorasha lanku suura gali fadi lakuwad shaqeeya lahaaye. war mey diidey ini dadkaas bari lan soomaali an dhaladi qoomiyadiis eta kenya madax wiina ka noqoda lan soomaali jinsiyadiis eta itoobiya madax weyne mey la eraayi haku xukumo soomaalia ina xukumo mey aan diidee taas baaba la helo karo ani mey aminsana in la deera doona maalin dhow mey arako doontana soomaalida dagan kenya door mey la eraaye siyaada kenya ku leta dareemo karna. Ee Tan itoobiyo dagan door feyla ka leta waa qoomoyada lamaad ee itoobiya ku eyin ani mey aminsana inwadama kale nin sheemo doonaan ey la hanaknee marka meela hayka dhaafooyoy yaa laha. kan anka danbeya magaala madaxda waa dabcan saaxiibo badan yaa ku hadaleen. mogdisha horta wey lalayaaban " suaal" ey an daadahaaya ? eyna wal an ogal lanba inta hasurma mogadisha is isjiijifadee wali kaleyaa mogadisho mey lunka tawi .ar mogdisho soomaaliyaa yaa ku dhaxeyta .adi ey gaar kinka weeli ini aan dooda an surnaata .

- **Qodobka 9aad:** mogadisho soomaali yaa ku dhaxeyta caasimada jamhuuriyadda soomaaliyeedu waana saas ka xuruxdanta hadii luka shaltawa si noqodaasa wey oga maalintii laku shaltaba gobolkun bur buri meela anka liidata noqote mogdisho.ani mey aminsana mogashasoomaali dhan le xuquuqdiyee in lasiiya soomaali dhan an ogal .qof soomaali eh wal an diiran majara ee ey lees xijine dabcan gobolkas dadaa walka shal badan ya dadaa ka badnaado kora dadaa ka xiga karo ana mey aminnasa dadka an matalnow dadka lamaad ya ka win dadka caasimada .biitoooni maka le wal ka leyaan male. Canshuurta an ku badan yaa biyaayaan amniga dadka sugahayan yawo nuuc walba bulshada geeka mogdisho kasugan eta mey aaminsana doorka aan ka feyla dadka haaya dadka una matalaano.

hadda walyar xaquuq yaa ka leeyan mal aragow .bal horta wey an baahantaa marka aan ka horeyta sida ye ata ina ka saxna. Si baaaba an sax sanaayna yee baaba laka dulmanyaa dulmiga aanka weyn yaa ka jar ahata baaba laka dhibaateysanya markaan mey aaminsanna mogdishooy cadaalad aan baahanta marka aan ka horeyta ini bulshadee laan cadaalad fala .inis cadaalad falaan .maqaamshee iyo mey la araaye nidaamshee iyo matalaadiyee qof somaaliye diidan maleh lakiin meyla la fadee in si sax eh wali ku kooya ley qeyb sada muraayad bulshada soomaaliyeed isku aragaasa ini noqota meel qaranka iyo bulshada soomaaliyeed matalo korta in ye noqota aan baahanna laakiin ey liis xijinee saaxiibada inta hasurmoow mogdisho meey la araaye xabadka aan garaacadow mogdisho lan isin ku xigtaan maleh,lan isin ka letiin ma leh dadka mey la areeye wadankan an ka horeeyay mey la eraaye hormarintiisa qeyb ku ehna mey aminsana bulshada soomaaliyeed eed aaan mahadsan yiin saaxiibadii haku shaqeeye.

- **Qodobka 6(2)** Dabcan siiqada mararka qaar lanqurahaaya mey la eraaye odiwaa "qeycad" mey laka jeda dadka koonfurta dagan beydha iyo xudur mey ku kasakoraan meel ku daran yaa seedaasa markan "beycad " anigahaqawada waayi isku dhaaf bulshada ana matalow markun wey codsadee ani yeena tii lakasow buluuga iyo wali liska fahma jari astaanta saaxiibada sida ha jeediye ee ogtaa wala inta aan roogna wal kabada wu hadii lixdan ha hor shabeela la hasaari hada idaaley saaranooy ama irin, yaambo ka saaranow astaanta ka wel dhanooy that's meel aan dareerna .markan ini wal la, kabadala wala dastuurka lan sheeniyo ini kuwada shaqeynooy. eed an mahadsantiin dulqaadka asxaabadiyo gudoonka eed aan ka mahadsan tiin salaamu caleykum warax matullahi.

12) **Sen. Zamzam Dahir Mohamud:**

Awalan Asalamu Callaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu waad mahadsantihiin, aniga waxan rabaa 3 qodob kaliya inaan ka hadlo.

- **Qodobka 3(5)** oo Gabdhaha xildhibanada labada gole ay ka midesanyihin ayna soojeedin guud ay ka qabaan oo aan gudoonka gaarsiin doono haduu Alle idmo, halkan ay ka so wada jeediyeaen unbaan rabaa in aan wax ku daro oo meesha ay istaageen aan la istaago haduu Alle idmo.

- **Qodobka 3(5)** wuxuu u qoranyahay "Haweenku wa inay ka mid noqdaan dhammaan 3 laamood ee dowlada iyo guddiyada madaxa banaan ee heer federaal, heer dowlad goboleed iyo dowladaha hoose si wax ku ool ah, lana sugo gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo", kaliya waxaan rabnaa in meesha naloogu xiro 30%, dadka qaar waxay qabaan in meelo kale 30% la galiyo oo cutubkan mabadii`da ka hadlaya lagu darin, laakiin waxyaabaha aan u dooranay waxaa kamid ah "inclusivity"ga ah inuu mideenayo qodobkaan xilalkii oo dhan, oo ah kuwi la isku dooranayay iyo kuwii laysku magacaabayay, annaga gabdhaha Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan Baarlamaan ayaan ku matalnaa, ma aha Baarlamaanka oo kaliya in aan xildhibano ka noqono in loo doodo, wa in aynu u doodnaa gabadha agaasimaha noqoneysa, gabdhaha la shaqaleysiinaayo iyo gabdhaha Golaha wasiirada, qodobkan waxaa u dooranay in uu saameeynayo dhammaan Hay'adaha dowladda, balse uusan Baarlamanka kaliya uu san saameynaynin, saas ayaan udoranay, si aysan gabdhaha Soomaaliyeed oo dhan u helaan xuquuq midaysan oo aysan u noqon kaliya u helin xuquuq Baarlamanka ku eeg.

- **Qodobka 8aad** waxa uu ka koobanyahay 3farqadod, in farqo 4aad lagu soo daro oo dhaheyso "Aabo kasto soomaaliyed ama hooyo kasta oo soomaaliyeed cunuga ay dhalaan si "automatic" ah ayuu ku noqonayaa "citizen" in qodobkaa lagu soo daro ayaan codsanayaa, waayo xeerarka, Dastuurka iyo shuruucda waxaa loo sameystaa marxaladda lagu jiro in looga baxo, marxaladaas hada gabdhaha Soomaaliyeed way haysataa cadeynteedana way duuban tahay, gabdho Soomaaliyeed oo muwadiniin ah oo dalkan xuquuq ku leh awlaadoodii in meelaha kula dhibanyihiin oo ay ka mid yihiin Arday Hooyo soomaaliyed oo wiilkeeda muqdisho ka dirtay oo "Passaport" Soomali loo sameeyay oo turkiga waxbarasho ugu dirtay "Passport-kii" marka uu kadhacay safaradii Turkiga u diiday ayaa hada "case" kaas ayaa taagan, marka in xal loo helo ayaa loo baahanyahay, shuruucda dalka wuxuu u sameestaa marxalada ama dhibka taagan in looga baxo, gabdhaha Soomaaliyeed dhibka haystana in laga baxo muhiimadeeday leedahay waynu xoojinaynaa.

- **Qodobka 9aad** aad ayaa looga hadlay qaasatan waxa aan u mahadcelinayaa xildhibanada labada gole ee kasoo jeeda Somaliland, waxaad moodaa inay si mug iyo miisaan leh uga hadleenoo uu R/wasaare ku-xigeenkii hore ugu horeeyo marka waa mahadsanyihin. Qodobka 9aad labo farqo ka kobanyahay, farqada 2aad waxay leedahay maqaamka waxa looga hadli doonaa cutubka 5aad, qodobka 2aad waxa ku qornayd awal xulashooyinkii 3da ahaa ee Baarlamanki 9aad iyo kii 10aad gudiyadoodii dastuurka ku soo diyaariyeen 3da xulasho waxaa muhiim ah inta la keeno in looga hadlo, Cutubka 5aadna qaybtii iyo mudnaantii Maqaamkii uu ku laahaa Muqdisho waa loogu tagi doonaa, laakiin hada waxa muhiim ah qodobka 9aad farqadiisa 2aad inaan loo "refer" gareynin chapterka 5aad ee hadda xulashoyinki ku qornaa inta la keeno Baarlamanka uu ka doodo oo xulashada Maqaamka Muqdisho mudantahy laga hadlo aad ayaad u mahadsantihin.

13) **Xil. Ahmed Osman Dirie:**

Mahadsanid Gudoomiye mudanayaal ugu horreyn dhammaystirka Dastuurka waa mid kamid ah howlaha ugu waawayn ee dalkani horyaala, waana arrin xil gaar ah uu ka saaran yahay Baarlamaanka maadaama uu yahay hay'adii sharci dejinta ee dalka Marka way ifarax galinaysa mas`uuliyadaa iyo xilkaa nasaaran oo hawsha aynu u fadhino .Waxaa Jira sifooyin lagu yaqaano dastuur hufan oo ay kamid yihiin inuu dastuurku u qoran yahay ama ku qoran yahay luuqad waadix ah oo lafahmi Karo, iyo inuu si wanaagsan u kala xaddeynayo awoodaha hay'adaha dowladda, oo uuna madaxa isku galinayn iyo in uu dhigayo in markii loo baahdo lafuri karo wax laga badali karo, waayo duruufuhu Way is bedelayaan Marka waxaa ila quman inaan maanka ku hayno oo arrimaha Guud Marka aynu Dastuurka lafa gurayno, intaa hadaan ka yimaado oo aan u imaaado cutubka aynu maanta u fadhino ee doodayda ku aadan waxaan ka bilaabayaa:

- **Qodobka 1(3)** oo dhigaysa awoodda iyo gobonimada dalka waxaa iska leh shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, isaga oo awoodaas isticmaalaya si toos ah ama si dadban, qodobkan waxaan qabaa in la cadeeyo sida dadban ee awoodaa uu shacabka Soomaaliya u isticmaalayo, awoodda shacbigu labo siyaabood buu u isticmaala: (1) mar waa si toos ah oo doorashooyinka markuu codeynayo baa kamid ah; iyo (2) Marna wakiil buu soo dirtaa, wakiiladiisa isaga oo Soo dhexmarayo ayuu awoodiisa "exercise" -gareeyaa oo Baarlamaanka uu kamid yahay, Marka waxaan qabaa in halkaa layiraahdo iyagoo adeegsanaya ee iyagoo awoodaas u isticmaalayo si toos ah ama adeegsanaya wakiilada sida

dimuqraadiga ah u dorteen,  ee in halkaas saas loo cadeeyo waan soojeedin lahaa. Taa Markaan ka tago.

- **Qodobka 2(1)** oo dhigaya Diinta islaamku waa diinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sidii hore loo sheegay marba haddii Dal laga hadlay ama "state" laga hadlay dadkii iyo dhuulkiina way ku  jiraan ee marka taa waan ayidayaa, waxaan sidoo kale ayidayaa in aynu cadayno in islaamka uu dalkani "practice" gareeyaa, waayo marar badan waxaynu aragnay iyada oo shiico faafinaya dambi lagu soo oogay, marka in aynu sidaa u cadeynaa waa lagama maarmaan,  waxaan kale oo aan qabaa  in ay jiri doonaan xeerer afkaarta guracan ay sunniga laftiisa afkaarta guracan ayaa ku jirta, xeerar reebaya inay imaan doonaan waan qabaa, oo hadeer dhibta ugu wayn ee dalka kajirta waxa wee yaan mid dabada ku haysa diin weeye,  waxa la dirirayna diin baa ay adeegsanayaan ee haddaan qodobka inta kaga imaaado.

- **Qodobka 6(5)** oo ka hadlaya Calanka iyo Astaanta Qaranka farqadiisa 5aad waxay oranaysaa in dowlad goboleedyadu ay yeelan karaan Calan iyo Astaan u gaar ah halkaa waxaa soojeedin lahaa in lagu daro oo aan ka hor imanayn Astaanta iyo Calanka Jamhuuriyadda, haddii astaantii iyo calankii dowlad goboleedyadu ka hortimaado Jamhuuriyadda oo fariimo gaar ah gudbinaysaa iyaduna waa mushkilad taa arka waan soojeedin lahaa. Waxaan kaloo soojeedin lahaa Astaanta sifooyinkeeda la taxay in sawirkeedana Dastuurka lagu daro.

- **Qodobka 8(3)** ee shacabka iyo jinsiyadda waxay dhigaysaa in Muwaaddinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu qaadan karo jinsiyad dal kale Dal kasta miyuu qaadan karaa? Dalka qaar waxaa dhici karta inaan aqoonsaneenba inay dal yihiin ama waxaa dhici karta dalka qaar ayaan ogolayn Inaan "Visa" siino Marka halkaa in lacadeeyo baan soojeedin lahaa waxaan oran lahaa (Dal kale oo ay soomaaliya aqoonsan tahay in lagu daro).

- Arrinka jinsiyaddu waxaan qabaa wuxuu u baahan yahay in indha gaar loo yeesho u baahan yahay ee cidda xaq u yeelanaysa jinsiyadda Soomaliya, arrintaas waxy u baahan tahay in aad loogu taxadaro waxaynu nool nahay xili "number" -ka ama "size" -ka publishing-ku uu awood iyo cudud yahay,  ee wadamada jaarkeena tirada dadkoodu ay aad u kordhayso Marka inaguna taynu Soo koobno ilama qumana ,arrintaa waxay u baahan tahay inaynu indhagaar ah u yeelano ee jinsiyadda qofku dhalashuu ku helaa waa in lagu cadeeyaa meesha, in jinsiyadda qofku dhalasho ku helayo aabaha iyo hooyaduba oo ma Iman karo, ee waxa jiri karto iyaduna oo dunida Soo kordhay hadda in qofku qof Soo korsada hadii qofka soomaaligu Soo korsada qof aan soomaali ahayn maxaa laga yeelayaa ,taasna waxaan qabaa iyada lafteeda doodaha ubaahan inaynu lafa gurno, Marka  intaasan ku Soo koobi lahaa soojeedin taydda aad Baad u mahadsan tihiin Asc  .

14) **Xil: Mohamed Muhumed Mohamed:**

Guddoonka labada aqal xildhibaanada sharafta leh, labada guddi Guddiga baarlamaanka iyo Guddiga madaxabannaan iyo martisharafta iyo media-ha ba ASC.

Intaan gudo galin dhowr qodob baan islahaa wax ka taabtaabo, waxaan is yara waydiinayay dhowr shay oo ah inta badan soomaalida xoogaa fahmo xumo in ay ku dhacday, waxaynuna

nahay dal islaam ah ilaahayna kitab ayuu noo soo dajiyay isaga mooyaane xeerarka kale ee la qorayo maxay tahay, dad badan oo soomaali ah ayaa lagu fitneeyay arrintaa oo ah waxa meesha aan ku hayno ayna ahyn diin ayaa ummadd badan loo sheegay inta badan dadka shacabka soomaaliyeed lagu jahwareeriyay. Dastuurka markaad eegto cutubkiisa 1aad, qodobada aan manta ka hadlayno

- **Qodobka 2aad farqadiisa 1aad, 2aad iyo 3aad** intaba waxay u qoronyahihiin, "islaamku waa diinta dowladda dalka soomaaliya", diin aan ahayn islaam dalkan laguma faafin karo mana soo saari karo sharci aan waafaqsanayn mabaad'iida guud ee sharecada islaamka iyo maqaasideeda, annigo intan in ka fiican oo la dhihi lahaa in ay jirto ma filayo oo ka bixinaysa tilmaamta ummadda soomaaliyeed , dal islaam ah in aynu nahay, waxa aynu ku xukun tagaynuna ay tahay wax ku dhisan shareecada islaamka, dadka ay shareecadoodu iyo dastuurkodu ay noocaas tahay oo dadka dhiigooda banaysatay, waxa ay ku soo gabanayaan dadkan diin ma haystaan, dadkan waxay beri ilaahay la hortagi lahaayeen ayagay u taalaa, intaas waxay iga tahay araar. Haddii aan si toos u galo

- **Qodobka 1(1)** waxay u qornayd Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federal oo muslim ah lehna gobonimo ku salaysan caddaalad iyo sarreynta sharciga, waxaan isleeyahy ereyga "Gobonimo" kaligiis meel ma istaagi karo, dadka si fiican u yaqaaano luuqada soomaaliya, waxan ku darayaa saddex qodob "oo muslim ah, gobonimo, madaxbanaani dhulleed iyo umadeed iyo hogaamineed kuna salaysan caddaaladda iyo sarreynta sharciga", qodobkaas intaas ayaan siiqo cusub uga dhigay.

- **Qodobka 2(1)** asal ahaan waxay u qornayd islaamka waa diinta dowladda, isbeddel waxaa la sameeyay oo lagu bedelay dalka, xildhibaano badana oo horayna way ka hadleen waxaan isleeyahay "definition-ka" dadkii hore ee saxda ahaa ee qoray waxay ogaayeen micnaha ay samaynayso dowladda, sababta oo ah dawladda marka la qeexayo asalkedu waa dal iyo dad oo leh astaan qaran saas ayayna ku macno wayntahay, laakiin haddii la yiraahdo dal, dalku waa dhul kaliya, marka dowladda ayaa ka macno wayn, waxaana saxan in dastuurka sidiisii hore lagu celiyo, siiqayntiisu waxay noqonaysaa ama la dhihi karaa dhowr erey "islaamku waa diinta dowladda Jamhuuriyadda Soomaaliya" .

- **Qodobka 1(4)** oo kaligeed meel taagan oo ah lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn shareecada islaamka iyo maqaasidiisa labadaas in la is waafajiyo oo laga dhigo marka la isku daro "islaamku waa diinta dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya shareecada islaamka ayaa saldhig iyo asal u ah, dhammaan sharciyada iyo xeerarka dalka u dagsan lamana soo saari karo sharci lid ku ah shareecada islaamka iyo maqaasideeda". Labadan qodob intii la kala saari laha halaga dhigo hal qodob oo macnahooda la fahmayo, qaabkaas ayaan dhigay.

- **Qodobka 3(5)** haweenkana ay ka muujiyeen "concern" sida ay u qoran tahayna macno badan laga fahmaynin oo la yiri haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhamaan sadexda laamood ee hayadaha dowladda iyo guddiyada madaxbanaan ee heer federaal iyo dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose sida uu sheegay xildhibaan odowaa, faahfaahinta in sidaa loo dhigo sax maaha, siiqayn cusub oo aragtideeda waxaa kamid ah "haweenku waa in ay ka mid noqdaan hay'adaha dowladda iyo guddiyada madaxbannaan ee dalka si

waafaqsan shareecada islaamka lagumana takoori karo jinsayadoodda dumarnimo" intaas in lagu koobo, tabashada ay dumarku qabaana sida hadda senataradii iga horaysay ay dhigtay, meeshan 30% laguma qori karo, laakiin markaas xukuumadii joogto ayaa xeer gooni ah ku soo saaraysa si ay u sugto xuquuqda dumarka in ay meesha ku imaadaan, marka in qaabkan kaliya loo dhaafo ayaan qabaa oo ah " haweenku waa in ay ka mid noqdaan hay'adaha dowladda iyo guddiyada madaxbannaan ee dalka si waafaqsan shareecada islaamka lagumana takoori karo jinsayadoodda dumarnimo".

- **Qodobka 7(3)** farqadaas waa la tiray sababta loo tirayna waxaa la yiri waxay khilaaf ka abuuraysaa xuduudaha, waxay ila tahay dhulka soomaaliyeed waxaan aaminsanahay in gumaystuhu mar kala jarjaray oo ummadda soomaaliyeed deegaankooda iyo dhulkooda waa la yaqaanaa laakiin xuduud beenaad oo ummadda soomaaliyeed loo sameeyay ayaa jira oo aan innagu raali ka ahayn , ummadda soomaaliyeedna ayna raali ka ahayn la inagalama tashanin muddada uu dhulkaas naga maqanyahayna dhul aan sheeganayanay weeye dadkeenuna ay ku nool yihiin, hadii aynu ka taanaasulayno dhul ahaantaas iyo dad ahaantaas at "least" ummaddu wada hadal bay galaan waxba waxbaa lagu bedeshaa marka innagoo taagan inaan dhahno aan "ignore" garayno oo aan isaga tagno anigu meeshay ku saxantahay ma garanayo. Marka hadii aynu waynay awood aynu dhulkeenu ku helno yaanan waynin awood aan dhulkeena maqan ku tilmaamno, waana sidii markii hore ee dastuurka ugu qorneed oo ah dhulka jamhuuriyadda federaalka soomaaliyeed iyo khilaafaadka soohdimaha ee caalamiga ah ee ka dhashay in xalintooda loo maro tub nabadeed iyo iskaashi waafaqsan qawaaniinta dalka u dagsan iyo kuwa caalamiga ah, farqadaas sidaas ayay awal ahayd waana in sideeda lagu daayo hadii aan wax ka fiican lagu badalaynin.

- **Qodobka 8aad**: Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayay awal ahayd, Soomaaliyeed waxaa lagu beddelay Soomaaliya, farqadan waa la bdedelay waxa kaliya ee laga beddelay waa Federaalka ayaa la yiri, bedelitaankii Soomaaliyeed iyo Soomaaliya waa nalaga qariyay sida meesha ay ugu xusantahay lama xusin sababta loo xusi wayayna Jamhuuriyadda Soomaaliyeed dadka meesha ay koobaysay way yaqaanan, laakiin soomaaliya marka la yiraahdo dhulkiina horay ayaa loo soo tiray dadkiina hadda ayaa la rabaa in la tiro, arrintaasi sax maaha, waana arrin la rabo in la isku hoos galiyo, waxa maanta waxyaabaha laga doodayo waxaa kamid ah "African Union iyo EUROPEAN union" ayaa la isku wadaa, dadkeena soomaaliyeed ee bangal, diri dhawa, lughaye, ilaa iyo kudhaye ku noolaa in aan annaga sii kala saarno sax ma aha wax nagu kalifayna ma jiro ummadda Soomaaliyeedna yaan lakala gaynin, ereygaa dib haloogu celiyo "ummadda Soomaaliyeed ama Jamhuuriyadda Soomaaliyeed".

- Qodobkayga u dambeeya ee caasimadda ee **Qodobka 9(1)** caasimaddu waa in ay noqotaa magaalada muqdisho hadii aan dastuurkan ansixinayno caasimaddu waxay noqonaysaa magaalada muqdisho, sida ay ku noqonayso "option-adii" lasoo bandhigay annigu waxay ila tahay "option-"ka 1aad in uu noqonayo, sababta oo ah caasimad iyo maamul goboleed isma qaadan karaan saxna ma aha. Caasimadda hadii aan ka dhigno muqdisho waxay noqonaysaa caasimadda hadhoow, "option-ada "aan qaadanayno option-ka 1aad lambar one in uu noqdo sadexda "option" ee naloo soo bandhigay, buuga faahfaahinta ayaa dib loogu laaban karaa, hadii ay caasimadu meesha ay noqonayso dood ay ka taagantahay aan la sugno cutubka 5aad oo wixii isku mid ah la isa soo raacinayo.

15) **Xil. Hassan Abdi Ismail:**

Gudoonka sharafta leh guddiga dib u eegista dastuurka xildhibaanada sharafta lehee labada aqal, dastuurka dib u- eegistiisa ayaan ku jirno cutubkiisa 1aad, marka u horeyso ASC. Waxaan rabaa doodda in aan toos u galo ee cutubka 1aad, dastuurka marka laga hadlaayo waa heshiis bulsho wejiyo badana wuu soo maray, dastuurkii u horeeyay ee dastuurkeena ahaa ee shacab Soomaaliyeed afti u qaado wuxuu ahaa dastuurkii 1960kii, wixii ka dambeeyay burburkii soomaaliya, marna axdi qaran ayaan samaysanay, marna dastuurkii ku meel gaarka ahaa ee 2012 ayaan dib u -eegis ku wadnaa. Sideedaba waxaa jiray waxyaabo aasaasi ah oo mabaad'i ah, oo aan u baahnayn in waqti la isaga lumiyo,

- **Qodobka 2(1):** waxaa kamid ah diinta, dalka waa dal islaam ah oo sunni, ummadda soomaaliyeedna waa muslimiin,

- **Qodobka 6(1):** waxaa kaloo kamid ah calanka, markaan midnimada qaadanay calanka buluuga ah ee shanta xidig leh waxay kamid tahay waxyaabaha aan laga hadli Karin, waxaan arkayay dad aad uga doodayay, dadkii sameeyay ee soomaaliga ahaa markay midnimada qaadanaysay ee awoowayaasheenii ahaa, ee dalka gumaystaha ka xoreeyay mabaad`i iyo aragti ayay ku sameeyeen oo ah waxa aynu manta ku faanayno oo aynu haysano, oo aynu annaga iska burburinayno oo aan rabno in aynu dib uyagleelno.

- In wixii wanaagsanaa ee awoowaayaasheen soo qabteen oo wadanka usoo shahiiday, in annaga siyaabo sahlan oo luuqado jilicsan oo waxyaabo humaag ah oo mugdi ku jiro in la isku hoos galiyo ma aha, waxaana kamid ah dhulka dadka soomaaliyeed leeyihiin oo gumaystuhu kala qaybiyey, waxaa ka mid ah , dadka soomaaliyeed waa dad isku isir ah isku diin ah, isku luuqad ah , isku dhaqan ah, waxyabahaas in dood la galiyo wax u baahan ma ahan waana waxyaabaha aasaasiga ah ee mabaad`iida dastuurkeena kamid ah, laakiin hadda waxaa ii muuqata qaabka hadda loo soo qoray qodobada qaarkood in ay mugdi ku yara jiraan.

- **Qodobka 2(1**) xitaa marka aad fiirisid qodobka diinta qeexaya ee ah qodobka 1aad islaamku waa diinta dowladda ayaa dastuurkii asalka ahaa ku qornaa, laakiin waxaa lagu badalay islaamku waa diinta dalka jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dalka diintisu way tahay, laakiin maadaama oo la isku xukumayo waa in lagu daro " islaamka waa diinta dawladda iyo dalka jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyed" dowlada wax maamulaysa waa in lagu cadeeya in xukunku Meesha jira oo dalka kaliya la dhihin oo ayna noqonin wax meesha isaga qoran.

- Qodobka kale Soomaaliya waa dal islaam ah oo sunni ah burburkii kadib wax badan baa dhacay, mad-habyo badan oo Soomaaliya iyo fikrado badan iyo xagjiro iyo dhibaatooyin badan oo lala daal dhacaynaa, si khilaafkenu uu u yaraado waa in meeshaas mad-habka shaaficiga lagu soo aruuriyo ayaan qabaa, si dadkan marba ayna dhinac u yaacin oo khilaafkoodu uu u yaraado.

- Waxaan u gudbayaa xuduudaha ama dhulka **Qodobka 7(3)** dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee khilaafaadka caalamiga ah ka dhashay xalintooda, wuxuu ku

qornaa dastuurkii hore ee asalka ahaa waa la tiray, in meeshiisa lagu soo celiyo weeye, hadaan tabar la haynin for "free" waxba kuma bixinayno, dadka qaarkood waxaan u malaynayaa in ayna wax badan dareensanayn, dareenka soomaalinimada iyo mas'uuliyadda iyo waddaniyadda in ay ka maqantahay, qodobka sadexaad waa in meeshiisa lagu soo celiyaa.

- **Qodobka 8aad** waa jinsiyadda, qodobkan sidiisaba 4 qaybood ayuu ka koobanyahay, afarta uu ka koobanyahayba dastuurka aan dibu-eegista ku samaynayno siday ugu qoranyihiin waa in loo daayo, oo aan waxba lagu darin, waliba waxaa laga tuuray faqradda 4aad oo ah diidmada, laalista, ka qaadista jinsiyadda laguma xiri karo sababo siyaasadeed, waa la tuuray ee waa in lagu soo celiyaa. Laba arrimood oo muhim ah tan dhulka iyo kan la siyaasadeynayo oo jinsiyadda Soomaaliyeed , labadaasba waa labadii la tuuray waa in lagu soo celiyaa meeshoodii ayaan usoojeedinayaa guddiga.

- Waxyaabaha yaabka leh ee meeshan ku qoran waxaa kamid ah qodobka 8aad iyo qodobka 1aad wuxuu sii raacinayaa meesha la tiray, waxaa lagu nidaaminayaa jinsiyadda muwaadinka iyada oo tixgalin gaar ah la siiyay dalalka aan dariska nahay iyo kuwa aan isku duruufta nahay, fadlan eeg bogga 17aad ee warbixinta, markii dal jinsiyadiisu oo annaga oo kale ah dad isku diin ah, isku luuqad ah, isku af ah isku dhaqan ah oo duruufo siyaasadeed oo uu gumeestuhu kala qaybiyay jinsiyadiisuna sharci loo sameeyo loo baahanyahay, waxaa daraasad lagu sameeyaa dal ay isku duruufahaas oo kale yihiin oo sideena oo kale ah isku luuqad ah isku diin ah isku af ah isku dhaqan ah oo sideena oo kale la qaybiyay. Dadka noocaas ah side jinsiyadoodu dadka qarna ay qaxeen wadamo kala duwana galeen carab , cajam ,yurub iyo ameerikaba oo ay qaarkood maqanyihiin 60 sano qaarna 40 qaarna 50 ama 30 sano oo intaas oo "generation" ay naga maqanyihiin waxaa loo fiiriyaa dal noocaas oo kale ah, laakiin in daraasada looga dhigo itoobiya iyo "kenya" sida ay jinsadooda u samaystaan, meeshaas waxaa umaleynayaa Sharaf dhac bay ku tahay guddiga dib u eegista dastuurka iyo khubarada kala shaqaysayba, waayo "kenya" dadkoodu isku diin ma aha isku qowmiyad maaha isku dhaqana ma aha sidoo kalena itoobiya isku diin ma aha isku dhaqan ma aha isku luuqad maaha. Marka dal noocaas ah ay jinsiyadda soomaaliya waxaa lagu salaynayaa tixgalin gaar ah dalal noocaas in la dhaho waxay meel kadhac ku tahay sharafka baarlamaanka labadiisa aqal iyo guddiga qaabka ay u daraaseynayaan daraasadda noocaas ah.

- Bogga 17aad, 18aad, iyo 19aad waxaa ku qoran daraasad laga sameeyay jinsiyadda, kulli waxay qeexayaan sharciga 1962-kii jinsiyad soomaliya in ay ahayd isir iyo ab, axdi qarameedkiina waxaa ku qornaa jinsiyaddu in ay ahayd isir. Daraasadii la sameeyay baarlamaankii 2011-kii, ummadda soomaliyeed laga sameeyay wuxuu ahaa isir waxa hadda shaki loo galinayo ma garanayo. Waxaan rabaa in aan ku soo gabgabeeyo in jinsiyadda soomaaliya ay tahay isir aabe iyo hooyo ka yimid oo ab ka ab ah oo aan mugdi la galinin, waxyaabo iska "technical" oo badan ayaa noo yaala oo siyaasadeed, markii waxyaabaha muhimka ah ee ah diinta, dhulka dhaqanka, luuqadda iyo jnisiyaddaba in aan marnaba madmadoow la galanin.

- Arrinta caasimadda ee **Qodobka 9aad** ah saddex "option" ayaa warbixin laga soo diyaariyay, laakiin cutubka 5aad maaddaama loo dib dhigay waxaan la sugayaa doodayda cutubka 5aad haddii uu alle ka raali noqdo.

16) **Sen. Mohamed Abdi Osman:**

Gudoonka labada aqal, xildhibaanada labada aqal ee sharafta leh, hawlwadeenada, miidhiyaha, labada gudii ee madaxbanaan iyo dhamaan martisharafta ka soo qaybgalayaasha, waxaan idinku salaamaya  salaanta islaamka aslaamu caylkuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu.Runtii qodobadaydii aan ka hadlayey xildhibaanadii iga horeeyay baa ka hadlay, markaa wax yaabo yaryar ayaan rabaa inaan taataabto. Mudanayaal, mudanayaasha labada aqal runtii waxaan maraynaa marxalad imtixaana, sidaan wada ogsoonahay Baarlamaanadii inga horeeyey 9aad iyo 10aad arrimahana dastuurka iyo dib-u- eegistiisa waa laga soo shaqeeyey qoloba meel bay soo gaadhsiisay. Maaanta waxaad moodaa fursadii inaynu ingu haysano. Runtii waa fursad taariikhiya hadii aynu sidii ay tahay uga soo baxno oo uga shaqayno xildhibaan kasta oo labada aqal oo inaga mid ah taariikh nololeedkiisa ayey wax kagalaysa oo uu odhan doono waxaan ka mid ahaa Baarlamankii arrintaas  ka shaqeeyey oo dhameeyey aynu u noqondoonto "*legacy*" aakhirkiisa. Sidaa daraadeed waxaan soojeedinayaa inaynu taxadir siino kana shaqayno una dhabar adaygno. Mudanayaal runtii labda guddi oo ka soo shaqeeyey arintan dastuurka oo hada ina horyaala waan u mahadcelinayaa, runtii waxaa ka muuqata inay ka soo shaqeeyeen wakhtina galiyeen ka hor intii aanay inoo keenin, runtii meel aynu inagu wixii aragtideena ah ama wixii ku dar ah ama ka gooy ah, laakiin way ku mahad san yihiin siday uga soo shaqeeyeen. Waxaan leehay waad mahad san tihiin. Intaa markaan ka tago.

- **Qodobka 8(1)** waa laga hadlay xildhibaano badan baa kusoo celceliyey aniguna waan sii adkaynayaa. Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya waa mid, lama kala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhamaan muwaadiniintiisa, wuxuu u qornaa soomaaliyeed markaa, waxaan la qabaa xildhibaanadii hore waana ayididayaa meesha ay tahay soomaaliya in lagu soo celiyo soomaaliyeed. Qoraalkii hore waxa weeyi Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed waa mid lama taabtaan ah lamana kala qaybin karo wuxuuna ka kooban yahay dhamaan muwaadiniinta, Taa in lagu soo celiyo ayaan soo jeedinayaa.

- **Qodobka 7aad:** Gobonimada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo idil oo ay ku jirto Bariga, Badda, jasiiradaha, dhulka hoose, hawada sare iyo gayiga qaarkeed dhul iyo biyo goboleed kasta oo kusoo biiray "Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya". Taasna wuxuu u qoran yahay erayga dhulka waxaa lagu beddelay geyiga waana kalmad ku haboon, iyadana waan ayidayaa.

- **Qodobka 4(3)** xeerkasta oo go'aan kasta ama talaabo maamul kasta oo kasoo baxa xeerka kasta ee hay'adaha dawlada kana soo horjeeda dastuurka wuxuu noqonayaa waxba ka jiraan waxaana burinaaya awoodda uu lee yahay Maxamadda Dastuuriga ah. Halkaas mudanayaal badan baa ka hadlay waxaa loo baahanyahay runtii in maxakamadii dastuuriga ahaa gadaal loogu noqdo oo guddoonka iyo madaxda kale laga wada shaqeeyo in la helo maxakamadii loo "reffer" garayn lahaa oo maxakamadii la dhisi lahaa.

- **Qodobka 3(3)** waxaa reeban cayda diinta islaamka, halkaas waxaan dhihi lahaa waxa reeban cayda in la caayo. Waxaa reeban caayida diinta islaamka. Halkaas caay in lagu badalo caayida ayaan soojeedin lahaa.

17) **Xil. Faaiza Mohamed Jeyte:**

Wixii laga hadalyoo dhan waa laga hadlay waxaan rabaa inaan su'aal weydiiyo labada guddi kan madaxbannaan iyo kan kale, waxaan idin waydiiyey sadexdan qodob oo ka diinta looga hadlaayo, kan jinsiyada looga hadlaayo, iyo kan dhulka looga hadlaayo sababta aad u tirteen ? waxaa rabaa su'aashaas inaad ka jawaabtiin ,waxaan is leeyahay anagu waxaan leenahay dastuurka heblaa wata iyo heblaa wata lakiin hebalada soomaalida hebla kale oon ahayn baa ku jira, sababtu waxay tahay dhulka soomaaliyeed oo aad xuduudahooda leedihiin waa laga hadlayaa, xuduuda soomaaliya waa la yaqaanaa ,gabadh sufuleetile iyo geed qodox leh ku yaalo weeyi, horta intaa weeyi xuduud soomaaliyeed.

- **Qodobka 2(1)** Diintana hadalka qaynuunka wuxuu u qoran yahay (diinta islaamku waa diinta dawlada). Dawlada hadii layiraahdo wixii oo dhana waa ku jira waxba kama maqna sababta aad u leedihiin dalka oo idin kaga dhexjirtana waa inaad ka jawaabtiin?

- Su'aasha jinsiyada, jinsiyada soomaaligu gofku waa waxay udhalato siyaasad loogama qaadi karo danbi uu galo loogama qaadi karo. Wax qof biniaadam ah oo jinsiyada wadankiisa looga qaadikaro, waxaa ka muuqda laba arimood meeshan mid kana aan sheegaayo oo ah gamco kale oo soomaali kuweeda ahayn inay ku jiraan meesha iyo digtaatooriyad inay soo socoto ooy hada bilaaw tahay la rabo, digtaatooriyadu waxay tahay qofkii in la dhaho jinsiyadii qofka soomaaliga ah laga hadlo. Qofka soomaaliga ah waxaaba la ogolaaday inuu jinsiyad kale qaadan karo. Qofku Seeba tii uu u dhashay ee abtiriska "DNA" ahayd hadal looga galinayaa oo looga hadlayaa.

- Tankale waxaan rabaa tii ay saaka xildhibaanadii u horeeyey ka hadleen Jamhuuriyada soomaaliyeed, meelkasta oo qodob ah, waxaa ku qoran soomaaliya waa jamhuuriyadda, meesha soomaaliya ah maadaama soomaaliya ay tahay hal markaas soomaaliyeedna ay jamac tahay. In Jamhuuriyda Soomaaliyeed meel kasta loo qoro kuli, halka cutub ee laga doodayo sagaalka qodoba siday ugu qoran tahay in la wada badalo oo aad ka dhigtiin jamhuuriyada soomaaliyeed waa Jamhuuriyad federaali ah oo aad sidaas u qortiin.

- Waxaa jira qodobka arrinka gabdhaha iyo 30%ka, horta 30% gabdhaha waxaan leeyahay in raga laga tuugo waa qalad. Waxani waxay leeyihiin maaha waxani waa wax ummad soomaaliyeed leedahay waaye nin iyo naag toona malaha, waxaa loo baahan yahay horta soomaaliya yaa dani ugu jitaa, yaa soomaliya badbaadin kara, yaa wax u qaban kara, Anaga waa inaan dhahnaa boqolkiiba 50% leenahay. Waxaa ladhahay xalaal maalin cad baa la quutaa, wexeena horteenaan ku qaybsanaynaa 50 %ayeey leeyihiin anaguna 50% leenahay. 50 %kooda kulama tartamayno ha qataan anga 50% kayaga nagu lama tartamayaan. Sobobtuna waxaa weeyi waan ka amaana badan nahay , waa ka tuuga yar nahay ,wadanka waa uga nixi ognahay, jawaasiis maaha gabdhaha, dalal shisheeye kama shaqeeyaan,markaa inaan anaga tuuugno oo aan dhahno 30% hanala siiyo. 30%ka ayna siinayaan wax ay leeyhiin meesha ma yaaliin. meesha waxa yaala waxay leeyihiin maaha, waxani wax ummad soomaaliyeed leedahay waaye, xildhibaanimada ummadda soomaaliyeed loogu addeegayo. Ragu hadii ay dumarka u naxayaan gabdhaha caanaha gadaaya kuwa lix saac jaadka gadaaya guryaha ha geeyaan, kuwaas ha xereeyaanoo biil ha siiyaan oo sidaasaa horta laga rabaa. Laakiin qof shaqaysanaya oo wax soo baratay oo ummada inay bad baadisa rabta qiil yaan loo raadin, dalka ay leeyihiin muwaadiniin waaye soomaali baan nahay wadankana hadaad badbaadinaysaan 20 sano, waxa wax dumiyaaba waa idinka, waxa dhibaatada

soomaliya oo dhan ka taagani waa idinka. Gabdhow iska ilooba 30% hanala siiyo qasab waaye 50% bay leeyihiin 50% baan leenahay, waxay leeyihiin meesha ma yaalaan waa loo simanyahay. Qofku wax buu soo bartay dalkana angaa u fiican, yaana laga biq-biqin oo laga leexleexan, sababtoo ah waa ka run sheeg badanah, waa ka amaana badan nahay, cadaaalad badan nahay, waa ka Alle cabsi badan nahay, haday diidaan 68 cod ayaan halkaas banaanka la is taagaynaa, dastuurkuna ha iska rakaysnaado, kii yaalayba laguma dhaqmaynine, anaga kan yaalana waa iska diidaynaa, xagaasaan tagaynaa waxaanan leenahay raali kama nihin, ma rabno 68 cod ayaan banaanka la tagaynaa, laakiin inaan tuugno oo 30% hanala siiyo nirahno maaha waxa Meesha yaalaa waxay leeyihiin maaha waxani wax loo simanyahay waaye.

- Qodobka looga hadlaayey af soomaaliga waa iska af soomali uune, Maay iyo Maxaatirina waa laga dhigi karaa af soomaali uun hadii lagu eekeeyana wax weeyn oo 'problem' uma arko, af soomaaligu waa af soomaali.

- Qodobka kale ee caasimada inkastoo gadaal loo rarey oo layiri waxaa loo raray cutubka, caasimadu muhiin waaye, waxay ahayd in meesheeda lagu soo daro oo dooda lagu daro, laakiin waxyaabo kale in gadaal loo geeyey baa laga yaabaa, marka doodeeda lagaadho ayaan ka hadli doonaa.

**18) Xil. Dr. Elmi Mohamud Nur:**

Doodda inteedii badnayd waa layidhi, laakiin waxyaabo yaryar ayaan meelo kaga noqonaynaa, bal wixii lasii hagaajin karo aan wax kaniraahno. Waxaan bogaadinayaa labada guddi ee soo diyaariyey qoraalkan, markaa anigu waxaan dula istaagayaa qodob-qodob meelaha aan is leehay waxay u baahan yihiin in lagu daro.

- **Qodobka 1(1**) Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah, Federaali iyo in federaal la yidhaahdo sidaan isleeyahay waxay ku haboonaan lahayd in fedaraal layidhaahdo, waan ku waafaqsanahay, muslim sunni ah in layidhaahdo lehna gobanimo ku salaysan cadaalad iyo saraynta sharciga ayaa qoran, gobanimo kusalaysan cadaalad lama yidhaahdo, waxaan umalaynayaa gobannimadu inay wax lawada leeyahay tahay, iyadda maaha waxay kusalaysan tahay cadaaladu, laakiin malaha waxaa ka fiicnaan lahay in layidhaahdo, lehna gobanimo iyo dawladnimo ku salaysan cadaalad iyo saraynta sharciga, maxaa yeelay cadaalada iyo saraynta sharcigu dawladnimaday la imanayaan camalka bini'aadamka, laakiin gobanimadu waa wax la isa siiyey oo aan hananay weeyi, dabcan halkaaa markay joogto waxaan u baahanahay in magaca lasheego oo la qeexo oo la yidhaahdo magaca jamhuuriyada federaalka oo magaceedu yahay layiraahdo si aanan waxba magacyo kale iskaga soo bixin, si cid waliba waxay doonto iskaga odhan magaca jamhuuriyadu waa in sidiisaa loo qoraa oo magaceedu waa noocas layidhaahdo.

- **Qodobka 1(2**) waxaa ku jirta Soomaaliya waa jamhuuriyad dimuqraadiya oo ku dhisan axsaabta badan oo soo dhawaynaya kala duwanaanshaha afkaarta oo dhan ayaa qoran, soo dhaweynaya waa laga qurux badan yahay tixgalinaya ayaa ka fiican. Afkaar kala duwan waa la tix galiyaaye afkaar kal duwan looma yeedho, laakiin wixii kala duwanaansho ah inaan tix galino ayaan u baahanahay.

- **Qodobka 1(3)** Allaahu subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awooda gobannimada dalka waxaa iska leh shacbiga jamhuuriyada federaalka soomaaliya, asagoo awooddaas u isticmaalaya si toos  ama si dadban u adeegsanaya hay'addihiisa  uu u xilasaartay  si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada federaalka soomaaliya, oo iyana u baahan sixitaan yar oo la yidhaahdo 'typographic error' Si toos ayaa qorane waa in si toos ah la yidhaahdo.

- **Qodobka 1(4)** oo ka hadlaysa gobanimada. Waxaa fiicnaan lahayd in laga horaysiiyo gobaminadu waa mulkiyad wadareed sideedaba   umadu wada leedahay mulkiyad wadareed la wada leeyahay weeyi, ay reeban tahay in qof kamida shacabka jamhuuriyada maahee jamhuuriyadu weeyi ay sheegato ama la wareegto xaqa lahaanshaha ama u isticmaasho si u gaar ah, halkaasna  kalimaad baan kasaaray oo  ka bilaabmaya waxa reeban kalihaatay, waa in laga horaysiiyaa gobanimadu waa mulkiyad wadareed ay reeban tahay layidhaahdo, in cid gaara si gaara ugu takri fasho.

- **Qodobka 2 (1)** waan ku waafaqsanahay sidii layidhi, in layidhaahdo islaamku waa diinta dawlada ama la yidhaahdo diinta dadka iyo dawlada la yidhaahdo  waan ku waafaqsanahay.

- **Qodobka 2 (3)** waxaa reeban cayda diinta islaamka ah iyo samayta falkasta oo muujinaya naceyb, waxaa qoran cayda diinta islaamka karaahiyaheeda baa qoran, markaa erayga karaahiyaha in meesha laga saaro oo layidhaahdo samaynta falkasta oo muujinaya nacayb diinta uu u qabo.

- **Qodobka 3aad**: mabaadiida jamhuuriyada federaalka oo kamid ah baa qoran, jamhuuriyada federaalka soomaaliya waa xubin kamida in la yidhaahdo ummada Afrikaanka iyo Carabta weeyi.

- **Qodobka 3(2**): waxa kale oo iyana Jamhuuriyadda Federaal oo ku dhisan mabaadii aasaasiga ah ee nidaamka awood qaybsiga, awood qaybsi halkaa lagu muujiyaa ani wey igala qurux badan tahay, nidaamka awood daadejinta federaaliga ah in la yidhaahdo, awood daadejin in loo istimaalo  ayaa ila haboonaan lahayd.

- **Qodobka 3 (5)** waan ku waafaqsanahay gabadhaha  in runtii kooto ama tiro fiican sida ay ka dhawaajisay xildhibaan faa'isa waliba anuu waxaa odhanlahaa inta xafiis iyo maaliyad, caafimaad iyo waxbarashiyo in iyaga loo dhiibto ayaan oran lahaa, degenaan shiyaheenna nabad galyadeenaa ku jirta ayaan odhan lahaa, markaa anuu waxaan soo jeedinayaa xeerar qeexaya oo xaqiijinaya inay gabdhuhu intaa helaan oo doorashooyinka iyo hawlahaas oodhan la xidhiidha in lagu soo daro oo xeerar lagu xaqiijiyo arimahaas, hogaansiga waa waxa loo baahan yahay dhamaan inay haay'aduhu ay u hogaan samaan.

- **Qodobka 1(1):** Luuqada haddii layidhahdo waxaa qoran af soomaaligu Maay iyo Maxaa tiri waa afka rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, af carabiguna waa luuqada labaad, marna af baan isticmaalaynaa marna luuqad, waa in la is waafajiyaa oo la yidhaahdaa luqada ama 'language' carabiguna waa ka labaad. Rasmiga ah marka layidhaahdo oo 'working language' ka laga hadlo xafiisyada halagaga shaqeeyo markaa, hadii aad tiraahdo lahjaadkeenii qaybihii aan u qaybsameeynay

xafiisyada halgaga shaqeeyo waxaa laga yaabaa in 'confusion' farabadan ina galiyo . markaa waxaan odhan lahaa afka soomaaliga oo kaliya halagu koobnaado dadkana waxaan odhan lahaa kii u sahlanaado ha qoraan, laakiin waxaad ku waajibinaysaa inuu 'working language' ku noqdo kaas halkaad 'official' ama rasmi ka leedahay luuqada qaran waa Maay iyo Maxaatiri oo sidaas layidhaahdo, markaa 'choice' ayey heli karaan dadkii ama xukuumadihii.

- Marka laga hadlayo Astaanta 'bay-cad' ka, bay waxaa lagu isticmaalaa xoolaha 'colour' kooda ama midabkooda khaasatan dibida ama lo'da markaa neefka cad ee boorka ah ayaa la yidhaahdaa bay cad ah, dhiin ah, boor ah sidaa ayaa la yidhaahdaa, markaa bay cad inuu yahay shakibaa iga galaya runtii calankeenu markaa runtii taana aad haloo xaqiijiyo.

- **Qodobka 6(3)** Waxaan halkan ku dari lahaa heesta calanku waa qolaba calan keedu waa sax laakiin anigu heesta calanka iyo heesta qarankaba waxaan odhan lahaa midhaha aan ku luuqaynayno midho wax macna leh ka turjumaya inay nodaan, masalan qolaba calan keedu waa caynoo midab kaliyana waa ka hadlaynaa waxaan kahadalaynaa xidigoo iyadiibaan amaanaynaa taasi macno weyn oo dawladnimo iyo qiyam kama turjumayso, astaanta maaha waxa lagu mashquulayo, waxa lagu mashquulayaa waa macnaha sameysmay ee dawladnimo weeyi, waa inay markaa noqotaa mahadnaq inaan dawladnimo gaarnay ka tujumaysa duco iyo Alle bari aad dalka wanaagiisa iyo barwaaqadiisa u baryeyso ayey ka turjumayso midnimo iyo wadajir umadeed ka turjumayso, gonabanimo iyo madaxbanaani aan helnay inay ka turjumayso, wadaniyad iyo qiyam ay ka tujumayso, himilo iyo hiigsi horumar ay ka turjumayso, markaa waxaan u baahanahay in wax wayn oo micna leh kusoo kordhino oo aan hiigsanayno noqoto markaa in tartan la galiyo iyadoo muyuusikadii iyo laxankii sidiisa loo daynayo lakiin macnaha erayada aynu doorasho sameeyno

- Waxaan ku soo gaba gabagabeynayaa waxaan u baahanahay dastuurku waa mug iyo baaxad weynyahaye, tobigyada aasaasiga waxaan uga baahanhay in 'discussion' gaara iyo dooda gaara laga sameeyo si fahakeenu uu u sii qoto dheeraado.

**19) Xil. Abdirisaq Abdullahi Moallim:**

- **Qodobka 2(1):** islaamku waa diinta dawlada ayaa ku qornay dastuurkii hore lakiin markii laga wada munaaqashooday waxaa aad uu ugu batay hadalku inuu islaamku yahay diinta dadka, dalka iyo dawlada.

- Si gooniyaan u fiirin doonaa arintaas inaan ka dhex weynana marabno, taas waan isla garanay sidoo kale waxaad ku daartee dastuurka magaca ay qaadanayaan madaxweyna yaasha gobaladu waxaa layidhi Hogaamiye, waxaan jeclaan lahaa in lagu daro oo la daba dhigo meeshee dawlad goboleedyada ladhihi jiray in maamul goboleed ay dad badan ka dhawaajiyeen,

- mid sadexaad oo iyada laftigeedu u baahan in laga wada munaaqishoodo oo ah abwaankii heestan curiyey u jeed kii uu ka lahaa iyo hada meesha aan taaganahay inay wax badan iska badaleen. Qolabaa calankeedu wuxuu ka hadlayey dawladaha afrika kajira ee aduunka ka jira qolawalba calan gooniya oo lagu gartay lahayd,laakiin markaas inagaa qolaan ahayn laakiin hada maxaa dalka kajira kuligeen waxaan noqonay qolo qolo iyo reer reer,

cidwalbana calaneey sameeysatay,markaa qolabaa calankeedu waa cayn in la yidhidaan qabaa, laakiina hada sidaad aragteen qola walba calan bay yeelatay,markaa waxaa fiicnaan lahayd in wixii hada ka danbeeya tartan la sameeyo oo hees qaran oo ka turjumaysa waxa aan hadda ku jirno oo aan an dhahay qolabaa calnkeedu, Calan federaalku leeyahay oo loo tartamo in lagaliyo oo kadibna dastuurka lagu soo daro markaas,qolabaa calankeedu wixii waa is badaleen.

- Waxaan u mahad naqayaa labada guddi oo shaqo fiican soo qabtay ka soo shaqeey in kastooy ku fiicnayd in lafiiriyo qodobka 132 aad ee dastuurka oo sheegaaya inaan wax-kabbedal lagu samaynin cutubka 1 aad sababtoo ah dooda dheer waad arkaysaan oo cutubkaasi wuxuu si toosa u abaarayaa diinta, calanka, jinsiyada, xuduudaha iyo wixii la mida intooduna waa ‘very sensitive’ waaye, waa arin u baahan in sifiican oo mug leh loo fiiriyo ka soo qaad anigoo kale markii laga hadlaayo shacabka aan matalo 50% waxay dagan yihiin dhulka aynu unaqaano soomaaliyeed, sidaas ay tahayna isku weel ma nihin dadka itoobiya wax ku darsadayna kuma jirno oo mustawaqiyahooda ma qaadano luqadoodana ma barno waxna kuma darsano,

- laakiin soomaali waaye oo waa dad soomaaliyeed ilaahay deegaankaas ku abuuray, hadii markaa la yiraahdo dadkaa halaga samro kama samri karo cidii ka samarysaa iyadey u taalaa, umadda soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan waa soomaali, dhulka qaar waxaa la inooga haystaa xoog iyo xuduud beenaad gaalku sameeyey ma ogiye, maaha dhul aan anagu u ogolaanay inay meeshay rabeen aadeen, dadka soomaaliyeedna waligood iyo waligoodba waxay diidanaayeen inay dadkaas wax ku darsadaan, laakiin markii anaga qabkeenii jabay oo dawladii aan haysanay iska burburinay oo aan inagii lafteenii aan noqonay qaxooti iyo kala carar ayey yiraahdeen amay sidaas sidaasi dhaantaa oo meeshas kale aadeen markaa dadkaas lagama samri karo lamana tuuri karo, anuu waxaan qabaa inaan dadkaas ayaga laftigooda lasoo koobin dadka oo federaalka jamhuuriga hala dhehee hala yidhaahdo soomaaliya, qof kasta oo soomaaliya meesha uu joogo ama xagaa ha joogo ama intaa ha joogee inuu soomaali yahay.

- Waxaan kaloo rabaa oo meesha ka maqan xeerar badan oo aan ansixinay wasaaradaha ay lahaayeen xeerwalba waxaa ‘cover page’ u ah boga eray bixinta hadalo badan oo aan la fahmi Karin ayaa jiri kara, eray bixin toodii ayaa la soo raaciyey, dastuurka sida ka muuqata maalaha waxa eray bixina. waxaa taas cadynaaya oo meesha kajira dastuurku wuxuu badanaa ku qoran yahay hadaad sidiisaba akhrisaan afka miiga oo dadka miiga dega afkooda ku badan oo sida hada lo’da iyo laga sheegaayey waxa lagu tilmaamaayo oo ku badan, waxaana la rabaa in lagu dhaqo dad magaala degan nidaam dawli ah oo belad ka jira, wixii markaa in la is waafajiyo oo la ogaado erayga meesha ku jiraa inuu yahay eray u qalma oo la fahmikaro,

- waxaan meeshaan ku hayaa erayo sahlan weeyi laakiin wey adag tahay in la fahmo erayga sharci, xeer, qaanuun intaba waxa u dhexeeya saddexdaas mala fahmi karo, sharci waa sharcigii Alle waa sax laakiin anaga maalin walba sharcibaa naloo keenay oo aan gudbinay baan dhahnaa, Waa is diidan yihiin saw maaha, xeerku sidoo kale, qaanuunku waa sidoo kale markaa sharci xeer qaanuun digreeto sharci ama qaanuun sharci waxaas oo dhami ma la fahmi karo iyo waxyaabo badan oo ku jira jamhuuriyada federaali ah iyo jamhuuriyada federal ah ani makala fahmi karo waxa ay kala yihiin laakiin marka eray bixin lagu sameeyo

way fududahay in la fahmo, soomaaliya iyo soomaaliyeed oo kale, hada dooda ugu badani waxay ka hadlaysay soomaaliya iyo soomaaliyeed oo kale, aniga hadeerto oo aad ii jeedaan aaba garan la'e ilmaha yaryar oo hada soo dhalan doona, dadka high schoolka ama jaamacaddaha ku jira way ku addag tahay inay fahmaan, markaa eray bixin in lasoo raaciyo waa qasab oo lafahmi karo waxa meesha ku qoran, mida kale dadku dastuurka waa ka baqaan badalkiisana aadaa looga baqaayey waxaa jirtay xasaasiyad, waxaan rabnaa inaan sheego dalkan muduu burbursanaa, mudadaas uu burbursanaa hadii la rabo in laga soo baxana waa inuu dalku dastuur yeeshaa, dastuurku markaa waa xeer ama nidaam bulsho isku af garato oo ay rabto inay isku maamusho, isla dastuurkaa waxaa kujira qayb aduun weynaha inagu xidhaysoo dalalka kale sidaan ula dhaqmi lahayn ka tujumaysa, markaa xeer inaan yeelano aan isku maamulno aduunakana kula dhaqano waa 'very important' waana sax lakiin waxaad ogaataan, dastuurkan ama xeerkan qawlkii Alle maaha waa la badali karaa, dawladaha dimoqoraadiyada fiican haysta oo ku dheereeyey waxaa kamida dawlad maraykanka, 300 sano ayey jireen 27 jeer ayaa la badalay, hadaad fiiriso 13 sanaba mar ayaa 'amendment' lagu sameeynaayey ama qodob ha ahaato lagu sameeynaayey ama laba qodoba ha noqotee, anaga waxaa laga yaabaa inaan ka soo degdegno oo 5 sanno ba mar 'amendment' lagu sameeyo, waa ubaahanahay xeer iyo dastuur inaan yeelano waa u baahanahay inaan aduun weynaha la jaan qaadno, waa u baahanahay wixii qaladan inaan saxno, sidaas darteed dastuurka yaan xasaasiyad laga qaadin.

- Yaan loo arkin Sharcigan hadii aan laga shaqayn ama la baas gareyn hadii laga shaqeeyo in laga tagaayo waan ku noqonaynaa tabashadiinaan tix galinaynaa cid alaale cidii ka soo hor jeedana oo diidana waa imaan kartaa hadiiba maanta imaan waydana berito ayey jaanis uleeyihiin in wax kabadal ku sameeyaan yaan la baqin dawlad burbursaneed ayaan rabnaa inaan istaajino oo wakhtigeeda aan u helno sidaas darteed waan soo dhaynayaa iyadana, qodob yar oo daba socda midii xuduudaha gobolkasta waxaad moodaa in lagu soo xad gudbay haday kiiniya noqon lahayd iyo haday itoobiya noqon lahayd, sidaan idiin sheegay dadkaan matelaa waxay jiraan itoobiya 50% dadka iyo deegaan ilaa 25 tuulo oo kamida, oo itoobiya ay kusoo durugtay oo calankeedii uu sudhan yahay oo ay kamid tahay deegaanka aad taqaanaan feerfeer ayuu yaalaa calanka itoobiya, xuduuduna intaa waa ka fog tahay oo waa ka shisheysaa dastuurka meesha aan ka niri xagan itoobiyaanka jirta anuu waxaan qabaa oo iga qanciya gudiga inuu dastuurku yahay kii 1960 kii, laakiin yaan ladhihin itoobiyaa xagan naga jirta iyo kiiniyaa xagan naga jirta kiiniya gobolada soomaaliya meela ayna soo galin majirto. Markaa dastuurka qaybta xuduudaha waxaan isla qaadanaynaa inuu yahay kii 1960kii oo uusan jirin xuduud beenaadkii gaaladu inagu kala qaybisay, soomaaliga meesha degan uu yahay soomaali maalinkii la helana 'referemdum' na dadkaasi dadkooda kamid noqon doonaan oo ay ku soo biiri doonaan.

20) **Xil. Dr. Mohamed Sheikh Ahmed Mohamed:**

Ugu horayn xildhibaanku waxa uu u mahad celiyay labada guddi ee dastuurka kasoo shaqeeyay waxa kale oo uu intaas ku daray in ay soo qabteen shaqo wanaagsan sidoo kalena dadaal badan ay sameeyeen waxa kle oo uu sheegay in ay nasiib badanyihiin guddiyada iyo xildhibaanada labaduba maadaama ay 63 sanno kadib ka doodayaan dastuurka. Intaanan u gudo galin qodobada aan rabo inaan wax ka tilmaamo.

Si guud ahaan dastuurku waa heshiis umadeed, labo qodob baan rabaa inaan iyagana tilmaamo. Mar ummadda dastuurka loo dajinayo horta ummad jirta weeyaan jirina doonta

waligeedna jirtay qab iyo xan iyo karaamo iyo dadnimo ayay lahayd, lahaana doontaa duruufuhu way is badalaan waxa dhici karta sodon sanno oon la noolayn xaalado aan caadi ahyn, qaxootinimo badan iyo iska daba wareeg badan iyo han-jab iyo qab-jab badan uu inagu dhacay inay saamayn inagu yeeshaan. Markaa horta ruuxdii soomalinimada ee qabka iyo hanka iyo jiritaanka iyo ummadnimada lahayd horta. Ummad sii jiri doonta oo qab yeelaan doonta ayaan wax u qoraynaaye duruufta hada aan joogno yaanay aad inoo saamaynin iyadoo aan waaqaca laga tagyn oo waxa duruufta mumkinka ah ee suura galka ah.

Midda labaad waxa laga yaabaa dadka qaar inay tabasho ka qabaan, tabashadu waa labo nooc, mid waa halaysa sugo oo waxan dad baa maqane hala sugo, taas waan kasoo gudubnay oo sugitaankaas way socon doontaa dib u eegistu mar walba, waxyaabaha suurta galka ahna waa la samaynayaa waxa kalena markay suura-gal noqdaan baa laga daba tagi. Mida labaad oo ay dadku dareenka ka qabaan waxay tahay habka loo ansixinayo iyo codaynta iyo xudduurka intaba inay wax aad shafaaf u ah oo muuqda inay noqdaana dad baa dareen ka qaba. Waxaan qabaa hadii aan tii hore kasoo gudubnay tan yaaan laga gudbin ee si fiican haloo waxeeyo. Hadaan u imaado qodobada waxaan ka leeyahay, aad baa wax looga idhi lakin meelana waan xoojinayaa moolana waxbaan ku darayaa.

- **Qodobka 1aad** Si guud waan taageersanahay qodobada faqraadka lagusoo daray iyo sida loo siiqeeyay guud ahaan, Soomaaliya Jamhuuriyad Federal ah weeyaan, waa muslim waa sunni bay dadku aad u sheegeen waanan waafaqsanahy sababtoo ah shiicadu waa fikir caqadi ah soo galitaankiisana dhibaato faro badan baa ka imaan karta, markaa maaddaama aysan hadda jirin in la xadido waxba dhib uma arko waa fiicantahy. Mas'alada kale ee lagusoo celceliyay ee ah shaafici halaga dhigo wadanka oo halagu qoro dastuurka la idhi, midaas ayaan wax yar ka leeyahay. Way fiicantahay in ababinta ilmaha manaahijta iyo fatwada iyo axkaamta qadaa'igaaba inay midaysnaadaan oo tashuush diini ah aanay ku dhicin oo aysan kala fuq-fuqin way fiicantahy, midnimaday u fiicantahy, wadamaduna way ilaaliyaan arintaa iyada ah lakin dastuuriyan in lagu dhigo ma qabo lkn waxaan qabaa in manaahijta iyo meelahaas fadwooyinka la geeyo sababtoo ah waxa cibaadaatka la xidhiidha waa saabit oo dhib malaha madhab in la qabsado lkn noloshan is badalka badan ee mucaamalaadka leh ee siyaasada ee maamulka leh, inta ay noloshu toban qarni kahor manta is badashay ayay shuruucda iyoo habka loo dhaqmayo iyo sida loo maaraynayo is badalayaan markaa madaahib waqtigaas kahor la sameeyay oo inta badan ah fasiraad diinta sidii markaa dadkaas duruufihii jiray ay ku qiimeeyeen, duruufihiina ay boqolkiiba kun ay is badaleen maanta marka la fiiriyo baahida jirta, madaahibta islaamka oo dhan marka laysku daro magaca islaamka ayaa taxadi adag ku jira maxaa yeelay shuruuc mutadawir ah aad nolosha uula jaan-qaaday baa cidhiidhi xoog badan ku haysa, markaa meel kasta oo islaamka laga faa'idaysan karo, nimdaamka siyaasiga iyo maamulka iyo dhaqaalaha lagu horumarin karo in laga faa'idaystaan u baahanahy qunuubta hada islaamiga ah ee shaqaynaya, madhab shaafici ah hala qaato hadii la idhaahdo way wada xidhmayaan gidigood ma shaqaynayaan markaa taas intaasaan ka leeyahay, yaan aad laysugu waxaynin siyaasaduna waa kasii fogtahay lakin dhinacyadaas halagu ilaaliyo way okay wayna fiicantahy.

- **Qodobka 2aad:** Labo eray ayaan isagana ka leeyahy, mid aad baa loosoo celceliyay laakin dhinac baan ka xoojinayaa. **Faqradda 1aad:** Waxay leedahay diinta iyo dawlada oo lagu

badalay diinta dalka, asalkii hore ayaa saxsan sida ay dad khubaro ahi sheegeen aragtidayda, labo dhinacba way ku saxsantahy dawladnimadu marka macnaheeda siyaasigaa la fiiriyo, dawladu way ka balaadhantahy dalka oo waa qayb kamid ah, iyadaa ka guddo wayn sida horay loo sheegayba oo kuma noqonayo, dhinaca kale mcnaha ay ka fiiriyeen oo ay isleeyihiin, dawlad u arkaan qoloda xukunka haysa baa looga jeedaa oo dalkiiba laga saarayaa ay isleeyihiin, macnahaa laftiisa hadii la fiiriyana sidanaa ku saxan, maxaa yeelay dadka iyo dalkuba sidooday islaam iskaga yihiin, waxa u baahan in la caymiyo oo diinta loosoo hogaamiyo waa nidaamka xukunka markaa labo goorama macnaha isagaa sidaas ku fiican, lakin waxaan ku dari lahaa eray kale in la raaciyo**,** islaamku waa diinta dawlada waana asalka dastuurka iyo xeerarka dalka.

- Si oo yacni taban ayaa faqrada 4aad loogu sheegay markaa in si togan loo sheego ayaa ka fiican oo halkan la raaciyo oo la idhaahdo islaamku waa diinta dawlada waana saldhiga dastuurka iyo xeerarka dalka. Qodobkaas taban wuxuu la mid noqon doonaa ee 4aad midka saddexaad ee qodobka 4aad ee dastuurka looga hadlay oo kale, wax kasta oo shareecada islaamka khilaafsan oo soo baxaa waa waxba kama jiraan, in sidaas loo dhigo ayuu noqon doonaa midkaas, markii sidan loo qaato weeyaan halkan, marka halkan sidan loo qaato kaasi sidanuu noqon karaa shaklul-caam lakiin waan u iman doonaye, kahor waxaan rabaa oo aan waafaqsanahay badalitaanka erayga xeer lagu badalay sharci meesha la isticmaalayay way fiicantahy dastuurka guud ahaan, sababtoo ah dagaal fikri ah ayaan ku jirnaa, dagaalkaas fikriga ah qalabka la adeegsanayo mid ka mid ah wuxuu yahay in dadkani ay sharcigii Illahay ay baarlamaanku sharci dajiyayaal yihiin oo dad masaakiin ah inta maskaxda loo galiyo markaa lagu quwaynayo, markaa in fikradas laga fogaado inkastoo aysan dhib lahayn in xeer la iska isticmaala sidaa u fiican. Waxaan rabaa markaa in faqradan 4aad ee isla qodobkaas labaad oo u dhigmaysa lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn shareecada islaamka iyo maqaasideeda, hadii qodobkaas inta hore la qaato inta faqrada 1aad aan ku sheegay, tan waxa loo dhigi karaa xeer kasta oo kahor imaanaya shareecada islaamka waa waxba kama jiraan. Lkn hal kle ayaa loo baahanyhy.

- **Qodobka 4(3)** waxay xadidaysaa saraynta dastuurka weeyaane wixii dastuurka baal marsan yaa go'aan ka gaaraya waxan dastuuri maaha? Maxkamada Dastuuriga xadidaysa, maaddaama shareecada loo khasbay qodob dhan oo diinta iyo dawlada la idhi, wixii baalmarsan shareecada jihadee go'aan ka gaaraysa oo xukumaysa, lama xadidin, marka macnaheeda ma hirgalayaan weeye, waa in marka meeshaas lagu xadido faqradaas 4aad jihadaas labo ayay mid noqon kartaa, maxkamada dastuuriga ah in lagu daro hawlaheeday kamid tahay wixii shareecada islaamka waafaqsan iyo waxaan waafaqsanayn ayadaa go'aan ka gaaraysa taasina wax aka dhalanaya, dadka maxkamadaas sharcigeedi dib loogu noqdo oo dadka qabanaya xilalkooda iyo hawlaheedaba lagu daro eegitaanka shareecada inay waafaqsanyihiin dadkana ay yihiin kuwo ku xeel-dheer shareecada islaamka, in shuruudaas lagu daro ayay halkaasina u baahanaysaa.

- Labada Qodob ee cusub oo 6aad iyo 7aad ah waan soo dhawaynayaa in si dastuurka waafaqsan awoodda loo isticmaalo iyo dhulka iyo bada iyo ku saabsan waa okay oo waa fiicantahay, wax kaloo cudura malaha, waxa kale oon qabaa in labada qodon ee lasoo kordhiyay oo 6 iyo 7 ah ay horey maraan oo qodobka 5aad uu noqdo midka 7aad, sababtoo ah waxay la xidhiidhaan mabaadi'da guud. Sikasta hanoqotee gabdhaha karaankooda la xoojiyo iyo ka qayb qaadashadooda horumarka dalka, qayb walba waa arin muhiim ah

waanan soo dhawaynayaa waanan bogaadinayaa, haday keensato xataa in nisbo loo khasiso iyaga u gaar ah oo aan lagula tartamayn haday ku xaqiiqoobayso way fiicantahay, lakin waxaan rabaa labo arimood inaan hoosta ka xariiqno. Midi waxay tahay wadankan kama jiro loolan rag iyo dumar ah waan ku kalsoonahay haday dumarku noo qabtaan shaqada oo dhan oo ay noo hagaajiyaan, ahlan wasahlan ayaan leenahay oo waan u sacabinaynaa, haday ragu noo qabtaana waa ahlan wasahlan, haday isla qabtaana waa fiican, horta waxaan rabnaa dagaalo meelo kale ka jira inta lasoo min guuriyo horta yaan laynoo abuurin. Mida labaad waxaan u baahanahy guud ahaan kartida, dalkaan dulmi badan ayaa ka jira, sida loo kala nugulyahay ayuu dulmiguna dadka ugu kala saamayn badanyahy, dumarkuna dadka nugul ayay ka mid yihiino dulmiga intiisa badan uu ku dhacayo, markaa karaanka dumarka iyo gabdhaha in la xoojiyaan u baahanhay oo sare loo qaado, sida kor laagu qaadi karo arinkaas ee loogu qancin karana waxa kamida, gabdhaha hada siyaasada ku jira iyo baarlamaanka inay bulshada iyo baarlamaankaba ku qanciyaan inay runtii mudanyihiin gabdhuhu inay soo bartaan inaan qaadano karaankooda ayaa qayb ka noqon karta.

- **Qobodka 4(3)** waxa uu soojeediyey madaaba uu isku soo noqonayo oo u yaala sidan: "Xeer kasta, go'aan kasta, ama tallaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heer kasta ee hay'adaha dawladda, kana soo horjeeda Dastuurka, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burintooda awood u leh Maxkamadda Dastuurka". in loo soo siiqeeyo sidan: "Xeer kasta, go'aan iyo talaabo walba oo kasoo baxda haya'dah dawlada, heerarkeeda kala duwan, kana soo horjeeda Dastuurka, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burintooda awood u leh Maxkamadda Dastuurka"

21) **Xil. Adan Mohamed Ali:**

Mahadsanid Guddoomiye, mudanayaal uguhoreyn dhameystirka iyo qabyotirka dastuurku waa mid ka mid ah dastuurka howlaha ugu waaweyn ee dalkani horyaala waana arrin uu xil gaar ah ka saran yahay Baarlaamka madaama uu yahay hay'adii sharci dajirta ee dalka markaa wey i farxad galineysaa mas'uuliyada iyo xilka inna saaran aan gudaneyno oo hawshaa u fadhino waxaa jira sifooyin lagu yaqaano dastuur hufan ama wanaagsan oo ay kamid yihiin inuu dastuurku u qoran yahay ama ku qoran yahy luqad waadix ah oo la fahmi karo iyo inuu si wanaagsan u kala xadeynayo awoodaha hey'addaha dowladda oo uuna madaxa isku galineyn, iyo inuu dhigaayo in markii loo baahdo la furi karo wax laga badali karo waayo duruufuhu wey is badalayaan markaa waxa ila quman ineynu maanka ku heyno oo arimaha guud marka eynu dastuurka lafa gureyno, intaa hadaan ka imaado aan u imaado, cutubka aan manta u fadhino ee doodeyda ku aadan

- **Qodobka 1(3)** oo dhigeysa awoodda iyo gobonimadda dalka waxaa iska leh shacbiga Jamhuuriyada Soomaaliya isogoo awoodaas u isticmaalaya si toos ah iyo si dadban, qodobkaa waa in lacadeeyo sida dadban ee shacbiga awoodda u isticmaalaayo, awooda shacbigu laba si buu u is ticlaamaa mar waa si toos ah oo doorashooyinka baa ka mid ah marna wakiilluu soo dirtaa wakiiladiisa isaga oo awoodiisa soo dhaxmaraaya ayuu awoodiisa "exracise" gareeyaa oo golahaan ama baarlamaanka ka mid yahay, marka waxaan qabaaa in halkaa la yiraahdo "ayagoo awoodaas u isticmaalaya si toos ah ama adeegsanaaya wakiiladda ey sida dimuqraadiga ah doorteen in halkaas saas loo cadeeyo waan soo jeedin lahaa.

- **Qodobka 2aad** oo dhigaaya diinta islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya sidii horeyba loo sheegay marba haddii dal laga hadlay ama "state" laga hadlay dadkii iyo dhulkiina wey ku jiraan ee markaa taa wan ayidayaa, waxaan sidoo kale ayidayaa ineynu cadeyno in islaamka wadankan "practice" gareeyaa uu sunni yahy waayo marar badan waxaan aragnay ayada oo dad shiica ah faafinaayan dalkaan gudihiisa danbi lagu soo oogay markaa ineynu sidaa u cadeynaa waa lagama maarmaan, waxaan kaloo qabaa in ey jiri doonaan xeerar afkaarta guracan ee sunniga laftiisa afkaarta guracan ee jira xeerar reebayana iney imaan doonaan waan qabaa hadeer dhibka ugu weyn dalkaan ka jirta mid ku heysa diin waaye qolooyiinkaan eynu la dirireynaa diin baa adeegsanayaan hadaan qodobkaa halkaan kaga imaado.

- **Qodobka 6aad** oo asigana ka hadlaaya calanka iyo astaanta qaranka faqradda (5) waxey oraneysaa in dowlad gobleedyadda ay yeelan karaan calan iyo astaan gaar ah halkaa waxaan soojeedin lahaa in lagu daro "oo aan ka hor imaaneyn asaataanta calanka Jamhuuriyadda" haddii astaan tii calanka dowlad gobleedka ka hortimaado tii Jamuuriyada oo fariimo gaar ah gudbineysa iyaduna waa mushkilad marka taas ayaan soo jeedinlahaa waxaan kaloo soojeedin lahaa astaanta sifooyiin keedaa latahay in lagu daro sawir keed iyadana .

- **Qodobka 8aad** oo ka hadlaaya shacabka iyo jinsiyadda faqradda (3) waxey dhigeysaa muwaaddinka Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya uu qaadan karo jinsiyad dal kale, jinsiyad dalkasta miyuu qaadan karaa? dalalka qaar waxaa dhici karta inaan aqoon sananeyba iney dal yihiin ama waxaa dhici karta dalalka qaar aynaan ogoleyn inaan "visa" siino markaa halkaa in lacadeeyo baan soojeedin lahaa waxaan oran lahaa dal kale oo ay soomaaliya aqoonsan tahay in lagu daro, arrinka jinsiyado indho gaara loo yeesho ayuu u baahan yahay cida xaq u yeelaneysa in aad looga taxadaro waxeynu nool nahay xili 'number' ka ama 'size' ka 'population' ku uu awood iyo cudud yahay wadama jaarkeena tirada dadkoodu aad u kordheyso marka inaguna teena soo koobno ilama qumana arintaa waxeynu baahan tahay indha gaara u yeelano mida kale jinsiyadu qofku dhalash uu ku helaa waa in lagu cadeeyaa,meesha in jinsiyada qofku dhalasho ku heleeyo aabaha iyo hooyadaba uu ka imaan karo waxaa jiri karta iyaduna dunida soo kortay haday hada 'adaption"baa jira in qofku qof soo korsado hadii qofka soomaaali qof soo korsado qof aan soomaali ahayn maxaa laga yeeleyaa?

**22) Xil. Nur Ahmed Dirie:**

Horta wax la sheegoba ma harin oo runtii wax hada la sheego oo qodobdii 9aad wax ku haray waaba yaryihiin in uun la iska hadlaayo mooyaane runtii waxaan sheegi lahaa anagu waxaan nahy manataalada dhabta ahayd ee qaranka soomaaliyeed ee labada aqal, marka hore waxaan u mahad celinayaa labada guddiga marka hore soo sheqeeyay oo shaqada badan soo qabtay hade waxa ay soo qabteen in la turxaambixiyo wax badan laga weydiiyo waa shaqadii ay soo qabteen oo loo igmaday runtii waxaan aad iyo aad u bogaadinayaa shaqada fiican oo quruxda badan oo ay soo qabteen hadaan erayo isku qabsi iyo qodobka,meesha laga saarayo wey imaanayan waxaa runtii ila quman anagu waxaan nahay matalaada dhabta ah oo maanta soomaaliya ay fiirsaneyso meeshaan aan taaganhy kuma quruxbadan soomaalida ay ka qaadan niyad jab, qof walba ha'aamino inuu yahay qaranka umada soomaaliyeed qofwalbo Meesha uu joogo inuu matalaayo ha ogaado sanatar ha

adaado ama xillibaan ha ahaado waxaan mataleynaa uma soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan  ayaan mataleynaa waana is ognahay anaga soomaali ah dad aan waxba ka war qabin inaan u dhaqan  maaha jifo walbo oo soomaali ah golahaan waa lagu matalaa labada gole xaqiiqo weeye ama ha joogo kenya ama jabuuti ha joogo ama kilinka hajoogo.

Waa lagu matalaa labadaan gole dastuurkaan aan manta ku dhex jirno aan arimihiisa u falaaqayno waad ogtihiin soomaaliya marxalidihii ey soo martay oo kala duwanaa xaqiiqdii qof walbo oo soomaalia ah manta rajada uu leeyahy waa meeshaan marka horta geedka geedaha soomaaliya ka baxa waa taqaanaan  ' yaaqa , labiga bardaha hareeriga ,jirada geedka waa meeshaan laamahana waa goobaha kale geedii ma'ahan miyaa ledahay lanta jirada hoose ee labiga laanta hore labi maaha miyaa leedahay horta arintaas runtii aad iyo aad arintaas soomaalida meeley joogtaba waxaan leenahy halkaan waa jiradii soomaaliya soomaaliga meel walbuu joogana waa laantii arintaas baarlamaankaaan kow iyo tobnaad shaqo badan buu soo qabtay wuxuu wajahay shuruuc farabadan baarlamaanadii hore runtii ey ku dhiiran waayeen hadana wuxuu ku dhex jiraa dastuurkii uma qalanno markaa anaga umadda soomaaliyeed dhan baan mataleynaa farafareyn kale  baarlaankan uma qalmo mana ku haboona runtii anaga ummadda soomaaliyeed baan mataleynaa dastuur kaan aan sameyneyno ummadda soomaaliyeed baan u sameyneynaa qodobda hada qodob hadda aan ka hadlo majiro runtii waxaan qodobada waxaa ka hadlay xilibaanada   waqti inaan ku dhumiyana marabo.

- **Qodobka 8aad (4)**: hala soo celiyo. waxaan kaloo leeyahy,
- **Qodobka 7(3)** asaga sidiisa haloo daayo ee runtii markii la fiiriyo dastuuradda caalamka u dagsan inta badan kuma qorna xuduudaha kuley raga howshaan soo diyaariyay qibrad bey u leeyihiin inta badan kuma qorna xuduudaha laakiin anaga lixdankii qodobkaas oo lixdankii baala raacayaa naftigiisa waala waayay bal arintaa hala raadiyo waa muhiim inaan helno bal xuduudihii qaabkuu u dhigaayay kuley markii leys weydiiyay lama arkinkas lama arkin baala   yiri arintaas ee muhiim inaan ka taxadarno

- umadda soomaaliyed meeshan waxa lagu haayo iney aad ugu taxadarno waaye waxaa kaloo lasheegay inaa anaga  meeshaan ku heyno waxaan diinta islaamka shaqal ku laheyn waxaan u sheegeynaa umada soomaaliyeed meel walbo ey joogto iyo dadka ku mashquul san in baarlamaankaan diinta iyo waxyaabo badan  ka fogyahy koow dasruurkan laguma qoraayo waxaan diinta islaamka waa faqsaneyn intaas qof walboo soomaali iney ku filan tahay baan u maleynaya qof walboo soomaali ah intaas baa ku filan hana ku qanco inaanan lagu qoreynin wax diinta islaamka wax u dhibaaya, intaas waxey inoo tahy macno guudna inoo sameyneysaa dadkaa barabogaandada iyo wax yaala la taagan oo dastuurkaan iyo howshiisa runtii ayaga dana kale  ka leh, hadana dhinaca kale ,

- diinta islaamka xageeda u wareegaaya laguma umada soomaaliyeed iyo dadka wax inala wadaaga waxaan u sheegeynaa dastuurkeena manta baarlamaankaan toban iyo koowaad loo fadhiyo laguma qoraayo wax diinta islaamka wax u dhibaya intaaas mar hadii ay tahy waxa kale waa iska hadal badni iyo in lamajaajaleynaayo wax yaalihii kale   howshii socotay , waxaan bogaadinayaa xillibaanada  iyo sanatarada iyo gudoonka maanta daadihinaya howshan runtii aad iyo aad baad u mahadsan tihiin anugoo qodobadii hadaan ka hadli lahayn waa haray slooma hadlee wey noqtay in umadda soomaaliyeed waxaan u sheegayaa soomaali nimadii iyo diintii wax  u dhibaya dastuurkaan inaan lagu soo qori doonin meel

walboo joogto soomaaliya ka jog caalamka ka  jog hadad ka joogto aduunka "Australia" hadaad joogto, kenya hadaad joogta, hadad Ethiopia joogto iyo hadaad kafa joogto meeshaan qof wax u dhimaaya laguma qoraayo.

23) **Xil. Mohamud Abdirahman Omar:**
Shir guddoonka aad ayaan u salaamayaa, labada guddi ee kasoo shaqeeyay arintaan aan u taaganahay ee dastuurkana aadbaan u bogaadinayaa shaqada fiican ey soo qabteen xildhibanada sharafta leh iyo warbaahinta iyo ciidamada securityga ee nala jooga waan salaamayaa intaa ka bacdi anaa haray looma hadlo sidii xilibaanadii hore sheegeen waa inaan ilaa habeen kii shaqeynaa, hadii eynu rabno in aynu ka mira dhalino dooda waayo waqtiga eyno heysano iyo qodobada na sugaaya aad bey runtii u badan yihiin hadii aan kusoo dhawaado qoboda aan doonaayo inaan wax ka sheegom aan mulaaxadeeyo ama aan wax ku kordhiyo xilibaanadii iga horeeyay sidey  u dhigen.

- **Qodobka 1aad** ee baaqa Jamhuuriyadda baan kalmad kaleeyahay sida qoran heybta Jamhuuriyada waxa la qoray soomaaliya waa jamhuuriyad fedaraalka ah oo muslim ah, faqradda (2) waxaa la qoray soomaaliya waa jamhuuriyad dimuqraadi ah, halkaas dood baan aniga ka leeyahay waxey tahay, doodu muslim iyo dimoqraadi meel ay iska soo galaan anigu garan mayo, dood wey jirtaa culimaddana wey ka hadleen in badan oo wax badan ka warameen lakiin muslim markaanu niraah "diinta islaamku waa diinta dalka iyo dadka iyo dowladda" waa diin mutakaamil ah wax ka dhiman eysan jirin marka sabab loogu soo daro hadana qeexid labaad loogu sameeyo Jamhuuriyadda oo daruuri ah ma jirto waayo waxey ka dhigan tahy hadalkani ku qoran sidan aan ka fahmay fikirkeyga gaaban muslimku wax ka dhiman oo dimoqraadiyada kusoo kordhineyso ayaa jira macnah caadiga marka ladhuuxo isla dimoqradiyada hoosteeda waxaa lagu qoray  dastuurkani waxa uu dhowraaayaa waxaan shareecadda islaamka aheen uu xeerinayaa majirto maadaama ay shareecadda islaamku marjic u tahay dastuurkeena  ee kalmadan waxaan isleeyahy inagu malihini maadaama layiri dastuurkan maaliyad farabadan baa kaga baxday beesha lixaad in cid lagu raali galinayo ee sidaas darteed unba halkaan lagu soo qoray bey ila tahay, marka aniga waxaan soojeedin lahaa in kalmadaan  laga daayo. meesha lagu deysto un soomaaliya waa jamhuuriyad fedaraal ah oo muslim ah, waxaanan xoojinayaa xubnihii kale ee sheegayay in sunni la raaciyo jamhuuriyad muslim ah sunni ah si looga taxadaro afkaarta kale ee faraha badan ee muslimiinta waayo muslim shiici ah, muslimyo fara badan baa jira islaamka laftiisa ama muslimiinta manaahijtooda imika wey kala fogyihiin runtii markaa taa iyadana waan xoojinayaa taa markaan katago.

- **Qodobka 2 (1)** dadkoo dhami waxay ka wada hadleen ee markii hore aheyd islaamku waa diinta dowladda, anugu waxaan xoojinaya kuwii iga horeeyay soojeediyeen in sadax erey lagu qoro oo layiraahdo "islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dowladdaba" si looga fogaado in inagabaa imika weeraha qaarkood ku marganeyna, dastuurkana waxaan usameyneynaa dee umad soo socota oo fahamkooda laga yaabo inuu si kale u dhigmo markaasi shaki u galo inaan u qeexno oo layiraahdo islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dowladda intaba in la yiraa aad ayaan markaa u xoojinayaa .

- **Qodobka 2 (3)** ee ka sheekeyneyso iney reeban tahay cayda diinta islaam iyo faquuqeedu waxaa ku qoran qof kasta oo ku gafo diinta islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda anugu halkaa, waxaan  odhan lahaa  lahaa halagu badalo "xeerarka

shareecada islaamka" waayo shareecada islaamka ayadaa ugu sareysa xeerarkeena taasna ayadana taas ayaan ku badali lahaa ama aan so jeedinaya in lagu badalo

- **Qodobka 3 (5)** oo ka hadleysa iney ka qeyb qaataan siyaasada iyo heerarkeeeda dowladnimadda waxey ku doodayaan in la siiyo 30% anigu waxaan ku oran lahaa waad wanaagsantihiin waan soo dhaweynayaa runtii sida la sheegay ayaga naga amaano badan nagana 'active' san inta badan , waxaan oran laha iska daaya 30% oo 70% baad bulshada ka tihiin 70% iska qaata, lakiin hal shardi baa ku xiran codkiina baan idin haayaa cid idin diideyso hadii aad baarlamaanka oo dhan qaadataan 80 ama 90 ka dhigataan oo jirtaa majirtee isku duubni intaad sameysaan ragaba meel ku tiiriya oo codkiina kula soo baxa xubnihiina markaa heys ku xadidina 30% inkastoo habla badan ay diidan yihiin oo ay ka boodsan yihiin.

- **Qodobka 4aad** ee sareynta dastuurka waxaa qoran shareecadda islaamka kasokow dastuurka ayaa ah kan ugu sareeya ee dalka, timir lafbaa ku jirta mar haddii shareecadana aan sheegnay shareecadda iyo dastuurka keebaa sareeya? shareecada sareysa waxaanu shareecada waafaqsaneyn oo dastuurka ku yaala aqbalaayana majiro wax dibada laga keenay oo la aqbalaayo majirto yaanan is xiijin ee sareynta shareecada islaamka ayaa shareeco inoo ah dastuurkuna ayada un buu hoostagayaa madaama aan la ogolayn wax shareecada ka hor imaanaayana lagu soo daro meelnaba inaan aayar iska qorono ineynu harkeena ka carareeno unbaad moodaayoo ay wax ina eryanayan, oo waxyaabihii aanu ku suntanayn aan ka cararayno ama aynu hoos u dhigeyno ama eynu qarineyno, si cad eynu ugu qorno sareenta shareecada ineynu ku qorno ayaan taana soojeedinaya.

- **Qodobka 8aad** oo dood badani ka taagantahay waxaan waafaqsanahay jinsiyadu iney tahay isir dadka soomaaliyeed xuduud makala lahan ee meel kasto oo ay joogaan, wixii xuduudo uu kala dhex dhigay gumeystuhu, hadii aynu ku qoreynin imikaba madaama Jamhuuriyaddu xuduud la garanayo oo caalamiya leedahay inagu hadaan ku qoraynin dee dal baa inaga maqan ineynu dastuurkeenu ku qorno wey nagu haboon tahy oo la naadiyo hadaan taa lagu qoreyn oo lagu dhiiraneyn ineynu ku deyno qofka isir u leh jinsiga soomaaliyeed inuu jinsiga soomaaliga helayo aad baan usoo dhaweynayaa xuduudaha ina dhaxyaala.

- **Qododbka 9aad:** Maqaamka caasimada kasoo aana loo rarin cutubtka 5aad halkaan lagaga hadlo lagu dhameystiro ayaan aad usoo dhaweynayaa.

Sen. Cali Shacbaan Ibraahim Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee aqal sare oo soo xidhay kulankii 13aad ee labada aqal. Mudanayaal aad baad u mahadsantihiin, waxaan soo gaadhayn xiligii gabogabadii ee aan xidhi lahayn golaha, sidaad la socoteenaba waxaan ka doodaynay cutubkeenii kobaad, wuxuu ku eegyahay isniinta ayuu ku eegyahay.

Dhamaan labada gole waad mahadsanyihiin intii dooda ka qayb qaadatay iyo intii gabogabada nala soo gaadhay inta golaha laga xidhayo aad iyo aad bay u mahadsanyihiin gaar ahaan raysal wasaare ku xigeenkii hore Mahdi Gouled, Mahad cawad iyo Dr.Elmi aad bay u mahadsanyihiin.

**Taariikh:** Febraayo 19, 2024

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad | |
| Kalfadhiga: | 4aad | |
| Kulankiisii: | 14aad ee labada Aqal ee BFS | |
| Goobta: | Villa Hargeisa | |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: | 145 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: | 30 Sanatar |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:20 a.m | |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:40 p.m | |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" | |

**Ajendaha:**
(4) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(5) Ansaxinta Ajendaha.
(6) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 1aad: Baaqa Jamhuuriyadda (Qobobka 1aad ilaa 9aad).

## Kulanka 14aad:

**Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe" – Guddoomiyaha Golaha Shacabka**
Bismilaahi Raxmaani Raxeemi, xildhibaanada iyo Guddoonka waad salaamantihiin, marka hore ajendaha inoo ansixiya idinkoo aad u mahadsan, aad iyo aad baad u mahadsantihiin. Ajendaheena maanta waa ka doodistii inaan sii wadno ayuu ajendaheenu yahay, sondon iyo dhowr xildhibaan baa hadhsan aad ha loo dadaalo, sidoo kalena ajendaha iyo 10 daqiiqana ha la ilaaliyo aad baad u mahadsanthiin waa inoo furanyahay. Xildhibaanada ha loo yeedho, yuusuf horay u soco.

**1) Sen. Saynab Ismail Mohamed:**
Waxaan salaamayaa guddoonka labada aqal iyo dhammaan Xildhibaannada labada aqal ee meesha fadhiya, hawlwadeennada, miidiyaha. Waxaan u mahadnaqayaa Guddigii Dastruuka, kuwa Baarlamaanka iyo "ICRIC" ba siday u soo diyaariyeen doodihii aan hadda wadnay.

- **Qodobka 3(7):** Waxaad mooddaa in lagu soo daray dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti qaran oo ay shacabka Jamhuuriyaddu wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya**.** Waxaan qodobkaa u rari lahaa Qodobka 44aad maaddaama kaligii meesha lagu tuuray nuxurkiisuna uusan si fiican u muuqanayn. H**addii loo raro qodobkaas oo khayraadka ah, markaas ayuu miisaan badan samayn lahaa.**

- **Qodobka 9(1):** Caasimaddu waa Mugdisho, waxaan iyadana u rari lahaa, maaddaama maqaamkeedii iyo ka hadalkeediiba la geeyey Cutubka 5aad, kaasna waxaad mooddaa inuu meel dhexe isaguna taagan yahay, halkaas ayaan u rari lahaa.

- **Qodobka 3(5):** Waxaa looga hadlay haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhamaan hay'adaha guud ee qaranka si wax ku ool ah jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo dhammaantood. Waxaa laga soo shaqaynayey muddo haweenku inay helaan kooto u qoran oo Baarlamaanka ugu jirta si ay xuquuqdooda ka qaybgal siyaasadeed, arrimo bulsho iyo mid shacabba u helaan. Markaa waxaan rabnaa Baarlamaanka 11aad ragga ku jira in ay gabdhaha kaga tagaan taariikh ayna qaadaan in la helo kootadaas. Sababta aan u leeyahay waxa weeye, haweenka Soomaaliyeed intii aynu burbursanayn waxay soo mareen ama taariikhda ay Soomaaliya ka dhigeen waad ogtihiin, cidina idiin sheegi mayso. Marka laga yimaado "Biological" iyo inaan nahay lab iyo dheddig shacabwaynaha Soomaaliyeed ka koobanyahay, waxaana leennahay xuquuq aan ku matalno ummadda Soomaaliyeed ugu shaqayno maskaxdayada iyo maalkayagaba. Waxaan u baahannahay in labadaa jinsi ee aan ka koobannahay ay wax isku mid ah uga helaan ka qaybgalka siyaasadda, bulshada iyo meelwalba taas ayaan ku xoojinaynaa.

  Haweenka waxay yihiin la idiin sheegi maayo oo lab iyo dhedig ayaan kala nahay. Laakiin waxaan ka rabnaa ragga jooga baarlamaankan in ay arrintaas qaadaan. Waxaana adkaynayaa, haddii Aadan laga abuuri lahaa wax kale, waxay kala ahaan lahaayeen wax kale duwan, laakiin waxa Aaden feedhiisa haweenka looga abuuray in aynaan kala qaloon oo ragga iyo dumarku noqdaan abuuritaanka halkaas ummadaa ilaahay meeshii laga abuuri lahaa. Markaa inaan isku diidno wax ama isjiid jiidno inaan isku oggolaan wayno 30% haween ah idin soo dhex fariistaan.

  Raga iyo dumarku way kala fikir duwanyihiin, way kala aragti duwanyihiin. Waxaa laga yabaa raggu inay ka fikiraan meel kore ama waxyaalo aad u sareeya. laakiin haweenku ay ka fikiraan ama maskaxdooda ku jirta nolosha dhabta ah oo shacabka Soomaaliyeed u baahanyihiin. Waxaan qabaa wax Soomaaliya ay la cago dhigan la'dahay, u dagi la'dahay meeshii la hiigsanayey u gaadhi la'dahay waa ka maqhnaashaha siyaasadda iyo go'aammada ee haweenka Soomaaliyeed. Waxaan soojeedinaynaa cod adag ,waxaan ku soo jeedinaynaa cod aan ka noqosho lahayn in haweenku ay helaan 30%kooda, haddii haweenka maanta ragga Soomaaliyeed oo halkaa fadhiya ee labada aqal ay fududayn waayaan arrintaas, waxaan hoosta ka xariiqayaa 68 gabdhood in ay Baarlamaanka u soo fadhiisan doonin in ay wax danbe ka sii ansixiyaan Dastuurka, arrintaas ayaan adkaynayaa oo haweennimo ah.

  Waxaan rajaynayaa in arrintasi noqoto wax aynu wada qaadanno si "consensus" ah oo isla oggol ah, isku wada raacno, yaysan noqon mindi mindi ku tag. Wax ay idin yeelaysana ma leh, waxay idin taraysaa qurux, fikir wadaag oo aad 40kii haweenka aad heshaan taasna maaha Baarlamaanka kaliya, laakiin qaybaha dhammaan "public" ama "private" ha ahaato in haweenku ka helaan 30% natiijo. Dowladda wanaag bay sababaysaa sidaan annagu aaminsannahay, waan idin soo dhawaynayaa, waxaan jecelnahay in arrintaas ay noqoto mid aan wada qaadanno.

2) **Xil. Mohamed Abdi Mohamed:**
Gudoomiye waad mahadsantahay, xildhibaanada sharafta leh dhamaan waxaan idinku salmaayaa salaanta islaamka asalaamu caylkuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Maanta waxaan u joognaa sidii oo aan ka hadlnay maalmooyinkan, waa maalintii sadexaad oo aan ka hadlayno dib u-eegistii dastuurka. Guddoonka labada guddi ee ka soo shaqeeyey Dastruuka marka u horaysa waan u mahadcelinayaa. Marka labaadna waxaan u sheegayaa maddaama qodobbada aan ka hadlayno ay ahaayeen kaliya Cutubka 1aad oo ka kooban 9 qodob.

Waxaan sii xoojinayaa in ay ogaadaan xidhibaannada intooda badan waxyaalihii ay ka hadleen in ay "note" garaystaan oo ahmiyad gooni ah siiyaan, si ay ugu soo daraan tusaalooyinkoodii danbe.

- **Qodobka 1(1):** oo ah Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaali ah, oo Muslim ah, lehna gobannimo, ku saleysan caddaalad iyo sarraynta sharciga. Qodobkaas xildhibaanno iga horreeyey intooda badan waxay ku soo dareen **"sunni ah"** wali wax kale oo aan sii qabaa in lagu daro **"mad habka Shaaficiga".**

- **Qodobka 2(1):** Oo ka hadlaya diinta dowladda oo u qoran, Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sida xildhibaano iga horreeyey ay horay uga hadleen waxaan rabaa inaan ku daro, Islaamku sidiisaba waa diinta dalka iyo dadka waa **in lagu soo daraa "dadka"** sababtoo ah si ay dul-duleelo yaryar ay inoo soo gaadhin. Tusaale ahaan dalka kaliya haddii lagu soo koobo waxay noqon kartaa dalku diin cilmaaniya ayuu qaadan karaa, laakiin waa in lagu soo daraa dalka iyo dadka intaba.

- **Qodobka 2(3):** Waxaa ku qoran, waxaa reebban cayda diinta Islaamka, karaahiyaddeeda iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta Islaamka. Qofkasta oo u gafa diinta Islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda. Waxaan soo jeedinayaa talo ahaan in ay ku soo qoraan **waxaa lala tiigsanayaa xeerka shareecada islaamka**, waxaa laga hadlayaa waa diin.

- **Qodobka 3(2):** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Islaam ah, kana mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka, waxay ku soo beddeleen Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Muslim ah oo ka mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka. Madaama Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Waxaan qabaa in qodobkaa sidiisii hore ee Asalka Dastuurka loo daayo oo ah "**Dal islaam**" ah muslimku waa dadka ku dhex nool.

- **Qodobka 3(5):** Marka ugu horreysa horta waxaan rabaa haweenkeenna Soomaaliyeed cid wax u diiddan ma jirto. Cid walba oo danaynaysa, waxaan rabaa maddaama uu dastuurkeennu qeexayo dhanka doorashooyinka in ay u simanyihiin rag iyo dumar intaba, ma jirto markaa sabab loogu qoro dastuurka kooto gooniya cid gaarana loogu qoro. Haddii ay noqoto kooto gaar in loogu qoro dumarka waxay ka horimanaaysaa sinnaantii uu qeexayey dastuurkeennu oo ahayd in ragga iyo dumarku dhammaantood ay u wada simanyihiin dhanka doorashooyinka , marka loo laabto. Markaa sidaas darted, cidwalba oo diyaar u ah dumarkeennii, hooyooyinkeennii iyo gabdhaheennii

Soomaaliyeed ay dhaheen waxaan nahay 60% bulshada dhexdeed. Sidaa darted, waxaan soo jeedinayaa in ay tartamaan wax alla wixii ay helaan ay meesha kala soo laabtaan.

- **Qodobka 5(1):** Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Af-Soomaaliga (Maay iyo Maxaatiri), af Carabigana waa luqadda labaad. **Halkan waxaa** Guddigu ku soo qortay Af Soomaaligu (Maay iyo Maxaa tiri). Waxaan soojeedinlahaa in sidiisii hore in loo dhaafo Afafka Rasmiga ah oo aan lagu soo koobin afka kaliya. Guddiga dib-u-eegista Dastruuka waxaan kula dardaarmayaa oo aan farayaa in ay ku soo daraan nuqulka kama danbaysta ah oo ay soo saarayaan in ay ku soo qoraan isaga oo ku qoran af Maay iyo Maxaa tiri labadaba, waana ugu fadhinnaa. Isaga oo aan la soo dhammaystirin waxaan filayaa inaan afti dadwayne iyo ansixintiisuba ayna suurtagalayn.

- **Qodobka 8(1):** kaliya waa sixid u baahan qodobka 8aad, waxay ku soo koobeen Soomaliya anigu waxaan qabaa in sidiisii hore lagu dhaafo Jamhuuriyada Federaalka **Soomaaliyeed** sidaas ayaan soo jeedin lahaa.

- **Qodobka 8(4):** oo gabi ahaanba way ka saareen guddigu oo ahayd diidmada, laalista iyo ka-qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed, markaa sidaas darteed way ka saareen, Waxaan soojeedinlahaa in ay ku soo daraan sababtoo ah waxay wax u dhimaysaa xuriyaddii, gobannimadii iyo muwaadinnimadii qofka Soomaaliiyeed ee uu lahaa ay wax u dhimaysaa. Sidaas darted, waxaan soojeedinayaa in qodobkaas sidiisii ay ku daayaan oo ay ku soo daraan.

- **Qodobka 9(1):** Magaalomadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Mugdisho, Kolay waxaan filayaa in loo raray qaybaha danbe. Kaliya guddiga waxaan rabaa inaan u soojeediyo maqaamka magaalomadaxda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa Mugdisho in ay ku soo daraan iyo halkii kale ee loogu talo galay ama halkii kale ee la isku afgarto oo la isku fahmo, sababta oo ah waxaan ognahay dhowr dowladood oo markii hore caasimaddoodu meel ahayd kadibna loo raray meelo kale.

3) **Sen. Leila Ahmed Ismail**

Guddoonka labada Aqal, xildhibaannada Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya labada Aqal, saxaafadda, marti sharafta, hawl-wadeennada, dhammaantiin Asalaamu Caleykum Warraxmatullaahi Wabarakaatuhu. Waxaan rabaa inaan ka hadlo qodobka lagu soo celiyey ee ah Diinta Islaamka. Waxaynu nahay innagu sunni, waxaynu ka siinahay Shaafici. Waxaan ka codsanayaa guddiga in ay intaa ku soo daraan.

- **Qodobka 3(5)**: Waaba xusteene waxay ka mid noqonayaa haya'daha dowladdeed inad intaa yar ku soo calaamadaysaan waan idinka codsanaynaa oo 30% ah. Soomaalidu waxay tidhaahdaa, gabaybaa waxa uu ahaa "mitid faro yar midhihii bataa kama macaashaane ". Dumarku maanta way isku duubanyihiin, meel ay ka gorgotamayaan ma laha. Raggeena Soomaaliyeed ee Baarlamaanka nagula jira waxaan ka codsanaynaa in ay intaas iyaguna codkooda ku kaalmeeyaan hablaha. Waxaan masuul kannahay oo aan matalaynaa hablaha Soomaaliyeed dhammaantood. Guddigu in ay intaas ku soo

darto way xuseen oo sifiican bay u xuseen, laakiin in ay haya'daha dowladda 30% meel walba ay ka ahaadaan Ilaahay idinkiis.

Habluhu way ka daggan yihiin, ka wanaagsan yihiin. Dumarku hay'adaha ay ku badanyihiin waad dareemi kartaan way ka wanaagsantahay meel waliba dumar kaga jiraan xubnaha dowladda. Markaa waxaan leeyahay kuwa la magaacabo iyo kuwa la doorto, dowladaha hoose iyo meel walba in dumarku 1,2 iyo 3 ka ahaadaan 30% ugu yaraan intaas ayaan ku soo celcelinaynaa, gabaygii ahaa **"mitid faro yar midhihii bataa kama macaashaane. "**Kalmadii ahayd dumarku isma doortaana maanta waanu beddelnay.

4) **Xil. Sharif Sh. Ahmed:**

Ugu horrayntii waxaan rabaa inaan salaamo guddoonka labada aqal, xildhibaannada laba gole, Guddiga Dib-u-eegista Dastuurka, Guddiga La-socodka iyo Hirgelinta Dastuurka, ururrada bulshada, saxaafadda, saraakiisha iyo ciidammada amniga.

Sharaf ayey ii tahay inaan maanta idinkala soo qayb galo xidhibaannada ama doodad. Waxaan aammisanahay inaan marayno marxalad muhiim ah oo u baahan in la tilmaamo waxyaabaha keeni kara qarankani inuu horay u sii socdo, geedi socodka dowladnimo uu horay u sii socdo. Waxaan rabaa inaan ku bilowdo inaan ka wada dharagsannahay wixii ka dhacay Addis Ababa kulankii ugu danbeeyey" African Union" oo ah meel martida Africa ka wada qayb galaan si siman oo aan loo fiirin yaad col tihiin iyo yaad heshiis tihiin.

Dowladda Ethiopia dhaqankii ay ku kacday uu ahaa dhaqan ka baxsan diplomaasiyadda, darisnimada iyo sida la rabo hadba Africa in ay u jaanqaaddo, markaa waan canbaaraynaa ficilkaas.

Waxaan rabaa inaan aado arrimaha dastuurka. Dastuurku waa arrin muhiim u ah dowladnimada muddo dheerna waa soo socday. Waxaan taageersannahay ama aniguba aan taageersanahay in la dhammaystiro. Waxaan rabaa warkaasi inuu aad u caddaado, dastuurka in la dhammaystiro. Laakiin hadda marka aad fiiriso ma dhammaystirbaa mise waa beddel?

Dastuurka hadda waxa ku socda waa beddel, beddelka laftigiisa waa la oggolyahay, laakiin waxaa la rabaa wadiiqadiisii in loo maro. Masalan waxaa waxaa laga beddelay 45 qodob, 97 faqradood, waxaa lagu soo kordhiyey 19 qodob iyo 94 qodob oo aan ku jirin asalka dastuurka. Sidaas oo kale waxaa la tiray 3 qodob iyo 26 faqradood oo ku jiray dastuurka asalka. Taasi waxay inoo caddaynee waxaan ka shaqaynayno waa inaan beddelnaa dastuurka. Dastuurka haddii la beddelayo waxa uu u baahanyahay nidaam ka duwan dhammaystir. Waxa uu u baahanyahay la tashi ka ballaaran intaan ayuu u baahanyahay.

Dastuur waa heshiis ummadeed oo keena inuu hano qaado nidaam dadku ay raalli ka wada yihiin. Waxaan wada ognahay maanta dastuurka in tabashooyin badan laga qabo. Waa la soojeediyey hadda, waa socdaan dastuurka ujeeddada loo samaynayana waa inuu keenaa midnimo. Waxaan aammisanahay meelaha qaar inuu keeni karo dhibaatooyin aan laga fikirin oo keeni kara in la sii kala qobqobmo. Annagoo xildhibaanno ah oo nala soo doortay oo deegaanno ka kala imaanay oo ah haya'dda kaliya ee loo dhanyahay ma aamisani inay

saxtahay inaan ka shaqayno waxa keeni kara kala qobqobnaan. Ayadoo lagu xallin karo arrimahaas hab nabadeed iyo wada hadal, maanta waa taariikh oo annagaa joogna qarankan, waa nala soo gaarsiiyey. Waxaa la innaga rabaa inaan ka fikirno maxaan u reebaynaa caruurteenna soo socota iyo kuwa joogaba. Waxaan rabaa inaan u gudbo intaas kaliya maaha. Waxaa ku jira dastuurka in la beddelo qaab dhismeedka dowladdinimo ee dalku leeyahay. Nidaam baarlamaaniya ayaan ku soconnay, waxaan u guuraynaa nidaam "presidential "ah. Lixdan (60) sano wakhti ka badan waxaan ku soo jirnay nidaam baarlamaani ah. Nidaamka baarlamaaniga ah ee aan ku soo soconnay intaas waa hannaanka isku keen hayey ilaa hadda. Qarankan burburkiisu waxa uu billowday maalintii sharciga la laalay, hannaankaasna la laalay ayuu billaabmay. Hadda baarlamaankaan iyo kuwii ka horreeyey wali awood uma helin in ay waajibaadkooda si furan oo xor ah u gutaan. Marwalba waxaa ku dhex jiray farogelinta fulinta. Waxaan ognahay dastuurkaan loobinkiisa iyo hadalkiisa kama imaan baarlamaanka. Waxaana la rabaa inuu ku dhammaado dastuur aan madaxwayne dooranayn, xukuumad ansixinaynin sharciyo sameeya bas. Nidaamka "presidential" ku waxa uu u baahanyahay talo intaa ka balaaran. Haddii la beddelaayo hannaanka dowladdnimo waxay u baahantahay wadahadal intaan ka dheer inaan galno, waxay u baahantahay in gole loo fadhiisto.

Arrinta hadda socota waxa aan hubaa inaan wada fahansannahay inaysan ahayn arrin caafimaad qabta oo ka shaqaynaysa midnimo ummadeed. Waxay ka shaqaynaysaa dano khaas ah, dastuurkana waxa keenay inuu socon waayo waxaa ugu wayn madax ka dhex raadinaysa dano khaas ah. Misaal ayaan idin siinayaa, dastuurkana waad ogtihiin xilligii aan madaxwaynaha ahaa dowladda ku meel gaarka ah waa laga soo shaqeeyey. Hal koomo[hakad] ma codsan in lagu daro kaliya waxaan ka shaqaynayey haya'daha loo xilsaaaray in ay dhammaystiraan. Cidii qaylo qabta inaan la fadhiisanno meeshaan ayaana lagu soo gaaray. Maanta oo aan ognahay bi'akmalihii inuu ka imaanayo haay'ado kale oo ay ahaadaan baarlamaanku inuu "control". Maanta oo dalku xaaladuu ku jiro aan dhihi karno soddonkii sano ee la soo dhaafay lama soo marin. Waxaan wada ognahay Soomaaliya iyadoo dawladda aan lahayn ama dawladdu ku meel gaartahay soo martay lama hawaysan deegaan Soomaaliyeed in la qaato, 'why' maanta loo hawaystay?

Ma masuuliyad ina saaran ayey ahayna inaan wajahno xaaladaha waa wayn ee ay ka mid tahay dalkii oo la qaadanayo? Ma masuuliyad ina saaran ayeyna ahayn inaan wajahno xaaladda amniga ee ka sii daraysa maalinba maalinta ka danbaysa? Ma la socontiin ciidammadii qaranka ee muddada dheer la soo dhisaayey maanta xaaladdoodu meesha ay marayso? Ma la socotiin xaaladda cadowgu meesha ay marayso? Ma la socotiin sanadkan gudihiisa in ay ATMIS ka baxayso? Waxaan maanta isku hayno meeshan anigu waxaan aamisanahay macno wayn ma samaynayaan, waxaa macnaha samaynaya waxa weeye inaan abbaarno "target" ka.

Mudaneyaal iyo marwooyin haddaan caqligeenna furi wayno oo aan abbaari wayno waxa la innaga filayo maanta. Maanta waxaan ka hadlaynaa gabadhaha 30% hala siiyo iyo lama siinaayo, aniga waxay ila tahay aan u soojeesanno waxyaalaha muhiimka ah ee hortabinta u leh qarankan.

"number one" Amni ayaa inoo ah ama "number one" waxaa inoo ah dalka la kala qaadanayo inaan ka hortagno aad waxaan u dhaliilayaa habka amnigu u socdo. Aad waxaan u

dhaliilayaa habka midnimada qaranka loo ilaaliyey. Ma aamisani sida hadda wax ku socdaan inaan meel ku gaari karno, dastuur aan ku ansixino, dowladda aan ku dhisi karno.

In laga guuro nidaamka baarlamaaniga ah oo loo guuro nidaam 'presidential' waan ognahay isqab qabsiga jira ama imaan kara, laakiin xalka kaliya ma waxa uu noqonayaa in la sameeyo madaxwayne iyo madaxwayne ku-xigeen "option" kale ma jiro miyaa?

"Option" kale ayaa jira "option" ka jira waxa weeye, raysalwasaaraha uu madaxwayne soo magacaabo hadday wada shaqayn waayaan ha fasaxo waa "option", wuxuuna xaqiijinayaa dan waynoo ah labada hay'adood madaxtooyada iyo golaha wasiiradu in ay isasaarnayn. Aniga waxay ila tahay mudane iyo marwo, laakiin runta waxaan u baahannahay mas'uuliyad ayaa ina saaran manta. Aniga halkan waxaan u imiday "tabriata tandima" "Tabriatu- dimmah"

Inaan meesha ku mashquulno uma imaanin 30% maa laga dhigaa mise 28% laga dhigaa, gurigan aan ku xirannahay jawi gaar ayaa ka jira bannaankana jawi gaar ah ayaa ka jira. Dadku waxay dareemayaan khatar, waxayna arkaan "example" horay u soo dhacay oo aduunyada kale ka dhacay. Markaas waxay ila tahay baarlamaanka isaga oo sidan oo awooddii leh ayuu shaqayn la'yahay oo fulintii ka dhex bixi la'dahay. Marka la yiraahdo waa laga guuray waxa loo guuray nidaam "presidential" ah, waxaad ogaan doontaan taloba ma yeelan doonaan.

5) **Xil. Mohame Sheikh Noor Osman:**

- Waxaan salaamayaa Guddoonka iyo xildhibaanada sharafta leh, waxaan filayaa dastuurka dhamaystirkiisa inay xildhibaanadu xaq u leeyihiin. Waxaan rabaa inaan toos u abaaro qodobada aan isleeyahay bal wax ku dar ama "chance" kaaga ka qaado, waxaan rabaa inaan toos u galo doodayda.

- **Qodobka1(1)** Arrinta laga hadlay ee ku saabsan "muslim, sunni ah" waxaan ayidayaa xildhibaannadii ka hadlay ee yidhi ha laga dhigo muslim, sunni ah. Arrimaha ku saabsan madaahibta, kollay madaahibta waxay u baahantahay axkaam gooniya ayey u baahantahay, markaa arrintaas mad habaha hoos loo galayo waxay ku fiicantahay maddaama door culumadu ku leeyihiin wax ka beddelka dastuurka iyo hawshiisa in culumada loo dhaafo arrintaas ayada ah.. Maalin walba tadawur baa ku dhaca axkaamta, axkaamtana waxay ubaahantahay in culumida loo dhaafo, laakiin in dalkaan laga ilaaliyo shiicada oo la yiraahdo Soomaaliya waa dal sunni ah, waan soo dhawaynayaa waana arin fiican.

- **Qodobka 2 (2)** Waxay ka soo qaadeen Qodobka 1aad, waxay ku sameeyeen kordhin, waxay kusoo dareen oo ay aad u sharraxeen arrinta xisbiyada badan. Arrinta xisbiyada badan waa biyodhaca dastuurkan waan soodhaweynaynaa in dalka xisbiyadiisa ay bataan waa arrin aad u fiican waaye.
  Qodobka dowladda iyo diinta waxaan qabaa sidii hore oo uu ahaa in loo dhaafo, faahfaahintiisa faqrada 1aad, isla qodobkaas ah in lagu soo daro "dalka, dadka iyo dowlada" talabixintaas waan soo dhawaynayaa aad ayaana u raacsanahay. Waxaan kaloo Guddiga ku amaanayaa f(3) ee ay ka hadleen arrimaha diinta. Waxaan dhihi lahaa

meesha karaahiyaynta in laga baddelo waxyaalaha la karaahiyeysanayo diinta maahine, in laga dhigo "**Naceybka Diinta"**. Lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn shareecada Islaamka "is good" arrin fiican waaye waan soo dhaweynayaa.

- **Qodobka 6 (2)** Astaanta marka laga hadlayo Soomaaliya waa dal Jamhuuriyad ah oo dhisan hadda lama dhisaayo, in Guddigu nagu mashquuliyaan calaamadaha, calanka iyo waxaan u arkaa dib u dhac tahay iyo marin habaabin.

- **Qodobka 7aad:** Oo ay soo kordhiyeen oo ay yirahdeen geyiga, arrinta geyiga waa arrin aad u waanagsan waaye. Dowladaha adduunka waxa ay ku dhismaan labo nooc, Soomaalida waa "Nation" ee ma aha "State", state waa "political "political entity" oo kala dowlad iyo kala luuqad ah. Soomaalidu waa dad isku dal ah oo isku diin ah, isku mad hab ah, isku caqiido ah, waa "Nation" dowladnimada Soomaaliya. Arrinta iyada ahna waan soo dhawaynayaa aad bay ugu bisilyihiin.
- Qodobka dhulka iyo khilaafaadkiisa iyo soohdimaha sababta looga saaray ma garanayo, laakiin waxaan ku talo bixinayaa qodobkaas in meshiisa lagu soo celiyo.

- **Qodobka 8aad:** Shacabka iyo jinsiyadaha "I don't know" sababta guddiga u abuurayaan arrimaha ku sahabsan khilaafaad. Waxaad mooddaa waxyaabo laga midaysanyahay oo Soomaali ku mideysantahay oo khilaafaadba ka taagnayn in Guddigu isku mashquuliyeen. Qodobkaan waxaan qabaa in sidii hore ee uu dastuurka ku qornaa loo daayo oo faraha looga qaado aan muran badan dadka laga gelin jinsiyaddooda. Haddii ay jirto cabsi doorasho waa la kala badnaanayaana waa "issue" kale. Arrintaa ayada ah annaga waxay noo tahay qad "axmar" ah. Jinsiyadda Soomaaliyeed waxaad tiraahdeen waa siiqeyn, anigu siiqeyn uma arkee waxaan u arkaa marin habaabin. Dadka in lamarin habaabiyo sax ilama aha oo jinsiyaddooda lagu dheelana. Haddii ay jiraan faragelin noosheega. Cidda Guddiga faragelinta ku sameynaysa oo madaxa kaga imaatay hannoo sheegaan. Inkasta oo Guddigan uu Madaxweynuhu ku ammaananyahay in Guddigan shaqada ay hayaan aysan safarro Nairobi iyo meelaha inta ay aadaan aysan shaqo soo qaban oo ay dalka joogaan hay'adihii lugta kulahaa ay ka madaxbanaan yihiin, marka cidda idin ku khasbaysa waxyaabaha aasaasiga Soomaalida in aad ku rafataan in aan ogaanno iyaduna way ficnaan lahayd. Waxaan ku talinayaa jinsiyadda, calamada iyo maba'diida in sidooda loo dhaafo oo aan dadka hada "problem" iyo buuq aan lagelin, qofka leh jinsiyadda Soomaaliyeed lagama qaadi karo jinsiyada waa iska marin habaabintii aan sheegaynay uun. Dalkan Soomaali ayaa iska leh, Jamhuuriyadda dhisan ayuu ahaa nooc walba oo ay Soomaali tahay waxaa dowlad u ah dalka Soomaaaliya, marka in aad ku mashquushaan taa wa iska marin habaabin faraha halaga qaado.

  **Qodobka 8(4):** Diidmada, laalista iyo ka qaadista jinsiyadaha, arrintaa waxaad mooddaa in aad faqradaa aad tirteen, waxaa dhici karta sida horay u soo dhacday in qof Soomaali ah la yiraahdo jinsiyadda ayaan kaa qaaday sida dowladda carabaha. Waxaan filayaa arrimaha jinsiyadaha in aad iska dhaaftaan oo aad faraha kala baxdaan.

  **Qodobka 9aad:** Qodobka maqaamka Mudisho oo lagu raftay ayaaa isoo hadhay. Waxaan filayaa Muqdishaawiyiintana waa joogaan annaga reer Muqdisho ayaan ka

midnahay. Magaaladaan Soomaali waa daggantahay in laga dhaafo rafashada faraha badan iyo isku dhiibdhiibka ayaan ku talinayaa.

Waxaan rabaa in aan Guddiga talo ka siiyo arrimaha lama taabtaan ka ah ee Soomaalida ka dhexeeya ee jinsiyada, diinta, dhulka, calanka, luuqada in aysan dadka ku jahwareerin, sababtoo ah dastuurkan isbadelkiisa waa keenay ama in laga shaqeeyo keenayba waa qodobadii aasaasiga ahaa oo ku saabsanaa dowladda aan qaadanayno noocee waaye. Laakiin jinsiyaddeena noocee waaye calankeenna noocee waaye iyo “who we are” dee waxay u ekaanaysaa wax kale ama siyaasad horena waan u sheegay. Meeshaan “Mexico” darbigeeda kama dhisna Soomaalida way isku soconaysaa waa reer guuraa. Cabsi doorasho ha la iska ilaaliyo waa la kala badnaan ha la iska ilaaliyo dadka jinsiyadoodooda yaan lagu dheelin Soomaalinnimada sidaa haloo dhaafo.

6) **Sen. Fartun Abdulkadir Karamo:**

Qof walba mansabka iyo maqaamka u uku fadhiyo ayaan ku salaamay asalaamu caylkuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Salaam ka dib madaama aan dastuurka ka hadlayno, Waxaan rabaa dhowr qodob inaan “comment” gayga ku darsado:

- **Qodobka 1(2)** Soomaaliya waa Jamhuuriyad **“federaal” ah** in meeshaas lagu daro dimoqraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha, loo dhan yahay kuna salaysan nidaam siyaasadeedka xisbiyada badan ee soo dhaweynaya kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo “**xeerarka caalimiga”** ah in lagu daro.

- **Qobodka 3(1):** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur’aanka Kariimka iyo Sunnada Nebi Muxammad (NNKH), wuxuuna ilaaliyaa Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda. Waxaan soojeedinayaa meesha ay ku qorantahay sunnada Nebi Maxammad (NNKH) in lagu eekeeyo “shareecada islaamka” maxaa yeelay shareecada Islaamku afar adillo ayey leedahay, adillada kobaad waa Quraanka Kariim ah, adillada labaad waa Sunnada Nebiga (NNKH), adillada saddexaad waa ijmaac iyo adillada afraad oo ah alqiyaas. Markaa waxaan **soojeedinayaa in Quraanka iyo sunnada aan lagu koobin ee Shareecada Islaamka** la dhaho si ay adillooyiinkii kale ay u soo galaan.

- **Qodobka Jinsiyadan**: waxaan codsanaynaa in qodobka jinsiyada loo qoro qaabkan ama sidii uu ahaa lagu celiyo oo ah” ilmo kasta uu dhalo Aabo ama ay dhasho hooyo wuxuu xaq u leeyahay in uu helo jinsiyad Soomaaliyeed” sidaan wada ognahay ragga Soomaaliyeed marwalba waxay sheegaan ama ay ku marmarsiyoodaan Diinta Islaamka. Waxaan rabaa Diinta Islaamka waan wada barannee meesha ka hadlaysa oo diidaysa in gabadhu ilmaha ay dhasho ay jinsiyaddeeda qaataan in ay noo sheegaan. Adillooyin cad cad ayaan annagu haynaa.Rasuulkeenu (NNKH) waxa uu yidhi “**بعض ”منى، قطعة فاطمه** **الله رسول من قطعة بواسطتها منها،فيكونو قطعة منها اولادها ان ومعلوم العلماء.** Adilladaa rasmiga ayaan haynaa **العلماء بعض** waxay leeyihiin, waxaa meeshaas laga fahmaa in awlaadeeda ay yihiin **قطعة** ka tirsan **الله رسول من قطعة بواسطتها فيكونو رسول فاطمه**.idinka waxaan idinka rabaa ragga dhahaya haddiii Diinta Islaamka ay oggashahay waan oggalnahay, xaddiis sidan oo kale uu diidaya in ay la yimaadaan. Xaddiiska hore idiin soo sheegay saxiixaynka ayuu ku

qoranyahay bukhaari iyo muslim baa wariyey. Waxaa jira xaddiis kale oo tarmiidi uu wariyey uu leeyahay" **"احبهم انى اللهم ابنتى، ابنا و ابناي هاذان".** Meeshaas waxaa ka cad Xasan iyo Xuseen in ay Nebi Maxamed (NNKH) ku abtirsanayeen. Xaddiiskan uu tarmiidi uu wariyey ayaa daliil u ah. Marka walaalayaalow diintan oo markaad rabtiin dhinaca aad rabtiin u raranaysaan naga daaya. Diintii waa indinla barannay, axaadiis cad cad ayaan idiin keennay. Sharciga dastuurka waxaan rabaa in lagu qoro ama **sidii hore lagu celiyo**, oo ah "ilmuhuu Aabo dhalo iyo ilmahay hooyo dhashaba ay helayaan sharciga soomaaliya"

- **Qodobka 3(5): Waxaan rabnaa in loo qoro qodobkan sidan: "**Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer Federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose ugu yaraan 30%", in lagu qoro.

  Dastuurkeennu waxa uu ka hadlayaa sinnaan, sinnaantaana haddaan fasirno idinkuba waxyaalo badan ayaa fasirtaane 50% ayey noqon. In aan u sinnaanno baarlamaanka oo 50% ragu qaataan,50% kale dumar ay qaataan. Waan idiin naxariisannay **قوّامون لرجال النساء على** ayaan fulinnay. Boqolkii soddon (30%) inaad war naga galisaan run ahaantii wax aan filaynay maaha. Marwalba waxaad ku celcelisaan **بيوتكن فى وقرن** guryihiin jooga. Baarlamaanka marka la yimaado, miyey aayaddani shaqayni. Hooyooyinka Soomaaliyeed laamiyada ayey jaadka ku gadaan, subaxdii ayey khudaaar gadid u dheelmadaan, caanihii ayey magaalada ku gadaan. Kuwaas waxaad dhahdaan naag karmeed ilmaheega ayey korsanaysaa naag adag weeyi. Tii baarlamaanka soo gashana waxaad leedihiin guryihiinna jooga . Maalin dhawayd labo dumar ah ayaa intan isku afgaadhay raggii oo dhan waa kaceen waxay dhaheen maba la idin siinaayaba. Run ahaantii wax la idiinka fadhiyo maba ahan ama aan marti idiinka nahay.

  Dastuurka waan wada leennahay. Dastuurku waa heshiis bulsho, waxaan raali ku nahay in intan lagu qoro, waayo hadii kale waxay noqonaysaa 70% bulshada Soomaaliyeed in ay dastuurka raali ka ahayn. Gabadha bannaanka joogta, ta baarlamaanka fadhida iyo meel walba oo ay joogaanba, qaran iyo qurbaba waa laga midaysanyahay.

  Qodobkan waxaan rabaa markaan duljoogo inaan saddex qaybood la hadlo. Qaybta kobaad waa Guddiga. Run ahaantii roobku marka uu socdo daruurta ayaa laga fahmaa. Guddiga markaan fiirinnay dad nala dagaalsan ayey u egyihiin. Laakiin dagaalkoodu iyaguu ku koobnaan in ay ka waantoobaan wax ay ku suganyihiin oo ay buugga ku soo qoraan qodobkaan ayaan Guddiga u jeedinaa. Baarlamaanka waxaan ujeedinaa labadiisa aqal rag badan oo annaga na taabacsan oo naga horreeya way jiraan aad ayaan ugu mahadcelinaynaa.

  Ninkii maanta na taageera iyo ninkii nagu istaagaba gabdhaha Soomaaliyeed waxay leeyihiin beerka ka ogsoonin, kii na taageerana waan ognahay, kii naga soo horjeedana waan la soconaa. Markaa waxaan leeyahay ragga Soomaaliyeed ee baarlamaanka ku jirow wax yaalo badan baad in la idiinkala shaqeeyo aad rabi doontaan. Tan nagala shaqeeya. Qof walba maalintiisu canjarkiisu qaawanyahee. Maanta ayaan idiin

baahannee inta ina taageersan waa ku mahadsanyihiin, inta kalena waxaan rajaynaa in ay na taageeraan oo ay qodobkan nala ansixiyaan.

Qodobka ugu danbeeya waxaan kula hadlayaa gabdhaha baarlamaanka ku jira, "term "kii hore dadkii joogay ayaan ka mid ahaa. Sharciga doorashada markii laga shaqaynayey waxaa dhacday markii ugu danbaysay in gabadhihii la kala shukaansaday, wasiir hebel ayaa isoo wacay. Madaxwayne hebel ayaa isoo wacay in la kala dhuunto, qaarkoodna imaan waayeen fadhigii, qaarkoodna ay aamusaan. Gabdhaha Soomaaliyeed tii sharciga nala difaaciwayda magaceeda iyo sawirkeeda waan dhajinaynaa albaabka ugu horreeya ayaan ku dhajinaynaa, gabdhahana way nooga soocnaan doontaa, tan danteena waaye. Nimanka qaarkood garasho ayey leeyihiin qaarna iska celin bay rabaan, waxaan soojeedinayaa ku iska celinta raba inaan iska celino, kuwa garabkeena taagana aad iyo aad bay u mahadsanyihiin.

7) **Xil. Abdirisak Hagi Abdi:**
Wixii aan ka hadli lahaynba Madaxweyne Sheik Shariif ayaa wuxuu nagaliyay "tabliiqin" ayuu nagu sameeyay. Waxaan is dhahnay dastuurka dhan ma iska dhaaftaan. Guddoonka sharafta leh, mudane guddoomiye, xildhibaannada sharafta leh, shacabka Soomaaliyeed ee warbaahinta nagala socda "Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu". Mudane Gudoomiye, xildhibaannada sharafta leh waxaan rabaa marka hore in aan ka hadlo:

- **Qodobka 5 (1)** Ee ka hadlaya Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya in uu yahay Afka Maay iyo Maxaa tiri, waxaan rabay in aan Guddiga u soojeediyo in ay ku soo kordhiyaan farqo cusub oo waajib kadhigaysa in hoggaanka dalka u sareeya sida Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka haddiiba aan yeelanno, Raysalwasaaraha iyo Guddoomiyaha Baarlamaankaba in ay ku hadli karaan Afka Maayga, qorikaraanna. Sababtoo ah waa in fariintoodu si isku mid ah u gaari karto. hooyada joogta Degmada Ufurow iyo hooyada joogta Degmada Aadan Yabaal. Sidoo kale mudane Gudoomiye, xildhibaanada sharafta leh Sida aad ogtihiin, Afka Maayga qoraalkiisa waa la dhameeya "alphabetical" kiisa waa qoranyahay, qof walba way u fududdahay in uu barto. Siyaasiyiinta hoggaanka dalkan damaca ka leh waxaan kula talin lahaa in ay bartaan Afka Maayga, sababtoo ah sida lasheegay, waxaa la yidhi geeddi baa loo socdaa oo dalkaan waxaa la aadayaa doorasho qof iyo cod ah, ogow dhowr malyan oo muwaadinyiin oo Soomaali ah ayaa ku hadla Afka Maayga. Qofkasta oo ku hadla Afka Maayga waa kaga jaanis badan yahay qofka kale. Waxaan rabaa in ay dadka fursaddaas ka faa'iidaystaan oo ay bartaan Afka Maayga.

- **Qodobka 3 (3)** Ee ka hadlaya Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo u qoran sida tan, "Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisantahay mabaad'iida aasaasiga nidaamka awood qeybsiga" Federaalka waan fahmi waayay. Waxaan jeclaan lahaa Guddoomiye Iidow in aad dhageysatid, Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisantahay mabadi'da aasaasiga nidaamka awood qeybsiga. Federaalka waan fahmi waayay ma waxaa loola jeedaa qoloba qolada ay ka "state" badan tahay ama federaal badan tahay way ka saami badan tahay. Waxaan soojeedin lahaa in lagu bedelo, in lagu qoro awood qeybsiga dalka ay beelaha Soomaaliyeed qeybsadaan "because "

iyaga ayaa dalka iska leh iyagaana "sovereignty" misa gobannimada iska leh, sababtoo ah "state" yada iyo federaalka waa lakala badanyahay, laakiin waxaa ka fiican in awood qeybsiga dalka loo celiyo beelaha Soomaaliyeed.

- **Qodobka 6 (3)** Oo ka hadlaysa calanka iyo astaanta: astaanta qaranka shalayna xildhibaan Mohamed Haarun ayaa ka hadlay. Waxaa kaloo wax ka taabtay xildhibaan Abdirahmaan Odowaa. Waxaan rabaa in aan wax ku darsado. Dunidaan aan joogno marka aad fiiriso Afrika gaar ahaan Bariga Afrika ee qaybta ka nahay astaamahooda qaranka waxaa ku jira duco iyo alle bari ayaa ku jira. Haddii aan tusaale ahaan u soo qaato saddex dal oo ka mid ah Bariga AfriKa ah. Tanzania iyada "munban africanizim" waaye waxayba ku bilaabataa astaantooda qaranka Africa ayaa loo ducaynayaa, hoggaankeedaa loo ducaynayaa , dadkeedaa loo ducaynayaa waxay dhahaan " mungu ye bariki Afrika yunguziwake nawatiwake". Waxay la micno tahay Allahayow Afrika hoggaankeeda iyo dadkeeda barakee, ayay ku billaabataa, sidoo kale dalka aan dariska nahay ee Kenya astaantiisa waxay ku billaabataa "emungu angufu kuba ebariki Kenya nawariwake" Allaha awoodda badnaayow Kenya dadkeedaba iyo dalkeedaba barakee ayay ku bilaabataa. Uganda sidoo kale iyadana waxaa waaye " Oh God uphold Uganda" ilaahayow Uganda xifdi weeyaan. Annaga astaanteenna qaranka waxay tilmaamaysaa waxaa la yiri, waxaa waaye waa heesta "qoloba calankeedu" waa hees tilmaamaysa calanka iyo midabkiisa. Waxaan fahmi waayay 64 sano kadib annaga maa wareersan oo calankii garan la' iyo qolada aan calanka u tilmaamayno ayaan garan waayay. Mudane Guddoomiye, xildhibaanada sharafta leh maxaa inoo diidaya anagoo ah dal Islaam ah in aan astaanta qarankeenna ka dhiganno duco iyo Alle bari oo aan dalka u ducayno, oo aan dadka uducayno oo aan Allah SWT waydiisanno dalkaan quruxbadan ee xeebta dheer leh in uu ilaahay cadawga nooga ilaaliyo, waxa diidi kara malaha. Waxaaan Guddiga u soojeedinlahaa in ay fursaddaas ka faa'iidaystaan iyagoo la kaashanaayo culuma awdiinka Soomaaliyeed iyo bahda fanka in ay arrintaan kaga faa'iidaysataan ayaan soojeedinlahaa . Gabagabadii mudane Gudoomiye, xildhibaanada sharafta leh dastuurka furitaankiisa waxay muhiim u tahay in wax badan oo dastuurka ka khaldanaa mise innaga dhinnaa lagu daro. Waxaan siyaasiyiinta Soomaaliyeed ee walaaca iyo walbahaarka ka qaba in wax-kabedelka dastuurka ay caqabad ku noqoto arrimaha hortabinta u leh dalka in ay qalbiga u furaan oo aysan sharaysanin oo aan qodob qodob u dul istaagno si aan wixii dalkaan wax u taraaya iyo wixii wax ka dhimaayaba aan ka reebno si ay Soomaaliya u hesho dastuurka ugu fiican ee dal mise bulsho uu yeelan lahaa.

8) **Sen. Zamzam Abdullah Ahmed:**
Guddoonka labada aqal xildhibaanada laba aqal howlwadeennada, martida sharfta, Guddiga Madaxabannaan iyo kan la-socodka dastuurka salama calaykum. Waxaan rabaa dhowr qodob oo ku wajahan doodda maalmahan socotay in aan soojeediyo

- **Qodobka 2 (1)** Ee ka hadlaysa islaamka waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan laqabaa xildhibaannadii hore **in lagu daro "Dalka iyo Dadka"**

- **Qodobka 3 (1)** Waxay u qoran tahay, "Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka kariimkla iyo Sunnaha Nebiga (Sallallahu Callayhi Wasallam) wuxuuna ilaalinayaa Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda".

Waxaa su'aal mudan Shareecada iyo dastuurka yaa horreeya? Shareecadaa horraysa, dastuurka ma ilaalinayo shareecadee, shareecada waxay ilalinaysaa dastuurka meshaa waxaa kajira "tanaaqud" ama iska horimaad waxaan soojeedinlahaa **in halkaas lagu beddelo in uu khilaafin shareecada islaamka iyo maqaasideeda**. Walaashey sentor fartuun ayaa waxay sheegtay in ay Guddiga dagaal nagula jiraan, waxaana caddeyn u ah marka laga hadlaayay xaquuqda haweenka waxay ku soo dareen qodobka ka hadlaya mabaadii'da aasaasiga ah. Mabaadii'da aasaasiga ah waxay ka hadashaa wixii xalaal ah, wixii xaraam ah qur'aanka kariimka, sunnada maqaasiddeeda, shareecada, laakiin haween xuquuqdooda cutubka 2aad ayaa wax ka hadlayaa xuquuqaadka, waxyaabaha xuquuqaadka ku saabsan waxa ay ku jiraan Cutubka Labaad sida xaqa ilaalinta xogta, xaqa racfaan ka qaadashada, xuquuda haweenka halkaas qodob ka mid qodobada xaqa ka hadlaya, maxaa loogu dari waayey?. sababta mabaadii'da loogu soo raray in aan wax la noo oggolayn markaaas aayay cadahay.

- **Qodobka 3(5)** waxaan aad u adkaynayaa gabdhihii halkaan soo istaagay iyo raggii ku taageerayba in qodobka ka hadlaayo xuquuda dumarka sidii ay u codsadeen oo aan ugu gudbinay Guddiga in ay **noogu soo qoraan 30% ay ku caddaato meesha xuquuqda** looga hadlaayana lageeyo.

- **Qodobka 4 (3)** Waxay ka hadlaysaa xeer kasta, go'aan kasta ama talaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heer kasta ee hay'adaha dowlada kana soo horjeeda dastuurka wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burinaya oo awood u leh Maxkamada Dastuuriga ah. Waxaan ognahay mudanayaal iyo marwooyin xeerarka marka naloo keenaayo ugu danbeynta sharciyada ama xeerarka naloo keenaayo waxaa ku yaalla xeerkaan wuxuu baabii'nayaa xeer kasta oo ka soo horjeeda, markaa waxaan halkan ku xoojinlahaa qodobkaas aad ayuu u fiican yahay. Waxaan ku xoojin lahaa in lagu daro xeerarkaa lawada baabi'inaayo la soo qaydo oo aan laga dhigin mid "mudhlaq" ah oo la dhaho xeer walba oo isaga lamid ah ayuu baabi'inayaa, Laakiin xeer walba ayuu baabi'inayaa haddii la dhaho xeerar badan iska soo horjeeda ayaa wada baaba'aya ayaa halkaas ka soo bixi doona. Qodobkan wuu fiicanyahay halkaas ayaan rabay in aan ku biiriyo.

- **Qodobka 7** Ee ka hadlaya xudduudaha, sida aan ognahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa ka maqan dhul nooga maqan "Ethiopia" iyo "Kenya": Soomaali galbeed iyo NFD. Xudduudahaan dastuurka lagu soo qoray aad uma cadda waxaan soojeedinlahaa in xukuumadda iyo hay'adeheeda fulinta ay keenaan soojeedin baarlamaanka la horkeeno xudduudahana caddaynayso si aan u ogaanno **xudduudaheenna oo cadna aan dastuurka ugu qoranno**.

- **Qodobka 8 (4)** Ee ah diidmada, laalista iyo ka qaadista waa latirtiray. Faqraddaas waxaan soojeedinlahaa in dib loo soo celiyo xildhibaanno badan oo halkan ka hadlayna aad aayay uga hadleen.

Ugu danbeyn haddii aan ku soo gabagabeeyo xaqa ay leedahay hooyada Soomaaliyeed iyo ilmaha ay dhashay oo ah in la siiyo jinsiyadda Soomaaliyeed oo aad loo soo celceliyay lagana tiray faqraddaasi. Waxaan aad u xoojinayaa in dib loogu sooceliyo faqradaasi,

sababtoo ah sida xaq u leeyahay aabbahu ayay hooyadana xaq u leedahay ilmaha ay dhashayna xaq u leeyahay. Waxaa naga maqan dad badan oo Soomaali ah, gabdho badan oo Soomaali ah oo guursaday rag kale oo aan xaquuq ku haysanin. Adduunka meel lagaga fekero ma joogno ilmahaan ma muslimbaa ma gaalbaa jinsiyadaan ma qadanayaa , ma qaadanayo meel lagaga fekero ma joogno. Dadka inta badan waxay ka wada yimadeen qurbaha. Tusaale, aniga Waddanka Ingiriiska ayaan ilmo ku dhalay, la iima fiirin way xijaabantahay ,way madowdahay, muslim waaye. Ilmahayga sharciga si toos ah ayaa loo siiyay. Waddankaygii aan u dhashay haddii ay ilmahayga u diidaan xaq, waxaan u malaynayaa qarnigaan aan ku jirno arrintaas in aynan ka soconaynin. Waxaan marka soojeedinlahaa oo aan aad u **adkaynayaa in Qodobkaa 8aad sidisii loo soo celiyo** oo ka hadlaya ilmaha hooyada Soomaaliyeed dhasho in uu helo jinsiyad Soomaali ah.

9) **Xil. Abdirahman Abdishakuur Warsame.**

Mudane Guddoomiye, xildhibannada sharfta leh, waan idin salaamay. Salaanta islaamka Asalaamu Calkum. Madaxweyne Sheik Shariif waa laga diiday baarlamaanka bannaankiisa yaan laga hadlin, baarlamaanka gudihiisa halaga hadlo ayaa layiri. Laakiin Mudane Guddoomiye, waxaan dhihi lahaa dastuurka waxa uu ka kooban yahay “letter and spirit” wax qoran iyo ruux waaye dastuurku. Dastuurka haddii la yiraahdo waxa qoran kaliya halaga hadlo oo ruuxda dastuurka yaan laga hadlin waa dhibaato. Wax kasta oo qoranna waxay leeyihiin ruux ama “spirit” ayay leeyihiin. Marka dastuurku xarfi ma aha macnihi wax jaamud ah oo qallalanoo laga hadlaayo ma aha, waxa uu xanbaarsan yahay madmuumkiisa iyo macnihiisa in laga hadlo waa Khasab. Anigu maqabo in loo diido dadku inay ka hadlaan ruuxda dastuurka. Haddii aan u gudbo :

- **Qodobka 1aad**: Waxa aan la yaabay waxa aytahay in dastuurku kulligiis siyaasadeysan yahay oo qaab siyaasadaysan loo soo sameeyay. Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaal ah, leh gobannimo dimuqraadi ah ku dhisan matalaadda dadweynaha loo dhanyahay, oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan. Axsaabta badan waa la tiray meesha lageeyayna nalooma sheegin, oo maxaaa loo tiray? Nidaamka xisbiyada maxaa loo tiray, Anigaa idiin sheegaya waxa loo tiray meeshan kuma qorna qodobkasta sababta loo tiray waa la sheegayaa, laakiin intan sababta loo tiray lama sheegin. Waxa aan loo sheegin waxaa waaye, mataqaannaa dalka ayaa labo xisbi loo rabaa qodobkaan ayayna khilaafsan tahay. Waxaan ka codsanayaa Guddiga kor joogtaynta iyo midka dastuurka ah ee Burhaan, ku soo celiyo nidaamka xisbiyada badan meeshaan. Nidaamka xisbiyada badan waa labo xisbi iyo wixii ka badan. Labo xisbi ma ahan, labada xisbi “Dual party “ayaa la yiraahdaa lakiin “multiparty” maxaa waaye xisbiyada badan waaye. Qodobkaas soo celiya meesha waa ka xadeen sababtaa u xadeenna waan fahansannahay. Waxaa rabtiin in aad na dhahdiin Qodobka 4aad ayay ku jirtaa oo dalka labo xisbi ayaa loo soo wadaa. Dalkaan dal labo xisbi lagu maamuli karo ma aha, hala soo celiyo nidaamka xisbiyad badan. Meeshaan ayaa laga tiray sabata loo tiray in la ii sheego ayaan rabaa. Guddoomiye ha i “abuse” gareynin madaxweynihi hore ayaa “abuse” garaysay. meeshan sababta looga tiray ayaan waydiiyey, qodobkasta oo la tiro sababta loo tiray waa la caddaynayay meshaan kuma cado cado sababta loo tiray. “Question” ka aan waydiinayo kaas waaye ee guddoomiye ii kaadi, ajandahaaga siyaasadeed waad namarsataye.

Midka labaad waxaan rabaa in lagu soo daro qodob kale, anigoo taas dabo socda in lagu soodaro qodob kale oo dhahaya "xisbiyada kan dowlada heysta iyo midka mucaaradka intaba waxay qeyb ka yihiin nolasha siyaasadeed iyo hannaanka dimuqraadiga ah". Kaas in lagu soo daro ayaan rabaa. Dastuurki 1960kii ayay ku jirtay qodobkaas sababta looga soo qaadan waayay ma garanayo. Waxaan kaloon rabaa in aan ka hadlo oo aan akido xildhibaan Mahad Cawad iyo xildhibaano badan qodob ay ka hadleen oo ahaa "Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya", Soomaliya halaga dhaafo Soomaaliyeed halaga dhigo saas ayaa sax ah meel walba oo Soomaliya ah waxaan taageersanahay in lagu beddelo Soomaaliyeed.

- **Qodobka 7:** Ee dhulka jamhuuriyadda waxa uu u qornaa dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee khilaafsan soohdimaha caalamiga ah ee khilaafka soohdimaha caalamiga ah ka dhasha in xalintooda loo maro tub nabadeed iyo iskaashi waafaqsan qawaaninta dalka u dagsan iyo kuwa caalamiga ah, **waa latiray waa in lasoo celiyaa** dastuurkaan ayay ku taallaa tiritaanka sax ma aha.

- **Qodobka 9aad:** Waxaan rabaa in aan u gudbo maqaamka waxay ahayd in uu "chapter" ka koowaad ku jiro waxaa la geeyay "chapter" ka 5aad, maxaa loo geeyay? Nalooma sheegin sababta loo geeyey maqaamka caasimada, saxiibkay Abdirahmaan Odowaa maalin dhaweyd wuxuu yiri waxaa lasoo hormariyay "Apetitezer" kii, madaxweyne, madaxweyne ku-xigeen, laba xisbi iyo dalkaan halka doorasho uu yeelan lahaa maa "apetitzer" ah? Maqaamka caasimadda waxa gadaal loo geeyay waxaa la ogyahay in aan dan laga lahayn dadka caasimadda. Waxaa la rabaa in guddoomiyaha gobolka in "text message" lagu maamulo. Waxaa la rabaa guddoomiyaha gobolka inuu ka shaqeeyo danta xukuummada iyo madaxtooyada sida uu hadda uga shaqeeyaba. Meelkasta uu taaganyahay dastuur hala ansixiyo ayuu leeyahay, dastuur miyaa loo diray isaga waxaa loo diray dadka deegaankaan ayaa loo diray. Maddaama sidaas la rabo qodobkii waa nalaga qaaday waxaa la geeyay meesha 5aad ayaa lageeyay. Halla soo celiyo, Qodobka 1aad [Cutubka 1aad] halagu soo daro. Ajandaha caasimadda iyo maqaamkeeda, dadka deegaanka muqdisho ku nool matalaad la'aan ma noqon karaan. Waxa ugu yar ayaa loo samayn waayay oo ah in Gudoomiyaal degmooyinka loo sameeyo "city council", waa la samayn waayay waxa dhan "mobile text" ayaa lagu maamulaa iyo "WhatsApp". hadaGuddoomiyaha, guddoomiyayaasha degmooyinka waxa dhan, haddii dadku doorasho lahaan lahaayeen oo ay dad matalo lahaan lahayeen maanta dhibaatada ku dhacday ma dhacdeen. Maalin dhaweyd nin ayaa ladilay magaalada macalin ayuu ahaa. Waan ka xumahay lama soo qaban inkastoo saxiibkay xildhibaan Khaliifna si dowladnimada iyo dastuurka ka baxsan uu u hadlay oo uu yiri hala soo dilo arrintaasna waxan rabaa xildhibaanka in uu "apologize" ka bixiyo. Gudoomiyaha gobolka wuxuu yiri waxaan kafaalo qaadayaa ninka la dilay ilmihiisa. Kafaalo qaad miyaan u dirsannay mise waxaan u dirsannay sharcigii iyo kala danbeyntii magaaladaan. Saas maxaa yeelayo mataqaannaa? lama doorto cid la xisabtamayso malaha. Sidaa darted, anigu **waxan qabaa qodobka maqaamka in la soo celiyo** oo" chapter" ka koowaad lagu soo daro oo aan nalaga gadanin oo aan gadaal loo riixin.

**Qodobka 3(5):** Waxaan ku soo gabogabaynayaa qodobka gabdhaha. Gabdhaha waan taageersanahay in boqolkiiba soddon (30%) la siiyo, laakiin qish ayaan idinsiinayaa.

Habraaca Qodobkiisa 5aad waxaa ku jira lix dalool dalool kamid ah hadday baarlamaanka haday keenaan qodob dastuurka lagu daraayo waa lagu darayaa. Idinka laftiina hadda ayaa la idin tijaabinayaa in aad gabdho isku duuban oo wax dhacsan kara aad tihiin. Waxaan u malaynayaa xildhibaannada aad ubaahantihiin waa 40 haddii ay idinka yaraato annaga ayaa idin taakulaynaayo, laakiin gabdhaha baarlamaanka ku jira oo dhan mooshinkaas soo qorta waa la idinkugu darayaa.

Waxaan ku raacsanahay madaxweynihii hore oo aan canbaaraynayaa waxa kadhacay Addisa Ababa inay xadgudub ku tahay qaranannimada Soomaaliya awalba Addis Ababa waa nagu soo xad gudubtay in la takooro Madaxweynaha iyo wafdigiisa waa arrin khilaafsan acraafta Midowga Yurub [ Afrika]. Adis Ababa, Itoobiya waxay ka dhigatay "seat" meel ay ku abuse gareyso ama ay ku takrifasho Midowga Afrika. Sidaas daradeed, baarlamaanka waa in uu soo saaraa qaraar ah in laga raro xarunta Midowga Africa Addis Ababa. Laakiin waxaa raacsanayaa oo aan uga baxayaa annagana waxaa nalaga rabaa xoogaa baarlamaanka bannaankiisa in aan tagno. Meelkasta waxaan ku soo qoranay Shareecada Islaamka. Aayadda Qur'aan ah oo muhiim ah in aan idiin sheego ayaan rabaa. Nebi Muuse markuu Allah aaday walaalkiis Haruun ayuu reerka uga tagay. Nin waxaa soo baxay Saamiri la yiraado dibi ayuu samaysatay wuxuu yiri isaga hala caabudo. Markuu soo noqday wuxuu ku xanaaqay waalkiis Haaruun, wuxuu yiri maxaad u oggolaatay in ay dadka caabudaan dibiga , Sheik Aadan Qur'aanka sifiican ayuu iiga yaqaannaa, marka garka iyo timaha ayuu ku dhagay wuxuu yiri "قَالَ يَبْنَؤُمَّ لَا تَأْخُذْ بِلِحْيَتِى وَلَا بِرَأْسِىٓ إِنِّى خَشِيتُ أَن تَقُولَ فَرَّقْتَ بَيْنَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ وَلَمْ تَرْقُبْ قَوْلِى" ayuu yiri madaxa ha iga dhufanin, tinta ha iga jiidin "inii khashiitu an taquula faraqta beyna banii israiila " waxaan ka cabsaday in aad idhado reer banii Israa'iil ayaad igu dirtay, marka midinimada reer banii Israii'l inaad iigu timaaddo ayaa iiga muhiimsanayd dibiga ay caaabudaayaaan. Dalkaan waxkasta midnimadiisaa ka muhiimsan. Dastuur aan beddelno mise yaanan beddelin ama aan wax katirno ama yaanan ka tirin, waxkasta oo midnimada dalka wax u dhimaayo, wax kasta ay ka muhiimsanyihiin sidaas daradeed haddii aan rabno cadowga dibad in aan iska celinno oo cadawga gudaha iska celinno waa in aan waxa aan ka shaqeynayno ay kashaqeeyaan midnimada dalka iyo dadka. "Compromise kastana aan u samaynaa midnimada dalka iyo dadka. Sidaa daradeed, waa in ay u muuqataa baarlamaanka iyo dowladda, xukuumadda, maamul goboleedyada, shacabkeenna gudaha iyo dibadda iyo midka Geeska Africa ku dhaqan oo Soomaali ah dad isku duuban iyo wixii isku duubi lahaa in aan ka shaqeyno annaga ayay na eersan dadka wax kalageynayo, yaana laga shaqaynin siyaasadan is babadalaysa . Dastuurkeenna wuxuu "confused " u yahay annaga ayaa ah "nation confused ". Aniga Abdirahmaan Abdishakuur ayaa la i yiraahdaa mar qabiil matallaa mar degaan matalaa oo Galmudug ayaa la iga rabaa oo waxaa la i yiri Hiiran oo aan ka imid katag oo Galmudug tag waa ok "no problem". Galmudug ayaan matalayaa qaranki waan matalayaa, masaalixda siyaasiga waan matalayaa annaga dhan ayaa 10 qof oo isku jirta ah dastuurkana 10 qof isku jirtuu matalayaa. Dastuurka xal kama dhigi karno sababtoo ah maanta waxaan taagannahay, Madaxweyne Farmaajo oo dhexdhexaadinaayo Xasan Sheik iyo Siciid Dani, shalay Xasan Sheik ayaa waxa uu dhaxdhexaadinaayay Farmaajo iyo Dani. Siyaasad sidaa ah ayaan kashaqeynaa ninaan waxuu ku leeyahay war idhaha isku labee xarafkaan maxaa laga beddelay "this is not how politics works "indhah aan kala furno "reaslistic" aan noqonno. Ragga xanaaqsan maanta shalay ayay faraxsanayeen, madaxda dowlad goboleedyada waxan dhahayaa marka aad

xildhibaannada soo xulaysiin hasoo xulannina ku idinka idiin codeeya ee ku aayatiinka dalka ka doodi kara talinkara , oo  dalka masiirkiisa ka hadli kara soo xusha .

10) **Sen. Zamzam Ibrahim Ali:**
Dhamaan waxaan ku salaamayaa qofwalba mansabka uu ku fadhiyo. Waxaan aad iyo aad u ayidayaa Senetor Faruun intii naga guuxaysay dhinac walba kataabatay. War aad ogtihiin ma idin sheegnaa ayay maraysaa baarlamaanka war aad ogtihiin ayaan idinku celcelinaynaa.

- **Qodobka 3 (5)** Waxaan rabnaa in naloogu qoro gudiyoow mala idinka tuugaayo warkan amar waaye sida aytahay uqaata. Haweenka waa in ay kamid noqdaan dhammaan saddexda hay'adood ee laamaha dowladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal, heer dowlad goboleed iyo dowladaha hoose ugu yaraan 30%. Gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isu magacaabo. Waad la yaabaysaan waxaad isleedihiin gabdhaha maxa "pressure" kaan ugu wacan. Idinka ayaan idinka aragnay marka aad na buusaysaan maad 30% iskugu koobaysaan mar aad naleedihiin 30% ayayba noo oggolaayeene goorma ayaa 60% iyo 70% noo oggolaanaysaan. Waxaa Allah mahaddii ah in maanta la idinka baryaynin, sababtoo ah inta uu dastuurka furnayn meelaha ayaan 30% la taagnayn su'aalaha nagu soo noqonaayay waxaa kamid ahaa dastuuriba maahin, waxa aan dastuurka idiinku jirin intee baad u wadiin, maantana waxaad la taagantihiin "why" aad iskugu koobaysaan 30% wax kabadan ayaad heli kartaane. Waxaad rabtaan nagama gadaysaan ragoow raali ahaada. Maanta waa naga go'antahay 30% haddii aan dastuurka lagu soo darin, dastuurku wuxuu noqon doonaa dastuur rag leeyahay oonay hal gabar gacanta utaagin. Haddii aan dastuurku ahayn dastuur ummadeed oo uu noqonaayo dastuur rag leeyahay oo la go' aamiyo meesha aad latagi lahaydeen ayaa larabaa. Gurbaaan waxaa layiri haddii la taago meeshii lagu garaaci lahaa ayaa la rabaa. Dastuur ay gabari ka maqantahay meeshi aad geyn lahaydeen idinkaa la idinka rabaa , guddiyoow warkaas waan idinkaga fadhinnaa. Haddii aad isku "try" gareysaan xildhibaannada intaan le'eg ayuu  rag badan oo nataageeraayanna ay jiraan in aad xaquuqdeenna, naduudsiisaan idinka mayelayno, khaasantan Guddiga dib-ueegista dastuurka, baarlamaanka federaalka annagaa idin soo ansxinnay, annaaga howshaas idiin dirsannay haddii aad rabitaankeenna ku shaqeyn waydaan "document"  malaha gurigiinna yaad la aadi doontaan.

11) **Xil. Abdirashid Mohamed Duale:**
Xildhibaannadda labada gole ee baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Guddiyada labada heer, ururada bulshada rayidka ah iyo dhammaan bahda saxaafadda Asalaamu Calaykum.  Maalmahan waxaa inoo socotay dooddii ku saabsanayd dib u eegista dastuurka oo runtii ah mas`uuliyad aad u wayn oo loo igmaday Baarlamaanka 11aad ee Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Arrinta ku saabsan dib-u -eegista dastuurka runtii waa mas'uuliyad u baahan inaan si adag ugu shaqayno, waa masuuliyada u baahan inaan ku fiirinno indho iyo qalbi furan oo ka  turjumaya dareenka shacabka Soomaliyeed. Waa meesha kaliya ee dadka Soomaaliyeed ka rajeynayaan inay helaan xasilooni siyaasadeed maddaama ay muddo dheer ku soo jireen xasillooni darro siyaasadeed. Waa meesha ay ka quurdaraynayaan in ay ka helaan xasillooni amni, Waa meesha ay ka quurdaraynayaan horumar amni. Mar hadday sidaas tahay, waxaa loo baahanyahay habka aan u shaqeynayno in ay noqoto hab deggan. Waa in aynaan u fiirinin maanta mucaarad baad tahay iyo muxaafad baad tahay. Waxaa loo baahan yahay in aan u fiirinno sida uu

barri inoo saameyn karo , sida maanta innaga oo xildhibaanno ah in uu barri inoo sameyn karo innaga oo ah siyaasiyiin madax bannaan ama shacab, waxaa la rabaa in aan si walba u fiirinno oo aan u rogrogno in aan mar walba muhiimadda kobaad, labaad iyo sadeex siinno midnimadda iyo wada jirka ummadda Soomaliyeed meel kasta oo ay joogto, oo qodobkasta iyo faqrada kasta oo aynu ku darayno dastuurka ama an toosinayno ku samaynayno ama mid cusub oo aan ku soo kordhinayno in ay noqoto mid ka tarjumaysa dareenka shacabka ummadda Soomaliyeed in ay noqoto mid ilaalinaysa midninamada umadda Soomaliyeed. Intaa marka aan ka gudbo dib oo aan u soo gubbo qodobada dib -u- eegista dastuurka cutubka ugu horreeya.

- **Qodobka 1aad** Oo ah Baaqa Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo lagu beddelay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya awalna ahaa Soomaaliyeed, waxaan arkaa labadaas micno ahaan Af-Soomaaliga iyo markii loo fiiriyo luuqadda sharciga intaba in ay labo micno oo kala wayn ayay leeyihiin. Markii la yiraahdo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxay koobaysaa meel kasta oo Geyiga Soomaaliya ah, laakiin marka aynu niraahno Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa “scope” kooban oo ka hadlaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya inta qaadatay hannaanka federaalka. Sidaa darteed maddaama ay kala mug wayn yihiin waxa ugu wayn qaranka ilaalinayo waa midnimada ummadda Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan dadka Soomaliyeed ee xaduudbeenaadka ka shisheeya magaca Jamhuuriyada Soomaaliya macno wayn ayuu ugu fadhiyaa uu “protect” gareeynayaa wax walbo oo dadka Soomaliyeed ka dhaxeeyay ayuu tilmamaayay, haday geyi ahayd, haddii ay dhaqan ahayd, haddii ay diin ahayd iyo haddii ay af ahayd intaba. Laakiin marka aynu soo koobno oo aan dhahno hannaanka jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya micnihii dhan wuu is beddelayaa wuxuuna noqonayaa inta hannaanka federaalka Soomaaliya uun ka jirta. Xataa waxaa shaki galaya Somaliland. Wuxuu sheegayaa habka ay hadda u qorantahay in Somaliland madaxbannaani gaar ah ay leedahay. Hannaanka federaalka markii la dhaho “state” yada federaalka ee hadda noo qoran kuma jirto, taas lafteeda madaxbannaani ayuu siinayaa habka uu hadda u qoranyahay. Anigu waxaan ku talinayaa **in magacii Jamhurriyadda Federaalka Soomaaliyeed lasoo celiyo ,** maaddaama uu ka micno ballaarantahay uuna ka mug ballaaranyahy oo uu koobayo dhammaan geyiga Soomaaliyeed.

  **Qodobka 2(1):** Qodobka kale ee ka hadlaya diinta, diin aan islaam ahayn laguma faafin karo, waxaan qabaa in lagu daro **“diin aan ahayn diinta islaamka ee sunniga ah laguma faafin karo”** qodobkaas intaas in lagu daro ayaan ku talinayaa.

- **Qodobka 3(7):** Dhulka, Badda iyo Hawada iyo khayraadka dabiiciga waa hanti qaran oo ay leeyihiin shacabka Soomaaliyeed, waxaa ka maqan in lagu daro “webiyada”.

- **Qodobka 4(3)**: Go’aan kasta tallaabo kasta ama maamul goboleed kasta oo ka soo baxda heer walba oo hay’adaha dawladda ah kana soo horjeeda dastuurka wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana fulinteeda awood u leh maxkamadda dastuuriga ah. maxkamadda dastuuriga ah ilaa muddo dheer way maqnayd illaa xilliyadii Dawladdi KMG. In marwalba maxkamadda dastuuriga ay dastuurka ku jirto dastuurka, laakiin lama dhiso. Maxkamadda dastuuriga inta aan la dhisin ka hor waxaa

qabaa in lagu daro **Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa awood u leh**, si meesha ay u marnaanin.

- **Qodobka 6aad**: Ee bidhaaminaya calanka kalarkiisa, dadka Soomaaliyeed "confuse" ayay ka qabaan, waxaa laga yabaa kalarka hadda meesha ku qaran ee bey-cadka ah, qof walba lahjad ahaan iyo luuqad ahaan inuu si u yaqaannaa bey-cadka ah. In la raaciyo sawirka colour-ka ee bey-cadka ah ayadana talo ahaan way ii muuqataa. Heesta calanka in la dhammaystiro ee qoloba calankeedu inaan lagu ekaynin ee bayjajka meelaha ugu ee muhimka ah lagu soo daro, si hadhow aan heeso "rap" ah gadaal looga raacsanin ayadana waan soojeedinayaa.

- **Qodobka 7aad**: Arrinta ka hadlaysa dhulka Jamhuuriyadda federaalka soomaaliya iyo khilaafka soohdimaha caalamiga ah ka dhasha, hadda ayuuba ka jiraa dhulka Soomaaliyeed wax ka dhalan doona ma ahan, marka in uu ka jiro in la yiraahdo qodobkaas meesha in lagu soo celiyo ayaan qabaa, oo la yiraahdo dhulka Soomaaliyeed ee khilaafka soohdimaha ka jiro xalintooda waxa loo maraya si waafaqsan qawaaniinta caalamiga ah waa la tiraye meesha ha lagu soo celiyo ayaan qabaa isagana.

  **Qodobka 7(3)** Arrinta ku saabsan xuduudaha ee dastuurkii 1960-kii tilmaamay xuduudihii hada way bateen sida ay hada u qoranyihiin, "state"-yada dastuuro kale ayay hada sameeysteen in la is waafajiyo sida ay hadda u qoranyihiin, jamhuuriyada federaalka soomaliya marka hadda la qorayay jihooyinka xikmad ayaa ku jirtay oo noo tilmaamay waxay ahayd in "scope" ama meel cayiman aysan jirin. Waqooyi dal hebel baa innaga jira markii la lahaa ama galbeed xikmad baa ku jirtay, xikmadii ahayd inaan meesha laga saarin. "State"-walba dastuur ayuu samasytay wixii halkaa naga jira dal hebel ayaa iska leh buu yiri marka taa lafteeda in la waafajiyo waan qabaa.

- **Qodobka 8aad:** Ku saabsan jinsiyadaha waxaan qabaa qof walba asalkiisu yahay Soomaali jinsiyadiisuna waa in ay noqoto Soomaali, oo laga daayo waxa lagu soo saarayo xeer wax in shaki la galiyo u baahan maaha midnimada iyo wadajirka dadka Soomaaliyeed inaan shaki la galinnin marnaba aan mugdi la galinin.

  **Farqadda (4)** Ku saabsan laalida iyo diidmada jinsiyadda lagumana xiri karo arrin siyaasadeed in booskeeda lagu soo celiyo ayaan qabaa sababta oo ah berito waxaa dhici karta qofka siyaasiga ah ama qofka talada meesha jooga ay is qabtaan in jinsiyada lagala noqdo in qodobka meesha lagu soo celiyo oo aan la laalin baan qabaa wax walba oo aan dastuurka ku darayno waa in aan u fiirino midnimada iyo wadajirka dadka soomaaliya, waxaan bariga afrika iyo "population" raadinayno waa inaan dad helnaa marka dadka soomaalida qayb kamid ah in aan ka sii tagno wax macno oo ay inoo sameynayso majirto

12) **Xil. Abdullahi Farah Mire:**

Innal xamdallilaah—--- Intaan qodobbada dhex galin arar yar ayaan ku billaabanayaa. Midka koowaad, guddoonka inay saxaan waxaa weeyi safkaa danbe oo liisaska maamul, liiska waxaa la rabaa inuu u hufanyahay sida uu u qoran yahayn in uu u dhaco, Laakiin inay siday rabaan u maamushaan sax ma aha. Waa wax khalad ah, in taleefan iyo whatsapp lagu maamulana waa khalad. Korkeenna waxaa ku dhaggan "projector", koley ma

isticmaalno, gadaashaana meeshii lagu dhajin lahaa way samaysantahay. Liiska wuxuu ku fiicanyahay inuu  gadaal ka muuqdo si hufnaanta u saxnaato. Doodda dasturkana si ay u noqoto mid qurux badan oo si sax ah u socota.

Dastuurkan aan ka hadlayno waxaa ugu muhiimsan dib u heshiisiinta siyaasadeed Soomaaliya oo laf dhabar u ah weeyi. Madaxwaynuhu waa kii hal ku dhigiisu ahaa "Soomaali Heshiis ah, Dunidana Heshiis la ah". Hal arrin ayaa "arar" iga ah oo mabda` siyaasadeed ah, oo aan sidaan quraanka u aaminsannahay aan u aaminsannahay, dastuur heshiis lagu yahay ayaa Soomaali heshiis ka dhigi kara. Marka Soomaaliya dastuurka si fiican u qaadato oo ay ku wada hadasho, fursado fiican la siiyo, ugu dambayntii dastuur heshiis lagu yahay ayaa Soomaaliya heshiis ka dhigi kara. Wixii ka soo hara ama Soomali kala dhantaalan ama wax ka dhimmanyihiin ama dhutinaysa ayaa ka dhalan karta. Intaas waxay iga tahay mabda`. Marka aan qodobbada doodu u furantahay aan u imaado waxaan ka billaabayaa.

- **Qodobka 2aad** Oo u qoran 'Islaamku waa diinta dawladda, mabda`aas waa mabda` daastuuri ahoo dasaatiirta caalamul islaam oo dhan saabit ku ah, wuxuuna soo billawday qarnigii 18aad. Dastuurkii u horreeyay ee la qoro ee dawladdii cusmaaniyiinta ayuu ku qornaa, kii tunusiya ee ku xiga ayuu ku qornaa, qodobbada ku xigana asaga ayaa fasiraya. Dawladaha Islaamka dawlad uu qodobkaas ka maqanyahay majiro, wuxuuna ka tarjumayaa dawladdu in ay masuul ka tahay diinta, marka aniga ma arko sabab loo beddelo, waxaa waaye mabda` dastuuri ah oo thaabit ah oo caalamul islaam ka mid ah. Qodobbada ka dambeeyana asaga unbay fasirayaan. In aan sharci la soo saari karin, azharu shariif-na wadiiqo dhan ay ku sharfayso ayay ka soo saartay. Waxaana lamid ah Qodobka 3aad waxaa laga tiray lama soo saari karo sharci aan waafaqsanayn mabaadi`da guud ee shareecada islaamka iyo maqaasiddeeda. Guddigu waxay yiraahdeen mabaadi`da guud way badan tahay sidaas darteed maqaasidda kaliya ayaan ku koobaynaa. Mabaadii`da guud wax badan oo aan xaddidnayn ma aha. Azharu Shariif ayaa wadiiqad ka soo saartay, waxayna ku sharraxday in ay yihiin mabaadi` ay wadiiqadu isku waafaqsanyihiin. Sidaa darted, waxay xayndaab u tahay ama xirsi xir Shareecada Islaamka u tahay. Qodobkaas sidii dunida Islaamka ay u qaadatay aynu u qaadanno oo aynaan waxba ka saarin. Labaddaba haddii aynu dib ugu noqonno, tafsiirka iyo wadiiqada labadaba, laba mabda` oo dastuuri waaye in laga saarana sax maaha.

- **Qodobka 3aad**: Waxaan ka dul istaagayaa qodobka lagu soo kordhiyey oo ah farqadda lixaad. Awood dowladeedka heer kasta waxaa loo adeegsan karaa si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka JFS, way saxantahay, laakiin ma ictiraafayso in wadanku Federal yahay oo dasaatiir kale uu leeyahay. Dastuurkan, dastuur heer Federal waaye, awoodaha "state"-yada ay kala leeyihiin waxay ku tifatiranyihiin iyo hay`adaha kala duwan ee fulintooda waxay ku tafotiranyihiin dastuuradooda. Sida mudlaqa ee loo samaynayo ma ictiraafaayo jawiga aan ku jirnay iyo wixii aan isla qaadanay. Aasaaska oo aan Qodobka 1aad ku qeexnay in uu dalku dal federal yahay. Qodob kaloo lamid ah wuu jiraa meeshiisa ayaana ugu tagayaa.

- **Qodobka 4(2)**: Wax laga beddelay sharci kasta ama tallaabo maamul oo kasoo horjeedda dastuurka, maxkamadda dastuurka ayaa awood u leh fulinta sharcigaas ama tallaabadaas si waafaqsan dastuurka. Waxaana lagu kordhiyay heer kasta, nuxurka waxaa weeye dasaatiirta dowlad goboleedyada in dastuurkan uu laalo ma aha , waa in uu qirsanyahay awoodaha ku tafatiran maxkamadaha markay soo marto xuquuqul insaanka sida uu dastuurku u tilmaamayo wax ku tumanayo ayay maxkamaddu burin kartaa modelada judiciary lagu soo sheegay. Laakiin dastuurka waa in uu qiraa uusan meesha ka saarin is waafajinta dasaatiirta maamul goboleedyada iyo dastuurka federaalka, isla markaasna dalku in uu dal federal yahay uu u qiraa oo meesha uusan ka saarin waxaan dastuurka ahayn oo aan jirin. Awoodo maamullo oo kala duwan iyo doorashooyinka xilliga ay dhacayso iyo awoodaha la kala leeyahay ee heer dawlad goboleed ku qoran la iskama indho tiri karo halkan ereyga lagu kordhiyay ayaa khalad ku ah **sida uu u qornaa farqadda 2aad in lagu daayo ayaan soo jeedinayaa.**

- **Qodobka (3)5** Gabdhaheenna sharafta leh waxaan ku raacsanahay in qoondada ay qorteen ee mooshinka ah ee 30% waa in lagu kordhiyo. Ugu yaraan gabadha ilmaha ay dhasho in jinsiyad uu helo. Wax annaga ugub nagu ah ma aha dunida islaamka oo dhan xuquuqdaa way qirtay, waana xaq gabadha iyo ilmaha ay dhashay ilaalinaya. Bulshada in ay ka takoornaanin wax sameynaya. Waxaan xasuustaa, gabadh dhaqtarad ah oo kuwayt joogtay oo ilmaheeda iyo gabadheeda korsanysa oo Soomaali ah oo dastuurkeenna halkaas xaddidaya darteed gabadheedii iyo iyadaba iqaammadeedii looga kansalay. In gabadheeda baasaboor Soomaaliya aysan haysan, waxayna ku qasabtay in wadan latin America ah ay ka dhacdo oo dhulkii ay ka shaqaysanaysa oo dhan. Qadiyaddoodu waa qadiyad caam ah oo meel kasta taala. Qof Soomaali ah oo Soomalinnimada ka jecel ma garanayo oo ka difaac badan oo twiter iyo meel kasta hadday noqota jooga, Laakiin in ay ku xaddidnaato oo dulmigaas uu ku dhaco waa khalad. Waaxaan guddiga u soojeedinayaa in gabdhaha walaalaheen ah, hooyooyinkeen ah in laga hoos qaado codsiga ay soo gudbisteen.

- **Qodobka 6aad**: Hal farqad ayaan ka taabanayaa. Waana farqadda 5aad ee lagu soo kordhiyay oo tilmaamaya in ay "state"-yada iyo dawlad gobolada ay yeelan karaan kaliya Calan iyo Astaan, laakiin ayna yeelan karin hees qaran. Waddan federal oo laga mamnuucay ma jiro in state-yadu yeelan karaan hees qaran in ay yeelan karaan. Innaga teena ayaa dib u- eegis u baahan oo micno iyo nuxur in loo sameeyo u baahan. Waxna midnimada kama tarayso. Wax shiddo ay ugaysanayso malaha, sabab lagu daro oo loogu diidana majirto. Wadammo idinka midnimo jecel oo 50 "state" ah ayaa 48 kamid ah mid waxay leedahay walba hees qaran oo u gaar ah. Nuxur koodana heesuhu waa wax wacyi galin ku saabsan oo markaas dadkii mesha wada jooga, family, heesta carruurta, heesahooga gaarka ah intii meel wada jootaba inyaroo ay isku kiciso ay hesho waa wax macquul ah ..

- **Qodobka 7aad**: Waxaa laga tuuray farqada saddexaad ayaa laga tuuray. Anigu waxaan qabaa dhul dawlad leedahay muran in cidi ku qabsato kama maarmo. Hadda ugu dambaysay Kenya ayaa bad nagu haysatay, qodobkan ayaan adeegsannay, waxaana u laabannay xeerarkii dunida. Maxkamaddii dunida ayaan la tagnay, dhulkeenna tuhun ma galinayno ee mar walba way imaanaysaa. Anigu waxaan dhihi lahaa hala sii siiqeeyo

inaan is  afgarad lagu xalin Karin cid dhulkeena inagu qabsatay. In qodobkan lagu daro oo marwalba laga saaro in is afgarad iyo wadahadal hoose Kenya waxay doonaysay aan ka diidnay oo aynu maxkamad la aadnay. Itoobiya waxay maanta doonaysaa aynu ka diidnay kulli qodabkan ayaa xaddidaya in dib loo sii siiqeeyo oo lagu daro " in dhulka Soomaalidu ciddii uu damac ka soo galo aan is afgarad lagu xalin karin, oo dedaalka dibloomaasiyad ee halkaa gaaray , oo illaa madaxwayneheenna loo sii daayay inaan dastuurka ku xirsi xirno oo qodobkaas ku adkaynaya ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 8aad**: Farqadda laga tuuray ee 4aad oo ah diidmada, laalista iyo ka qaadista jinsiyadda laguma xiri karo siyaabo siyaasadeed. Qodobkan dadkii hore uga hadlay ayaan ku xoojinayaa, qodobkaas wuxuu ilaalinayaa in qofka muwaadinka lagu xadgudbin, shiddo loo gaysanin. Jinsiyadda sideeduba waa in baaqa Jamhuuriyaddu sidaas ay ugu caddahay ama ay ugu qorantahay, in qof aan arrimo siyaasadeed loogu qaadi karin.

- **Qodobka 9aad:** Waxaan la qabaa dadkii hore uga hadlay maqaamka hadii la yiri Cutubka 5aad ayaa lagu caddeynayaa maqaamka iyo matalaaddiisa. Anigu waxaan qabaa maqaamkeeda in uu sidaa u xaddidanyahy. Qodobkaas wuxuu ka hadlayaa maamul goboleed iyo gobol, marka waxaa soo socda maamul goboleed ama gobol maqaamkeeda waa la xaddiday wax hadda aad gadaal ugu dhigteen majiro. Dooddii dadkii horaan la qabaa datuurka meeshay ugu jirtay ayaan la qabaa.

13) **Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu:**
Bismillahi, Mudane Guddoomiye xildhibaannada sharafta leh, ururrada bulshada rayidka, culimo awdiinka ah dhammaan Asalaamu Caleykum**.**

- **Qodobka 1aad**: Baaqa Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya , waxaa ku qoran Soomaaliya waa Jamhuuriyad  Federaali ah markii hore waxay ahayd federaal  i  ayaa lagu daray ma aqaanno sababta loogu daray. Federaal waa federaal uun ee federaali ma ahan. Waxaa ku qoran oo muslim ah lehna gobannimo ku salaysan caddaalad  iyo sarraynta sharciga. Meeshaas waxaa ku qoran "muslim ah" qodob soo noqonaaya ayaa jiray qodobka 3(2) oo ku qoran Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal muslim ah oo kamid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka, marka laba jeer ayaa waxay soo noqotay muslim, islaamka ayaa aas`aas ah, muslimkana waa dadka diintaas haysta ee ku dhagan, waxaan qabaa in laga dhigo islaam  loo celiyo oo la yidhaahdo  islaam, sababta oo ah hadaad fiiriso  Quraanka marka uu diin ka hadlaayo oo dhan wax uu soo qadaanaa islaam **ان الدين عندالله الاسلام** alle agtii diini waa islaam. Marka diin haddii laga hadlaayo waa Islaam waxaa kale oo ku jiro Quraanka **ومن يتق غير السلام دينا فلن يقبل منه** qofkii jeclaada diin aan diinta islaamka ahayn laga aqbali mayo. Marka diinba markuu Quraanku ka hadlaayo wuxuu soo qaataa Islaam, marka waa inaan annaga soo qadaannaa.

  Waxaan kale oon fiiriyay dasaatiirta ay leeyihiin wadammada carbeed iyo kuwa islaamka waxay leeyehiin dowlad Islaamiya, dowlad Carabiya, marka annagana waxaa nalaga rabaa inaan dhahno Dowladda Federalka waa dowlad Islaam ah. Horayna Xildhibaan Odawaa ayaa sidaas uga dhawaajiyay. Haddaad fiiriso meel kasta sidaas ayaa ku qoran. Sida dowladaha carabiya **marka in Islaamka loo celiyo oo meshaas**

**muslimka uusan ahayn ayaan aniga qabaa**. Qodobadaasna la isku soo raro saddex qodob ayaa ka hadlaayo arrimahaas.

- **Qodobka 2, (3)**: Ee Guddiga soo kordhiyeen runtii waan uga mahad naqayaa guddiga arrin muhiim aad u ah waaye in ay keenaan qodob reebaya cayda diinta islaamk. Waxay dhaheen waxaa reebban cayda diinta islaamka, karaahayadeeda iyo wax kasta oo wax u dhimaya arrimaha Diinta Islaamka waa sax, Laakiin waxay dhaheen qofkasta oo u gafa diinta Islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda. Haddii qof Quraankii, diintii iyo nabigii uu ku xad gudbo ma waxaa lala tiigsanayaa xeerarkii wadanka u yaalay? Annaga Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ayaan leennahay oo la qoray 1964 oo aan wax badan qoraynin. Marka meelo badan oo Shareecada Islaamka ku qoran tahay waa jirtaa oo gadaal ku qoran oo qodobka 11aad uu ka mid yahay, sidaa darteed waa in lagu qoraa waxaa lala tiigsanayaa Shareecada Islaamka wax dhibaayo ma jiro maaddaama dastuurkaan naftiisa uu leeyahay saldhig waxaa u ah Quraanka Kariimka ah.

  **Qodobka 3aad** Asna horay siduu u ahaa waxaa ku jirtay caddaaladda bulashada, hada waa laga reebay markii hore wuxuu ahaa "dastuurka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Quraanka Kariimka iyo Sunnada nabiga SCW, wuxuuna ilaalinayaa maqaasidda Shareecada Islaamka iyo cadaaladda bulshada. Caddaaladdii bulashada waa laga reebay, markaa caddaaladda bulashada runtii waa aasaaska dowladnimda waliba waa mabaadi`da asaasiga ah inay cadaalad dadku ay helaan. Marka ma garan karo sababta loogu reebayo caddaaladda. Cadaalad ma waxaa loo doonanayaa Shabaab macnaheeda saas ayay noqonaysaa. Ma waxay bannaynaysaa in macalimiinta iskuulka la dilo ee kadib la yidhaahdo dambiilayaashii way baxsadeen. Caddaaladdu waa aasaasi wadankan wuxuu la bur bursanyahay waa caddaalad darro, in meshaas aan laga tagin ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 4(2):** Guddigu waxay beddeleen meeshii xeer ahayd, xeerkasta sharci ayay ku beddeleen. Way fiican tahay, laakiin qodobkii oo dhan ayay beddeleen oo markii hore wuxuu ahaa sharci kasta ama tallaaba kasta oo maamul kasoo horjeeda dastuurka waxaa qaadaysa maxkamada dastuuriga ayaa awood u leh, Burinta sharcigaas ama tallabadaas maamul si waafaqsan dastuurkan.

  Qodob si qurxan u qoran oo dad sharci yaqaanno ah ay qoreen ayuu ahaa markii,hore, laakiin hadda markii aad fiiriso sida hadda ay u qoreen Guddiga waa Afsoomali jajaban. Wuxuu leeyahay xeer kasta, go`aan kasta ama tallaaba kasta oo maamuleed oo kasoo baxa heer kasta, waxaa oo kasta maxaa loogu baahday? Kasta, kasta macnaha macquul ma ahan Af-soomaliga sidaas ah sax ma ahan waxaa fiican haddii tooda ay ku adkaysanayaan in kasta, kastadaas la isku soo guuriyo oo la yiraahdo go`aan ama talaabo kasta oo maamuleed ama kasoo baxa hay'adaha kala duwan ee dowladda wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, ee burintooda waxaa awood u leh Maxkamadda Dastuuriga. Markaas Af-soomali sax ah ay noqonaysaa, laakiin hebel kasta, hebel kasta ma aqaanno meel laga keenay.

- **Qodobka 5aad:** Runtii waa qodob ka hadlaaya Afka Rasmiga ah qodobkaan waan garan karaa sababta uu meesha ugu jiro, waan garan karaa xasaasiyadda uu leeyahay, waan fahansannahay. Laakiin dad badan ra`yigooda ayay ka hadleen anna arigtidayda waxaan jeclaan lahaa inaan la igu colaadinin oo la ii ogalaado waxaa ku qoran Af-Soomaaligu waa Maay iyo Maxaa-tiri waa Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya, Afka labaadna waa afka carabiga ah. Maxaa loogu baahday in baraakad la galiyo oo lahjada la sheego meel ay ku jirto luuqad ma aragtay aduunka oo dhan hadii la soo helo, hal dastuur oo wax baraakhat la geliyey ma jirto. Luuqadaha adduunka oo "official language" waa layaqaannaa dalka luuqaddaas ayaa kow ah ama labaad luuqad ayaa "official" ah. Dalka Kenya ayaa noogu dhow waxaa la leeyahay "the official language of Republic of Kenya are " English iyo Sawaaxili waaye. Laakiin, Kukuyada oo toban kun ku hadasho laguma darin meesha. Tukaannada waxaa ku hadasho saddex malyan meelna laguma qorin haba yaraatee. Amxaarada, Afka Amxaariga wuxuu yahay Itoobiya, Oromada oo sodon milan ah laguma darin meeshaas sabab loogu qorana ma jirto. Afka Oromada wuxuu kamid yahay afarta af ee qaaradda Afrika ugu wayn, Carabiga, Howsaha, Sawaxiliga, afar waxaa soo galaya Oromada. Sababta loogu soo qoray waa la fahmaa, Laakiin sida saxda ah waa in sidaa loo qoro waa in la dhahaa "Afka rasmiga ah waa Soomaali, af Carabigana waa luuqadda labaad". Adduunyada fog hadaa tagto, Taliyaaniga luuqado badan ayay ku hadlaaan haddana lama sheego meel ay ku qoran tahay. Waxaa la dhahaa luuqadda ramiga ah waa Taliyaani. Waxaan ku hadlaayo waa cilmi haddii ay jirto cid hayso dal adduunka ka mid ah oo inta ay baraakad galiyaan haddii jiraan hannala tuso. Luuqadda rasmiga ah marka la leeyahay waa luuqadda sharciga baarlamanka looga hadlaayo waa luuqada ay dadka maxaakiimta ku dhaqmaan oo ay qasab tahay in iskuulada lagu dhigto, jaamadaha lagu dhigto, ama maxkamadaha looga shaqeeyo. Haddii qareen Soomaali ah ama Af-Maay ah ku qasban yahay garsoore jooga Burco ama Boorama inuu Af-Maay ku jawaabo, marka waxaan leeyahay arrintaas caadifad badan baa ku jirto sida ay tahay haloo celiyo.

- **Qodobka 6aad**: Heesta qaranka dad badan ayaa ka hadlay oo xildhibaan midnimo uu ka mid ahaa runtii aad baan ula qabaa, sababtoo ah micnaha ku jira "qoloba calankeedu" marka la yidhaahdo. ilmaheena marka dadka ajenabiga loo fasirayo oo ay iyagu arkaa heesaha wadamo kale leeyihiin markay arkaan oo kuweena loo fasirayo, waxay leeyihiin "qolobo waa calankeeda" ka dib waxay leeyihiin "so what" ma ku jira, duco ma laha, waxay ay leedahay ma leh wax micno oo ku jiro ma leh, ani waxaan qabaa in too tartan furan la qabto oo sax ah Af-soomaligaas dadka Soomliyeed in loo bandhigo la isku soo ururiyo ama dad suugaanyahan ah oo hadal fiican oo wadanka u ducaynaaya oo sidoo kalena dad hanooninaya in la keeno oo sidaas lagu beddelo. Waxa kale oo jiro, Qodobka 6aad dowlad gobaleeeyda waxay yeelan karan calan iyo astaan u gaar ah, laakiin maa yeelan karaan hees u gaar ah. Haddiiba aad u ogaalaatay astaan, hees maxaad ka rabtaa. waxyaalaha qaarkood waxaa la rabaa inay noqdaan in caqligeena la shaqeeyaan, markaa ani waxaan qabaa in loo fasaxo inay hees yeelan karaan.

- **Qodobka 7aad**: Waxaa ku jiro dhulka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya waa laguma xad gudbaan lama kala qaybin karo lama kala goyn karo, horay waxaa loo so yidhi dawlada masuul ka ah, hadana waxaa la yidhi lama kala qaybin karo lama kala goyn karo, laakiin waa la iibin karaabaa ku jirta. "why" loo dhihi waayey halkan loogu

dari waayey lama iibin karo maxaa loo dhihi waayey, horay dawlada masuul ka ah waa la soo yidhi, hadana waxaa la leeyahay laguma xadgubi karo oo kaliya, laakiin waxaan rabnaa in la yidhaahdo dhibaato badan oo dhulka ah baa jirta, arrimo badan oo dhulka ah baa jira lama iibin karo in meeshaa lagu qoro.

Qodobka 4aad: ee ka hadlayey jinsiyadda, waa in dadka loo ogalaadaa oo aan qasab looga qaadin, arrimo siyaasadeed looga qaadin.

- Gobalka Banaadir caasimaddiisa waala caddeeyay, laakiin waxaa la yidhi maqaamka magaalomadaxda leedahay iyo matalaadeeda, waxaa lagu xeerinayaa Cutubka Shanaad ee dastuurka ma ahan waxaa lagu go`aaminayaa. Waxaa lagu caddeynayaa ma ahan waxaa la rabaa hadhow markii xaggaas la tago in la dhaho baarlamaanka wuxuu kasoo saari doonaa xeer gaar ah. Dadkaan meeshan daggan waxay leeyiihiin masiirkooda, matalaad marka meesha ha lagu qoro.

14) **Sen. Deqa Hassan Hussein:**

Guddoonka labada aqal, xubnaha baarlamanka labada aqal, media-ha, howl-wadeennada dhammaantiin Assalaamu Callaykum. Guddoomiye aad baad u mahadsantahay. Marka hore, waxaan rabaa in aan arrar ka hormariyo qodobbo aan dul istaagi doono hadduu Alle idmo. Sida aad ogtihiin dastuurka in uu ku meel gaar ka baxo waxaa nasiib u yeeshey baarlamaankenna 11aad oo runtii taariikhduna xusi doonto in uu kumeel gaarnimadii ka saaray dastuurka. Sidaa daraaded, qodobbada dastuurka in aan ka shaqeyno waxay noo tahay muhiimad gaar ah.

- **Qodobka 3(5)** Waxaan sidoo kale la hadlayaa ragga Soomaaliyeed intooda kujira Baarlamanka Federaalka Soomaaliya in ayna wax "sensitive" in ayna u arkin gabdhaha in ay ka hadlaan qoondada 30%. Gabdhuhu markay ka hadlayaan dhammaantood uma jeedaan in baarlamanka ay ka helaan 30% oo kaliya. Qoondada ay gabdhuhu ka doodayaan waa dhammaan jagooyinka laysku magacaabo iyo kuwa loo tartamo, ciidamada qaranka, agaasimayaasha meel walba waa in gabdhuhu 30% ay ka helaan, haddii aad taas nala qaadataan waxay culeyska ka qaadeyasaa gabdhaha baarlamanka soo doonanaya waxayna noqon doontaa qayb kamid ah inay baarlamanka yimaadaan oo aydaan "sensitive"u arkin.

  Sidoo kale, waxaan rabay haweenkeenna baarlamanka ku jira in aan dhaho waxaad xaq u leedihiin baryo ma galaan, xaq ayaana uleennahay. Laakiin waa in aynu waddadeeda u marnaa, waana in aynu ka hadalnaa mar walba si sharciyana uga hadalnaa, waa walalaheen ragga Soomaliyeed, waxba nooma diiddana ina ula hadalno si waafaqsan sharciga waxaa la wada leeyahay iyo sida aan ku heli karno aan si deggan u waydiinno.

- Qodobbadayada markaan u soo daadago. **Qodobka 6aad** ee ka hadlaya calanka iyo astaanta qaranka **farqadiisa 1aad**, sidaa ogtihiin Calanka Soomaaliya midabkiisa runtii waa isku khilaafsanyihiin umadda soomaaliyed. Qof walba midab gaar ah ayuu u arkaa inuu calanka yahay marka qodobka waxaa ku qoron luuqad ayna qof walba fahmeynin.

Waxaan jeclaan laha siiqada mida loo qoray in la caddeeyo color kana la caddeeyo laguna qoro luuqad lawada fahmayo.

- **Qodobka 6(2)** Saad ogtihiin dastuurka waa heshiis bulsho, heshiis bulashana bulsho badan oo kala lahjad ah ayuu u dhaxeeya marka in lagu qoro luuqad la wada fahmi karaan dadka. Calankuna uu noqodo ina mar danbe laysku qabsan, dastuurku maddaama uu maanta gacanteenna uu kujiro calanka Soomaaliya color-kiisa in la cadeeyo oo sida xildhibanada iga horreeyey soojeediyeen u cadyahay.

- **Qodobka 5aad** :Oo isagana ka hadlaya luuqada Afka Soomaliga ee Maay iyo Maxaa-tiri, waxaa jira dad innaga mid ah oo Soomaali ah oo aan luuqad midna ku hadlin oo ku hadla "sign language" ku hadla in iyagana meel laga soo daro la yidhaahdo xeer nidaamiyayaal lagu soo saaro, in dadkaas helaan si ay u fahmaan iyagana madaama ayna Maay ku hadlin, Maxaa-tirina ku hadlin. dadka baahiyada gaarka qabo ama naafada ah ee dhagaha la` ama indhaha la` in "sign language" lagu soo daro qaybta sida xeer nidaamiye ha lagu xuso hadii la rabo iyadana inay ka muuqato.

- Qodobka ay gabdhaha Soomaaliyeed ay aad u soojeeediyen ee ka hadlaya xuquuqda gabdhaha waxaan ana ku biirinaya gabdhihii iga horreyay.

- **Qodobka 3(5)** In lasiiqeyo oo aan codsaneno ragga soomaaliyed baarlamaanka xubnihiisa ka codsaneynaa in la siiqeeyo sidii gabdhaha ay soojeediyeen aan ku biiriyo codkayga **"haweenku wa inay ka mid noqdaan dhamaan 3da** laamood ee haya'daha dowladda iyo guddiyada madaxabannaan heer Federaal, heer dowlad goboleed iyo dowladaha hoose ugu yaraan 30% in loogu qoro, meeshii ay ka ahayd in la xeerinayo gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo.

- **Qodobka 8aad**: Ee ka hadlaya jinsiyadaha iyadana waxaa soojeedinayaa oo ku biirinayaa gabdhaha Soomaaliyeed, maaddaama gabadhu ay hooyo tahay hooyaduna ay dalkeeda ka maarmin in carruuteedana in loo oggolaado inay helaan jinsiyad. Waxaa dhacdey maalin dhawayd gabadh kamid ah gabdhaha Soomaaliyed waxaa ka xanuunsaday cunugeeda waxay u bahatay inay dhaqtar dibadda gayso, waxay wayday "Passport" xaaladdii wiilkeeda ku jiray wax way ka qaban waysay oo waxaa loo diiday "Passport" maddaama uu dastuurkeenna uuna qoraynin, qodobkaasna waxaa jeclaan lahaa in lagu qoro **"ilma kasta oo uu dhalo aabo ama hooyo Soomaaliyeed wuxu xaq u leeyahay in uu helo jinsiyada soomaaliga"** iyadana in laguso daro.

- **Qodobka 9(2):** Waxaan soojeedinayaa maqaamka Muqdisho in lagu xeerin doono Cutubka 5aad marba haddii Cutubka 5aad looga hadlayo dooddiisa markaas ay noo taallaa qaabka loo dhigayaao, Laakiin waxaan soojeedinayaa marba haddii uu cutubkan uuna qadaneynin in loo celiyo **Cutubkiisa 5aad loo celiyo oo meesha laga saaro**.

Mar 1,2,3aadba waxaa idinka codsanayaa xubnaha sharafta leh in gabdhaha xuquuqda ay raadinayaan in aan loo arag baarlamanka kaliya, ee loo arko hay`adaha dowladda dhammaantood si aad culeeyska iskaga yareysaan inaad aqbashaan.

15) **Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed**

Marka hore waxaan umahad celinayaa Allah. Marka labaad guddoonka iyo labada guddi ee dastuurka oo soo qabtay shaqo layaqaanno iyaga iyo sharci yaqaannadooda. Cutubka maantana hor yaallo xaqiiqdii waxay uga soo shaqeeyeen si waafaqsan shuruucda qaanuunka waxayna ku soo qoreen luuqadaha lagu qoro dasaatiirta, waxyna ka ilaaliyeen wax badan oo iska hor imaanaya. Waxaan rabaa guddoonka baarlamanka iyo guddigaba in aan u soojeediyo dastuurka waxaa la daahfuray ama laga shaqeynaa xilli uu dalku dagaal ku jiro lana dagaallamayo fikir xagjir ah oo qaldan. Xuseen Iidow waxaan jeclaan lahaa in uu dhageysto talada aan u soojeedineyno. Waxaan rabaa ururkaas argagixisada ah wuxuua dadka ku maaweeliyaa oo been ugu sheegaa in uu waxa aan maanta ka doodeyno ay tahay dulmi, dastuurka aan maanta ka shaqeyneyno uu yahay wax qeyru sharci. Sidaas darted, waxaan talo ku soojeedinayaa maalin walba oo aan dooddaas ka qeyb galeyno in culimada Shiikh Cali Wajiis iyo culimada kale ee meesha fadhiso la siiyo 10 daqiiqo oo ay ku sharaxaan dastuurka iyo wuxuu diinta ka qabo. Si ay dadku u fahmaan sharciga marin habaabinta ay wadaan kooxdaas, waana talada aan u soojeedinayo guddoonka.

- **Qodobka 2aad**: Waxaan rabi lahaa diinta dalka in lagu daro oo lagu caddeeyo in dalkaan uu yahay sunni. Xildhibaano kale waxay soojeediyeen in fikirka iyo madaahibta lagu siiqeeyo taas ayadaa ani maqabo. Laakiin waxaan qabaa kaliya **in lagu caddeeyo inuu dalku muslim islaam sunni ah inuu yahay**.

- **Qodobka 8aad:** Oo ka hadlaya jinsiyadaha waxaan rabay meeshaas inaan ku qeexo ama aan talo ahaan u dhiibto in la caddeeyo qofka muwaadinka Soomaaliyeed qaabka ku weyn karo jinsiyada iyo dhalashada, qaabka uu u weyn karo basaboorka. waxaan ognahay dalkeena siyasadiisu inaysan fadhinin, waxaan ognahy nin maanta ku jecel inuusan bari ku jeclaaneyn, waxaan ognahay in ay hadda muwaadiniin Soomaaliyeed ay ku dhacday in basabooradii laga ceshto, si taas aysan u dhicin waxaan jeclaan lahaa in lagu soo daro dastuurkana lagu qeexo qofka muwaadinka ah ee weyn kara basaboorka in maxkamad ay xukunto, maxkamadna ay ka qaadi karto Kaliya, taas oo markaa looga fogaanayo in siyasadda iyo jinsiyadda lakala ilaaliyo taa ayada ah. Marka qodobkaas waxaan soojeedinlahaa in qofka muwaadinka ah marka uu waynayo jinsiyadda ay maxkamadi ka qaadi karto.

- **Qodobka 3(5)** Qodobka kale ee muhimka ah oo aan rabay in aan qeexo waxaa weeye gabdhaheenna Soomaaliyeed oo runtii abaal nagu leh iyo ixtiraam, diintenna islaamkana markay gabdhaha ka hadleysay ay gaarsiisay meeshii ugu sarreysay. Waxaa xasuusataa Nebiga (NNKH) markii murugada walwalka iyo walbahaarka uu ladaris noqday, guriga inuu galay hoosna iskaga soo xiray, qofkii 1aad ee u qalbi qaboojiyay shaqadiisana inuu hora ugu sii socdo ku dhiiri galiyay waxay ahayd qof dumar ah ayey ahayd . Diinteenna Islaamka marka waxaa saldhig u ah ama laf dhabar ayay u yihiin dumarku. Sidaas daraadeed, codkayga waxaan leeyahy dumarka xaq bay u leeyihiin inay "system"-ka dowlad nimada qayb ka noqdaan. Laakiin waxaa su`aashaa mudan waxay tahay dastuur marka la qorayo dadka sharciga yaqaanna ayaa qoree laguma qoro qoondo 30% ah. Sharciyaqaannada waad weydiin kartiin, Maxaa yeelay dastuurka in uu is jabiyo lama rabo dastuurku wuxuu leeyahy qof walba oo muwaadin Soomaaliyeed ah wuxuu xaq u leeyahay in uu tartamo gabadh iyo wiilba, hadana ma isla dastuurkii

lagu qori karaa, mayee 30% kamid ah raga ayaa loo didayaa. Waxaa aan raadineyno ee dumarkeenna ka cabanayaan waa caddaalad darro, laakiin inay caddaalad darro kale ka shaqeeyaan ma ahan. Tusaale ahaan wiil iyo gabadh ayaa isla dhashay, wiilkii iyo gabadhii dastuukeenu wuxuu leeyahy xaq waxay u leeyihiin gabadha iyo willkuba in ay tartamaan, dalkan xilalkoodana ay u siman yihiin, Waa caddaalad. Misana ma waxaa caddaalad ah wiilka matartami karo ee gabadhaa tartami karto, mayee gabadhaa tartami karto ee wiilku ma tartami karo. labadaas cadaaladood tii sax ah ayaa dastuurka lagu qoraa? marka dastuurka guddiga, sharciyaqaannada iyo qaanuunka iyo dadka sharcigaan ka shaqaynayaba ammaan iyo bogaadin ayay mudan yihiin si layaqaano iyo luuqad sharciyadeed ayay ku soo qoreen.

- Waxaan soojeedinayaa dumarka xuquuqdooda waa waajib in la siiyo baarlamaanka inay kamid noqdaan. Golaha Wasiirrada in ay kamid noqdaan iyo heya'daha kale ee dowladda ay kamid noqdaan, laakiin qaab ay hadda wax u raadinayaan qaab qaynuun ma ahan qaab sharcina mahan, caddaalad darro intaas le'egna lagama shaqeyn karo. Waxaan leeyahay aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin labada guddi iyo sharci yaqaannadoodaba. Wax la aqbali karo oo la dhihi karo laba isla dhalatay midna ha tartamo midna yuusan tartamin, caqligaas cidda aqbaleyso oo hora ugu socon kartaa meelna la soo istaagi karta ayadana waa su`aal meesha ku jirto.

16) **Xil. Sharif Mohamed Abdalla:**

Anigu waxaan ka billaabayaa qoraalka waxaa ku qoran oo aanan garaneyn, waxaa ku qoran diyaariyey Gudddiga Maxadabannaan ansixiyey Guddiga Dib-u-eegista dastuurka. Ansixintaas ma fahmin anigu, haddiiba ay ansixiyeen maxaa noo yaalla maa la isticmaalo eray kale, Haddii oo la ogayn sharci kale oo awood u siinaaya inay ansixiyaan waxaan jirin. Warqadaha qurxuun oo labada guddi ay soo qoreen waxaa ku jira qalad madbaci ah oo haddii soo martay, guddiga koowaad kan labaad inuu arko ahayd, Dhowr meelood weeye, waan la wadaagi doonaa. Meel talooyinka ahayd waa la labinlaabay, caddaaladdu sidaa soo kale waaye. Warqadda kale waxaa u sii dheer inay soo qoreen 26 bishii 7aad 2023 ilaa 2025 bishii 12 2024, meeshaas waxaan uma laynayaa inay 2023 u jeedeen maaddaama arrintu tahay dastuur in sifiican loo eego ayeey ila tahay waa tallo. Ararta markay tilmaamaayeen "Column" yada kan bidixda kan midigta ah waxay yiraahdeen columnka dhanka dhexda waxaa ku fileyd dhexda inay yiraah daan. Waxaan ku baraarujinayaa waxa la qorayo inaan si sahala lagu soo gudbin. Waxaa kale oo aan arkay haddii dastuurka ay tilmaamayaan kan aan haysanno (dastuurkii 2012). Cutubka 1aad baaqa Jamhuuriyada Soomaaliya ayey ku qoreen "column"ka bidixda ahaa, waxay ku saxeen Jamhuuriyada Federalaalka Soomaaliya, laakiin kan ( dastuurkii 2012) waa ku qoran yahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, wax la saxay anigu uma jeedi, haddii ay laba dastuur tahay maahine.

Jamhuuriyadda waa laga hadlay. Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaali ah muslim ah. Sidii nin sheeka oo hadlaayey meesha ka sheegay, waxaan iyadana tilmaamayaa isla qodobkii 1aad ee columnka ugu danbeeya oo kan midigta ah, waxaa lagu kordhiyey erayo faallo ah, markaas waxaa ku qoran halkan waxaa *loo kala dhigay laba dhigood* ,yacnii loo qaybiyey laba farqadood way ahaan lahaydba taas asluub laga habboon yahay ayaan u arkayaa. Arrinta xeerka annagoo haysana Af- Soomaali original ah oo xeer la yiraahdo inaan godka u galno sharci oo ka imaan karto oo ka dhalan karto waxoo gaa yaroo lagu naqdiyo

in kastoo wax la bartay uu yahay waa laga fiican yahay,  xeerka isagana sidaas baan dhihi lahaa.

- **Qodobka 2(3**): Waxaa reebban cayda Diinta Islaamka, horta cayda diinta islaamka waxay ahayd in far waaweyn lagu qoro, meesha hada far yar yar lagu qoray, laakiin diimaha oo dhan in lacaayo meesha kuma jirto. Cayda diintu inay isla socoto ayaa wanaagsan, maaddaama aad adigu tiri diintayda lama caayi karo dadka kaleeto tooda in lacaayo meesha kuma jirto gaar ahaan diimaha samaawiga ah. Meeshaas waxaan raacinayaa oo laga dhawaajiyey Sunni ah. Culumaduna ha iga raali ahaato Islaamku sunni kaliya maaha markaa inaan hoos uga daadegno waa laga fiican yahay. **Siday u soo qoreen inaan ku gaabsano** oo Islaam la yidhaahdo sunni laga dhaafo, sunni iyo wax kaloo toona.

- **Qodobka 4(3)**: Oo u qoran xeerkasta, go 'aan kasta ama tallaabo maamuleed oo kasta , inkastoo la soo gaabin karaa baa laga hadlay, oo ka soo baxa heer kasta iyo haaya'daha dawlada kana soo horjeeda dastuurka waxaa ku dari lahaa kana soo horjeeda dastuurka iyo shareecada waa waxba kama jiraan waxaa loo gudbinayaa meelaha kale, **waxaan ku daray dastuurka iyo shareecada.**

- **Qodobka 5 aad**: Qodobkani waa xasaasi afkuu ka hadlayaa fiicnan lahaydaa inaan hal af kaliya lahoonno midnimaduu ka qayb qaadan lahaa. Fiicnaan lahaydaa inaan ka qayb galo inaan afka u marno inaan umadda ku midayno. Haddiiba siday tahay loo qaato waxaan ka ratimaysa, sidaa hadda loo sheegay, dadka qabanaaya xafiisyada guud ee dalka ay labadaas luqadood ku hadlaan. Waxaa weeye guddiga  iyo madaxda baarlamankuba inay isla eegaan "sidee xeero loo xagtaa ilkana wax ku gaarin", maxaa yeelay mandiq maaha in dadka xafiisyada dawlada qabanayo oo dhami inay ku hadlaan afka maxaaga iyo afka maayga oo isla jira, sidaa darteed arintu waa dastuur waxaan ka hadlayno in la dhiiri galiyo la kobciyo, kor loo soo qaado afkan dastuuriga ah, laakiin waa inaan ka taxadirnaa wixii dhibaato ka imaan karto. Asaxaabta qaarkeed waxayba dhahayeen ha lagu daro "sign language" ama luqada dhagoolayaasha.

- **Qodobka 6(3)** Heesta qaranku waxay rabto ha ahaato heesta qaranka ama nashiido ha ahaato, waxaan arkaa baarlamaankii 10aad laga soo billaabo marka la qaadayo gacanta halkaa la saaro (laabta). Waxaasi ma jiri jirin waxay ka socotana ma garanayno. Dabcan waxaan ka aragnay meelaha kaleeto in halkaan la saaranayo. Anigu tababbar waan soo maray, waa la gaardiyi jiray, waa la heesi jiray, sidanaa la iska ahaan jiray (gamcahaa hoosaa loo daadajin jiray). Gacanta halkan la saarayo anigu waxaan qabaa (waa laabtee) ku dayasho dadyaw kale oo aan dhaqankeennii iyo qiyamkeenii aan ku salaynayn weeye, taa iyadana, waxaan ku dari lahaa madaama laga hadlaayo heesta calanka, dabcan   in la   dhamaystirana waan qabaa.

- **Qodobka 7(4**) Waxa "reference" garynaysaa dastuurkii 1960kii. Waxaan u malaynaayey 1961 dastuurka rasmiga ah ee uu dalku lahaa arrintaana cilmigayga kuma wayna 60kii "draft" tiga jiray iyo kii aftida loo qaaday ee 1961kii ahaa midka  loola jeedo ma aqaani, laakiin waxaan qabaa in la saxo.

- **Qodobka 8aad** Waloow aan filaayo jinsiyaddu markale laga doodi doono ama laga dooday, lakiin anigu waxaan qabaa qof Soomaali ah sideedaba denbi kasta oo uu galo inaan jinsiyad laga qaadi Karin, laakiin la ciqaabi karo, la xukumi karo, loo diidi karo inuu tartamo, cirka muu aadayaa. Biduun dalalka qaara isticmaalaan laakiin qofka Soomaaliga ah inaan marnaba laga qaadin jinsiyadda, laakiin wixii uu danbi galo ciqaab waxay rabto ha ahaatee la marsiiyo.

- **Qodobka 9aad:** Waxaan u malaynayaa sida dadkoo dhami u tilmaameen arrintan waxaynaan ogayn macluumaad aanan haysan oo aan lala wadaagin baarlamaanka ayey og yihiin. Guddiga dastuurka haddii kale kuma dhici lahayn inay xusaan haddana aysan soo ban dhigin, arrintaas ama halala wadaago baarlamaanka ama meeshan ha laga gooyo oo gadaal ha loo celiyo.

**17) Sen. Ilyas Badal Gaboose:**

Anigu toos baan iskaga galayaa, anigoon waxyaabo badan soo marmarin. Anu waxaan dhihi lahaa dastuurka in la dhamaystiro iyo siduu saaxiibkay sheegayey in la baddelo way kala duwan tahay. Markaa anigu dastuurka in la dhammastiraan qabaa. Waxaan hadda dhibaato innagu kallifay aan la garanyn inaan la galin baan qabaa. Waxaa number 1 ah innagu Jamhuuriyad hadda la abuurayo ma nihin, oo hadda xeer loo samaynaayo ama constitution. 1960 kii baan xornimo qaadannay, constitution baa la sameeyey, afti baa loo qaaday, wuu ansaxay waa lagu dhaqmay

- **Qodobka 6aad:** Anigu hadda sabab calanka iyo astaanta iyo xuduudaha looga hadlo ma garanaayo. Wax innagu kalifay in laga hadlana ma garanyo iyo jinsiyadeennii sabab aan hadda uga hadalnaba ma garanayo. Waxaa innagu soo kordhay oo kaliya markaynu burburnay ka bacdi waxaan qaadannay federal. Federaalku waxa cusub ee uu la yimid inaynu ka hadalo mooyaane , xuduudeheennii, jinsiyadeennii iyo wixii calankeennii, astaantiisii wax baddelaa inuu yimid anigu maqabo. Markaa arrinta federaalka iyo awoodaha sidaan u qaybsanayno iyo wixii lamida sida khayraadka loo qaybsanayo iyo waxaa inaan ka hadalno mooyaane anigu waxa kale lagu mashquulayaa, in lagu mashquulo ma qabo. Arrinta 'federalism'ka aan ka hadalo, taasaa wax innagu soo kordhay ah, waxa kale inuu siduu dastuurku ahaa loo daayo ayaan qabaa.

**18) Xil. Mohamed Adan Mohamed:**

waxaan salaamaya Guddoonka labada aqal, sidoo kale waxaan salaamayaa Guddiga labada heer. Gudoomiye Burhan iyo Guddoomiye Xuseen ay kala hogaaminayaan, xildhibaanada, saxaafada, culumada Soomaaliyeed, ururada bulshada iyo dhamaan inta kale ee halka joogta, waxaan ku salaamaya salaanta islaamka asaalmu caylkuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Ugu horreyntii waxaan qabaa maalintii buuggaagta la qaybinaayey buugaag badan ayaa ka maqnaa. Xildhibaannada anigu aan kamid ahay markaa waxaan qabaa in buugaagtaasna loo keeno. Midda kale, waxaan rabaa inaan raacsado falkii guracnaa ee dawladda Itoobiya kula kacday waftigii Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya uu hogaaminayey oo ka qayb galay shirkii Afrikaanka oo ka dhacayey Addis Ababa, qaabkii foolxumada ahaa loola dhaqmay aad iyo aad ayaan u canbaaraynayaa waanan ka xumahay.

Haddii aan galo doodayda ama hadalkayga, kollay waa maalintii saddexaad waan gaba gabaynayaa. Waxaan jeclaan lahaa xildhibaannada qof walboo hadlaa hadduu iska baxo dadka halkan ku hadhaaya oo wax dhagaysanaya ayaa yaraanaya. Markaa sidii saxiibkaa ama walaalkaa kuu dhagaystay oo aad adna u dhagaysataa oo aad u joogtaa illaa laga soo xidhaayo.

- **Qodobka 1aad:** Qodobkan oo dhammaan xildhibaannadii ka hadleen "Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federal ah oo muslim ah oo markaa lagu daro sunni. Markaa anigu waxaan ahay dadka qaba in lagu daro shaaficiya, waayo waxaa dhibaatada noo keenay oo xagjirnimada noo keenay oo is riixriixa masaajida iyo goob walba noo keenay waxa waaye madaahibta kale dadka wata waaye. Waxaa arkaysaa qofkii oo saddex mad-hab ku sameeynaaya weysa-qaadka kaliya ama salaadda gudaheega ku samaynaaya. Markaa waxaa fiican qofku inuu hal mad-hab ku tawfiiqo oo hal mad hab qaato. Markaa dalkan baryo dhexe waad arkayseen "Video"yo la wareejinaayo oo dad Soomaaliyeed la shiicaynaayo. Dalkan Soomaaliyeed annaga dad ayaa nagu soo simay culimo ah, oo u dhintay oo u dhibaatoobay, oo diinta fidinteeda wakhti badan galiyey. Markaa in ciyow la dayaco maaha. W**axaan qabaa dastuurkeena hanaloogu qoro muslim, sunni, shaafici** ah. Waayo waad ogtihiin baryahan shiicada sida loogu faafinayo Xamar ama loo wad wado kilibyo laga duubaayo dad Soomaaliyeed oo la wareejinaayo. Waxaas oodhan inay soo af jartaan rabnaa oo xukunno iyo ciqaab yeelato.

  Qodobka kale Islaamku waa diinta dawlada waxaan qabaa in asalkeedii loo daayo, haddaan saddexda shay la isku daraynin dalka, dadka iyo dawlada. Waayo intee laga soo xigtay oo lagu dayday qaab dhismeedkan la leeyahay islaamku waa diinta dawlada oo dalka la leeyahay mise waxay ka wadaan "infisaalu dawla cani diin". Annaga dawlada iyo dadku kala hadhimaayaan kulli waa wada Islaam. Aniga dadka qabaan ahay sharci iyo xeer, xeer in loo daayo. Wuxuu soo saaro madaxweyne iyo raysul wasaare ama wasiirro ay soo saaraan, sharcina wixii baarlammaku soo saaro uun loo dayaan qabaa, In kastoo si kale loo macneeyoo erayo kale oo u macnayesheen, laakiin wax kasta waa inaan ku adkaysanaa.

- **Qodobka 3(5):** Haweenka sidaad ogtihiin ragga waxaa ugu fiican kuwa dumarka u fiican. Waad ogtihiin gabdhaha waxay inoo sameeyeen iyo waxay yihiin iyo waxay noo tahay. Markaa bulshada Soomaaliyeed waa bulsho ku dhisan haween wax tarkooda iyo kaalmadooda iyo shaqadooda iyo juhdigooda. Markaa aniga waxaan rabaa gabdhaha maamul haday noqonayaan waxaa ka soo baxay balqiiso oo kale. Gabdhaha Soomaaliyeed waxaa ku jira gabdho badan oo hoggaan wacan oo ku astaysan astaan wanaagsan edeb, akhlaaq iyo diin ku salaysan, laakiin maqabo qolo gaara ah loogu qoro 30%, dad badan oo u baahanaa jira 30% in loogu qoro dadka curyaamiintana maxaa loogu qoraa iyagana. Dhalinyaraan nahayee Soomaliya 75% waa dhalin yaree dhalin yaradana maxaa loogu qorayaa? Markaa dastuurkii aan kala qaybsannoo qolo walba qoondadeedii halkaa ha loogu qoro, ama sidii kowdii hore uu u furfuray dastuurku oo sinnaan iyo caddaalad ahayd halloo daayo. Gabadha rabta maalintii carto soo gashay illaa haddeertana joogo faamilkeeda sow wiilal kama dhalannin? Taasaa caddaalad darro ah. Midda kale, waxaan rabaa waddanka waxaa layidhaa waddanka hooyo, gabadha Soomaaliyeed cunugeeda inay waxay iyadu qaadato uu qaato waayo

dalkaaba dalka hooyo layidhaahdaa markaas taas biyo kama dhibcaan waaye. Hadday haysato jinsiyadda, cunugeeduna waa helaa. Gabdhaha inta joogta oo baasaboorrada ajaaniibta wata dibadahay dhalmo u aadaan. Markay soo dhalaanna waa soo laabtaan cunugiina ay baasaboor usoo helaan oo markaa gabdhaheennii waa inay xuquuq helaan. Gabdhaheennu waa sharfan yihiin markastana sharaftaa iyo wanaaggaa ayaan u haynaa.

- **Qodobka 6aad:** Heesta iyo heesta astaanta u ah waxaan la qabaa ama "second" ayidayaa asxaabtii halkan ka hadashay Maxamed Haaruun iyo dadkii ugu horreeyey ee billaabay ahaa, heestu waa inay noqotaa hees wax ku oola oo macno sheegaysa, yeysan noqon wax yaabaha la ilaaliyo. Adduunyada dawladaha waxaa la ilaaliyaa haddii meeshan xaflad ay ka jirto waxaa laga yaabaa heesta calanka in la iska shido oo maanta oodhan shanjeer lix jeer la iska shido, sax maaha waa in waxyaabo la ilaaliyo, heesta qaabka ay u dhisan tahay iyo astaanta waxaan qabaa in faro galin lagu sameeyo oo hadda kadib la diyaariyo wax quruxsan oo mug iyo miisaan leh loo sameeyo, ma u muuqato hees hadda, oo innaga dalkeena masoo hadal qaadayso. Wax duco ahna ma samaynayso markaas halkaas waxaan leehay waa muhiim.

- **Qodobka 9aad:** Mida kale maqaamka caasimadda, maqaamka caasimadda waxaan qabaa sababta gadaal loogu raraayo guddigu hannoo sharraxaan oo ha noo sheegaan. Waxaasaa kallifay sidaasaa loo samayn waayey hanna yidhaahdaan, waayo in la yidhhaahdo gadaalaa loo raray , waxkasta gadaalaa loo sameeye ma qabo.

- **Qodobka 8aad** Midda kale, waxaan qabaa Qodobka 8aad oo qofka jinsiyada ah, qofka Soomaaliyeed jinsiyada ciqaab ha mutaysto wax walba ha mutaysto xabsi, dil ha mutaysto wuxuu rabo ha mutaysto laakiin jinsiyadiisa asbaaba siyaasadeed loogama laaban karo waa ayidayaa faqradaasi ay tireen gudigu waa inay soo celiyaan. Sababta ay u tireenna ay caddeeyaan. Markaa datuurka waxaa maanta nasiib u yeelannay baarlamaannadii naga horreeyeyna uga nasiib badannahay inaan maanta dastuurkii Soomaaliyeed aan ka shaqaynayno, oo ka doodayno, oo erayadiisa qaab dhismeedkiisa iyo qaabkiisa. Inkastoo aan aniga markii horeba qabay cutubkan koowaad inaan la taataaban oo faraha laga qaado oo sidii loo daayo wax badan hadda laguma samaynin, waxa lagu sameeyeyna waa waxyaabo aan macno badan dhalinaynin.

**19) Xil Mohamed Kerow Mohamed:**

Mahadsanid mudane guddoomiye, mudanayaasha sharafta leh, xildhbaannada ururrada bulshada, culimmada iyo dadka kale, martida joogta waan idin salaamay. Salaam kadib, waxaan kaliya soo jeedinayaa 'lambar one' guddiga aad ayay u mahadsan yihiin waxey soo gaaarsiiyeen dastuurkaan marxalad lagu dulshaqeyn karo oo aad u fiican ayay soo gaarsiiyeen, toos ayaan u galayaa qodobadii aan soo qortay.

- **Qodobka 1aad:** Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, meesha ay ku qorantahay Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan soojeedinayaa baaqa in ciwaan looga dhigo arar ama hordhac looga dhigo. Maxaa yeelay baaqa wuxuu sheegaa jamhuuriyadda oo hadleyso , oo wax ay tahay sheegeyso. Sidaas darteed, waxaan soojeedinayaa in meesha iyada ah ciwaan looga dhigo hordhaca dastuurka.

Meeshaas waxaa ku qoran qodobka koowaad, wuxuu sheegayaa Soomaaliya waa jamhuuriyad federaal ah oo muslim ah, lehna gobonnimo ku saleysan caddaalad iyo sarreynta sharciga. Meeshaan waxaan ku darayaa ani Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah oo Islaam ah horey dad badan u sheegeen dad badan ugu hadleen. Muslim kalmadas ayada ah waxey ka timid islaam. Sidaa daraadeed, Islaam ah in la dhaho. Tan kale, waxaan qabaa **in la dhaho sunni ah**, shaafici ah albaabbadaas dhan in la xiro. Haddii matalan la dhaho federaal ah la dhahay albaabkii xukunnadii kale la xiray, Islam ah hadii la dhaho diimahii kale albaabkooda la xiray, sunni ah hala dhaho ayada dee, shiico iyo albaabkeeda yaa la xiray. Shaafici ah halagu daro ayadana madaahibta meesha iyada ah lagu xiro. Meeshaan waxaan qabaa in lagu daro oo aan kala go'in, Soomaaliya jamhuuriyad federaal ah, islaam ah,sunni ah, shaafici ah, oo aan kala go'in. Meeshaan halagu daro si kala go'go a looga tago inta kale sideeda ayaan leeyahay,laakiin waxaan ku daraa meshaa ugu danbeesa leh gobonnimo ku saleysan caddaalad bulsho, waxa looga tagay ma'ogi **marka cadaalad bulsho halagu daro meshaasi dhahayaa**, qodobka kale ayaa jira meshaan.

- **Qodobka 2aad**(1): Oo dhahaaya Islaamka waa diinta dowladda,islaamka waa diinta dalka ayaa meshaan ku qorneed,islaamka waa diinta dowladda ayaa sax aheyd sababtana waxa waaye,dowladda dad iyo dal iyo nidaam xisaabeedka xukumaaya ka kooban marka haddii dalka la dhaho, meesha waxaa laga tagay dadkii. Marka islaamka waa diinta dowladda, shareecada islaamka ayaa saldhig u ah xeerkasta oo dowlada loo sameynaayo.Meeshaan qaybtaan lagu daro ayaa la rabaa intaas ayaan soo kordhinayaa.

- **Qodobka 2aad(5)** : Waxaan soo jeedinayaa mudane guddoomiye, lagu daro qodob(5) oo cusub in lagu daro oo la dhaho waxaa jireysa hey'ad culimada Soomaaliyeed, dhismaheeda xeer gaar ah baarlamaanka ka soo saarayaa. In qeybtaasi lagu daro ayaan rabaa oo Hey'adda Culimada Soomaaliyeed maxaa la dhahayay Qodobka 2aad (5) lagu xuso si loo dhiso Hey'adda Culimadda Soomaaliyeed.

- **Qodobka 4aad**(3): Sida uu u qoran yahay ayaan la qabaa, laakiin waxaan qabaa xeer kasta ama go'aan kasta ama talaabo maamuleed kasta oo kasoo baxda xeerkasta oo hey'ada dowladda kala duwan leh. Dastuurka meesha ku qarantahay Shareecada Islaaka iyo in la dhaho dastuurka taas ayada ah in lagu daro. Afka rasmiga ah ee waddan sida ay u qoran tahy ayaan la qabaa in la dhaho Af-soomaaliga( Maay iyo Maxaa tiri) waaye. Runtii afka maayga ma helin dowlad hormarisa mahelin. Afkii maxaaga ayaa maxaa la dhahaayay la qoray asaga ayaa nidaam loo sameeyay asagaas ayaa suugaantiisa waxkasta la horumariyay. Illaa markii ugu danbeesay loo maleenaayay Afka Maayga inuu afba ahayn oo ninkii ku hadla la dhahaayo muxuu dhahaayaa dadka is dhahaan. Marka waxaan soo jeedinaa Afka Maayga inuu helo xuquuqdiisa horumarineed. Afka haddeer gabar ayaa sheegtay oo 'standard' ah, luuqadda dhagool yaalka 'sign language" ka dabcan bulsho badan ayaa ku hadleysa afka asaga ah tilmaa'mahaas isku fahmaayaan waxaan qabaa in asaga aad loo horumariyo. Waxaan kusoo gabagabeynaa, nuqulka ku xiga in naloo qeybin doono lasoo qori doono iney kusoo daraan nuqul Afka Maayga ah, qeybta ugu danbeysa.

- **Qodobka 7aad (4):** Oo ka hadlaaya xuduudaha Soomaaliya maxaa la dhahaayay Gacanka Carbeed iyo Jabuuti ayaa dhinacaan ka xigta, itoobiya,qeybtaan maloo baahna waxaan qabaa in laga tiro sababtoo ah qodobkaan 3aad nagu filan. Qodobka 7aad(3) xuduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya,waa xuduudihii ku asteysnaa 1960kii marka taas ayaa sax ah aniga waxaan qabaa taas in lagu dhaafo qeybta kala lagu soo daray waqooyi, koonfur ahaanta naga xigta dastuurkaba laga saaro sababtoo ah geographical area bes ay tilmaamayaan. Tan kale oo ugu danbeesa Soomaaliyeed.

- **Qodobka 8aad**: Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa mid,marka Soomaaliyeed iyo Soomaaliya laba macno iney kala tilmaamayaan ma'u maleyneynin aniga markun haddii iska darsantay macnaheeda tilmaameysa **waxaan qabaa Soomaaliyeed** kaas in la dhaafo.

20) **Xil. Omar Yusuf Galadid:**

Guddiga labada gole, baarlamaanka labada gole, guddiga madaxbanaan iyo dib u-eegista dastuurka iyo guddiga la-socodka iyo hirgelinta dastuurka, hawlwadeenada labada gole, saxaafada salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu .Bacda salaam, waxaan rabaa inaan u mahad celiyo Guddiga Madax-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka iyo Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka Dastuurka shaqaday soo qabteen, aad iyo aad baan uga mahad celinayaa. Waxaa kale oon rabaa inaan u mahad celiyo runtii odayaashii dastuurkan ku meel-gaadhka kasoo shaqeeyey qaarna dhinteen qaarna nool yihiin. Intii dhimatay Allaha u naxariisto, inta noolna Ilaahay cimrigooda ha waasiciyo. Intaas kadib, maaddaama ay wakhti danbe tahay qodobbada muhiimka uun baan doonayaa inaan asiibo oon ku sii dheeraan oo "comment" ka bixiyo.

- **Qodobka 2aad:** Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyada Federaal Soomaaliya. Waan la qabaa saaxiibbadaydii iga horreeyey in lagu daro asalkii wuxuu ahaa Islaamku waa diinta dawladda. Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyada Federaal Foomaaliya w**axaan qabaa guddigu intan ay ku soo kordhiyeen waan la qabaa.**

- **Qodobka 2(3):** Waxaa reebban cayda diinta islaamka. Qodobkaana runtii aad baan u bogaadinayaa guddigu inay ku soo daraan, maxaa yeelay diin caygu innaga aad buu inoogu badnaa runtii.

- **Qodobka 5aad:** Afka rasmiga ah, afka rasmiga ah waa Maay iyo Maxaa tiri anigu waxaan qabaa afka rasmiga ah waa Af-Soomaali, Af -Soomaali uun ha lagu dhaafaan dhihi lahaa. In la dhaho Afka rasmiga ahi waa Maay iyo Maxaa tiri "Necessary" maahaa sababtoo ah afka rasmiga ahaa baa wuxuu yahay Af-Soomaali, taas intaa ha lagu dhaafaan oran lahaa.

- **Qodobka 5(2)** Dawlada Federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa, ilaalisaa isla markaana horumarisaa afka Soomaaliga iyo suugaantiisa. Halkan waxaan aad u jeclaan lahaa Guddiga Madaxabannaan iyo Guddiga La-socodka ee baarlamaanka inay ku daraan "sign language" ka maxaa yeelay ummad badan oo Soomaali ah oo waxaa jirta dad aan dhaga lahayn oo u baahan laftigoodu inay waxa adduunka ka socda inay la

socdaan ayaa iyadana meesha ku jirta. Markaa waxaan qabaa in “sign language” ka lagu daro si ay bulshadaa iyagana xaquuqdooda u helaan.

- **Qodobka 6aad:** Heesta Qaranka Soomaaliyeed waa qolaabaa calankeeda. Waxaan laqabaa saaxiibaday intay ka dhaheen heestu calanka iyo xiddigay tilmaamaysaa, laakiin heestu ka turjumaysaa umadda Soomaaliyeed ama shacabkiii oo qiiro leh, dhulkii iyo, halgamayaashi iyo ka sheekaynaysaa maahin. Xitaa qaaditaankeeda runtii ma xiiso galinayso ama ma muuqato hees aad iyo aad ugu qiiroonayso maahin taasna waan jeclaan lahaa in dib hees calan loo sameeyo.

- **Qodobka7(3)** Dhulka Jamhuriyada Federaalka Soomaliya ee khilaafaadka soohdimaha caalamiga ah ka dhashaa in xallintooda loo maro tub nabadeed iyo iskaashi waafaqsan qawaaniinta dalka u dagsan iyo kuwa caalamiga ah. Guddidu way ka saareen qodobkaas oo asalkii ahaa. Anigu ma qabo sababtay uga saareen way kasii hoosaysaa siday hada udhigeen waxay dhaheen faqradan waa la tiray sababta loo tiray ayaa ah inay shaki galinayso soohdimaha geyiga Jamhuuriyda Federaalka Soomaaliya, oo ay u horseedayso inay khilaaf ka abuuri karaan xudduudeheenna. Waxaa meeshaa ii muuqata Soomaaliya ama xidigteenna ama calankeennu waa shan qaybood waaye, waa Jamhuuriyadda, Jabuuti, Soomaali Galbeed iyo NFD, marka aan ka hadalno dhahno shikibay galinaysaa, cabsibaa meeshaas ku jirta. Ma dalkii aan lahayn baa illaa iyo hadda si sharci ah inooga maqnayn oo gumaystihii reer Yurub ay ku qaybsadeen oo shan qaybood inoo qaybiyeen. Aduunyadu ma jirto hal waddan oo shan qaybaad loo qaybiyey, markaa waxaa u xalaalaynaynaa inaan ka hadli karinba, markaa **waxaan qabaa qodobkaa in booskiisii lagu soo celiyo.**

- **Qodobka 7(4)** Xudduudaha Jamhuuriyda Federallka, waqooyi waxaa innaga xiga gacanka cadmeed waa sax, waqooyi galbeed waxaa innaga xiga Jabuuti waa sax, galbeed waxaa innaga xiga Itoobiya, koonfur galbeed waxaa innaga xiga Kiiniya, bari waxaa innaga xiga Badweynta Hindiya waa sax. Laakiin markii la dhaho Itoobiya waxay innaga xigtaa galbeed, maxaa meeshas ku qarsoon, waxaa ku qarsoon “for example” waxaa laga yaabaa dhallinyara badan inay ku jiraan baarlamaanka oo hore taariikhdii la socon. Waxaa meeshaas ku qarsoon Awdal haddaan hadda soo qaadanno Gobolaka Awdal waxaa deggan Beesha Ciise iyo Samaroon iyo beela kalaba wey deggan yihiin. Waqooyi Galbeed markii la fiiriyo 10 gobolbaa xudduud beenaadkaa innaga hareeraysan. 10-kaa gobol, hada “for example” Awdal markaa ka soo qaadno beesha ciise iyo samaroon baa dagan, markaa Qodobkan Meesha buu ku soo galay, laakin gadaal baan rabaa qodobka 8aad buu noqon donaan jawaabtiisa tan noqnaysa. Waxaa la raabaa bari iyo galbeed marka la dhaho xuduudkan xuduud Soomaaliyeed waaye labada dhinacba ay isku wexeeyaan, Awdal Beesha Ciise bari way degtaa galbeedna wey degtaa, Samarroon barina wey degtaa galbeedna wey degtaa Itoobiya maaha. Waxaa kuu soo hadhay Waqooyi Galbeed waxaa bari iyo galbeedba dega Gadhxajis waa niman Isaaqa. Togdheer sidoo kale Dhulabhante iyo Habarjelaa deggan. Mudug, Majeerteen iyo Leelkasaa deggan. Galguduud, Mareexaan iyo Habargidirbaa deggan. Hiiraan macnaha waxaan ka wadaa barigeeda iyo galbeedkeeda. Galbeedka aad dhahaysaan horta waa dhul Soomaaliyeed waa inaad ogaataan. Ka hadalka aan ka hadli weynay darteed ayaa maanta waxaa Itoobiya awood u yeelatay oo inay ka damacday

xeebahaan qabsanaysaa. Xeebihii dalkiinaan qabasanayaa waxaa hamigeeda ugu weyni yahay deegaankaas ama baddaas ay soo gaadho weeye. Markaas waa in laga taxaddaro oo in lala socdo gobolkan ama deegaannadan aynu dhahayno Itoobiya labada qayboodba labduba Soomaali waaye. Xabashidu ama Itoobiyaanku waxay u yimaadeen military ahaan ee dhulku dhulkaagii waaye.

- **Qodobka 8aad**: Oo ah qodobka ugu muhiimsan shacabka Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliyeed tan waxaan la qabaa saaxiibaday siday awal ahayd ha loo daayo. Soomaaliyeed waa mid lamana kala qaybin karo wuxuuna ka koobanyahay dhammaan muwaadinaainta, **taa sideeda haloo daayaan aniga qabaa.**

- **Qodobka 8(4)** Diidmada iyo laalista iyo ka qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaaba siyaasadeed. Qodobkaa sidiisii ha lagu soo celiyo. ID markii imika la qaadanayey dadbaa asbaaba siyaasadeed loogu diiday oon ognahay. Markaa qodobkaana waa in sidiisii loogu soo celiyaa. Waxaan rabaa oon markaa soo jeedin lahaa oon rabaa inaan ku darsado hal qodob. Guddigu ma note garaysaayaan malaha waxaan ka hadlayno malaha, Okey waxaan raabaa qodobkan in farqaddan lagu daro "qofkasta oo Soomaaliyeed oo asalkiisa dhiigiisu Soomaali yahay waa muwaadin" waa in lagu daraa. Wixii kale xeerinaaya dhalashada sida lagu helaayo iyo sida lagu weeynaayo gadaal bay ka imaanaysaa, laakiin waa in faqraddan finalka lagu soo daraa "qofkasta oo asalkiisu Soomaali yahay waa muwaadin, yaan laga hilmaamin hadhow waan is weydiin doonnaa.

- **Qodobka 9aad** Maqaamka, magaala madaxda federaalka ee Soomaaliya waa Muqdisho, intaa waan og nahay. Waxaynu sugaynaa dooddeedii maaddaama dib loodhigay dooddeedaan la sugaynaa hadduu Ilaahay innagu simo. Waad mahadsantihiin.

21) **Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud:**

Gudoomiye, xildhibaannada dhammaan waan idin salaamayaa. Salaam kadib dooddeena ayaan horay u galeynaa. Waan u mahadcelinayaa labada guddi shaqada adag eey soo qabteen iyo waqtiga iyo juhdiga ay soo galiyeen. Intaas kadib, dooddii socotay ayaan waxyar ku darayaa, qodobbada inta badan xildhibaannadu way taabteen.

- **Qodobka 1(5):** Waxay leedahay gobannimada iyo midnimada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa laguma xad-gudbaan. Markaa waxaan rabaa inaan ku daro intaas, Gobannimada, madaxbannaanida iyo midnimada qaranka bad, bari iyo xuduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa laguma xad-gudbaan. **Markaa waa in bad iyo berri lagu daro.**

- **Qodobka 2 (1) :** Ee ka hadlaysa Islaamka, Islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dawladda, oo markaas lagu soo daro dadka, dalka, iyo dawlada federaalka ayaan ku kaabi lahaa qodobkaas 2aad faqradiisa 1aad.

- **Qodobka 2(3) :** Oo guddigu uu ku soo kordhiyay waa qurux badanyahay aad ayay u mahadsanyihiin guddigu, waxaa reebban meesha cayda ay ku qorantahay in lagu beddelo caayidda, oo eraygaa sidaas loo fasiro.

- **Qodobka 3 (3):** Waxay guddigu usoo qoreen, Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisantahay mabaadi'da asaasiga ah nidaamka awood qaybsiga federaaliga ah. Markaa awood qaybsiga nidaamka federaalka inuu sidii hore ku habboonyahay ayaan isleeyahay qodobkaas.

- **Qodobka 4 (2):** Waxay leedahay cid kastaba, dhammaan hay'adaha dawladda, ururrada siyaasadeed iyo ururrada bulshada waxa waajib ku ah inay u hoggaansamaan ku dhaqanka iyo ilaalinta dastuurka. Qodobkaas wuxuu fasirayaa isla qodobka ka horreeya, shareecada islaamka ka sokow dastuurka Jamhuuriyadda waa xeerka ugu sarreeya dalka isaga ayayna u hoggaansamayaan xukuumadda, heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya, wuxuuna hagayaa curinta iyo go'aannada siyaasadeed ee qaybaha dawlada. Markaa labadan qodob, qodobkan hadda cusub ee faqradda cusub ee 2aad waxa fasiraysaa faqrada 1aad, waxaan isleeyahay markaa inaan loo baahnayn ayay noqon kartaa.

- **Qodobka 5aad:** Afka rasmiga ah sida laga dhawaajiyay wuxuu ku dhanyahay, Afsoomaaliga in la yiraahdo, kaddibna luuqadaha kale oo Carabiga luuqadda labaaad inay noqoto sida iminkaba ku qoran. Afka soomaaliga ah in lagusoo kordhiyo, dadkii hadda halkaan laga turjumay oo muddada dheer dooddu socotay aan waxba kala socon. Dadkii baahiyaha gaarka ah qabay oo ay ka mid yihiin dadka dhagoolayaasha iyo dadka indhoolayaasha ah ayaguna xuquuq ayay leeyihiin.

- **Qodobka 6aad:** Heesta iyo calanka waxaan jeclaan lahayn in sidiisii hore lagu daayo oo calanka Jamhuuriyada Federaalka ah sida lagu muujiyay qaybta (A) ee jadwalka koowaad waa laydi buluug furan oo dhexda ay kaga taalo xidig cad oo shan gees ah madaxyo simana leh, markaa'bey-cad' ka laga saaro oo sidaas fasiraadiisu halkaasay ku caddahaye lagu daayo ayaan soojeedin lahaa.

- **Qodobka 4 (6) :** Waxa uu leeyahay dawladaha xubinta ka ah dawladda federaalka. Markaa dawladaha xubinta ka ah waxaan soojeedin lahaa in maamullada lagu beddelo. Maamullada xubinta ka ah dawladda federaalka oo meel kasta oo dawladaha xubinta ka ah ,meelo badan ayaan ku aragnaye , in maamullo loo beddelo oo dawladnimada laysku daayo.

- **Qodobka 7(1):** Waxa soo noqnoqotay gobannimada, Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxay koobaysaa geyiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo idil oo ay ku jiraan berriga, badaha, webiyada, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi qaaradeedka. Markaa waxa ka buuxda (iyo iyo iyo), markaa waxaan soojeedinaya in laga saaro oo geyi qaaradeedka dhul iyo biyo laga dhigo oo laga saaro (iyo iyo) daas tirada badanle ee soo noqnoqotay ayaan soo jeedinaynaa.

- **Qodobka 7 (3):** Sida laga warramay, faqradda dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee khilaafaadka soohdimaha ka dhasha ayaa iyana qodob muhiim ah inuu aaminsanahay sida xildhibaannada hore ka hadleen ayaan aaminsanahay in isagana lagusoo celiyo. Isla qodobka 4aad wuxuu leeyahay xudduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa xudduudihii ku astaysnaa dastuurkii 1960kii.

- **Qodobka 7(4)** Waxa ku qoran xudduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, tilmaamo ayuu bixinayaa, Waqooyiga Gacanka Cadmeed, Waqooyi Galbeed Jabuuti, markaa qodobkan isagaa is diidan 1960kii Jabuuti ma jirinba. Dalkan Jabuuti la yiraahdo Soomaaliya ayuu kamid ahaa hoosna tilmaamuhuu ku siinayaa markaa in la saxo ayuu u baahanyahay qodobkaasi oo labada qodob la is waafajiyo.

- **Qodobka 8aad:** Sideedii hore ayay ku habboon tahay, shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, in lagu daayo Soomaaliyeed.

- **Qodobka 8 (4) : O**o diidmada iyo laalista jinsiyadaha Soomaaliyeed ka hadlay waxaan rajaynaynaa in sidiisa lagusoo celiyo sida laga wada hadlay, waxaan rabnaa marka in jinsiyada qodobo cusub lagu daro oo ay ka mid tahay, ilmaha uu dhalo aabe haysta dhalashada dalka ama hooyo haysata dhalashada dalka uu qaadan karo jinsiyada dalkaas, hooyo iyo aabo waaye, inay u simanyihiin oo jinsiyada haduu aabe dhalay iyo haday hooyo dhashayba ay muwaadin noqon karaan oo dalka ay ku abtirsadaan iyo sidoo kale qof kasta oo ku dhashay gudaha dalka soomaaliya inuu muwaadinimadiisa uu xaq u leeyahay sida ay aduunyadu u ictiraafsantahay.

- **Qodobka 9aad:** Waa laga wada hadlay oo wuxuu qeexayaa maqaamka magaalo madaxda. Meelaha qaar waxa laga yaaba 'typing error' inuu jiro magaalo madaxda Muqdisho, waa okey qodobka intiisa dhimman ee ku aadan dib ayaan u dhiganaynaa oo maqaamka ka hadlaayo. Sida laga wada hadlay dastuurka dalka waa shaqada uu leeyahay Baarlamaanka. Run ahaantii xildhibaanno badan oo halkaan ka hadlay ayaa war ku rogay oo yiri dastuurku la tashi badan ayuu u baahan yahay. Markaa hadda dastuur cusub lama dhisayee, dastuurkaan waa dastuur laga soo shaqeeyay oo dadka Soomaaliyeed kasoo shaqeeyeen oo lagu soo qoray inuu Baarlamaankii 9aad ka shaqeeyaan, ay xaq u lahaayeen oo Baarlamaanka 11aad soo gaaray. Markaa shaqadan waxa iska lahaa Baarlamanka labadiisa aqal maantana waa horyaallaa, muddo dheerna waa laga hadlayoo waa soo noqnoqday warkaas. Waxaan rajaynaynaa marka in labada guddi ee loo xilsaaray ay qodobbada 49ka iyo 90ka faqradood eey u soo qoreen waa soojeedintooda, annagaa nalaga rabaa soo jeedinteenna inaan ku darno. Waxa iyaga dheeraadka ku ah laga saaro, la is waafajiyo oo wax dalkan u cuntama aan kasoo saarno waana wax goloyaasha horyaalla oo shaqo billaabatay, socotay, meel fiicanna maraysa inay tahaan aaminsanahay. Waxaanna nasiib u yeeshay inuu dhammaystiro dastuurka, Baarlamaanka 11aad labadiisa aqal. Dhammaan marka asxaabta siyaasiyiinta ah waxaan leennahay, dastuurka quluubta halloo furo oo hallaga daayo doco-docaynta iyo gacmo-gacmaynta, yaanan indho siyaasadeed lagu fiirinnin dastuurka, aan ku fiirinno indho sharci iyo baahida uu dalku u qabo inuu helo dastuur dhammaystiran.

22) **Xil. Mohamed Deeq Barre Omar:**

Bismillaah**,** guddoonka labada aqal, guddiga iyo xilibaannada labada aqalba waan salaamayaa. Haddaan hore u galo ka hadalka Baaqa Jamhuuriyada Cutubka Koowaad. Waxaan waafaqsanahay oon raacsanahay xildhibaannadii iga horreeyay oo soojeediyay in lagu daro waddankan in uu yahay waddan muslim ah sunni, waliba Shaafici la raaciyo mad-habta shaafici la raaciyo. Umaddan Soomaaliyeed waxaan ognahay waxkasta lagu

tijaabiyay si dadka loo ilaaliyo dalkanna loo ilaaliyo waa in lagu daraa muslim sunni ah, Shaafici ah, taas ayaan ku biirin lahaa. Qodobka aan raacinaayo oo ii xiga:

- **Qodobka 2aad:** Ee diinta, dalka, waxaan ku dari lahaa Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyada fedaraalka dadka iyo dalka. Yacni Islaamku dalka kaliya la dhihin guddiga waxaan u soojeedinlahaa iney ku biiriyaan dadka, taana dadka in lagu daro. Faqradda 2aad, waxey leedahay diin aan aheyn islaam laguma faafin karo dalka Jamhuuriyada Soomaaliya. Aniga waxaan qabaa diin aan Islaam, sunni aan aheyn, illaa hadda waxaa yimid shiico mashaariic timid barmaamish dadka lagu baadiyeynaayo. Aniga waxaan qabaa in la raaciyo diin aan aheyn Islaam, Sunni laguma faafin karo Jamhuuriyada Federaaliga Soomaaliyeed. Midda meesha ah Soomaaliya aniga waxaan qabaa **in laga dhigo Soomaaliyeed,** taana waan soojeedinayaa.

- **Qodobka 3** (3): Mabaadii'da aasaasiga, Qodobka 3(3) waxey leedahay Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya waxey ku dhisan tahay mabaa'dii aasaasi ah nidaamka awood qeybsiga federaaliga ah. Aniga waxaan qabaa qoraalka nuucaasi ma ilaalinaayo kursigeyga, kursiga dadka aan matalana ma ilaalinaayo. Nidaamka federaliga ah awood qeybsiga maamul gobleedyada dalka ka jira marka la fiiriyo dad baan maaamul gobleed laheyn. Hadda Beesha Direed oo kale, malahan maamul gobleed haddii marka ay timaaddo kuraas hala qaato ama dadka la mid ah kuraastooda halloo yimaado ama beelaha kale, waxaa la marsiin karaa nidaamka ah awood qeybsiga federaaliga. Haddii laakiin maamul gobleedka Udublaan oo kaliye uu jiro waan yeeli lahaa. Aniga waxaan qabaa, aniga marka maaddaama arinkaas wali maamul gobleed aan leennahay uusan wali dalka ka jirin, oo xuquuq naga maqan ay tahay, waxaan qabaa aan rajeynaa inaan heli doonno sida dadka ay u heystaan oo kale. Waxaan qabaa in lagu daro awood qeybsiga federaaliga ee beelaha 4.5 ama shanta beelood in lagu qoro sida dadka aniga ila midka ah ay san xuquuq la 'aan u noqon.Qodobkaas saas ku biirin lahaa.

- **Qodobka 6aad** : Calanka iyo astaanta ayaa laga hadlay dad badan ayaa dood ka qaba in lagu sawiro shabeel. Markaan arko calammada qaar oo ay ku sawiran yihiin shinbir iyo wax lamid ah iyo hadda waad ogtahay Soomaalida ee iney miitaal ahaan u tahay shabeelka dad yacnii jira oo ama markii leys qabsado ha ahaato ama micno sameyneysaa. Aniga waxaan qabaa dadka diidan ee leh wax kale hallagu sawiro ama bahallo kale iyo wax kale hallagu sawiro qaba aniga ma qabi. Waxaan qabaa in loo daayo shabeelkaasi. Heesta astaanta calanka haddaan u imaado, ayadana oo isla astaanta ka mid ah heestaasi ninkii sameeyay waxa uu ka hadlay waxa ka maqnaa dadku raadinaayeen calan iney helaan. Calankuna maxa uu macneynaya iney helaan gobonnimo, gobonnimadii ayuu sawiray, gobonimadii ayaa calan ah calan caadi ah ma aha waxa uu ka hadlay waa gobonnimadii ayuu ku matalay calankaan buluugga ee markii la sameynayay gobonnimada astaan u ahaa. Sida loo fasiraayo aniga ma qabo waa gobonnimadii waxa uu ka hadlay calanka, haddii calanka aan weyno gobonnimadii weynay. Midabkaa buluugga ee xidigta leh astaana ay ku jirto ee jiritaanka leh, markaa anigana taana waxaan qabaa in loo daayo. Waxaan u maleynaa waqtigeyga wax ayaa laga xadi rabaa!

- **Qodobka** Geyiga Jamhuuriyada  Federaaliga Soomaaliya oo ah Qodobka 7aad, waxaan aad ula yaabay illaa hadda Jamhuuriyaddaan dhisan waxey ku dhisantahay waa laba gobol isu tagay dastuurka kuma jirto labadii gobal ee isku tagay oo ahaa koonfur iyo waqooyi oo midoobay. 1dii luulyo ayay Jamhuuriyada Soomaaliya ku taagan tahay, haddaan taa ka tagno marka maxey ka dhigan tahay? Waxay ka dhigantahay innaga ayaa markaasi  dalka kala jareyna. Sidaa la ajligeeda, waa in lagu soo daraa Jamhuuriyadda waxa asalka u ah, xudduudaha marka laga tago, waxa asalka u ah waa in ay ku jirtaa.

- **Qodobka** Jinsiyadda ka hadlaayo aniga waxaan qabaa qodobkii hore ee laga saaray diidmada iyo laalista iyo ka qaadista iyo jinsiyada laguma xiro karo asbaabo siyaasdeed in lagu soo celiyo.

- **Qodobka 8(4)**: Waxaa aad looga hadlay gabdhaha iyo carruuraha kale wata. Horta, waxaan u fahmay carruurta laga hadlaayo waa carruur ajaaniiba oo aan soomaali aan ahayn. ilmahaa baasaboor la'aanta ah ee ajaanibka ah, dabcan dal ayey u dhasheen qof "alien" ah ama meel ka yimid ma jirto, Ilmaha baasaboor la'aanta waddan hebel haddey u dhasheen, gabadhii waddan hebel u dhashay, wadan hebel baasaboor ha uga keento. Marka waddan hebel baasaboor looga keeno  carruurta halloo warsado degganaansho waddanka. Ama sidii kale haddii la yiraahdo gabar kasta ilmaha ay dhasho waa Soomaali noqonayaan. Yaa soomaali noqonaaya? Taas naga rabaa, waa kuma qofka  Soomaaliga noqonaayo? Haddii gabar kasta cunugga ay dhashay u yiraahdo, asalkii ummada yaa ah ? Yaa soomaali ah ? Waxaan qabaa ilmahaan laga hadlay ee aad loogu celceliyay ee gabdhuhu la dhibaatoonayaan, waan la dhibaatooneynaa, laakiin ha sameeyeen haddiiba ay dhacdo oo ilaahey u qaddaray oo ay markaa qof aan Soomaali aheyn ayay guursatay,sey doonto haku timaaddee, dalka ay ka timaadday baasaboor ha ugu raadiso, ha'u doonto markaa ka dib waddanka Soomaaliya markaasi wixii nidaam ah ama baasaboor ah ama xeer loo danbo loo samaynaayo, sidii baasaboor loogu helikaro halloo siiyo. Laakiin aniga waxaan qabaa, mabaadi'da ilaalineysa yaa Soomaali ah waan wada garan karnaa si aysan nooga dhiman.

- **Qodobka 9aad:** Waxaan rabaa inaan ka hadlo maqaamka Mugdisho. Waxa looga leexleexdo haddaan fahmay. Maqaamka mabaa'dii lagu soo saari doonaa, waa lagu celceliyay, aad loogu celceliyay. Dadka Mugdisho aad ayay ugu dhibban yihiin. Maqaamka sida saxda ah waxa ay tahay, waxa laga dhuudhuumanayo waxa ay tahay Mugdisho  yaa leh,oo kow lagu qoraayaa? Oo labo lagu qorayaa? Saddex yaa lagu qoraa? Waxa laga heshiin la'yahay waxaa la diidan yahay dadka Mugdisho iska leh. Aniga dadka aaminsan baan ka mid ahay Mugdisho in la leeyahay, lasii kala  leeyahay. Taas dadka aamisan baan ahay. Waana sababta diiddan in magaalada Mugdisho maqaam yeelato. Waxaan qabaa arrintaa yaanan laga leex leexan. Qof walba tuulo, Deegaan ayuu leeyahay. Mogisho maqaamkeeda waxa ay ku heleysaa waxa ay tahay arrimahaas oo laga xishoon, oo la soo aado. Waxaan ku soo gunaannadayaa, waliba aniga waxaan ahay Ciyaal Xamar. Mugdisho dadka Ciyaal Xamar iyo Reer Xamar ma ogtahay. Marka aniga waxaan ahay Ciyaal Xamar, Mugdishaan leeyahay ma lihi. Dadkii ka xanaaqayna ma ihi. Waxaan rabaa inaan ku soo gabagabeeyo, waxaan canbbaareynaa falkii Dowladda Itoopiya ay ku kacday Madaxweynaha Jamhuuriyada

Soomaaliya wafdigii uu hoggaaminaayay, astaanta qaranka ah. Mudane Xasan Shiikh Maxamuud falkii lagula kacay ee aadka u qaab u qaawanaa aad ayaan ugu xumahay waan canbaareynayaa. Runtii waxaan bogaadinayaa sida madaxweynaha ugu bareeray, inuu makiiba shirka gaaro, si kastuu ku gaaro madaxweynaha inuu shirka gaaro, ka hadlo muujiyo arrinta Itoopiya ay ku kacday. Runtii arrintaas madaxweynaha waan ku bogaadinayaa sida diiran oo waajibaadkaa qaran uu soo gutay. Soomaalidu horay waxay u tidhi Itoobiya falka ay ku kacday waxaa ku soo baxaaya maahmaahdii aheyd ' ninba caacadii ma daayo ' bahalna cayrin ma daayo. Aad ayaad u mahadsan tihiin.

23) **Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud:**

Gudoonka labada aqal, culimada iyo ururada bulshada, labada guddi, shaqaalaha baarlamaanka, meedhiyaha iyo amniga aslaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarkaatuhu.

- **Qodobka 3(3):** Waxaan rajeynayaa inaad dhageysataan guddoomiye Iidow iyo Guddiga Madaxabannaanba si fiican noo dhagaystaan, hoosna ka xariiqataan qodobkaas. Wuxuu leeyahay mabaadi'da asaasiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxay ku dhisan yihiin mabaad'ida awood qeybsiga nidaamka federaalka. Rag faro badan halkaan wey ka hadleen ee waxaan rajeynayaa waxa wax lagu qeyb saday beelo waaye, Soomaaliya waxa ay wax ku qeyb satay beelo. Nidaamka federaalka qaabka uu u dhisan yahay horaan u sheegnay marrabno inaan ku noqonno. Waxa waaye waxa aasaas u yahay jabhadihii dowladda dhexe la dagaalamay qaabkaas buu ku dhisan yahay magacaa rabto u bixi. "From north up to south , central" ku dar ama "south" muxuu ahaa dhan kastoo dalka ka mida qaabkaas u dhisan yahay. Sidaa darteeda, nidaam federaal aad dhahdaa bulsho weyn, oo baaxad weyn, oo deegaan weyn ku leh, "population" ayaa xuquuq dooda halkaasi ku maqan. Sidaa darteeda, haddaan shalay raalli idinkaga noqonnay muxuu ahaa dulmigaas raali idin kaga noqonay, hadda hanoogu darina inaad dastuurkii noo soo hoos galisaan oo .5 kii aad tiraahdeen ayaan raali ku noqonee hana sii dulminnina. Marka waxaan rajeynayaa meeshaas nidaamka federaalka aad u badasheen awood qeybsiga beelaha Soomaaliyeed inaad ku beddeshaan ayaan jeclahay. Xildhibaanno farabadan halkaan wey ka soojeediyeen hoostana ka xariiqda.

- **Qodobka 3(5)** : Ee ka hadlaaya haweenka horta waxaan maleynayaa qodobkaas asaga ah doodda badan ka taagantahay qolo "masnaa, wa sulaasa ,warubaaca" ka careysan ay ku dheggan yihiin hablaha oo maxuu ahaa ayagana waa laga la'yahay fasaxa waallaga la'yahay. Markaasa **وقرن فى بيوتكن** Ilaahaa yiri, masnaa, wasulaasa Ilaahaa yiri, laba doodana inaan qasab u qaadanno waaye. Waxa markii la leeyahay boqolkii soddon (30%) hala siiyo hala taqsiisiyo haweenka dulmigii yaa ku batay, waa sax in wada furnaado oo nidaamka doorashada loo wada sinnaado, sinaantey ku jirtaa in la yiraahdo. Laakiin markii haweenkii haayay bulshada oo dhan qoysaskii ka bateen oo kuraasahoodii la' ogyahay nidaamka doorshada lasoo dhaafay oo lagu qoro muxuu ahaa boqolkii soddon (30%) lagu qoro ayna boqolkii labaatan (20%) ka helin. Waxaan rajeynaya tiradaas ayada ah illaa marxalad danbe dadka wacyigooda ama ragga wacyigooda ka koraayo haweenka iney u dhaxeeyaan, beynal kinsi wal kaniif ama inay u dhexeeyaan Kushiinka iyo suuliga intey ka gudbaayo nadaafadda iyo cuntada caqligooda ka gubbaayo ay u aaminayaan bini aadam ayaga ka mid ah oo xaq u leh

waxkastaba. **Waxaan rajeynayaa in boqolkii soddon (30%) ugu yaraan sidaa loo qoro ayaan aamminsanahay.** Waxaa kaloo xigta dhanka jinsiyadda. Jinsiyadda sideedaba gabadha Soomaaliyeed dastuur ama maaddo dastuuri ah oo maanaceyso oo diideyso majirtaa inaney ajnabi guursan karin? Marba haddaa u oggalaatay gabadhii Soomaaliyeed iney guursato dee cunugeedana inuu qaato baasaboorka wax micna ah oo ku jira malahan oo haddaba raggeena meelahas iney aadaan bey lix (6) bilood kusoo qaataan baasaboor ayagoo guursada haween. Gabadha Soomaaliyeed yaan la takoorin. Carruurteeda ciddey rabto ha guursato, carruurteedana xaq wey ku leeyihiin maddaama hooyada Soomaali tahay waxaa sharaf ugu filan iney hooyadiisa Soomaali tahay.

- **QODOBKA kale ee ASTAANTA**: Qodobka 5(2) ee ilaalinta luqadda waxaa la socotaan bulshada baahiyaha gaarka ah qaba oo ay ururada bulshada ay matalaan qofkastoo Soomaali uu matalo codkooda waa in aan ku hadalnaa waxaanba dhihi lahaa cidkastoo "minority" ah oo la dhibaateeyay xataa beelaha kale haddey ku jiraan annaga hanna soo aadaano, annagaa u hiillineyno. Laakiin qolooyinka kale kasoo baxaayo ayagoo wataan booskooda hannoo yimaadeenno. laakiin dadkaan baahiyaha gaarka qabo ee indhaha l'a ama maqalka la' sidey kuwa kale xaq u leeyihiin ayay xaq u leeyihiin in waxa dalka kasocdo ay ogaadaan. Xaqaas si loo ilaaliyo luqatul ishaaraha "sign language" in la hormiyo ayaan soojeedin lahaa.

- **Qodobka 6aad**: Ee astaanta, aniga horta nin iska Reer Xamar ahayoo baadiyahaas waxba aan ka garaneyn. Laakiin qolo dugaagta la tacaamushay baa halkaan ka sheegtay xayawaanka shabeelka waxa halkaan noo keenay magaraneyno iyo cidda nagu kalliftay in calankeenna astaan looga dhigo. Laakin sida lagu sheegay, mid ciillan yahy, gaar u daaq yahay, cadow yahay, dad la socod uusan laheyn. Mararka qaarkood waxaad arkeysaa Soomaalida waxa ay saaxiibbo u la'dahay guri kasta waxa ay leedahay saaxiib istiraatiiji. Suuriyadaas adduunka dhan ku duuleen wey taagan tahay, waxey ku taagan tahay waxey leedahay saaxiib istiraatiiji ayay leedahay la yiraahdo 'Ruushka'. Kenya waxey leedahay saaxiib istiraatiiji layiraahdo Britian. Jabuuti saxiib istiraatiiji leedahay la yiraahdo Faransa. Annaga saaxiib istiraatiiji dunida kama lihin, cadow ma lihin, saaxiibna ma lihin. Malaha shabeelka in aan ka keennay ayaan u maleynaa. Bal shabeelkaas halla beddelo. Aniga waxaan soojeedin lahaa dhankaanna sabuul laga dhigo dhanka kalana laga soo jeediyo geel, dhanka hoosena la dhigo malaay. Bulshada Soomaaliyeed saas ay ku matasho, maddaama aniga sabuul 'community' matalo sidaa waxa weeyaan iney dadka u fahmaan bulshada ay ka kooban yihiin. Taasina waxaan leeyahay qeyb taasi ha lagu matalo .

- **Qodobka 9aad:** Caasimada iyo Mugdisho arrinteeda dhibaato ayaa ka taagan. Wey dhibtootay, dadkooga matalaad la'aan ayay noqdeen. Maanta waxaa jira bulsho yacnii marka laga soo tago beelaha kale ee ku soo qaatay kuraasta xaafadahoodii kale luuqyadii kusoo qaatay, maamul qoboleedyada ku soo qaatay. Beelo kale waxaa jirta matalaad sanatar aan ku laheyn annagaaba roon sanatar Fartuun kheyr allaha siiye reer Hirshabeele halkaas xabbo nasoo siiyay. Laakin bulshadii Banaadir degnayd oo Banaadiriga aheyd oo layaqaannay oo meel kale aan waxba kusoo qaadaneynin Aqalkii Sare aanba waxba ku laheyn. Matalaaddii iyo maqaamkii waxaan rabnaa in waxa weeyaan la keeno . Waan sugeynaa sababta dib loo dhigay dooddeedaa adag waan fahmi

karnaa. Maqaamka Mogdisho waa muqaddas ineysan dhaafin baarlamaankaan hadda jira waa inuusan dhaafin oo waxa weeyaan dooddeeda la keenaa laguna xaliyaa.

**Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
oo soo gabogabeeyey kulankii 14aad: Xildhibaanada sharafta leh, xildhibaanada iyo senatarada waa isku mid waa wado xildhibaano. Marka xildhibaano la yidhaahdo, dadka qaar waxay moodayaan ina senataradii laga tagay, dhamaanteen waa xildhibaano aad iyo aad baa loo dadaalay waad mahadsantihiin, inkastoo qodobkii la dhahaayey shirku intuu socdo xildhibaanku haduu iska baxo isaga oo aan fasax qaadanin, isaga oo maalintaa dhan golaha iman ayuu la mid noqonayaa labada xeer sidaas bay qabaan ee labada aqal.
Markaa qaladkaa uu iska jiraa waad u jeediin, dadka inoo soo hadhay.
Maanta waxaa inoogu eekaa jadwalkii la soo dajiyey la soo ajendeeyey in loogu gudbo cutubka 2aad maanta la isku ogaa.

100 xildhibaan macalaa marka la isku daro senatarada ayey tiradii gaadhay, doodii waa dhamaan waysay, waxaa noo harsan 18 xildhibaano iyo senataro marka la isku daro ayaa noo hadhsan. Arrinta aan ku jirno dastuurkan, runtii arrimihii kale waa ka duwanyahay waa arrin masiiri ah, markaa xildhibaanada barito oo markii hore maalin nasasho iska ahaan jirtay iyo xisaabaad kale in la galo oo salaasada ha dulqaato oo aan gabogabayno, hadii kale waxaan noqonaynaan in jadwalkii is qaban waayo oo dib u dhac kale yimaado, xili soon ayaa inagu soo socda waad ogtihiin.
Markaa baritoole sidoo horay loo soo xaadiri jiray ha loo soo xaadiro, xoghayaashuna hada ha direen, bari waxaan dhamaystiraynaan dooda 18 xildhibaan baa noo hadhsan, si aan arbacad u bilowna cutubka 2aad aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

**Taariikh:** Febraayo 20, 2024

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad | |
| Kalfadhiga: | 4aad | |
| Kulankiisii: | 15aad ee labada Aqal | |
| Goobta: | Villa Hargeisa | |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: | 143 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: | 28 Sanatar |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:20 a.m | |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:40 p.m | |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur “Madoobe”. | |

**Ajendaha:**
(7) Furitaanka Aayadaha Qur’aanka Kariimka ah.
(8) Ansaxinta Ajendaha.
(9) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista Soojeedimaha Wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 1aad: Baaqa Jamhuuriyadda (Qobobka 1aad ilaa 9aad).

**Kulanka 15aad:**
**Xil. Sheikh Adan Mohamed Nur “Madoobe” – Guddoomiyaha Golaha Shacabka**
Xildhibaanada sharafta leh, dhamaan guddoonka labada aqal waad salaamantihiin, waxaan rabaa intaan aan ansixin ajendaha, arrin yar oo soo kordhay baan rabaa inaan idiin sheego idiinka oo aad u mahadsa. Xildhibaano toddobaata iyo toddoba ah (77) waxay noo keneen mooshin aan ka qabayna oo ah in gabdhaha Soomaaliyeed barmaajishkaas wata.

Xildhibaanada soo qoray gabdho kaligood maaha, labada aqal bay isku jiraan waxay codsanayaa in mooshinkooda ay akhristaan. Mooshinka dastuuriyana sharciga waa waafaqsanyahay, markaa waxaan rabnaa ina hal gabadh ay u akhrido, midna ayido aad u ogolaataan, markaa guddiga ayaan ku wareejinayaa doodeena ayaan bilaabaynaan sidaas inaad nala ogolaatiin ayaan rabaa, madaama uu ajendaha uuna ku jirin, laakiin inaan ku sharafno madaama toddobaateenaya labada aqal soo qorteen intaas ayaan rabaa inaan idin ogaysiiyo.
Markaa taas idinkoo og in ajendaha la ansixiyo sidaas ku bilaabato ayaan idinka codsanayaa. Ajendaha sidaa inoogu ansixiya idiinka oo aad u mahadsan.

Qaybtaa hore waa mooshin ay soo gudbiyeen toddobaatan iyo toddoba (77) mudane oo labada gole ah. Waxaa ku lifaaqan **Xil. Foosiya** oo ayidday iyo **Xil. Fiyoore** isaguna ka hadlay fikirkiisa iyo wixii la isku ogaa mooshinka in lagu soo daray qodobbo kale oo aan ku jirin.
Mooshinka waxaa soojeedisay:

**Sen. Sareedo Mohamed Hassan:**
Ujeeddada: Soojeedinta wax-kabeddelka si waafaqsan Qodobka 74(3,e) iyo Qodobka 34aad ee xeer-hoosaadka golaha labada Aqal. Mudane Guddoomiye xubnaha labada gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee hoos ku saxiixan marka ay arkeen Qodobka 3(5) oo

ku saabsan haweenka iyo Qodobka 8aad oo ka hadlaya shacabka iyo jinsiyadda; marka ay tixgaliyeen muhiimadda ay u leedahay labadaas qodob iyo sida ay u dhigantahay in aan wax ka beddelno, maddaama ay khusayso haweenka Soomaaliyeed. Marka ay garowsadeen in ay tahay lagama maarmaan in wax laga beddelo, xubnaha labada gole ee Baarlamaanka, waxay soo jeediyeen sida tan in qodobbada loo beddelo:

- **Qodobka 3(5):** Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose **ugu yaraan (30%)**, gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo.

- **Qodobka 8aad:** In lagu daro faqrad 4aad oo u qoran sidatan: "ilma kasta oo u dhalo aabbe ama ay dhasho hooyo Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay inuu helo jinsiyadda Soomaaliyeed". Waxaa ku saxiixan mooshinka 77 xubnood oo labada gole ah.

**Xil. Fowzia Yusuf H. Adan:**
Waxaan u soo kacay in aan ayido arrintaa muhiimka ah ee taariikhiga ah, 60 sano dastuurkana lagama hadal. Wakhtigii hore ee laga doodayna waxa ay ahayd wakhti la cusbaa, adduunkuna uu heerkan gaadhsiisnayn. Waxaa jirtay nin walba oo halkan fadhiya hooyo ayuu leeyahay, walaal ayuu leeyahay ama uu dhalay. Mustaqbalka adduunka xidigaa lagu tartamayaa. Soomaaliya waxay u baahantahay, shinbiri hal baal kuma duusho, in labada baal si wanaagsan loogu wada duulo. Waan ayidayaa waana codsi inta diiddan in ay naga aqbasho.

**Xil. Mohamed Deeq Barre Omar:**
Waxaan rabaa inaan ka hadlo mooshinka. Waxaan ka qabaa dood qodobka ah ilmaha la leeyahay jinsiyadda Soomaaliya in ay khusayso. Walaalayaal, qofka Soomaaliga ah ilaalintiisa annaga ayaa la innaga rabaa. Waddanka argagixiso ajaanib ayaa timid, ilmo ayey ku dhaleen. A nnaga ayey na laayeen, markaa haddaad rabtaan in ilmahaasi "passport" Soomaali ah qaataan, haddaad rabtaan jinsiga Soomaaliga ah inuu dhumo anigu ma qabo. Si qofka Soomaaliga uunsan u lumin in lagu daro arrimahaasi.

Labo gabadha Soomaaliga ah ilaahay haddii uu qaddaro oo ay dhasho cunug ajanabi ah, waxaan qabaa cunugaasi cirka kama soo dhicin waddan ayuu u dhashay, aabihii wadan ayuu ka soo jeedaa. Waddankaas "passport" ha uga doonto oo haka keento, kaddib arrinkiisa ha laga arrimiyo, markaas haddii la siinayoo degganaasho, haday arrin kale jirto.
Laakiin meesha ay ka billaamanayso wixii socdaba haddii Soomaali noqdaan, wixii la dhalaba aan dhahno waa Soomaali, waa kuma qofka Soomaaliga ah?

Arrintaasi waa mas`uuliyad darro, anigu shalay warqadda la qorayey waan arkay, qoraalkeeda waan la socday waxa laga hadlay ama dadka laga codsaday waxa ay ahayd in la qoro haweenka 30% middaas ayaan ogaa. Qodobkani waa dheeri. Boqolkii soddon (30%) aniga ma diiddani, **laakiin jinsiyadda Soomaaliga ah yaan la luminin, xildhibaanno arrintaasi waa muhiim.**

1) **Xil. Mohamud Abdulkadir Haji "Jeego":**
Gudoonka labada aqal, baarlamaanka labadiisa aqal, saxaafada, ciidama amniga iyo labada Guddi ee kala ah gudiga dib u-eegista iyo guddiga la- socodka dhamaan waan idin salaamayaa aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarkaatuhu.

- **Qodobka 3(3)**: Mabaadi'da Aas`aasiga ah ee jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee awood qaybsiga marka laga hadlayo Meesha ay ku qorantahay nidaamka Federaaliga ah waxaan rabaa in lagu beddelo **"awood qaybsiga nidaamka beelaha Soomaaliyeed".**

- **Qodobka 9aad:** maqaamka magaalada Mugdisho cutubka 1aad ayuu ku jiray dib ayaa loo dhigay macnahaa anagu ma fahmin. Magaaladan mugdisho waxay u baahantahay maqaam, xuquuq, cashuurta laga qaado magaalada muqdisho waxaa lagu kabaa maamulo goboleedyada dalka, markaa canshuur bixiyo yaal weeye waxay u baahanyihiin xuquuq in ay helaan. Tan xigto waa deegaan doorashadaydii magaaladani dadka aan matalo ayaa dagan waxay u baahanyihiin in ay helaan xuquuq.

- **Qodobka 5(1):** Afka Rasmiga Jamhuuriyada waa Maay iyo Maxaa tiri, waxbadan ayaa ka socday ayaantan, waxaan rabaa in aan xoojiyo afka Maay-ga dastuurkeena kow ayuu ka yahay, hadana waa luuqada Baarlamaanka gudihiisa waa lagu liida, ma aqaano sababtaas, mudane Gudoomiye waxaan soojeedinayaa in lagu soo daro xeer hoosaadkeena maalaha shaqada ee saddexda maalin ee Baarlamaanku shaqada leeyahay in maalin ka mid ah inaad nagu shirgudoomiso afka Maayga, si dadkani ay u bartaan loona fahmo afka Maayga macnihiisa .

- **Qodobka 8aad: waxaan soojeedinayaa in sidiisii hore lagu soo celiyo** ee dastuurka ku qornayd laalistii yadoo aan loo dayeyn in qaab siyaasadeed qofka jinsiyadiisa lagala laabto, iyadoo la ilaalinaya muwaadiniinta in lagu xadgudbo qaab siyaasadeed .

  Tan haweenka, mudane Guddoomiye waxaa laga hadlay "passport" ciyaalka ajaanibta ma qaadan karaan, anaga Baarlamaanka ayaan ka tirsanahay qaarkeen xaasaskeena ayaan dirsanay, caruurteena halkaas ku dhalanaya waxaa la rabaa in ay jinsiyada soo qaataan, ilmihii ayaa "passport" ii soo qaadanayaa ayaa lagu dirayaa ciyaalkii, halkana gabadh soomaaliyeed hadii ay wiil dhasho waxaa loo diidayaa inuu jinsiyada qaato,wax sax ah ma aha, waxaan rabnaa in lagu tageero haweenka waa guursan karaan qof ajaanib ah, laakiin waxaan kula talinayaa qof ay guursanayaan hadii uu ajanabi yahay inuu ahaado qof muslim ah oo la ilaaliyo diinta islaamka iyo sharciga dalka, anigu waan tageersanahay cod dheer ayaana ku taageeraa in dumarka xuquuqdooda aasaasiga inaan ilaalino waa hooyo , maanta intaa rage halkan joogo barbaarinteena iyo waxbarashadeena hooyo qayb ka ah , aniga markaan sidaas leeyahay hooyo ayaa isoo korsatahay aniga si gaar ah hooyo ayaa isoo korsatay, waxaan ilaalinayaa xuquuqaadkeeda. Gabdhaha maanta horfadhiya maaha kaliya xuquuqda la rabo in ay yeeshaan dumarka, gabdhaha kaliya maahinoo waa gabadh kasta oo Soomaaliyeed weeyi.

- **Qodobka 9aad:** Maqaamka magaalada mugdisho wuxuu u baahanyahay dastuurkan in uu ku cadaado in labadiisa Aqal dib u-eegista dastuurka in lagu sixi doono, hadana waxaa loo raray cutubka 5aad, markaa Guddoomiye xuquuqda Gobolka Banaadir si gaar ayay

annaga noo taabaneysaa, waxaan rabnaa in la ilaaliyo nidaamka xuquuqda Banaadir, waxay leedahay maqaam gaar ah in ay yeelato horayna waan u sheegay cashuur bixiyayaal weeye.

Waxaan rabaa in aan Baarlamaankan labadiisa Aqal inaan ku wargaliyo in aan qof walba oo dulman aan garab istaago, waxaan rabaa anagana beesha 5aad waa dulmantahay inaad garab istaag u muujisaan, labada Guddi, Guddiga madaxbannaan iyo Guddiga la-socodka dib u -eegistana laga shaqaynayo wixii beesha 5aad lagu dulmiyo idinka ayaa qayb ka ah oo baritoole idinkaa wax la idinka waydiinaa.

2) **Xil. Mohamed Abdilaahi Kayse:**
Gudoonka labada aqal ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, xildhibaanada labada aqal, labada guddi ee dastuurka iyo dhamaam marti sharafta ka soo qayb gashay kulankan, waxaan idinku salaamaya salaanta islaamka aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Xildhibaanno waxaa ina horyaalla arrin masiiri ah oo taariikhi ah. Dhammaystirka iyo Wax-kabeddelka Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed oo aan baryahan u madlanayn kuna gudojirno waa taariikhi, haddii aan ku guulaysanno inaan ka dhigno mid ka turjuma baahida ummadda Soomaaliyeed, mid marjac u noqda sinnaanta, wadajirka iyo wada-noolaashaha shacabka Soomaaliyeed, dhowra qarannimada, madaxbannaanida dalkeena iyo kaaramada ummaddeena. Haddii aan ku guulaysanno waa arrin taariikhi ah oo u soo hoyatay ummadda Soomaaliyeed. Baarlamaanka 11aad waxa uu ku suntanaan doonaa baarlamaankii ku guulaystay dhammaystirka haykalka dowladdnimo ee is diiddooyinka badan dhex jiifeen.

Waa taariikh haddii aan ku guulaysanwayno oo aan ku guuldarraysanno in aan ka digno asbaabihii aan horay u soo sheegay. Baarlamaankani waxa uu mugdi u horseedayaa shacabka Soomaaliyeed, waxaan ku suntanaan doonnaa kuwa taariikh madow ku leh ummadda Soomaaliyeed gudaheeda. Muraayadda baarlamaanku waa guddoonka, waxaan ka rajaynaynaa in ay noo dulqaataan masuuliyad dheeri ahna muujiyaan, oo ay noo oggolaadan in aan si hufan u gudanno waajibaadkeenna.

Waxaan rabaa saddex qodob inaan ta`kiidiyo oo aan dul istaago. Saddex qodob oo “actually” isku sidkan marka si loo eego. Waa Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Qodobka 7aad, saddex qodob oo is wata oo kala ah geyiga, calanka iyo astaanta iyo Qodobka 8aad oo ah jinsiyadda Soomaaliyeed. Waxaan ku hormarayaa jinsiyadda, waxaan jeclaan lahaa in dib aan ugu xidho saddexda qodob ee aan soo sheegay.

Horta dib aan u laabto waxyar. Waxaan meesha ku fadhinnaa oo aan matalaynaa shacabka Soomaaliyeed oo uu nin walba deegaan ka soo jeedo. Anigu waxaan ka soo jeedaa “constituency” magaalo la yidhaahdo Buuhoodle oo qayb ka mid ah ay tahay dalka Ethiopia, qaybta sokena ay tahay Soomaaliya. Dadka “constituency” oo aan ku matalno Baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya qayb sanadkiiba waxay joogaan gudaha Soomaaliya, qaybta kalena dalka Ethiopia, jinsiyaddan i hortaalla kuma cadda qofka Soomaaliga ah ee asal ahaan ama isir ahaan Soomaali ah.

- **Qodobka 8(2):** Waxaan jeclaan lahaa faqradda 2aad in ay u qormato "jinsiyada Soomaalinnimo ee Jamhuuriyada Federaalka **Soomaaliyeed**" markaa waxay oggolaanaysaa qofkasta oo ku abtirsada ama isir ahaan ka soojeeda ummadda Soomaaliyeed in uu iska dhex arki karo. Markaan ku darno erayga Soomaalinnimo, waxaan sii jeclaan lahaa in aan dib ugu laabanlo "law No. 28, 1962 "Article" kiisa "Somali Citizenship" 3aad oo tilmaamaysa yaa Soomaali ah? Markaan taa ku xidhno waxaan aamisanahay inaan dastuurka aan ka shaqayno uu noqon doono dastuur matala ummadda Soomaaliyeed dhammaan.

- Haddii aan yara balbalaadhiyo, eray uu maalin hore ka dhawaajiyey walaalkay Amiin Jeesow, Soomaali baa nahay oo labadii Soomaali ayaan meesha ku matalnaa. Laakiin 3dii innaga maqnaa ee NFD, Kilinka 5aad iyo Jabbouti waxaan ogsoonnahay in aan kulligeen qayb ka nahay oo "citizenship" kooda qayb haysno. Waxaa inoo oggolaanaya inaan qaadanno Soomaalinnimada iyo isirkaan ku abtirsanayno. Haddiiba marba sidaas tahay, wax diidi kara ma laha wiilka ku dhashay Gaarisa ama Kilinka 5aad inuu citizenship Soomaaliyeed qaato wax ka hor istaagayo ma jiro.

- **Qodobka 7(1):** Oo u qornayd Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed ama Soomaaliya, xildhibaanno badan ayaa su'aal galiyey. Haddaan nidhaahno Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama Soomaaliyeed illaa intee in la eg ayey "cover" garaynaysaa dhul ahaan. Maamulka Somaliland qayb ma ka yahay mise kama mid aha? Guddigu way dadaaleen waxay bixiyeen xudduudaha Jamhuuriyada Federaalka oo ay qeexeen ilaa Gacanka Cadmeed kor ayey gaadhsiiyeen, waxaa ila qumman markaa in dib u eegis dastuurro badan oo waddammada dariskeenna ah inaan soo koobno oo sidii sharciga 1962.

  Waxaa kale oo aan rabaa si la mid ah sharrixii hore jinsiyad qofka Soomaaliga ah meelkasta uu joogo waxa uu innala wadaagaa calanka, dhulka, astaanta qaranka Soomaaliyeed, markaa dastuurka qaybahaas oo kala ah.

- **Qodobka 1(3), Qodobka 6(1)** iyo dhuka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya magac bixintaa waxaan jeclaan lahaa in guddigu dib ugu laabtaan oo ay ku qoraan "Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed". Waad mahadsantihiin, waxaan si gooni ah rabaa inaan ugu mahadceliyo bahda saxaafada oo dhab ahaantii wadanka gudihiisa dhib badan shaqadooda ka muta, waxaan jeclaanlahaa inay arrinka masiiriga ah ee aan haysano "accountability" dheeri ah noo muujiyaan oo Guddoomiyaha iyo Guddiyadu soojeedimaha aan soo jeedinayno way qoranayaan, laakiin saxaafadda ay ilaaliso xildhibaan kasta oo hadla qodobka uu taabto inta jeer ee uu taabanayo. Qodobka jinisyadda waxaa laga yabaa afartan (40) xildhbaan inay ka hadashay, 40 xildhbaan soojeedimahooda waa in ay "media" inoo hayaan si ay korjoogto innooga ahaadaan.

3) **Xil. Hassan Hurre Ugaas:**
   Gudoonka labada aqal, guddiga noo soo diyaariyey dastuurka, xildhibaanada labada aqal, marti sharafta kale ee waayaragnimada lagu soo xulay ee nala joogta, bahda saxaafada iyo intii aan iloobayba waad salaamantihiin**.** Waxaan rabaa Baarlamaanka intii uu furmay shirkani in aan u hambalyeeyo, sababta oo ah si "civil" ah oo qaddarin iyo xushmad leh yaan u hadalnay iskuna dhagaysanay waad mahadsantihiin. Mid waxaan odhan guddoonka iyo

hawlwadeennadooda, waxaan arkayey waraaqo  is dhaadhaafaya, magacyo isku kor qoran , xaashiyo " page one" ka baxaynin iyo----.

Waxay isoo xasuusisay sheekho la odhan jiray "animal farm" oo ay xoolihii go`aansadeen oo ay yidhaahdeen bini`aadankii eex ayuu ka dhammaan waayeen, bal innagu aan maamullo samaysanno. "Animal farm" book la dhaho ayey samaysteen, waxay noqotay in ay xeer isku maamulaan samaystaan, xeerkii qodobkiisii 1aad waxay ka dhigteen oo ay dastuurkooda ku qorteen "all animals are equal". Markii ay qasab noqotay in ay is doortaan si ay isku hoggaamiyaan, waxay ku darsadeen qodob kale oo la yidhaahdo" all animals are equal but some animals have no right". Markaa guddoonka waxaan oran lahaa bal inaad "book animal farm"la yidhaahdo soo yara akhrisataan.

- **Qodobka 1aad**: Wuxuu leeyahay Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaali ah, oo Muslim ah, lehna gobannimo. Gobannimo lama yeesho, shaadh baa la yeeshaa, dhar baa layeeshaa, geed baa la yeeshaa, adhi baa la yeeshaa "either" gob baad tahay ama gun baad tahay, markaa siiqadaa ha  la beddelo oo ha laga dhigo" Soomaaliya oo Muslim ah, **"Gobna ah**"haddii gobannimada la inasiin karo oo la innaga qaadi karo, laahaansho ma ahee gobannimada waa la noqdaa. Siiqadaa in la yara habeeyo waan soojeedinayaa.

- **Qodobka 7(3):** Asalkii Dastuurka, Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee khilaafaadka soohdimaha caalamiga ka dhasha in xallintooda loo maro tub nabadeed iyo iskaashi waafaqsan qawaaniinta dalka u degsan iyo kuwa caalamiga ah, waa laga tagay. Sababta loo tiray ayaa ah in ay shaki gelineyso soohdimaha geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayna u horseedeyso inay khilaafaad ka abuurmi karaan xuduudeheeda. Waxaa jira nin xoolo badan leh , lo` badan ayuu leeyahay, laakiin ciidan raaca oo badan ma haysto, markaa faahfaahinta badan ee ay soo qoreen waxay ka mid tahay xoolahaa waa la hadyeeyaa waxaa la yidhaahdaa libaaxu iyo dhurwaagu waxa ay ka cuni karaan ha ka soo cunaan, maddaama ay ciidan haysan inta soo noqota ayaan iska haysanayaa, waxaad moodaa "explanation"fiican oo ay ina siiyaan in ay waayeen oo iska hadleen oo ay dhaheen sidan iska qora.

  Waxaa dhab ah annaga iyo Ethiopia markaan tusaale ahaan" specifically focus "  aan saaray Ethiopia, xudduudaha "dispute" uu ka jiray intaan dawladda la noqon calammo iyo soohdimmo la kala siin uu ka jiray. Afar iyo toban goor boqortooyooyiin Soomaali ah iyo kuwa Ethiopian ah ay horay isku dirireen waa "historical" ninkii rabaa "Google it". Intaan xorriyadda qaadannayna ayadana qaar keen badan ayaa joogay labo dagaal oo "major" ayaan galnay. Labadaa dagaal ee "major" ah dumnad iskumaan qabsanin, ceel biyoodna maan isku haysanin, soohdimaan isku haysannay inkiraadna malaha, meel aan kaga heshiinnay oo aan nidhi khilaafaadka soohdimaha ee intaas oo dagaal aan ka galnay uu dhammaaday anigu ma garanayo. Mana ayna ka heshiinin, markaa inaynu khilaafaadkii innaga iyo iyaga innaga dhexeeya aan qoriwayno oo soohdimahaa waa sidaas oo aan ku xurmayno, waxay dhashay kii aan isku haysannay aan annagu ku haysanay iska daaye ay baddeenii iyo dhulkii ay hadda damacdo ayey dhashay taasi.

  Maahmaah ayaa ahayd "hadii aan aygaygii hore ka doodi lahaa ama aan ka garrami lahaa kayga danbe lama dileen". Kii hore markaan ka aamusnay waxay dhashay intay dhihi lahayd

waar bal iska aamusoo waa la idiin daayee, inay dhahaan way jilicsanyihiine in kale kaga soo darsada oo bad ka hela. Waxaan idin xasuusinyaa ninkii daawaday ayaa daawadee waxaa jira "film" "God must be crazy" waxaa ku jira cunug oo inta uu reerkoodii ka lumay, dhurwaa ayaa arkay ilmihii, kaddidna uu cayrsaday. Markuu cabbaar daba orday, cuniggii waxa uu qaatay qori ka dibna madaxa ayuu saartay. Dhurwaaguna wixii ka dheer uu ka cararaa baa la yidhi uu ka istaagay, cuniggii qorigii ayuu madax ku haystay ilaa uu meel nabadgalyo uu ka helayo uu gaadhay oo meel buur ah ayuu ka fuulay. Innaga waxaad maqli xildhibaano halka intay soo istaagaan la soo istaagaya Ethiopia waa 120 million. Waar bal cagaha aan dhulka ku hayno, xitaa qoriga madax ma saaran waynay waa intaas oo ay innaga cabsatee. Cagaha aan dhulka ku hayno, xudduudaha iyo "dispute" ay iyadu abuurtay oo hadda ay dhul ka rabto waa innaga dhexeeyee, mid aan innagu horay isku haysannay wali aan meel isla dhigin way jiraan. Markaa khilaafaadka annaga Ethiopia naga dhexeeya si nabad ah lagu raadiyo sabab loo qori waayo ma jirtee, **qoraalkaa sidiisii ha lagu soo celiyo.**

- **Qodobka 8(1):** Waxa uu leeyahay Shacbiga Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid, lamana kala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhammaan muwaaddiniinta. "Absolutely", sida uu u qoranyahay way fiican tahay, laakiin ma dhammaystirna, yaa muwaadin ah waa ay ka maqantahay? "definition" inaan bixinno aad ayey muhiim u tahay, nin baa laga yabaa in uu qabo Soomaaliya waxay ku koobantahay xudduudda.

  Soomaalinnimadu xudduud kuma koobna, xudduud beenaadka aan la leennahay Itoobiya ama Kenya, in ay xudduud beenaad yihiin waxaad ku ogtahay "signature" kamaan ahayn markii "charter" **xudduudaha, sidooda ha loo dhaafo la dhahayey saxeexayaasha kuma aanan jirin.**

  Gabdho yar yar oo intay Masagawaa iyo ku dhasheen Cowswayne iyo Badhan ayaa hadda ganacsiyada ugu waa wayn ku leh Niarobi iyo Addis Ababa "passport" iyo mustawaqihii Itoobiya ay haystaan waxay ku qaateen Soomaalinnimo, waxaa u saxiixay "chief" halkaa deggan ama isku reer ha ahaadaan ama reer kale ha ahaadaane. Soomaalinnimadu sidaas ayey inooga dhaxaysaa, meel walba ayey ka jirtaa. Xudduud kuma koobna kani waaba xudduud beeneed. Dhalinyaro badan oo ka booday dayrka Maraykana 90% waxay wateen passport Keenyaati ama Itoobiyaan ah. Soomaalinnimada ayey ku qaateen. Soomaalinnimadu waa muhiim yaan la kala dhantaalin.

  **Faqradda labaad** ha lagu daro oo ha la yidhaahdo "qof kasta oo asalkiisu Soomaali yahay, iyadoon loo eegayn goob dhalashadiisa iyo goobta uu joogo waa muwaadin Soomaaliyeed" **intaa in lagu daro ayaan codsanayaa**.

4) **Xil. Mukhtar Mohamed Guled:**
Gudoonka iyo dhamaan xildhibaanada labada aqal, marka ugu horaysa aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarkaatuhu. Runtii aad iyo aad ayay farxad iigu tahay in aaan kamid noqdo xildhibaannada Baarlamaanka 11aad ee maanta iyo maalmihii la soo dhaafay iyo maalmaha na soo aaddanba u taagan kashaqeynta arrimaha dastuurka iyo dhammeystirkiisa dastuurkii Ku-meelgaarka ahaa muddii ka badnayd 12ka sano. Waxaan rabaa inta aan guda gelin qodobbada aan doodda ka qabo waxaan rabaa in aan dhowr arrimood xildhibaanada saxiibbada ah ee labada aqal iyo dadka na daawanaayo aan ugu muujiyo oo kow ay kamid

tahay. Dastuurka waxaan sheegnaa markasta, qofkasta oo soo istaago in uu yahay waa heshiis bulsho haddana sidaa ay tahay ayada oo ay saas tahay waxaad mooddaa xildhibaannada qaar in ay ka xishoonayaan in ay dastuurka si dhab ah uga hadlaan. Maaddaama waxa aan kahadlayno ay yihiin heshiis bulsho, muddo qarniyo ah ama sanado ah sii socondoono, waxaan usoojeedinayaa xildhibaannada saxiibaday ah in ay si cad uga run sheegaaan oo aan cidna aan laga xishoonin, oo cidna aan loogu aabbo yeelin, maadaama uu heshiis bulsho yahay. Qof walba oo meeshaan fadhiyana wuxuu matalaa shacabka Soomaaliyeed guud ahaan iyo "state" yo gaar ah ayuu matalaa. Wixii dan u ah shacabka Soomaaliyeed iyo deegaannada uu kasoo jeedo in uu ka run sheego ayaan usoojedinayaa saaxibbadayda, arrinta kale ee aan rabo in aan xildhibaannada ku guubaabiyo waxaa kamid ah xildhibaanno qaar ayaa inta ay soo istaagaan waxay leeyihiin dastuurkaan looma dhamma, waxay ahayd in ay wadar oggol noqoto in siyaasiyiinta laga soo tala galiyo ayay ahayd. War xildhibaanow annaga yaan matalnaa? Hadii siyaasiyiin bannaanka jooga oo toban(10) sano kahor xil sooqabtay ay rabaan dastuurka in ay maamulaan annaga maxaa naloo dirsaday shaqadeenna maxay tahay?

Markasta oo aan soo istaagno waxaan sheegnaa in dastuurka shaqadeenna tahay. Haddii dastuurka ay shaqadeenna tahay, sabab majirto aan siyaasi bannaanka taagan aan oga war sugno in aan kasii shaqeyno. Sidaa darteed xildhibaannada waxaan leeyahay shaqadaan waa shaqadiinnii, shacabka Soomaaliyeed idinkaa uga masuul ah. Qabiil Soomaaliyeed oo meeshan ka maqan in uu jiro ilama aha. Haduu jirana qofbaa matalaayoo oo u fadhiya. Sidaa darteed, waxaan qabaa xildhibaannada shaqadooda in cid kale masuuliyad ugu dhiibin oo ay kashaqeeyaan.

Arrinta saddexaad oo doodda ka hor in aan soojeediyo aan rabo waxay tahay, siyaasiyiinta qaar oo xildhibaanno nala ah oo shalay halkaan ka hadlay ama maalintii ka horreysay oo lahaa xildhibaannada ay soo xuleen dowlad goboleedyada waad ku khasaarteen. Waxaan leennahay siyaasiyiinta noocaas ah, xildhibaannada shalay lasoo xulay ama sida khaldan qaabdarrada ah lagu soo doortay annaga ayaa kamid ahayn. Laakiin maanta ma oggolin in shacabka Soomaaliyeed iyo xildhibaannada soo socda lagu doorto qaabkii qaabdarrada ahaa oo aan annaga ku soo baxnay in ay ku soobaxaan diyaar uma nihin. Sababta aan u furnay dastuurka oo aan rabno in aan kumeel-gaarka uga saarno waxay tahay in shacabka Soomaaliyeed ama qofkasta oo raba in uu xilqabto in uu si xorriyad ah ku soobaxo ayaan rabnaa. Lakiin hebelna waan diidaayaa hebelna waan oggolaanaayaa in nin siyaasi ah ama madaxwene dowlad goboleed, ma oggolin sidaa hala ogaado .

- **Qodobka1(1):** Waxaa ku qoran, Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah, Muslim ah. Waxaan qabaa in lagu daro sida saxiibaday hore ay soojeediyeen "**ah muslim sunni ah**" oo lagu caddeeyo halkaas saxiibdaday iga horreeyay ayaan xoojinayaaa. Sidoo kale, lehna gobonnimo ku salaysan caddaalad, meeshaas waxaa laga soo tagay caddaalad bulshadeed oo qodobka koowaad oo aad labada qodob ka dhigteen ku qornayd markii hore. Waxaan soojeedinayaa in caddaaladda lagu daro caddaalad bulsheed. Hadda ayaan ka war haynaa iyadoo shanta beelood wax lagu qeybsado, beelaha qaar dulmi cad hadda lagu haayaa oo awood qeybsiga dalka si khaldan u dhisanyahay. Waxaan soojeedinayaa oo aan xoojinayaa meeshaas caddaalad ah "**caddaalad bulshadeed"** in lagu soo daro .

- **Qodobka 1 (2)** : Waxaa ku qoran, Soomaaliya waa Jamhuuriyad Dimuqraadi ah , faqradda 1aad iyo 2aad iyadaa is khilaafsan. Waxaan soojeedinayaa sida faqrada kobaad ku qornayd oo ahayd Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah in lagu qoro oo lagu muujiyo. Meesha waa Jamhuuriyadda Dimuqraadi kaliya aad ku qorantahay in lagu qoro Soomaaliya waa **Jamhuuriyad Federaali ah**.

- **Qodobka1 (5):** Waxaa ku qoran gobonnimada, madaxbannaanida, midnmimada qaranka iyo xudduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa laguma xad gudbaan ayaa ku qoran. Sidaa darted, waxaan soojeedinayaa sida saxiibbaday qaar horay u soojeediyeen, gobannimada, madaxbannaanida, midnimada qaranka iyo xudduudaha **"Dhuleed iyo Badeed"** in lagu muujiyo.

- **Qodobka 2(1)**, Waxaa ku qoran, Islaamka waa diinta dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, horrayna waxay u qornayd Islaamku waa diinta dowladda. Aniga shaqsi ahaan waxaan taageersanahay midka danbe ay guddiga soo qoreen oo ah islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Sababtoo ah dalka ayay ku dhexjiraan shacabka Soomaaliyeed iyo dowladdaba isagaana ah mid baahnsan. Waxaan soojeedinayaa **in sida guddiga u soo qoreen loo qaato**.

- **Qodobka 2(3)** ; Waxaa ku qoran,waxaa reebban cayda Diinta Islaamka , karaahiyadeeda iyo waxkasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta islaamka. Qofkasta oo u gafa Diinta Islmaaka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda. Xeerarka Jamhuuriyadda meesha aad ku qorteen waxaan soojeedinayaa in lagu qoro "**Shareecada Islaamka**" oo aad ka tirtaan xeerarka Jamhuuriyadda Meesha aad ku soo qorteen.

- **Qodobka 2(2):** Oo ku qoran, Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya waa dal muslim ah kaliyaa ku qoran **"sunni " ah in aad ku dartaan** ayaan soojedinayaa.

- **Qodobka 3(3)**: Waxaa ku qoran Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya waxay ku dhisan tahay mabaadii'da aas`aasiga ah ee nidaamka awood qeybsiga federaaliga ah. Meeshaas waxaan u malaynayaa guddiga ahaan in aad ula jeddaan federaaliga dowlad goboledyada. Dowlad goboleedyada waa lagu kala badan yahay, soomaaliya kuma dhisna federaali waxay ku dhisan tahay qaabka 5ta beelood ama beelaha Soomaaliyeed siday wax u qaybsadaan, sidaa darteed meesha aad ku qorteen awood qeybsiga federaliga ah waxaan soojedinayaa in lagu beddelo **awood qeybsihga beelaha Soomaaliyeed**. Haddii aan lagu muujin karin 5ta beelood in lagu muujiyo beelo Soomaaliyeed ay wax ku kala qeybsadeen heshiisna ku yihiin dowladda Soomaaliyeed.

- **Qodobka 5aad:** Qodobkii hore waxaa ku qoran asalka dastuurka Afafka Rasmiga ah kan danbena waxaad ku soo qorteen Afka rasmiga ah. Waxaad sheegteen Af Soomaligu waa Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, Af Carabiguna waa luuqadda labaad. Marka meshaas waxaa ku jira in ay labo luuqadood yihiin Soomaali mid ah iyo mid luuqadda Carabiga ah. Ciwaanka hore waxaan qabaa in aad sidiisii hore ku soo celisaan oo aad ku soo qortaan "**Afafka Rasmiga ah**", maaddaama Af Soomaali iyo luuqadda Carabiga labaduba ku qoran yihiin.

- **Qodobka 5(2):** Waxaa ku qoran, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa. Waxaan qabaa sidii horay loo soojeediyay waxay **daryeelaysaa in lagu soo celiyo** ilaalisaana in lagu beddelo **ilaalinaysaa** iyo meesha hormarisaa ah **in lagu beddelo hormarinaysaa** oo Af Soomaaliga siiqadiisa la toosiyo ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 6(1):** Erayga **Bey-cad fasiraaddeeda** waan idin kaga fadhinnaa. Wax fahma illaa haddaa waa la la'yahay. Guddiga ayaa laga rabaa in ay fasiraan "Bey-cad" meesha ay ka keeneen.

- **Qodobka7(3):** Waxaa ku qoran xudduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo la tilmaamay oo Waqooyiga iyo Gacanta Cadmeed iyo waxaas lagu qoray. Qodobkaa waxaan qabaa in gabi ahaan in laga saaro ayaan soojeedinayaa. Tusaale, dhamaan dowladaha caalamka kajira waad "Google" garayn kartaan, waad baari kartaan, dal xudduudihiisa ay ku qoran yihiin meesha ay ku eg yihiin ma jiro "totally". Waxaan soojeedinayaa farqadda afraad oo **xudduudaha lagu muujiyay in aad meesha ka saartaan.**

- **Qodobka 8aad:** Shacabka iyo jinsiyadda, guddiga aan ku ammaanayaa sida ay u soo qoreen. Waa sida saxda ah haddii run la isku sheegana dhammaanteen aan wada aamminsannahay. Fulinteeda ama ka qeyb qaadashadeedana ay sax tahay. Waxay u qorantahay, "Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa mid, lama kala qeybin karo, wuxuu ka kooban yahay dhammaan muwaadininta. Jamhuuriyadda laga hadlaayo waa tee horta? Aan isla fahanno xildhibaannada saxiibaday ah ee meeshaan soo istaagay ee ka hadlay muwaadinka Keenyaanka ah ee Soomalida ah ee Gaarisa ama Mandera jooga, ama midka Jigjiga jooga ka hadlay ee leh waa Soomaali. Waa run magaca Soomaalinnimada ayaan wadaagnaa. Jabbuuti ayaa nala mid ah. Sidoo kale, wadammada dariska Keenya iyo Itoobiya, Soomaalida ku nool ayaa nala mid ah. Waxaan qabnaa shacabka Jamhuuriyada ku nool waa waxa ku dhexjira "Number Seven". Wixii ka baxsan ajnabi ayuu noqonayaa. Xildhibaannada soo qaadanayo wadammada kale marka la tago "passport" ka inta laqaato lagu safri karo isagana inta ha imaado sida dadka ajaanibta u qaataan oo sharciga ah ha u maro kadibna haku safro. Laakiin, Shacbiga Jamuuriyadda ee doorashada ka qeyb qaadanaayo ee xilalka dalkaan ka qabanaayo waa shacabka ku nool "Number Seven". Dadka ku eer sheeganaayo Soomaliland ayaa maqan, Soomaliland Soomaaliya ayay kamid tahay qariiradda "NumberSeven" ka ayay ku dhexjirtaa. Laakiin wixii ka baxsan Itoobiya, Kililka Shanaad ha ahaado ama NFD ha ahaato. Xilligaan la joogo Soomaaliya kamid ma aha shacbigeeda. Marka ay halkan imaadaan ama marka aan halkaa tagno, sida aan ajnabi ugu nahay ayay ajanabi ugu yihiin. Laakiin waxaan wadaagnaa magaca Soomaalida. Waxaan qabaa in sideeda loo daayo oo "Number seven " ayaanba tabar u la'nnahay **wixii ka baxsan in aan nala soo galin ayaan qabaa.**

- **Qodobka 8(4)** : Sidaad u tirteen in loo soo celiyo ayaan qabaa. Waxay ahayd diidmada laalista iyo ka qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed. Tusaale aniga waxaan ahay Soomaali waligay qurbaha ma tagin, intaan ku dhashay, ku barbaaray. Haddii jinsiyadayda la iga laalaabto inteen aadayaa? Meel aan aadi karo mahaysto. Waxaan qabaa qofka jinsiyadda Soomaaliga u dhashay marnaba lagama ceshan karo **sida ay u qornayd in loo soo celiyo** oo aan gorgortan laga geli karin.

5) **Sen. Seynab Ismail Mohamed:**
Gudoonka, dhamaan xildhibaanada labada gole, bulshada rayidka ah iyo labada Guddi ee soo diyaariyey dastuurka aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Waxaan halkaan ku fadhinnaa ummadda Soomaliyeed baynu ka koobannahay haddii aan ummadda Soomaliyeed ka koobannahay waxaan isku raacnay in dastuurka lafuro. Haddii dastuurka laga shaqeynayo waxaa loo bahanyahay niyad sami iyo wanaag iyo rajo fiican oo ummadda Soomaaliyeesd naga rajeynayso in aynu kaga shaqeyno. Waxaan ku faraxsanahay in ay baarlamaankaan ka midyihiin dhalinyaro "appetite" u haysa maskax nadiif ah leh oo qodobbada si waangsan u soo qeexayay oo uu kamid ahaa yarkii shalay yiri heesta halagu beddelo wax duco ah. Runtii waxyaalo kuu dhadhamaya ayaa jira, waxaa jira sida lambarka layiraado ebar tiradee waxba kama beddelo waxaa jira siyaasiyiin sidaas ah oo dhalinyaradaan maskaxda nadiifta ah leh in ay beddelaan. Waxaan uga digayaa baaqna u soojeedinayaa arrintan dar Allah iyo masuuliyaddii aan u dhaarannay baan uga shaqeynaynaa. Waxaan rabnaa qofwalba maskaxdiisa ra'yigiisa iyo waxa ay la noqoto halkan lagaga doodo. Bulshadii rayidka ayaa "check and balance" sameynayso oo innala joogto halkaan. Intaa oo boqol oo qof kagama shaqeyn karaan wax lugooyo u ah ummadda Soomaaliyeed. Laakiin haddii aan is iraahdo buuggaan akhri oo aan niyad fiican ku akhriyo, waxaan garanayaa wixii aan ka shaqeynayo. Laakiin haddii uu [Madaxweyne]Xasan Shiik iiga dhex muuqdo oo madaxweyne ah oo ay muuqato in aan raalli ka ahayn shaqadaas waxay noqonaysaa shaqo khalkhal leh oo qodob halkaan ku qoranbaa mid ayaan dhaweyd halkaan soo istaagay si khaldan u akhrinayay. Waxaan rabnaa in aan si daacad ah oo lillaalhi ah oo maskaxdeennuna aynu kaga shaqeyno. Qof u quudhi kara "region" kiisa ama ummadda uu matalo wax xun halkaa in uu uga qaado majiro. Laakiin in khalkhal la geliyo dastuurkii wakhti baa innagu socda. Waxaan rabnaa xilligiisii in aan ku dhammeyno. Waxaan rabnaa in aan juhdi galinno. Ramadaan baa soo socoda in maalin walba qof wali kurisigii usii muuqdo in uu khalkhal galiyo way ila khaldantahay. Waxaan qabaa waxan layiraahdo xudduud beenaad 1954 tii lanagama qaadin awood markii Soomaalidu diidday guumaysiga, annagoo la innagu xumaynayo ayaa Ingiriisku inna waxa uu ujaray " Reserve erea" inna wuxuu u jaray dhinaca Kenya. Marka in aan ayidno oo dhulkeennii iyo dadkeennii sharciyayno ilama wanaagsana. Mar unbay iska imanaysaa, wax walba wakhti bay leeyihiin. Waxaan rabnaa in aan ummaddeena Soomaaliya sidaa loo xusay aynan kala soocnayn.

- **Qodobka 3(5)** Waxaan soo dhaweynayaa baqii gabdhaha oo laga aqbalay waxaan u mahadnaqayaa ragga xildhibaannada ah, geesiyada ah oo walaalahay ah, oo shalay noo saxiixay oo nagu taageeray. Waxaanna canbaaraynayaa saqiir siyaasadeedka doonaayo inuu maalin walba maskaxdii iyo jahidii uu golaha ku socday marin habaabiyo. Soomaaliya hanoolaato.

6) **Xil. Abdulasis Mohamed Mohamud QAMBI:**
Guddoonka labada aqal, labada aqal ee baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya salaamu calaykum waraxmatulaahi wabaraakaatuhu. Arraar badan gali mayo wakhit danbe baa la joogaa. Maalintu waa maalin aan maalmihii shaqada uga barannay ahayn. Marka waxaan rabaa in aan boobsiiyo sagaalka qodob. Runtii intooda badan waa laga wada hadlay. Sidii aan u arkaayay baa looga hadlay. Lakiin waxaan is iri haddii aad

tirada badanin waa naqaannaa qoloda baarlamaanka oo minute lama qaado. Marmar Baarlamaan waxa dhaca wixii ayaa meeshiisa ku soo noqda waan ayidayaa cidkasta oo iga horreysay.

- **Qodobka 1 (1):** Meeshaa muslimka ah baan ka qabaa in "**Islaam laga dhigo**". Dad badan baa sunni ku daray. Aniga sunni-ga waxaan leeyahay qeybta diinta halloo raro qodobokaa intaas ayaan ka qabaa meesha muslimka ah "Islaam" ha lagu daro oo dowlo Islaamiya ,dowlo muslim ah dunida kama jirto.

- **Qodobka 1(3)**: Meesha la leeyhay shacbigaa wuxuu u xilsaaranaya awoodaha u isticmaalayaa si toos ah iyo si dadban u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay. Hay'adaha shacbigu uu doorto badanaa waa labada aqal, haddii la soo gelin karo siiqada waxaan qabaa **in baarlamaanka la soo geliyo.**

- **Qodobka1(5)**: Gobannimo iyo madaxbannaani maxaa u dhexeeya? labaduba waa qoran yihiinee.

- **Qodobka 2aad:** Oo diinta ka hadlaya aniga waxaan qabaa in siiqada oo dhan la beddelo oo, waxaan qabaa in la qoro "**diinta dalka iyo dowladda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed waa Islaam sunni ah** ". Halkaas sunniga in lageliyo ayaan qabaa, oo Meesha ay qorantahay islaamku waa la leeyahay diinta, dalka iyo dawlada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa islaam sunni ah in halkaa la galiyo ayaan isleeyaay oo sidaa loo qoro, maxaa yeelay dowladdana waa naqannaa oo macno gaar ah ayay bixisaa oo canaasiir dowladnimada ku samaysanta ayaa jirta. Dalkana waa layaqannaa oo macno gaar ah ayuu bixiyaa. Kuwaas mid kamid ah ayay ahayd. Marka labaduba in la xuso waan qabaa dowladdana la xuso dalkana la xuso.

- **Qodobka 2(3):** In la caayo diinta Islaamka, waxaan qabaa in la reebo in la caayo, waxyaabaha muqaddasaadka oo dhan. Dadyowga kale xitaa diimahooda in la caayo iyadana in la xuso waan qabaa, maxaa yeelay, Suuratul Ancaam, Aayadda 108aad Allah wuxuu ku leeyahay, **وَلَا تَسُبُّوا الَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ فَيَسُبُّوا اللَّهَ عَدْوًا بِغَيْرِ عِلْمٍ** Waxaa dhalisa mararka qaarkood in diintaada la caayo marka aad qofka kale muctaqidaadkiisa iyo diimihiisa gasho. Taana waan qabaa in sidaa laga dhigo. Waxaan kale oo aan qabaa xeerka lagu qaadayo qofka caaya diinta in ay noqoto **Shareecada Islaamka oo uuna noqon dastuur**. Xildhibaanno badan baa soojeediyay iyaduna waan ku raacayaa. Meelkasta oo Muslim ku qoran in Islaam lagu beddelo ayaan is leeyahay.

- **Qodobka 3(4)** : Waan fahmi waayay 5 goor ayaan ku celiyay ma hakadka(,) iyo joogsiga (.) meelaha ay kujiraan baan aad u fahmi waayay, bal dib haloogu noqdo iyaduna. Waxaan rabnaa dastuur qof kasta uu fahmi karo. Dastuurkii hore waxaynu ugu wareernay halkaan ayaan xasuustaaa. Qodobka 72aad baan toban beri ku doodaynay oo nin walba dacal heystay oo daliishanaaayay, waana iska soo horjeeday. Aragtiyahayagu aragtiyo is diiddan baan hal qodob u daliishannay. Maddaama wixii aan faraha kula jirno si wixii aan uga kaaftoonno, luuqad sahlan oo la fahmi karo oo aan micno badan oo lajiidjiidan karo yeelan karin baan rabnaa oo luuqad waadix ah.

- **Qodobka 3(5):** Oo haweenka ka hadalaysa, haweenka waan taageersannahay in boqolkiiba soddon (30%) loo qorana wann qabaa. Sidii loo dhigayay oo boqolkiiba soddon (30%) ahayd si ka duwan baan qabaa. Aniga waxaan qabaa in qodobkaan lagu daro ugu yaraan **saddex meelood hal meel in in saddexda laamood** ee dowladda heerkasta oo ay yihiin ka helaan.

- **Qodobka 3(6)** : Waxaan qabaa siiqada uu u qoranyahay in wax laga beddelo. Awood dowladeedka Af-Soomaali maaha waa wax lasoo turjumay ayaad modaa. Awood dowladeedka meesha ku qoran waxaan is leeyahay halaga dhigo **heerkasta** halla soo hormariyo heerkasta oo awood dowladeed ah waxaa loo adeegsan karaa hala dhaho.

- Awood dawladeed **ka ha laga saaro hadhow marka ha la soo daabacayo**

- **Qodobka 3(7)** Webiyada hallagu daro dad badan ayaa soojeediyay, webiyadeennu waxay ka imaadaan inta badan dal aan daris nahay. Haddii aan lagu caddeyn oo aan mabaadi'da dastuurka ku qoranna aanay ka mid noqon, waxaa laga yaabaa hadhow in aan awood badan lagelin.

- **Qodobka 4(3**) Waxaan is leeyahay xeerkasta, go'aan kasta tallaabo kasta meesha ay ku qoran tahay, qofkalena waa yiri "kasta" halloo wada danbeysiiyo **"xeer go'aan ama talaabo kasta"** hala dhaho qaraarna halalgu daro ayaan qabaa. Maxaa yeelay goloyaasha marwalba qaararro ayaa ka soo baxa. Meesha ugu danbeysa isla faqraddaasna waxaad ka tirteen si waafaqsan dastuurkaan. Aniga waan qabaa **in lagu soo celiyo si waafaqsan dastuurkaan**. Maxaa yeelay isla dastuurkaan waxaa ku "mention" garaynsaan dastuurkii 1960kii. Marka meeshii hadhow la isku qabsan lahaa oo qolo la imaan lahayd dastuurkii 1960kii, waxaan qabaa in lagu caddeeyo si waafaqsan dastuurkaan hallagu soo celiyo oo dastuurkaan ha noqdo waxa lagu kala baxaayo.

- **Qodobka 4(1)**: Waxaa ku qoran Shareecada Islaamka ka sokow Dastuurka Jamhuuriyada waa xeerka ugu sareeya ee dalka isaga ayayna u hoggaansamaysaa xukuumadda. Xukuumadda keliya meesha la sheegayo dhammaan hay'adaha dowladda oo dhan hala sheego. Afafka maddaama meesha labo AF ay ku qoran yihihiin ciwaanka Afafka halagu soo celiyo. Maayga iyo Maxaatiriga xasaasiyaddiisaa badan oo marrabo in aan galo.

  Waxaan is leeyahay luuqadaha, luuqadda dhagoolayaasha halagu daro, maxaa yeelay muwaadiniin Soomaaliyeed weeye oo xaquuq u leh oo xaq u leh in ay wax bartaan, oo xaq u leh in ay maxkamadaha tagaan oo la dacweeyo oo iyaguna wax dacweeyaan. Waa in luuqaddooda loo qoro waan qabaa. Luuqadda nooca ay noqonayso waa la isku qabsan karaa, laakiin waxaa jira "one Federation of deaf" oo luuqadda u sign gareeyay la islayaqaan oo uu nin Dr ah sameeyay. Dastuurrada adduunka laga isticmaalo boqolkiiba toddobaatan (70%) waa ku qorantahay luuqadda dhagoolayaasha. Waa luuqad gaar ah oo calaamada ah, luqaddaas waxaan qabaa in la adkeeyo oo la qoro ayaan qabaa.

- **Qodobka 6(1):** Qodobkaan "Bey-cad" kaliya la isku haysto wax badan oo aan garanwaayay baa kujira. Qodobka 6aad kalmadda xidaayad qofkii fahamsan kalmad kasii fudud oo lafahmi karo halagu beddelo. Isla faqradda 2aad, hareeraha waxaa ka haya laba shabeel oo

isu tusmaysan. Isu tusmaysan kalmad halkaan macno ku samaynayso iilama muuqato, is eegaya miyaa laga wadaa? Ma aqaan sida ay u qorantahay, idinkaa la rabaa in aad dib ugu noqotaan.

Heesta calanka shaqo idinka idiintaallay ma aha, oo la idinkuma eedayn mayo. Wixii ay ahaydba waa wax muddo lagu dhaqmaayay oo dadkaan ka dhexeysa ama ha inoo xumaato ama ha inoo fiicnaatee iyada ayaynu isticmaalaynay. Laakiin waxaan qabaa inta badan waxa la isticmaalo heesta ma aha ee waa "music" kada marka "music" kada heesta qoloba calankeedu in lagu qoro waan qabaa. Maxaa yeelay waxa astaan ahaan loo garaaco waa "music" kada ee heesta ma aha. Qodobka 4aad ee aad ku soodarten laftigiisa billad sharafta calanka billad sharfta dowladda miyaa? Billad sharaf calan kaliya ah ma fahmin.

- **Qodobka 7(3)**: Oo aad tirtirteen hala soo celiyo ayaan qabaa. Waxaad meesha ku qorteen waa suurto gal oo aad u tirtirteen waa wax maangal ah, laakiin waxaa lagu beddeli karaa baan isleeyahay wakhtiga hala xaddido. Xudduudihii 1960kii oo kale hallagu daro. Wixii lagu muransanaa waxaa lagu xallin doonaa qaabka meesha ku qoran laakiin **sideeedii halloo soo celiyo.**

- **Qodobka 7(4)** :Iyada ma haysto macnaha meesha ku qoran laakiin waxaa muuqata dastuurku luuqaddii uu waajibinaayay Af-Soomaali baad kadhigteen. Waxaana idiin qoran Af-ingiriisi A B C D E baa idiin qoran. In dastuurka iyo waxa ku qoran is waafaqaan waa fiicantahay. Halkaa hadday suurto gal tahay B T J hallagu qoro. Haddii ay adagtahayna B T J da carabigaa labo inoo ahaaye xuruuftii abjadiyada hala geliyo.

- Qodobka jinsiyadaha ku dheeraan mayo, boqolkiiba boqol ( 100%) sidiisii halloo soo celiyo. Faqraddii aad tirteenna soo celiya. Faqrooyinkii kalena yaan wax laga taaban **sidii ay innoogu qornayd dastuurkii hore hala soo celiyo.**

- **Qodobka 9aad:** Ee caasimadda halkaan waxaad ku qorteen aasimadu waa Muqdisho. Gadaalna waxaad tiraahdeen waxaa looga hadlayaa waxa ay noqonayso. Caasimadda iyo waxa ay noqonayso, ama horay noo soo mariya ama gadaal noogu wada dhiga. Caasimadda iyo waxa ay noqonayso hal meel aan kaga wada doodno ayaan qabaa. Halkaan hallaga qaado cutubka dambe oo aad u dib dhigteen halloo dib dhigo ama kan hallagu soo daro.

7) **Xil. Mohamed Ali Hassan:**
waxaan salaamayaa Gudoonka iyo baarlamaanka labadiisa aqal **.**Waxaan aad u ammaanayaa xildhibaannada qof waliba" comment" tiga uu kaqabo si toos ah ayuu u baxsaday ama u dhiibtay fikirkiisa. Qof qodob ka hadlay inuusan qofka dhihin waa la ii yiri macneheedu waxa uu sameynaysaa in 1 qodob 10 qof haddii ay ka hadasho in uu macno gaar ah yeelanaaayo. Marka yaan laga leexan waan idinku dhiirrogelinayaa inta isa soo qortay ka badan ha is qorto. Qodobbada laga hadlayna halagu laabto qof walba fikirka uu ka qabana haku celiyo mar labaad iyo saddexaadba.

- **Qodobka 1aad** : Arrinta laga hadlay Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaali ah, waxaan laqabaa oo Islaam ah **Sunni** ah lagu daro. Qodbkaas waxaan la qabaa xildhibannadii iga horreeyay.

- **Qodobka 2(1)**: Waxaa ku qornayd Islaamku waa Diinta Dowladda markii dambana Diinta Dalka ayaa laga dhigay. Sidaas waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horreeyay in lagu caddeeyo dowladda marka la leeyahay waxay ka koobantahay dalka iyo dadka iyo awooda gudaha iyo dibadaba ah. Sidaa daraadeed, waxaan qabaa **qodobkaan sidiisii hore in lagu siiddaayo.**

- **Qodobka2(3)**: Waxaa ku qornayd waxaa reebban cayda Diinta Islaamka, karaahideeda iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha Diinta Islaamka. Qofkasta oo u gafa Diinta Islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyada. Waxaan qabaa in lagu beddelo waxaa lala tiigsanayaa Sharciga Islaamka, maaddaama waxa uu ku xad gudbaayo ay yihiin Diinta Islaamka.

- **Qodobka3(3)** Waxaa ku qoran Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisantahay mabaadii'da aasaasiga ah ee nidaamka awood qeybsiga federaaliga ah. Waxaan qabaa in si cad loo qoro oo aan laga warwareegin oo ladhaho "Jamhuuriyada Federaliga Soomaaliya waxay kudhisantahay mabaadii'da aasaasiga ah ee nidaamka **awood qeybsiga 5ta beelood",** maddaama waxa hadda wax lagu qeybsado ay yihiin 4.5. Ugu yaraan haddii aadan dhihi karin waxaan jeclahay in lagu qoro 5ta beelood lagu qoro 4.5 ayaaba hadda la isku sii dulmiyaaye bal ugu yaraan ha qornaado.

- **Qodobka 4(3)** : Waxaa ku qoran xeerkasta go'aan kasta ama tallaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heerkasta oo dowladeed kana soo horjeeda dastuurka wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burintooda awood u leh maxkamadda dastuurka. Hadda maxkamad dastuuri ah ma dhisna sidaas darteed inta maxkamada laga dhisaayo waxaa burintaas awood u leh **labada gole ee baaarlamaanka in lagu soo celiyo.**

- **Qodobka 5:** Meesha ay ku qornayd Afafka ee lagu qoray Af-ka waxaan la qabaa xildhibaannadii iga horreeyay in sidiisa lagu soo celiyo A**fafka** laga dhigo.

- **Qodobka 6(3)** : Heesta qaranka ee meesha lagu soo koobay ee la soo yareeyay waxaan qabaa sidii dadkii iga horreeyayba in **heesta iyada oo dhammeystiran** lagu wada qoro.

- **Qodobka 6(4):** Waxaa ku qoran billad sharfta calanka iyo heesta qaranka Jamhuuriyadda iyo maamuuska ay mudan yihiin dadka mutaystay waxaa xeer gaar ah ku soo saaraya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Inta laga gaaraayo see loo maamulayaa? Ma sidii hore ayay ku socotay iyo qofkii doono ayaa iska bixinaayo xeerka inta laga soo saarayo waa in lajideeyaa oo wado loo bixiyaa.

- **Qodobka 7(4):** Waxay soo xigteen meesha faahfaahinta ay ka bixiyeen guddigu aad ayay u mahadsan yihiin waxay dheheen markaan aragnay dastuuradii hore lifaaqa ay soo raaciyeen waxaa ila quman in **lagu celiyo sidii uu ahaa 1960-kii** kii faahfaahintaan badan oo kuwanagsanayn in laga daayo.

- **Qodabka 8(1):** Waxay igula habboon tahay sidii uu ahaa, shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyed in **sidiisii hore lagu daayo**.

- **Qodobka 8(4):** Waa latiray waxaan laqabaa **in dib loo soo celiyo,** waxay ku qurxoonayd sidii hore ay ku qornayd.

- **Qodobka 9aad:** Oo qodobbadii aadka muhiimka u ahaa kamid ah magaalomadaxda Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa lagu soo koobay labo farqadood midna tilmaamayso in loo rarayo Cutubka 5aad, magaalada Muqdisho in ay sii ahaato in meeshaan lagu caddeeyo taas ayaaba u baahan in la saxo. Waxaan leeyahay qodobkaa meesha lagu tilmaamayo oo la leeyahay magaalo madaxdu caasimadu waa Muqdisho, waxaan soojeedinayaa qodobkaan iyo tafaasiishiisa in la soo hormariyo ama dib loo dhigo. Waaayo Muqdisho caasimaddii waaye, marka inta haddaan ka doodno oo lasharciyeeyo Muqdisho waa caasimaddi taas ayaanba dood kaqabaa in caasimaddu ay noqonkarto in la raro degaanno kale la geeyo. Maaddaama marna aysan ka jirin Muqdisho oo qodobii 3aad (3) ay sheegayso awood qeybsiga ayay tilmaamaysaa oo ku salaysan federaaliga la leeyahay. Awoood qeybsi kama jiro Muqdisho markii la dhaho degmooyinkii, saldhigyadii, xaafadihii, meel kastaba meel gaar ah ayay u raran tahay. Dadkii degganaa oo lagu yaqaannayna xuquuqdooda kuma helaan. Sidaa darteed, qoloba maalin halloo shidee halloo geeyo, toban (10) sano meel halla geeyo. Suurta gal ma aha Muqdisho inta qodobkaan inta ku saxiixo aan ku sharciyeeyo **waxaan isku heysannaaba inay caasimad sii ahaato in lawareejiyo ayaan qabaa.**

8) **Xil. Yusuf Geele Ugaas:**
Bismillaah, marka 1aad waa xilligii salaadda iyo qadada inaan soo gaabiyo ayaa la iga codsaday. Waxaan rabaa in aan u mahadceliyo guddiga labada heer ee ka soo shaqeeyay dastuurkan maanta wax ka-beddelkiisa aynu ka doodayno. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin, runtii shaqo fiican ayaad qabateen. Waxaanna rajeeynayaa in shacabka Soomaaliyeed waxa maanta meeshan idinku ka beddelayasaan ee inoo qornaa uusan noqon wax shacabka kala dira ee uu noqdo wax shacabka Soomaaliyeed ilaaliya oo isku ilaaliya midnimadiisa, hadii aan horay u galo.

  - **Qodabka 1(5):** Gobannimada iyo midnimada Jamhuuriyadda Soomaaliya waa laguma xadgudbaan baa ku qornaa, een waxaad ku beddesheen sideedii baad u soo qaadateen gobonnimada madaxbannaaanida iyo midnimada qaranka Soomaaliyeed. Qaranka xudduudaha waxaan qabaa in lagu daro "**Bad iyo Berri ba**", sababta oo ah hadda waxaa taagan xaalad baddeennii iyo berrigeenniiba lagu hunguriyeeynaayo. Sidaa daraadeed, waxaan qabaa bad iyo berriba in lagu daro halka note gareeyo.

  - **Qodobka 2(4) :** Waxaa ku qoran lama soo saari karo sharci aan waafaqsanayn mabaadii`da guud ee Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda. Waxaad ku beddesheen meeshaas sharciga ah xeer. Anigu waxaan qabaa xildhibaannadii iga horreeyayna way ka hadleen, in xeer, sharci, qaraar iyo wareegto horta aynu kala garanno waxa ay tahay, oo sharci yaqaanno ayaa fadhiya. Xeer sharci ma ahan oo waxaa soo saara executive-ka fulinta soo saarta, qaraarna innagaa hadda soo saari karna, marka waxaan qabaa **in meeshaas lagu celiyo sharcigii** oo dastuurku waa sharci ee xeer iyo qaraar midna ma aha iyo wareegto. Waa in loo daayo hadduu Alle idmo sharcigii, oo sidaa aynu u kala saarno.

- **Qodabka 5aad:** Afka rasmıga ee Jamhuurıya Federaalka ee Soomaalıya waa Maay ıyo Maxaatıri ayaa qorneed, sıdeedıı ayaana loo soo qaatay. Laakiin waxaan rabaa qodobka 5(2) ın lagu daro tayeeynta Afka Soomaalıga ıyo suugaantıısa ın lagu daro dadka baahıyaha gaarka ah qabo ee dhagaha ama ındhaha baahıda gaarka ah ka qabo ın sıgn language loogu daro oo ay ka faa`ııdeystaan, oo manaahıjteenna lagu kordhıyo oo ıyagana halkaa lagu caddeeyo ayaan soojeedın lahaa , oo **dadkaas baahıda gaarka** ah ındhaha ıyo dhagaha ka qabo ay haddıı Alle ıdmo helaan.

- **Qodabka 8aad:** Ee jınsıyadda ka hadlaya waa laga dooday, xıldhıbaanno ıga horreeyayna way ka hadleen Soomaalıya ıyo Soomaaliyeed mıcno ayeey kala sameeyneysaa. Shacabka Jamhuurıyada Federaalka **Soomaalıyeed lagu soo celıyo ayaan qabaa** oo guddıgu ay ku soo celıyaan. Mıdda kale ee ku saabsan faqradda mıcnıhıı qodabka 8aad wixıı hadda aan ka hadlay uun weeyaan. Horta dastuurkeenna oo aynu ku dhaqanno heerar kala duwannaa soo maray oo ınta badan uu "reform" "refere" gareeyno oo dıb ugu raacno 60-kıı ıyo 62-dıı. Anıgu waxaan qabaa dastuurkaas dadka qoray ee ka shaqeeyay runtii waxay ahaayeen dad Soomaalıyeed oo xılkas ah oo Soomaalınnımada ılaalınayay oo ay waddanıyad ku jırtay oo qaarkood naftooda u huray. Sıdaa daraadeed, anigu waxaan aammınsanahay ın aynu ka waddanısanayn kagana aqoon badnayn. Sıdaa daraadeed dastuurka in aynu falaadka ka deeyno oo waxyaalaha qaarkood ayaynu iska turno aynu u baahannahay. Shacabka Soomaalıyeed waa shacab Soomaalıyeed waxayna Soomaalı ku yıhıın qofka ın uu u dhashay Soomaalıya. Qofka Soomaalıga ah ee jınsıyaddıısu Soomaalıga tahay ee North Amerıka ku dhashay haddıı uu Soomaalı yahay qofkaa and by choice xuduud beneedka uu soo marin ın aan Soomaalınnımada laga qaadı karın baan qabaa anigu. lagama qaadı karo Soomaalınnımada. Sıdaa daraadeed, guddıgu waxaan ka codsan lahayn ın Qodabka 8aad sıdıısa loo wada qaato. Tusaale

- **Qodobka 8(4)**: Waxaa ku qoran mıcnıhıı dıidmaha laalısta ıyo qaadısta jınsıyadda laguma xırı karo arrımo sıyaasadeed, completly waa laga saaray oo way ka saareen guddıgu Waa ın ay ku soo celıyaan in qof muwaadın Soomaalıyeed ah arrın sıyaasadeed darteed jınsıyadıısa aan loogala noqon karin. Marka waxaan adkeeynayaa **ın qodobka 8aad sıdıısıı hore loo soo qaato** oo arrınka Soomaalıyeedna sıdıısa loogu daayo aanan lagu xadgudbın oo muwaadın arrın sıyaasad la xırıırta jınsıyaddiisa looga qaadı karın.

  Xıldhıbaankıı aniga ıga horreeyay waxa uu sheegay dhalasho kale ma haysto ayuu yırı baasabor kale ma haysto ayuu yiri. Waa runtiis haddıı tıı Soomaalıyeed sıyaasad looga qaado xaggee ayuu aadayaa? Sıdaa daraadeed, halkaas baan taas ku soo gaba gabeynayaa arrınka ku saleeysan.

- **Qodobka 9aad** : Ee caasımadda ku saabsan dıbbaa loo dhıgay dooddeeda waqtıgeeda ayaan galeynaa. Caasımaddu dee cıdna ma murmin karto hadda Caasımada Soomaalıya waa Muqdısho ee maqaamkeeda ıyo waxey heleeyso ıyo xuquuqaadkeeda ıyo kullı dooddeeda ayaan xıllıga loo raray la sugeeynaa. Aad ıyo aad ayadna u mahadsantıhıın.

9) **Xil. Mohamed Adam Dini:**
Mudanayaasha iyo marwooyinka, xildhibaanda, senatarada sharafta leh ee labada aqal, waxaa Sharaf wayn ii ah maanta inaan rayi'gayga iyo khibradayda aqooneed ama qanun intaba aan ka dhiibto.
Waxaan rabay inaan waxyar ka dhiibto oo aan ku horeeyo.

- **Qodobka 7aad:** Oo runtii muhim ah sida geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Anigu waxaan qabaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed in ay ka mug wayn tahay Soomaaliya, ayaan darrada dhacday waxay ahayd markii in nala kala qaybsado 1984. Ujeeddada naloo kala qaybsaday waxay ahayd in aynu nahay majority-ga qaaradda Afrika dhul ahaan, dad ahaana aynu nahay dad Islaam ah oo diinta Islaamka haysata oo sunni ah, ahna dad fircoon. Kalimadda Soomaaliya mufaq calayhi waan ku taageersanahay xildhibaannadii horay uga hadlay. Qodob waxaa jiray xildhibaanno saaxiibaday ah ay ka shanqariyeen. Geyiga Soomaaliyeed wuu ballaaran yahay waxaan qabaa **in lagu daro dhulka Soomaaliyeed**. Waansoo jeedin lahaa, dhulka Soomaaliyeed ee maqan waa dhul Soomaaliyeed, marka laga yimaado far lagu fiiqo dad gaara, waxaan qabaa dhulka naga maqan in uu yahay dhulka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliyeed. Marka waa muhiim in la adkeeyo oo la ta`kiidiyo midnimada dhuleed iyo diimeed iyo dadeed ee qaranka Soomaaliya uu leeyahay.

- **Qodobka 8aad:** Ee Shacabka iyo Jinsiyadda, jinsiyaddu waa muhim yaa Soomali ah? Soomaali waxaa ah qof hooyadiis iyo aabihiis diinta islmaaka haystaan oo ku dhashay dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed. Soomaali waxaa ah qof ka soojeeda dhulka xuduud beenaadka soomaaliyeed yaan qodobkaa laga tagin. Haddii aynu ignore garayno oo aynu ka leexleexanno qodobkaas, hadaynu ayaynu ku jirnaa annagoo jamhuuriyad xor ah, dhulkeenii nalaga haystay damaciisii inta lasoo dhaafay in aynu jideeyno oo sharciyeeyno taasna ayaan darro ayay nagu noqonaysaa. Waana wax taariikh madoow ah oo uga tagi doonno ilmaheenna iyo ilmaha ay sii dhali doonaan. Marka waxaan qabaa qodobkaa **in la adkeeyo xudduud beenaadka** oo lagu daro in dhulkaas uu yahay dhul Soomaaliyeed oo maqan, ee cabsida hala iska daayo, rabi baa laga baqaa. Haddii aadan qarankaaaga matali karin fadlan ha imanin baarlamaanka. Haddii aadan dhulkaas Soomaaliyeed ee maqan aadan sheegi karin, fadlan 'stay home'. Anigu waxaan qabaa dhulka Soomaaliyeed in aan lakala reebin, taasina waa midda koowaad.

- Jinsiyadda aan u soo dagee, jinsiyadda qaanuuniyan laba hab ayaa lagu qaataa. Legally, jinsiyaddu waa jus-soli o ah deegaan ama dhalasho ama jus-sanguinis oo waa dhiig. Arrintan gabdheheenna sharafta leh ayaa soojeediyay oo ilmaha ay dhalaan waxaan qabaa gabdhaha Soomaaliyeed sharaf iyo karaamo ayay leeyihiin, ilmaha ay dhashana oo ay u dhasho nin caddaan ah ama ajanabi ah xaq bay u leedahay ilmaheeda in ay haysato. Laakiin waa in lakala saaro zawjka deganaashaha waddanka uu ku imanayo. Ilmaha waxa uu ku xisaabsanyahay aabbo ajanabi ah. Marka waa in qaanuun la helaa, qofka ajnabiga ah xaddidaya. Waxaan qabaa ilmaha ay dhasho gabdhaha automatically wuxuu noqonayaa Soomaali. Laakiin waa in lagu xisaabtamo ilmahan in uu yahay ilmo isku jir ah oo aabe kale oo ajanabi ah haysto. Si markaas aynu uga taxaddarno dadka ajanabiga ah ee gabdhaheenna guursanaya, qatarta ay u keeni karaan jiritaankeenna

qarannimo. Waxaan qabaa in la adkeeyo oo dastuurka lagu daro qodob oronaaya " ninka ajanabiga ah ee guursada gabar Soomaali ah, xaq in uu u leeyahy muwaadin 10 sano in uu dalka joogo. Awalan waa in uu Diinta Islaamku haystaa" taasi waa biyo kama dhibcaan.Marka labaad waa in uu dalka ku suganyahay 10 sano ama ka badan.

Haddii lagu arko khiyaano qaran ama wax halis ku ah Diinta Islaamka, qarannimada, midnimada revocation legal waa in lagu sameeyo oo citizen nimada lagala laabto.
Aan u soo daadago gabdhaheenaa quruxda badan ee labada aqal, gabdhaheenna sharafta leh ee labada aqal. Anigu waxaan qabaa Diinta Islaamku xaq ayay siisay oo diin siisay ma jirto, marka labaad waxaan jeclaan lahaa arrintaas arrin ka muhimsan in ay gabdhu ka hadlaan. Sida xadgudubyada, tacadiyada ee gabdhaha maalin kasta loo gaysanayo ee noqotay nolol caadi ah. Xaq ayay leeyihiin gabdhaha waxay ku caana maali karaan ama ay ku guulaysan karaan, marka ay wadanka timaado hal qof iyo cod, biyo sacabahaaga looga dharkaa markaas ayayna gabdhuhu ku caano maali karaan. Marka xaqa gabadha Soomaaliyeed ay leedahay waa in uu dastuurku muujiyaa. Hooyo Soomaaliyeed ama gabar Soomaaliyeed xadgudbo lagu sameeyo jinsi ama jirkeeda waa in uu dastuurku muujiyaa inuu yahay danbi. Waliba hay`adaha ama judiciary-ga garsoorka si adag loogu muujiyaa oo la siiya ixtiraam gaar ah. Sidoo kalena raggu ay helaan, walow ay gabdhuhu ayaamahan ay tacadiyadu qayb ka yihiin, waxyaabaha hadda socda, laakiin majority-ga dadka innocent dhibaato gaadho ee victim-ka waa gabdheheenna karaamada sharafta iyo dulqaadka dalkan uu ku caano maalay ku soo mooday 30-kii sano ee u dambeeyay. Bal aan u galo constitutional Law-ga, waxa aynu hadda ka hadlayno waa arrin masiiri ah marka la samaynayo dastuur dhowr waxyaabood ayaa lagu saleeyaa;

1- Waxaa lagu saleeyaa nidaamka haykalka dowladda aynu qaadanayno muxuu yahay? 1960-kii aan dib ugu noqdee, waxaa la fiiriyay ma boqortooyaa ma republic-baa ma baarlamaani baa?
2- Borders-ka ama xudduudaha, xudduudada waddanka waa muqaddas oo lama taabtaan ah dastuurku waa in uu meel cad ka istaagaa. Anigu waxaan qabaa dastuurkii 60-kii waa laga yaabaa in ay wax badan ka maqanyihiin. Qodobka jamhuuriyadda qodob iyo labo in laga qaaday mooyaane anigu wuu ila fiicnaa.
3- Marka la aas`aasayo nidaamka dastuuriga awoodaha iyo xiriirrada ka dhaxeeya hay`adaha dowliga ah.
4- Waa in uu muwaadinku helaa fikirkiisa xorriyadda ee xorriyatul qawlka ah, in dastuurka lagu muujiyo iyo xorriyadda uu muwaadinku heli karo in deegaan la siiyo lana ilaaliyo amnigiisa, in la xafido sirtiisa gaarka ah, in uu shaqo helo, in jamhuuriyadda Soomaaliyeed yaan kalimaddaas laga fakinin. Xuruufta marka ay Soomaaliga tahay luuqadda Carabiga ah waa isim. Marka ay Soomaaliyeed tahayna waa sifo ama adjective, lakiin maadaama dhulka Soomaaliyeed uu ballaaranyahay waxaan qabaa in arrintan lagu daro.

Marka aan u soo dagdago biyo dhaca anigoo waqtiga ilaalinaya. 1960-kii marka aynu dastuurka samaysannay waxaynu ka soo baxnay xilli gumaysi ah oo adag. Waa ogtihiin 1957 ka hor inta aynu qaadanin trusteeshipka in la soo jeediyay oo layiri dadkan lama siin karo dawlad maba qaadi karaan. Laakiin ilaahay SWT wuu inoo fududeeyay dawlad

baynu noqonnay. Maanta waxaynu halkan ku joognaa innagoo qaran Soomaaliyeed matalayno, marka waxaan qabaa;

1- Dastuur in uu yahay heshiis ay ummadu ku heshiisay, heshiiskaas in aynu si fiican uga taxaddarno oo aynu asal uga dhigno.
2- In aynu midnimadeenna iyo jiritaankeenna ku ilaashanno, waxaana ku kalsoonahay inta aynu leennahay bisayl Soomaalinimo iyo waddaninimo leenahay. Maanta waxaa ii muuqata in aynu ku jirno xaalad adag. Dadkeennii iyo dalkeennii la innooga baahanyahy in si daacad ah u ahaanno, waxaynu kitaabka ugu dhaarannay qofkasta oo innaga mid ah marka uu dhaaranayay wuxuu ku dhaartay magac ilaahay, waxaa ku dhaaranayaa inaan ilaalinayo, danta, diinta, dalka iyo dadka. Kalimadda diinta in la hormariyo ayaan mar walba jeclahay. Marka walaalayaaloow aynu marwalba xafdinno umaddeenuna aynu u shaqayno. Laakiin aynaan ka tagin dastuur in uu yahay wax ay umamaddi ku heshiisay, wada tashigana uu muhim yahay. Waxaa wax lagu gaara maanta waa wadatashi. Tafaraaruqa waa waxa halkaa inna gaarsiiyay. Sododan sano ayaan darrada na badday. Inshaa Allah,' Laa taqnadhuu min raxmatillah' . Waxaan aamminsanahay in aynu ku guulaysanayno in aynu ilaashanno sharafteenna iyo karaamadeenna. Ummadda aynu matalnana si daacad ah ugu adeegno.

   Arrinta kale ee u dambaysa waxaan guddiga dastuurka u sheegi lahaa. Fadlan website-kiinna update ka dhiga, website-kiinna waxaa ku qoran xataa Guddoomiye Aadan Madoowe in uu uusan ahayn ee waxaa ku qoran Gud.Mursal. Hadii aad website-kiinna gashaan, please update ka dhiga luuqadahana badiya. Luuqadda Carabiga, Ingiriiska, Faransiiska. Haddii aad rabtiinna innagaa idinla diyaarinayna. Taana ka taxaddara. Dastuurku luuqadaha ajanabiga ah in uu ku qoranyahay waa muhim si ayna dadka ajanabiga ah innoogu soo gudbin si ay u akhristaan qaanuunkeenna iyo sharcigeenna oo ayna noo soo faragalinin. Taa canaan igama aha ee waa iga talo WSC.

10) **Sen. Prof. Dr. Osman Mohamud Mohamed:**

Guddoonka labada aqal guud ahaan, labada guddi ee soo diyaariyay, ansixiyey dastuurka maanta aan ka doodeyno wax ka-beddekiisa, cutubyada kala duwan intii gacan ka gaysatey, xagga sharci ahaan iyo dhammaan xildhibaannada labada aqal ee Barlamaanka Federaalka Soomaliya ,marti sharafta kale ee goob joogga ah iyo aqoonyahannada kala duwan iyo saxaafadda. Salamulah Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu. Mudane gudddomiye warkii horay ayuu u dhammaaday waqti dambana waa ay tahay, saacadduna waa ay gaabantahay. Waxaan ayidayaa, wixii hore loo yiri kuma sii dheeraan doono.

Cutubka 1aad qaybtiisa hore ee basic ah ama aas`aaska ah oo runtii cutubyada kale discussion ka xoog badan ugu baaahnaan doono. Marka in la iska fududeeyo way fiicnaan lahayd, in kasta oo hada saddex beri aynu wadno kuma sii foogaanaayi.

Mudane Guddomiye, waxaan rabaa hal daqiiqo in aan ku hor maro oo aan rabo in aan sheego in aan canbaareyn u soojeediyo falkii ka dhacay Addis Ababa ee ka fogaa qawaaniinta caalamiga ah iyo dibolmaasiyadda ee ku wajahnaa Madaxwaynaha Jamhuriyada Soomaliya iyo wafdigiisa sida loola dhaqmay ayaan waxaan rabaa canbaareyn deg deg ah in aan u soojeediyo, oo ahayd fal ka baxsan diblomaasiyadda adduunka looga dhaqmo. Waxaa kale oo aan rabaa hambalyo iyo bogaadin in aan halkan uga soo gudbiyo Madaxwaynaha Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya Dr.Hasan Shiikh Maxamud iyo

wafdigiisii la socdey sida geesinnimada leh iyo kartida leh ay u wajaheen mixnada ay lasoo kulmeen, oo runtii ahayd carqaladeyn. Carqaladentuna ay ahayd ka baajin ama isbaaro u dhigasho shirkii ahaa close meeting-ka ee madaxwaynayaasha kaliya galayeen ee albaabada u xirnaa in uusan gaarin ayay ahayd isbarada ay dhigteen masuuliyiinta dalka Itoobiya. Waxaan kale oo hambalyo u soo jeedinayaa Madaxwayne Ismaaciil Cumar Geelle oo runtii door muhiim ah ka qaatay mixnaddaas oo runtii wax badan xalliyey intaas ayaan uga baxay. Mudane guddoomiye, dastuurka Cutubkisa 1aad wax badan ayaa laga hadlay kuma sii dheeraanayo waan soo gaagaabinayaa.

- **Qodobka 1aad:** Jamhuriyadda Federaalka Soomaliya wax kale kama sheegayo tii laga shegey oo Soomaliya waa Jamhuriyad Federaal ah oo Muslim ah markii la leeyahay waa ku waafaqsanahay ama ayidayaa asxaabtii sheegay ee yiri Islam ah. Yacni waxaa waaye dowlad Islaamiya waa Islaam saas ayay ku qumantahay. Waxa dhan haddii aan dib ugu noqdo oo aan ka illooway labada guddi hambalyada in aan u jeediyo si hufan oo aad u qurxoon ayay u soo diyaariyeen. Inta hadleysayna markii aan dhageysanayay waa siiqo uun Af-Soomaali ku wajahan ayaa la toosinayay oo wax nuxur la beddelayay majirin. Marka taas guddoonka iyo labada guddi ayaan u dirayaa. Marka taas waa mid. Waxa kale oo dhan kuma noqnoqonayo si aan u soo gaabiyo.

- **Qodobka 2aad:** Ee ku wajahnaa diinta dalka waan ku waafaqsanahay qaabka uu guddiga u soo dhigay islamka wa diinta Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya. Waxaa reebban marka la aado farqadda 3aad cayda Diinta Islamka iyo karaahiyadeeda. Karaahiyo marka la leeyahay waxaa kujirto meel kale oo aan arki doono in la xoojijo Arrinta Af-Soomaliga oo ku taallo ayaa jirta, karaahiyo waa luuqadda Carabiga. Karaahiyadeeda meesha la leeyahay in la dhaho nacaybkeeda. Meelo badan waan arkay oo hadhoow fikirkayga ka soo jeedin doono. Karaahiyadeeda macnaha ay sameynayso waxaa weeye? Qofka Soomaliga in uu durba fahmi karo, marka in la yiraahdo nacaybkeeda in laga dhigo. Mid kale oo isla ayadii ayaa meeshan ku arkay oo ku wajahan siiqada midda carabiga waxaan rabnaa in la xoojiyo Af- Soomaliga, dastuurkeenna waxaa ku badan ama laga dhax arkayaa kalimado badan oo carabi ah iyada oo loo helayo kalimad Soomaali ah.

- **Qodobka 4aad:** Ee diinta dalka, lama soo saari karo xeer aan waafaqsaneyn Shareecada Islaamka iyo maqasiddeeda. Maqaasiddeeda waxaa lagu beddeli karaa ujeeddooyinkeeda si qofka uu si sahlan ugu fahmo. Maqaasid waa aynu naqaannaa laakiin luuqad carabi ayay ku fadhisaa.

  Tan kale, meelo kale ayay ku jirtaa ee qodobka mabaadi'da aas`aasiga ah. Dastuurka Soomaliya waxaa saldhig u ah Quraanka Kariimka iyo sunnada rasuulka SCW, wuxuuna ilaalinayaa maqaasidda ee baraakat la furay oo lagu qoray ujeeddooyinka, wuxuu ilaaliyaa shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda iyo ujeedooyinkeeda. Inta kale waa intii la yiri. Midda afaraad, in aan mabaadii'da waxyar ka iraahdo ayaan rabaa. Dastuurka Soomaaliya wuxuu dhiirrigalinayaa xuquuqda aadanaha, talinta sharciga iyo xeerarka caalamiga ah cadaaladda xukuumadda loo dhanyahay oo ku dhisan wadatashi kala soocidda awoodaha sharcidejinta, fulinta iyo garsoorka madaxbanaan oo leh hanaan ku dhisan isla xisaabtan daahfurnaan iyo hufnaan, waxaan dhihi lahaa **"ku**

**dhisan isla xisaabtan, daahfurnaan iyo hufnaan kana jawaabaya danaha dadweynaha"** waana siiqo yar oo la saxayo.

Mida haweenka, si buuxda ayaan u taageerayaa. Haweenka waa lafdhabarta ummadda Soomaaliyeed. Waxaana qabaa qodobka ay soo gudbiyeen **si buuxda ayaan u taageerayaa** oo ah haweenka in ay kamid noqdaan dhammaan saddexda qaybood ee hay'adaha dawladda, guddiyada madaxabanaan, heer federaal iyo heer dowlad goboleed oo la sugo jagooyinka la isku doorto iyo kuwo la isku magacaabo.

Mudane guddoomiye, intaan kale waa intii la yiri ee lagu noqnoqday oo aan soo koobaayo waxayna tahay:

- **Qodobka 6(1**): Arrinta ku wajahan calanka iyo astaanta qaranka, calanka waa staanta qaranka dhowr qof oo saaxiibadey ahna way ka hadleen. Calanka astaantiisu waa sida la sheegay, kumana noqonayo haddii kale ku rafasho ayay noqonaysaa. Calanku waa light blue. Waayihii dambe badanaa waxay baxday sagaashameeyadii. Waxaa soo baxay calanka buluuga ah ee culus ee madoow xigeenka ah. Marka calanka waa midkaa la sheegay. Kuwo kale kuma sii rafanayo oo aad baa looga hadlay. Waxaan soo qaadanayaa arrinta ku wajahan heesta calanka. Heesta calanka waa muhiim, adduunyo walbana waa wax lagu garto. Sida uu calanka uu usoo saaray Allah ha u naxariistee halgame Maxamed Cawaale Liibaan, heesta calankana waxaa soo saaray abwaankii iyo fannaankii ahaa  Cabdullahi Qarshe. Runtii mireheeda way xikmadaysanyihiin. Calammada adduunka oo kale ayay lamid tahay. Midabkiisa iyo qiiradiisuba wuu leeyahy. Dhibka jira wuxuu yahay dhowr jeer ayaa laga hadlay baarlamaankii 9aad, oo waliba la yiri astaanta muusikada calanka waa taas. Haddana waxaa mar kasta daba socota Soomaaliyeey toosoo. Soomaaliyeey toosoo waa mid fiican oo lagu soo maray laakiin, waa baraarujinta kicintii waagii xornimo doonka, marka waxaa loo baahanyahy in la meel mariyo oo aysan noqon wax isku dhafan oo lakala caddeeyo.

  Midda kale, oo aan rabay qof ayaa shalay ka hadlay oo waliba saaxiibkay ah. Calanku wuxuu leeyahy xurmad gaar ah, qofba waa inuu u istaago ama wuxuu saamayn karaa gacantisa midigta wadnihiisa saara, oo ay ka jawaabayso jacaylka iyo wadnaha in ay uga taalo calanka. Ma aha wax khalad in la saarto adduunyadu waa sidaa meelo badanna waa sidaa in la saarto. Waxaa kale oo suran arrimaha la isticmaalayo ee maamul goboleedyada. Waa tii la yiri way isticmaali karaan marka laga reebo muusikada ama heesta  calanka. Laakiin waxaa muhim ah marka la isticmaalyo calanka maamul goboleedyada ama xubinta ka ah dowlada federaalka calankeedu waa in uu dhinac yaalaa calanka dowladda federaalka oo lagu daro ayaan qabaa.

- **Qodobka 7(1)**: Midda gobonnimada, marka laga hadlayay ama geyiga Soomaaliyeed, waxaa lasoo xusay in geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ay ku jiraan, badaha, webiyada, jasiiradaha iyo dhulkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi qaaradeedka ma aanan fahmin waxa uu ka dhiganyahy. Meeshaas marka la sheegayo ee badaha, webiyada waa in ay ku jiraan buuraha oo waxay kamid yihiin astaanka qaranka Soomaaliyeed, in la micneeyo. G**udddiga sharafta leh geyi qaaradeedka waxa ay ka wadaan ayaa codsanayaa.**

- **Qodobka 7(3)**: Midda xudduudaha, sida loo dhigay ayaan qabaa walow aan qabo sida uu u dhigay xildhibaan Mahdi Guuleed ee meesha ku jirto in la xuso ayay u baahantahay. Inkasta oo la sameeyay xudduudaha 1960-kii, in lagu soo qoro dastuurkeenna, haddana waxyaabo kale way soo gali karaan. Sida hadda laga dhawaajiyay oo xagalahaas oo kale midda hadda Kenya galaysa camal in dib u eegis lagu sameeyo oo la isla arko inta kale waa intoodii oo horay ayaa loo dajiyay oo isticmaarki ama gumaystihii ayaa dejiyay. Rag ayaa ka dhawaajinayay xudduud beenaadkii in la xuso, nasiib darro waagii hore ayaa la dajiyay waana ognahay xudduudo beenaad in ay yihiin. Dhinaca Itoobiya marka la leeyahay xudduuda Soomaaliya in uu yahay Kililka Shanaad. Haddana waa wixii horay loo dajiyay oo map ku soo baxay. Qaabkaas ayay igu taallaa laakiin wixii laga sixi karo in laga daro.

- **Qodobka 9aad:** Ee ku wajahan Magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Maqaamkii waa kan hadda la sheegay oo la yiri, Magaalo Madaxda JFS waa Muqdisho. Haddaayay qof baa ka dhawaajiyay waxay fiicnaan lahayd middii la raray, sababta loo rarayna rag badan iyo dumar badan baa waydiiyay oo hadda macnaheeda rasmiga ah lama soo bandhigin. Waxaan kale oo aan xasuustaa arrinta maqaamka iyo metelaadda magaalada Muqdisho.Marar badan delay badan baa ku dhacay , waxaan xusuustaa labadii Febraayo 2020-kii markii laga hadlaayay shuruucdii doorashada oo waliba ka soo baxday golaha shacabka in aan lagu soo darin maqaamkii iyo metelaadii magaalada muqdisho nasiib wanaag oo aqalka sare uu ku soo daray iyadii in laga soo mid dhigay oo guddiga loo saaray.Laakiin hadda kuma sii dheeraanaayo mudane guddoomiye.Waan dareemi karaa markii meeshii loo raray laga hadlayo ayaan ka hadli doonaa. Guddigaas waxaa ku jiray rag badan oo meesha joogay, waa la soo qoray waana la soo gudbiyay madaxwaynihii markaa joogayna wuu saxiixay. Dib ayaaan u dhiganayaa, laakiin sababta aan guddiga hadda ka rabno waxaa waaye maxaa dib loogu dhigay? Wax dib loogu dhigay in macno waafi ah la siiyo ayaa loo baahan yahay. Maxaa yeelay waa muhim oo u baahan kala caddayn badan marxaladooyin badana wuu ku dhacay delay-gaas maqaamkii iyo metelaaddii magaalada Muqdisho. Maqaamkii halkan waa lagu xusay laakiin metelaaddii magaalada Muqdisho way dhimmantahay. Aad ayaad u mahadsantahy mudane guddoomiye iyo guddoonka sharafta leh. Waxyaabaha aan rabay kolleey waan soo koob koobay, laakiin waa wax lawada ogaa oo laga wada hadlay. Waxaan u rajaynayaa guul, dastuurku wuxuu muhiim u yahay nolosha ummaddeena, wuxuuna muhiim u yahay mustaqbalka dowladeenna. Waxaan aad u bogaadinayaa in la daba galo oo la quweeyo oo la daddajiyo waad mahadsantihiin WSC.

11) **Xil. Jama Mohamed Askar:**

Bismilaahi Raxmani Raxiim. Guddoomiye xildhibaannada sharafta leh, Asalaamu Calaykum. Maaddaama aynu joogno casir waxaan jecelahay aad u soo koobo dhawr daqiiqo igaga badan mayso. Caadiyan marka dastuurka la qeexaayo ama kalmadda ‘constitution’ ama kalmadda ‘annidaamul aasaasi’, dhammaantood waxay tilmaamayaan unkid, wax la unkayo. Waxay aasaas u yihiin dawladnimada. Dawlad si loo dhiso oo loo unko waa in dastuur la sameeyaa. Dastuurkaasi waxa uu sheegayaa mabaad’iida caamka ah ee dawladdaasi ku dhaqmayso. Wuxuu sheegayaa nidaamka siyaasiga ee ka jira dalkaa. Waxa

uu sheegayaa oo 'define' garaynayaa xuquuqda iyo xorriyaadka muwaadiniinta. Waxa uu qeexayaa xidhiidhka ay yeelanayaan hay'adaha kala gedisan ee dawladdu ay leedahay. Chapterka aan ka doodaynay Qodobka 1aad illaa Qodobka 9 wuxuu khariidad ama "map" ka bixinayaa mabaad'iida caamka ah ee ay ku dhisnaanayso dawladdeennu. Sida aan anigu u fahan sanahay ee ka fahmay halkan dastuurkani wuxuu jidaynayaa dawlad madaxbannaan oo Soomaaliyeed, dhulkeedu mid yahay Jamhuuriyad dimuquraadi ah, nidaamka asxaabta badan ku dhaqanta oo federaal ah. Isla mar ahaantaa, madaniya oo leh marjiciyad Islaamiya. Intaa markaan ka baxo, waxaan jecelahay dhar qodob si aanan ka hadlo, waxa kaloo "chapter" kaasi jidaynayaa in nidaamka dawladeed ee aan dhisaynaa uu noqdo mid isla xisaabtan uu suurta galka dhexa yahay. Haddii 'check and balance' ka jirin dawladnimadeeda halis baynu galeynaa. Awoodda "executive" ka fulinta iyo ta sharci dajinta iyo ta garsoorku aanay suurta galinayn nidaam iyo hufnaan, isla xisaabtan keeni karta markaa mabaad'iida caamka ahi "chapter" walba way ka muuqanayaan. Haddaad ka hadasho **"multi-party system" laga gooyey halkan oon jecelahay in dib loogu soo celiyo**, horana halkan waa looga hadlay waan ayidayaa qodobka 1aad waxa dastuurka ku yaallay, nidaamka asxaabta badan guddiguna waa ay ka saartay. Nidaamka siyaasiga ah ee dalkeenna si aynu u rabno inaan qeexno waa inuu noqdaa mid ku salaysan nidaamka asxaabta badan mabda' ahaan, hadhaw marka laga hadlayo xisbiyada xaga danbay ku iman doonaan, laakiin ka mabda' ahaan "chapter" kan waa inuu si cad uga muuqdaa arrintaasi. Waxaa kaloo ay ka saareen guddigu 'caddaaladda bulshada' meelkastoo caddaalad busho ku taalay waxay ku beddeleen caddaalad kaliya, markaad caddaalad tiraahdo iyo caddaalad bulshaba labo micnoo kala gedisan bey leeyihiin. Markaa waxaan jeclaan lahaa inay **guddigu dib ugu celiso meelkastoo ay ka masaxeen caddaalad bulsho.**

- **Qodobka 2(3):** Arrinta kaleen ka hadlayaa waxa weeye, diin cayga. Caadiyan jaraa'imka dhaca waxaa lagu nidaamiyaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, iyo Xeerka habka Ciqaabta Soomaaliyeed, sababta halkan loola soo doontay diin cayga aniga sidaan ka fahmay waxay muujinaysa in Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed in uu arikaa diin cayga lagu xalin kari waayey, oo ay tahay mushkilad baahday oo bulshada dhexdeeda ku baahday. Fahamkaasuu qofka imika akhriya ee ajaanibka ahi qaadanayaa "level" dastuuriya markaan arrintaa gayno waxay ka turjumaysaa mushikhlad aad u daran aynu rabno inaynu ku xallino xeer dastuur, xaqiiqana maaha. Dadkeennu waa dad muslim ah diinta jecel aan caayin diinta, way dhici karaan dad denbiya galey inay jiraan. **Markaa waxaan jeclaan lahaa in qodobkan gabi ahaanba laga saaro meeshan** oo loo daayo oo lagu nidaamiyo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. Waxaan maqlayey xildhibaanno leh Islaam naceyb dalkeena kama jiro. Hadduu dalal kale ka jiro qodobkani xudduudaheenna ka tallaabi maayo oo ma xallinaayo jaraa'imka ama Islaam nacaybka ka jira dalalka kale. Waxaan jeclaan lahaa inay guddigu eegto.

- **Qodobka 3 (6):** Ee ay soo kordhiyeen faqradaasi waxba kagama gadisna Qodobka 4(1) micna ahaan waa isku mid hadaan akhriyo eega "Awood dawladeedka heer kasta waxaa loo adeegsan karaa kaliya si waafaqsan dastuurka iyo xeerka jamhuuriyada federaalka Soomaaliya" ayey ku soo dareen.

- **Qodobka 4aad:** Sarraynata dastuurka ka hadlayana wuxuu leeyahay "shareecada Islaamk ka sokow Dastuurka Jamhuuriyadu waa xeerka ugu sarreeya ee dalka isaga ayeyna u hoggaansamaysaa xukuumadu heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, wuxuuna hagayaa curinta iyo go'aannada siyaasadeed ee qaybaha dawladda oo dhan. Markaa waa "duplication" halkan haddii sarreynta sharciga lagu sheegay halkan inay ku soo kordheen wax asal micnihii bixinaya waa "duplication" markaa **waxaan jeclaan lahaa faqraddaa ay kusoo dareen inay meesha ka saaraan.**

- **Qodobkaa 3(5):** Oo ka hadlaysa haweenka, haweenka waan la dhalannay, waa hooyadeen, waa walaasheen, waa hablaheennii. Wuxuu qodobkani sheegayaa oo uu khasab ka dhigayaa in heerarka kala gedisan ee dawladda kuwa la isku doorto iyo ku kalaba in ay gaadhaan. Arrinta qoondada ee haween badani halkan ka dhawaajiyeen isla markaana ay keeneen mooshin ku saabsan, waxay ka hor imaanaysaa xuquuqda haweenkaa waa "discrimination". Inkastoo ay yidhaahadaan waa "positive discrimination" ama faquuq togan waxaan u arkaa Soomaaliya konton sano kahor baa ugu danbaysay doorasho qof iyo cod ah oo ka dhacday geyiga Soomaaliyeed. Markii odayga iyo guddigu soo xulaysay caqabaddii jirtay maanta ummada Soomaaliyeed baa go'aanka iska leh. Halkan innagoo xildhibaanno ah cidda ay dooranayaan ummadda Soomaaliyeed lab iyo dheddig intaan ku go'aaminno dhakada kagama keeni karno. Xuquuqdaa waxa iska leh qofka Soomaaliga ah, qofka tartamaya lab iyo dheddig kuu doono ha ahaadee waxaa loo baahan yahay inuu afkaartiisa mabadii'diisa iyo kartidiisa ka iibiyo qofka Soomaaliga ah. Haddii ay dhacdo "outcome" markay soo baxdo in haweenku tiro ka hoosaysa intii loo bahnaa ay hoos maraan markaas ayay dhici kartaa koonto aan raadinno, laakiin "already" maynaan tijaabin konton sanadood doorosho qof iyo coda Soomaaliya kama dhicin. H**alka bayrta laga qabo** ee laga baqayo anigu ma fahmi karayo. Kootada meelo kala gadisabaa la galin karaa, dastuurkaa la galin karaa, xeerka doorashooyinkaa la galin karaa, waxaa kaloo jira waxa la yiraahdo party Koota xisbiyada ayaa la galinkaraa sharciyadooda. Markaa "completely" waan ka soo horjeedaa in heer dastuur laga dhigo koota. Li'annahuu "ceiling" ama saqaf bay u samaynaysaa tirada dumarka ee imanaya baarlamaanka. Marnaba kor uma dhaafi karaan soddon boqolkiiba (30%). Maynaan tijaabin boqolkii soddon (30%) in ay kor u dhaafi karaan iyo inay hoos uga dhici karaan. Nooca kootada ee haweenku rabaanna ma cadda. Kootada laba meeloodbaa la galin karaa marka laga hadlayo doorashada. Midna "process" kaa la koteeyaa midna "outcome" ka. ''Process'' ka , waxaan uga jeedaa in dumarka la siiyo jaanis lamida raga dhinaca sharraxaada. Midina waxaa weeye in kursiga la xidho. Midbaan oggolaan karaa in process ka la kooteeyo oo la yidhaahdo lambarka midka raga hala sharraxo dumarka. Laakiinse in la yidhaahdo kursi "already" aan cidiba dooran lab iyo dhidig uu noqon doono kii ku fadhiisanayaa waa la sii kootaynayaa arintaa "completely" waan ka soo horjeedaa. Waxaan jeclaan lahaa arrintaa in laga fogeeyo dastuurka.

- Hal arrin baan doonayaa in aan hoosta ka xariiqo. Dastuurkani intuu yahay qanuun waxaa ka badan inta uu siyaasad yahay. Dooddeena halkan ka baxaysaa, waxaa layidhi "article" ka halkan ku jira oo kaliya hala eeg eego. Siyaasadda ku xeeran dastuurka yaan laga hadlin guddoonkeena sharafta badani wuxuu samaynayaa qofkasta oo is yidhaahda "politics" ka ku xeeran dastuurka in laga hadlo waxaad ka baxday ajendihii. Waxaa

kaloon maqlayey nasiib darro in xildhibaannada qaarkood intay halkan yimaadaan "animal farm" iyo dhurwaa ka sheekaynayeen, muddo dheer waxaan jeclaan lahaa haddii aynu isku koobno innagu dooddii dastuurka oo dadkii dibadda joogay aynu ka soo qaadannay oo aynu niri innagaa xaq u leh ee loo oggolaaday xildhibaannada halkan jooga in "politics" ka iyo siyaasaadka ku xeeran dastuurkan loo oggolaado in si furan oo xoriyaddii ku dheehan tahay inay uga doodaaan.

12) **Xil. Yasin Abdullahi Mohamud:**

Waad mahad santahay guddoomiye, dhammaan xildhibaannada, gudgoonka labada aqal, xildhibaanada laba aqal, guddiyada labada heer iyo culumada, saxaafadda iyo dhammaan ka soo qayb ka galayaasha waxaan leehay, Aslaamu Calaykum Waraxmatullaahi. Bacda salaam, farxad gaar ah ayay inoo tahay baarlamaanka labada aqal ee Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya in aan u joogno maanta iyo maalmihii la soo dhaafay dhaymsaystirka dastuurka muddada qabyada ahaa ee aan u joognay maanta iyo maamlihii lasoo dhaafay in la dhammastiro dastuuka. Waxaan leeyahay waa fursad qaaliya oo ay ila tahay in aan ka faa'iidaysanno, ee intaa ka dib maalmihii lasoo dhaafay baarlamaanku wuxuu ku socday si macna badan oo xasilloon. Dastuurku waa dastuurkii dalkan in si miisaan leh, micna leh, deggan ha looga doodo, waxaan is leeyahay wax weyn ayey u tari dalka iyo dadka Soomaaliyeed, intaa ka dib waxaan la qabaa xildhibaannadii meeshaas ka dooday. Doodahoodii inta badan waxay ku salaysnayd micna ayayna lahayd. Waxaan rabaa inaan wax yar ka taabto Cutubkan 1aad.

- **Qodobka 3(5):** Ee ka hadlaya haweenka Soomaaliyeed waa lagu soo laalaabtay, haweenkuna waxaa la gaadhsiiyey heer ay mooshin qoraan. Waxaan is leeyahay dalkan waxaa la tilmaamaa inuu yahay oo lagu hal qabsadaa dalku inuu yahay dalkii hoooyo. Markaa gabdhaheenna in wixii ay rabaan, wixii aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka waxaan is leenahay in laga aqbalo, sidii ay rabaanna loogu qoro waa lagu qasban yahay. Haddaysanba ka hor imaanayn Shareecada Islaamka markaa waxaan leehay inta badan aniga ayay naga sheegtaan annagana faa`iidaan ku qabnaa iyaguna faa`iido ayay nagu qabaan, laakiin faa'iidada ay nagu qabaan masheegaan, laakiin inaan annagu sheegno weeye faa`iidada aan ku qabno. Markaa waxaan qabaa gabdhaha in qodobkaa gabdhaha loo tix galiyo oo loogu daro haday tahay kootada maaddaama uu dalku yahay dalkii hooyo. Aawlaada ay dhalayaan waxaan is leeyahay su'aal lagama keeni karo.

- **Qodobka 9(1,2):** Aad waxaa lagu tilmaamey oo lagu qoray Caasimada Gobolka Banaadir, maqaamkeedii iyo mataladeediina, waxaa layidhi gadaal ayaa loo raray. In lasoo hadal qaado ma ahayn, oo waxay ahayd in Cutubka 5aad lawada geeyo ama Cutubkan 4aad in lagu sheego oo lagu qeexo. Maddaama aad soo hadal qaaddeen waxaan qabaa guddiyada labda heer in ay caasimadda maqaamkeedii iyo matalaaddeedii iyo sida ay noqonayso ku soo celiyaan oo ay ka shaqeeyaan shaqooyinka noo yaala. Xulashada hadda aynu ku jirno inay ku soo daraan oo ay dib ugu soo celiyaan meesha ay ka baxsheen ayaan aad u rajeynayaa, sabatoo ah maxaa yeelay caasimaddu wax ka muhiimsan ee laga shaqeeyo inay jirto ma aaminsani, waayo waa caasimaddii ummadda Soomaaliyeed. Mushkilaadka ka haysta matalaad la'aanta iyo maqaam la'aantana dadka Soomaaliyeed way dareemi karaan. Marka caasimadda dad gaara ama cid gaara loo

xeerinmaayo ee waa caasimaddii ummadda Soomaaliyeed. Anigu waxaan qabaa in qodobkaas guddiyadu, maaddaama ay joogaan iyo xildhibaanada sharafta leh, **in dib loogu soo celiyo meeshiisii ayaan anigu soo jeedin lahaa**.

13) **Xil. Omar Ali Isak "Balash":**

Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mahadsanid mudane Guddoomiye, waxaan rabaa inaan halkan ugu mahad celiyo Guddiga la-socodka iyo Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-eegista Dastuurka. Waxaan aaminsanahay in ay shaqo aad iyo aad u qurux badan ay soo qabteen. Guddiyo ka horreeyey oo muddo badan soo shaqeeyey ayaa soo gaadhsiin waayey meesha ay hadda wax soo gaadheen. Qaabka ay u siiqeeyeen oo ay u qoreena aad iyo aad ayaan ugu mahad celinayaa. Xildhibaan Xuseen Iidow saaxiibkay iyo saaxiibbadiis dad khubra ah oo wax fahansan ayaa hawshan loo dhiibay aad iyo aadaan ugu faraxsanahay 100%.

Intaas kadib waxaan rabaa in aan ka hadlo oo qodobbada aan ku soo koobo maaddaama ay wakhti dambe tahay, si koobanna u dhigo Inshaa Allahu Tacaalaa. Waxaan rabaa inaan u sheego guddiga labadiisa qaybood, dastuurka qaabka uu u qoran yahay dad khubara ah oo Soomaaliyeed oo sharciyaqaanno ah ayaa turjumay. Af english ku qornaa markii hore iyagaa soo turjumay si qurux badanna turjumaaddoodu waa ay u fiicnayd. Run ahaantii qaabka ay u sameeyeenna aad iyo aad ayey u macaan tahay. Waxaan ka codsanayaa inay guddigu ku dadaalaan erey bixintii iyaga ka horraysay aad bay u fiicantahay haddaan lagu qasbanaanin, tirid ama baddalin, taas ayaan ka codsanayaa.

- **Qodobka 1(3):** Haddii aan si toosa ugu gudbo dooddayda qodobka 1(2) waxaa ku qoran midii hore allaahu subxaana wata caalaa ka sokow awoodda oo dhan waxaa leh shacabka, hada waxaad moodaa inay waxoogaa yar ka badaleen "Allaahu subxaana watacaalaa ka sokow awoodda gobanimadda dalka waxaa iska leh shacabka" wax baad soo kordhiseen sababta aad u soo kordhiseen in aad faahfaahisaan ayaan jeclaan lahaa.

- **Qodobka 2(2):** Sidii markii hore ay u qornayd oo ahayd "diin aan ahayn diinta Islaamka laguma faafin karo dalka". Intaa haddii lagu joojiyo oo Jamhuuriyada Federaalka ee aad ku darteen laga reebo, waa la iska fahamsan yahay dalku inuu yahay dalkii Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Markaa dastuurna sidiisaba la samaynaayo waxaa roon mabaadii` caama ayaa lagu qoraa dastuurka. Mabaadi`daas guud si kooban oo la fahmi karaa loo qoraa, luuqad la fahmi karana waa lagu qoraa. Markaa badnaanshaha iyo xajmiga dastuurku inuu waynaado waxyaabaha laga ilaaliyo dastuurka yey ka mid tahay. Markaa Jamhuuriyadda meela badanay ku qorantahay in aad iska soo koobtaan sidii horay uu u qornaa aad ku sii daysaan oo aad u dhaaftaan aad iyo aad ayey iila qurux badan tahay. In yar uun baad ku soo kordhiseen intii aad ku soo kordhiseenna waa la yaqaannaa.

- **Qodobka 2(4) :** Waxoogaa waad moodaa in aad iyo aad looga hadlay oo sharci iyo xeer idinkunu aad ku badasheen xeer aad qaadateen oo sharciga waxoogaa aad iska ilaalinaysaan mooddaa. Markaa ani waxay ila tahay "Inamal Acmaalu Binniyaat". Shareecadii Islaamka ulama jeednee oo malihii waa Aayado Quraana iyo Axaadiis. Hase ahaatee, dadkii in tashwiish badan lagu furay ayaad mooddaa. Baarlamaankana xeerkana wuu dajiyaa, sharci dejiyaalna waa la yiraahdaa. Sharciga aan dajinnay kii

ilaahay maaha waa la ogyahay, markaa waxay ila tahay erayga sharci yaan xasaasiyad laga qabin **sidiisii u qaata**, wax “problem” ah u maleyn maayo inay meeshaas ku jaban tahay.

- **Qodobka 3(2)** : Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa dal muslim ah, sunni ah dad badanaa soojeediyey anigana waan ku raacsanahay waan ayiddayaa “team” kii iga horreeyey, **in sunniga meesha lagu muujiyo** aad iyo aad ayey iila qurux badan tahay.

- **Qodobka 4(3):** Sida aad idinku u qorteen waxaad mooddaa in aad hal eray ka badiseen soo noqashadiisa, kasta, kasta kasta badanaa ku jirta. Qodobkaa sidiisaba haddii la iska daayo waan soo dhawayn in la iska dhaafo sidiisaba oo la “cancel” gareeyo. Sidii horey u qornayd wax walba meesha ay ku cad yihiin in sidiisii loo daayo ayaan soo dhawaynayaa. Ta labaad, ayaa waxaad ka dhigteen ta saddexaad. Markaa qaabkaad u qorteen waxoogaa ma jeclaysanin. Markaa sidaa darted, waxaan aamminsanahay oo aan jeclahay in dib loo qorin **ee kii kore lagu daayo,** kastadan shan jeer soo noqotay si ay meesha uga baxdo.

- **Qodobka 5** : Dawlada Federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa ilaalisaa isla markaana hormarisaa afka Soomaaliga iyo suugaantiisa, sida faqradu ay u qoran tahay waxoogaa culays badan lama saarin dawladdii. Afkeenniina waa Afka-rasmiga ah ee dalkeenna looga hadlo ee qoraalladu ku soo baxaan ee wax walba ay ku soo baxaan, waxay ila tahay **in siiqatul amar loo dhigo** “dawladu waa inay daryeeshaa ilaalisaa isla markaana hormarisaa Af -Soomaaliga iyo suugaantiisa” markaa meel looga baxsado ma leh hadhaw.

- **Qodobka 6 aad:** Waxaad mooddaa waa calanka iyo astaanta qaranka, calanka Soomaaliya waa calankeennii aan naqaannay quruxda badnaa. Hase yeeshee, midabka siyaabaha kala duwan oo qola kasta midabka rabto ayay adeegsataa. Buluuggaa kala duwan oo dhawr nooc kala leh. Markaa buluuggan faraha badan oo qola kasta si usoo qaadato. Waxoogaa aniga waxaa ila qurux badnaan lahayd in kuwaa kale labaabi`iyo dadkana lagu wacyigaliyo in la isticmaalo buluug furan oo calankeena rasmiga ah. Oo markaas u fiirsatid buugta aan hadda soo saaryno lafteeda qaabka buluugu u samaysan yahay maaha calankii in iyadaas laftigeeda wakhti badan la galiyo oo aad loo fiiriyo. Sidoo kale, calanka heestiisa dad badan ayaa ka hadlay way fiicnaan lahayd in dad khubaro ah oo suugaanta yaqaanna u fadhiistaan oo ay dib u qurxiyaan aad ayay iila fiican tahay, laakiin wax macna ah oo ay leedahy oo weyn dhexdeedii kuma jiraan. Markaa in macna loo yeelo erayo aad u macaan oo qurux badan oo duco iyo khayr badana lagu aruuriyo ayey ila tahay.

- **Qodobka 6 (3):** Sidoo kale meeshaan waxaaa ku qoran heesta qaranka. Markaad fiiriso heesta qaranka oo haddana la leeyahay “qolabaa calankeed” waa cayn siday u qoran tahay umalayn maayo inay hees qaran ay tahayee, waa heesta calanka. Waa in dib loo saxo oo layidhaahdo ‘heesta calanka’ layidhaahdo ayaa fiican. Heesta qaranka waa mid kale ee waayahan danbe loo isticmaalaayey Soomaaliyeey toosoo ayaan arkaayey, laakiin markaan odayaashii dadkii hore aan waraysannay heesta calankaa si rasmiya u

jirta markaa midaas waa midaas. H**eesta qaranka in laga tiro oo layidhaahdo heesta caalanka ayaan jeclaan lahaa.**

- **Qodobka 8(4):** Waa la tiray markaan xoogaa aan akhriyey dhinacyo badanna aan fiiriyey waxaa ila qurux badnaatay **in sideedii hore lagu dhaafo oon la tirin**.

- **Qodobka 9aad:** Ugu dambayn caasimadda dalka iyada oodhan in laqaado maaddaama maqaamkeedii aan laga hadlaynin iyada iyo maqaamkeediiba la is raaciyo oo ay hal mar noqoto ka doodista caasimadda. Sidaa saan aad iyo aad u soo dhawaynayaa.

14) **Xil. Aweys Mohamed Omar:**

Mudane guddoomiye waad mahadsantahay, labadda guddi iyo xildhibaannada sharafta leh. Waxaan rabaa wixii in badan laga hadlay inaan yara soo gaagaabiyo. Kow arrintaa, waxaan rabaa inaan marka u horaysa dul istaago oo xasaasiyad badani ka jirto jinsiyadda. Kow taasaan ka billaabayaa, maxaa yeelay wixii kale way iska fud fudud yihiin. Jinsiyadda sidaad ogtihiin in badanaa doodad badan laga keenay, in badanaa xildhibaannadaa ka hadlay oo iga horreeyey. Maalmahan qaarkood way isku khilaafeen shan qof oo isku raacday hal arrin. Jinsiyadda sidaad ogtihiin waxyaabaha la isku haysto waxaa ka mida gabadha ninka ajanabiga ah ilma u dhashay ninkii aan lahayn nin ee caruurtii meel ku dayacan yihiin. Qodobka ugu adkaa qodobkaasuu ahaa. Tan carruurta markaa sidaad ogtihiin carruurtaas maxaa laga yeelayaa ma waxay noqonayaan dad ilma Soomaaliyeed oo baasaboor Soomaaliya qaadanaya ama dhalasho Soomaaliya qaadanaya mise dhalsho Soomaaliyeed ma qaadanayaan? Taasi waa mid .

- **Qodobka 3(5):** Mida kale waxay ahayd waxaa la dul istaagay kootada. Kootada dhibkama taagnoo waxay ku xiran tahay gabdhaha dadaalkooda, boqolkii soddon (30%) ama boqolkii afartan (40%) hala siiyee horta cid diidi karta ma jirto. Gabdhihiinna halkaa inay soo fadhiistaan oo aay yihiin ummadda qayb ka noqdaan waa waajib waana muhiim, taas in la baraarujiyana qaybaan ka ahay.

- **Qodobka 8aad oo cusub**: Laakiin tan carruurta sidaad ogtihiin waxaa ka jira cunfi yaroo iska adag ilmahaas, masala kaloo waxaa jirta ninka Soomaaliga ah ee guursaday gabar ajanabi ah ee ama waddan kala ah ee carruur udhashay, carruurtaasina Soomaali ay noqonayaan ee la leeyahay dhalasha Soomaaliyey qaadanayaan. Gabdaha kuway dhaleenna la leeyahay Soomaali ma noqonayaan, waxa loo baahan yahay in taas habraac iyo dood kale in laga sameeyo, maxaa yeelay in badanaa ku dul wareegsannay, haddii gabadhii la leeyahay nin ajanabiya ma guursan kartid ninkana waa in ladhaho gabar ajanabiya ma guursan kartid. Waxa kaloo jiray ama aad u socday wakhtiyadii la soo dhaafay, dad masuuliyiina qabay gabdho ajaanibta xilalkiina way hayeen. Mas`aladu waxay tahay nin gabar ajaniba ah qaba inuu dalkan xilka qabto, xilalkii ugu sarreeyey kamida dalkay dhibaata ku tahay. Anuu waxaan qabaa taas in la joojiyo, maxaa yeelay ninkii hadduu naag ajanabi ah qabo oo xilka dalka ugu sarreeyo hayo waa dhibaato ee taasna anuu waxaan qabaa in meesha laga saaro.

- **Qodobka 2(1):** Tan kaloo qodobka laga hadlaayey waxay tahay islaamka, **islaamku waa diinta dawlada** taas waxaan qabaa in laa dhaafo. Tan kale ee la leeyahay Islaamku waa

diinta dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, marka la yiraahdo islaamku waa diinta dalka waxbaa ku jira, markaa macnaheedu waxay tahay dalkan in lagu "practice" gareeyn karo diin walba, tan waxaan qabaa qodobkan labaad intiisii hore loo dhaafo oo la dhaho "islaamku waa diinta dawlada".

- **Qodobka 1(1):** Arrin kaloo waxaa jirtay halagu daro sunni, haddana la leeyahay mad-habu Shaafici ayaan nahee ha lagu daro. Waad ogtihiin oo mad-habu Shaafici waa ugu culuma badnaa waan ugu cilmi badnaa. Laakiin ma jirto dawlad maanta mad habu Shaafici ka shaqeeyo sidaad ogtihiin. Carabtoo kale hadda waxay ku badan yihiin xanaabilada. West Afrikoo kale waxay ku badan yihiin maalikiyada in badana ku dhaqmaan. Waxaan ka hadlaynaa markaa waxay tahay mad habu Shaafici haddii la yidhaahdo waa lagu dhaqmayaa hal aayadoo jirta oo tusaala aan idiin soo qaadayaa( إِنَّمَا جَزَاءُ الَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي الأَرْضِ فَسَادًا أَنْ يُقَتَّلُوا أَوْ يُصَلَّبُوا أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُمْ مِنْ خِلافٍ أَوْ يُنفَوْا مِنَ الأَرْضِ) Cabdilaahi Binu Mascuud iyo Cabdulaahi Binu Cabbaas tafsiirkaas way ku kala tageen sidaad ogtihiin markii layidhaado aayaddaas . Shaafici wuxuu qabaa qofka danbiga galay ee laga xalaayey danbiga ee qof dilay ama wax dhacay ama wax dilay oo kale in la salbiyuu qabaa, tiirka la geeyo, la dilo. Kabbacdina saddex maalmood, afar maalmood la salbiyo, sidaad ogtihiin, annaga markaa ma ku dhaqannaa taas? Maya, qofkii xaqa laga oofinayo waad aragtaan tiirkaa aa lageeyaa oo waa la dilaa isla markiiba waa laduugaa. Markii waxaa laga hadlayo anuu waxaan qabaa in lagu istaajiyo sunni. Halkaas aan lagu darin mad habu Imaamu Shaafici. Waad fahanteenaan u malaynayaa? Maxaa yeelay, mad-hab Imaamu Shaafici uma samaysnaan isleehay ka dawlad ahaan in lagu maamulo. Waad ogtihiinoo haddaan niraano waan ku dhaqmaynaa waxyaabo badanaa dhacaaya, oo dadka Soomaalidu xaalado badan ayay ku jiraan. Markaa waxaan qabaa "Islaam, Sunni" ah in halkaas la istaajiyo, taa waa mid. Dastuurkan waa muhiim waana waajib waxayna sharaf u tahay golahan baarlamaanku in uu ansixiyo, kana shaqeeyo waajibaadkiisana uu guto. Wixii kaloo saamilay, waxaan qabaa wax saamilay la yiraahdo dalkaan kama jiraan dalkan madaxweynuu leeyahay, xukuumadaa joogta, gola baarlamaanaa jooga. Laakiin eraygan saamilay la leeyahay waa idhibay, ani xildhibaanaan ahay. Xildhibaankii iga horreeyey een kursigiisa ku fadhiyo saamilay ilama aha. Markaa waxaan qabaa eraygan saamilay oo maalmahan aadka noogu batay oo la leeyaahay siyasaddaan la leenahay madaxweynaha ama dastuurkaa la wada leeyahay. Nin aan xil hayn aa wuxuu rabaa dastuurka aayihiisa inuu ka shaqeeyo golahana aan fadhiyin waa dhibaato. Anuu maxaan ka shaqaynayaa oo xildhibaana? Nin bannaanka jooga ama aan ku jirin government-ga aa wuxuu rabaa inuu dastuurka hago. Dastuurka facebook iyo social media lagama hagi karo. Qofka waajibaa saaran halkaa hasoo fadhiisto haddaad xildhibaan tahay halkan dooddaada ka gudbiso, dooddaada dhiibo, halkan aan ku wada hadalo. Waxay iska noqonaysaa wixii kale wax ka jira malaha, wixii burhaantaada ah la imaaw halkan dastuurka uga shaqee. Xildhibaannada Golaha Shacabka "legacy" goodu kan ayuu ku xiran yahay. Sababtu waxay tahay meeqa sanaa la isku haystay 30 saano ama 40 saana la isku haystaa dastuurka qabyada ku meelgaarka ah. War dawladnimadu sidaa maaha. Dawladdu waa qaanuun iyo sharci, waa sharaf darro dal dhan oo aan dastuur lahayn baan dhex fadhinnaa. Waxaannahay xildhibaan aan jaakado xiran. Sideed xildhibaan ku noqon haddii aad dastuurka ka shaqayn weydid "that is real" . Waxa laga hadlayaa waxay tahay, annaga haddaan rabo in aan "legacy" qaadanno oo sharfteenna iyo

karaamadeenna aan ugu shaqaynayno ummaddii na soo dirsatay ee waajibku innaga saaran yahay, ee aan rabno in aan wax u qabanno ama wax u tarno. Dee sharciga dastuurka aan dhammastrino kana shaqayno.

Walaalayaal, waxaan ku soo koobayaa waxyaabo waxaa jira waajib innagu ah iyo wax yaabo waajib innagu ahayn. Xildhibaanka sidaad ogtihiin wuxuu leeyahay waajibaad la saaray lana weydiin doono berri.  Maxaa kamid ah waad ogtihiin oo mas`uul marka ladhoho "al masuulu min su'aal waaye" markaa qofku markuu masuul yahay su'aalaa hortaalla, waajibaa nasaaran, walaalayaalow wixii saamilay ah waxaan leennahay inoo kaadiya. Xildhibaanaan idiin nahay idinku matala oo aad dirsateen. Baarlamaanka 275 qof baa joogta, waa lagu dhanyahay wax ka maqan majiree saamileeyow raalli ahaada. Dadkii idinku matala baarlaamka bal usoo sheega fikirka aad qabtaan iyagaa gudbinaayee.

15) **Xil. Abdiqaadir Omar Moalim:**

Mahadsanid guddoomiye, mudanayaasha Baarlamaanka labada gole, guddoonka iyo labada guddi aad baan u salaamayaa, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu. Sharaf bay inoo tahay Baarlamaankii 11aad in aan ka mid noqonno, oo Ilaaheey uu fursad inoo siiyay in aan dhammeystirno ama aan ka mid noqonno dadkii xilligii dhammeystirka dastuurka soo haleelay Insha Allah. Ma rabo in aan ku dheeraado hordhacayga. Waxaan rabaa in aan galo qodobbada ku xusan Cutubka 1aad ee Dastuurka ee la inoo keenay afartiisa cutub.

- **Qodobka1(1):** Waxaan la qabaa saaxiibbada soojeediyay Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah oo Muslim ah in lagu daro. Waxaan la qabaa saaxiibbaday, xildhibaannada Sunni in lagu daro kaliya. Meeshaas in looga haro oo aan lagu sii foogannin Inshaa Allah, mad-hab iyo meelahaas in lala galin. Waxaan kale oo rabaa guddiga in aan u soojeediyo, waxaa ka muuqata dastuurkaan faahfaahin dheeri ah, detail badan ayaa ka muuqda. Saaxiibadeey xoogaa way ku soo fogaadeen, Mabaadi`ida Meesha in looga tago la rabo detail badan ayaa ku jiro.

- **Qodobkii 1 (3) :** Waxaa la yiri Allah SWT ka sokoow awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh shacbiga Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya, isaga oo awooddiisa u isticmaalaya si toos ah ama si dadban u adeegsanaya hey'adihiisa u xilsaaran. Hey'adaha u xilsaaran waa kuwee? Hay'adaha in ay adeegsadaan ama dastuukaan ka shaqeeyaan u xilsaaran waa labada gole, **meeshaasna waa in ay ka muuqataa labada gole.**

- **Qodobka 2aad(1) :**Islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dowladdaba waa in ay ahaato.

- **Qodobka 3(1) :** Waxaan qabaa faqradda 1aad oo ay ku xusnayd caddaalad bulsho **in meeshaas sideeda loogu soo celiyo** maaddaama aysan kujirin caddaalad bulsho.

- **Qodobka 3(2):**  Waa **in uu Sunni la socdaa**, dal Muslim ah ayaa ku jiro.

- **Qodobka 3(3):** Waxa ay sheegeysaa Jamhuuriyadda Somaaliya waxay  ku dhisan tahay mabaadii'da aasaasiga ah ee nidaamka awood qeybsiga Federaaliga ah. Sidaan

ognahay nidaam ay Soomaali ku heshiisay oo ay wax ku soo qeybsatay kuna soo caano maashay waqti badan oo goobaha iyo meel walbo aan u isticmaalno, qalbiyadeenna afkaarteena iyo doodahana ka buuxdo aan la sheegin baa jira, qodobkaas waan isla naqaanaa waa iska 4.5 waxba yaan laga warwareegannin majhuulna yaan laga soo qaadin. 4.5 meeshiisa hala iska keeno oo ha ku qornaado, ee ha lagu soo qoro ayaan qabaa maaddaama oo aan in badan ku soo kala badbaadnay dowlidnimana aan ku soo yagleelnay inta yaroo aan hadda heysano.

- **Qodobka 3(5):** Farqadiiisa 5aad haween. Haweenka baryahayaan wayba kacsanaayeen mooshin bay keeneen laakiin marba haddii ay diideen in ay xooggooda wax ku raadsadaan oo ay nala sinnaadaan amaba aya naga bataan. Maaddaama bushadiiba ay sheegteen in boqolkiiba toddobaatan (70%) ay ka yihiin boqolkiiba soddon ( **30%) ha la iskaga oggolaado**. Waloow aysanba gaareynin sida aan qabo. Haddii ay gaaraanna waxba dhib kama jiro.

- **Qodobka 4(3) :** Xeer kasta , go'aan kasta ama tallaabo maamuleed kasta ee ka soo baxda hey'adaha dowladda kana soo horjeeda dastuurka waa waxba kama jiraan, waxaana burintooda awood u leh maxkamadda dastuuriga ah. Sidaan ognahay dalkaan maxkamad dastuuri ah madaxweynayaashi isa soo badbaddalay in badan bay ka wareegteen. Sidaas daraadeed waxaan soojeedinlahaa in la isku daro maxkamadda sare iyo dastuuriga laba sababood daraadood: 1. Haddii madaxweynihii uu ka baqay uu ka wareegsanaayo in uu u fahmo maxkamadda dastuuriga ah iyo maxkamadda sare xoogaa baqdinti badnayd meesha ay ka baxdo uu sidaa ku soo dhiso iyo in dhaqaale ahaan iyo wixii ku bixi lahaa oo facility ay sidaa qaranka wax badan ay ugu badbaadaan sidaas daraadeed si aan sas looga qaadin **labada maxkamadood waa in la isku daraa soojeedinteeda.**

- **Qodabka 5aad:** Qodobka bilowgiisa ama cinwaankiisa waxaa ku qoran afka, kii horana waxaa ku qoran afafka. Marka waxaa sax ah afafka. Sideedana haddii afka lagu soo qoro waa in uu ka kooban yahay hal af. Laakiin afafka Carabi baa ku jiro, Af-soomaali baa ku jiro. Waa in lagu soo qoraa afafka ama kiisii hore la soo qaataa cinwaanka. Farqadiisa 1aad, Maay iyo Maxaa tiri waa sax in la soo qaato maaddaama dastuurka horana ay ku qornayd. Sidaan qabo saxiibba badan oo waxaan arkayay duraya Af Maayga. Waxaaba sax ahayd guddoonka in uu nagu guddoomiyo Afka Maayga. Guddigana waxaan u soojeedineynaa lahjadda Maayga sababtoo ah xaq bay u leeyihiin ummadda ku hadasha Afka Maayga in ay fahmaan, aqristaan aragtina ay ka dhiibtaan. Waa mahadsantihiin guddiga.

- **Qodobka 7aad:** Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, qodobkaan waxaan rabaa guddiga in aan u jeediyo waa geyiga. Anigu meeshaan ka imid waa Koofur Galbeed, Afka Maaygaana lagaga hadlaa. Way adag tahay qofka jooga Baydhaba in uu fahmo geyiga ama meelaha kale ee looga hadlao afka Maayga. Marka waxaan jeclaan leheen eray ka jilican. Sidaan ogsoonahay dastuurka bulshada ayaa iska leh waa in ay fahmi kartaa, ku dhaqmi kartaa aragtina ka keensan karaaan. Si loo helo taas waa in ay soo jilciyaan geyiga eraygaas eray ka jilcan in la raadiyo.

- **Qodobka 8aad** Shacbiga iyo jinsiyadaha. Farqadda 4aad oo la tiray waxaan qabaa in sideedii meesha loogu soo celiyo. Waxyaabaha kale aan hadda ka murmeyno, yaa Soomaali aan ahayn iyo maamada ilmaha ay dhashay iyo waxaas waxaa la yiri xeer baa la soo saarayaa oo baarlamaanka la keenayaa oo looga hadlayaa si detail ah laakiin mabda' ahaan **qodobkaan in la soo celiyo ayaan qabaa** oo ah, "diidmada, laalista iyo ka qaadista jinsiyada laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed". Dalkeenna waan aragnay waa jilicsan yahay wax badan baa siyaasadda lagu soo dabbaqaa ama lagu soo celiyaa waxaan leeyahay halla soo celiyo farqaddaas maaddaama ay muhiim u tahay ayna aas`aasi tahay. Waqtigii aan inagu intaa ka gudubno  wacyigeenna iyo waayoaragnimadeenna haba la tiro ama dastuurka lagu laabanaayo.

- **Qodobka 9aaad:** Oo in badan lagu laablaabtay waxaan leeyahay qodobkaan waaba sidiisaba abiteytarka la sheegaayo hoos kasii weeye asaga kaliyaa la keenay **waan ka baxay nuuxow.** Asaga kaliya in lasoo wada raro ama lawada raro meelihii la geeyo Cutubkii 5aad lageeyo. Maddaama aan la geeynin saaxiibadey waxaan leeyahay, wey innagu dayayeen oo weyna baroobeynayeen, kan danbe idin wada sugeynaa inshaallaah. Gabagabadii, waxaan rabaa aad baad u mahadsantihiin xilibaannada sharafta leh iyo guddoonka. Waxaan u jeeday baryahan saaxiibbo badan baarlamaanka nala fadhiyo oo markii horena xoogaa bannaanka iney kusoo yaraatay xilibaannimo soo doontay, haddana aan u maleynaayo xilibaannimadii in ay la yaraatay markaa u xiisay iney bannaanka u dooodaan. Haddii xilibaannada halkaan lagu aflagaadeynayo guddoonkiina uu fiirsanaayo waxaan leeyahay saaxiibadey meeshii bannaanka aheyd in ay raadsadaan "platform" kii iney raadsadaan  xoogaa xildhibaannimo ay cadaadis galisay u maleeyaa. Bal xilibaannimada iney ka yara tanaasulaan wax yar bannaanka ha aadaan oo xoogaa  xagga haka soo qeyliyaan "platform" kaas. Intaas waa iga kaftan Asalaamu Caleykum.

**16) Xil. Abdullahi Hassan Roble:**

Mahadsanid guddoomiye, xilibaannada sharafta leh iyo intiina kale meesha fadhisa, Asalaamu Caleykum. Aan eego marka ugu horreysa dastuurka. Dastuurka waa heshiis bulshadeed waa heshiis siyaasadeed, waa heshiis mujtamac oo wada waafaqsan yahay waxa meesha lagu qoraayo. Tusaale ahaan, mujtamaca "Christian" ka looma qori karo dastuur islaami ah, saa darted waxa uu ku saleysan yahay intaas. Mujtamaca annaga  ahaan laftooda siyaasi ahaan say u dhisan yihiin in loo tixgiliyo oo la eego qaabka ay iskugu xirmayaan si arintaasi loo xoogeeyo. Sidaas darteeda, waxaan filayaa in dastuurka uu ka wada jawaabo, mabaadii'da aas`aasiga ah taas oo ay kuwada saleysneed. Marka inaan xoogaa yar ereyada la toos toosiyo waa muuqataa, laakiin in aan lagu dheeraannin tafsiiro badan la galinin wixii hore barigii hore laga soo shaqeeyay aad bey muhiim u tahay. Awoodda markii aynu ka hadleyno waxaan moodaayay in haddeer la lahaa  haddeer dadna 4.5  ayaysoo qaadayeen ama 4.5, dadna ay yiraahdeen meelo ay wax ku qeyb sanaynaa mujtamacaan Soomaaliyeed ee maanta aynu joogno ee burbursan dadbaa kasoo shaqeeyay, asagoo burbursan oo Soomaali ka dhigay oo gobonnimo gaarsiiyay, oo oggoleysiiyay qofka Soomaaliga ahi in uu meel kasta ku noolaan karo. Mujtamac kastana ka mid noqon karo asagoo aan heyb iyo qolonnimo midna aan loo eegin. Dib yaan loo celinnin oo beelo iyo arrimo yar yar oo noocaas yaanan dib loogu celinin "waalla doogiye yaan la dacaroon".

Ummadda Soomaaliyeed mar bay gaari doontaa in ay noqoto ummad Soomaaliyeed oo is oggo,l oo meel walba uu tago ka shaqeysan kara, oo siduu doono ugu noolaan karo. Waa la gaarayaa oo la gaarayaa. Haddaba intiinan hadda dhawaan dhalatay ee ka danbeeysay siyaasaddii Soomaalinnimada ama inta badan laga yaabo iney hoggaamineyso siyaasadda maanta jirta. Siyaasaddaasi siyaasad Soomaali meel loo dhigo maahan. Beelna wax ku qeybsanmeyno, Soomaali beynu ahaaneynaa. Arrintaani horaa loo yiri wax kale maaha waa waxyar oo aynu ka gudbeyno oo aynu ku soo meel gaarnay, waana ka gudbi doonnaa. Laakiin wax wanaagsan maaha. Markaa sidaa darted, aan deyno mujtamaca Soomaaliyeed in uu yahay mujtamac dowli ah wax ku qeyb sada een nidaamka dowliga ah.

Marna ma jirto adduunyada meel la yiraahdo dowlad baa qabiil wax ku qeybsata. Meel ay adduunyada kaga qoran tahay lama haayo ama beel iyo qabiilna waa isku mid. Marka erayga noocaas in la joojiyaa fiican oo loo adeegsado dowladnimo iyo dad is oggol iyo ummad wada shaqaysa oo dowladnimo diyaar u ah in ay qabsato. Sharcigaan aynu maanta aynu qoreyno muddo badan baan u soojeedinnay guddoonka iyo maamulka in qoraallada dastuurka la hagaajiyo oo Af Soomaali wanaagsan oo sax ah iyo qeynuuniyan sharciyan u dhisan in la sameeyo.In badan baa laga dhaga adeegay maanta waxaan rabnaa haddaba guddigaan in ay u diyaar garowdo in dastuurkaan u qoran yahay qoraal habboon oo sida loogu tala galay noqonaya. Imika waad arkeysaan in la leeyahay ereyo lagu soo daray erayo ku dheeraad ah. Ereyo loo baahanyahay in lagu soo daray, arrimaha noocaan in aad ugu taxaddartaan dad qawaaniinta iyo Af Soomaaliga yaqaanna in loo dhiibo oo afka lasoo qoro oo aan mar danbe laga dhago adeeygin ayaan qabaa. Guddigaan ayaga ayaa hadda u xilsaaran labadaasi iney yeeshaan dad yaqaanna shuruucda sida loo qoro Af-Soomaaliga sida loo qoro labadaba. Arrintaas waxaan rabaa in Af-Soomaaliga la xoojiyo, dastuurka in aad loogu xuso in Af-Soomaaliga la xoojiyo waa afkeennii waa dad nimadeennii, waa umadnimodeennii in aynu afka xoojinno waa in aynu isku deyno.

Tan labaad, arrinta haweenku oo ay gabdhuhu soo qaadeen waxey ila tahay malaha hadda danbey moodeen ee maaha sidii ay ugu habboonayd. Danta ay moodeen in loo daayo, laakiin qaabka dastuurka loogu darayo iyo ereyada la xusaayo laftooda ugu yaraan waxaa loo baahan yahay bal in ayna noqonin wax hadhow cillad ku noqon ama nidaamka la doonaayo doorashooyinka ka hor yimaada in aysan noqonin ayaa loo baahan yahay. Marka qoraalbey u baahan tahay laakiin mabda` ahaan waan waafaqsanahay gabdhaheenna Soomaaliyeed meelwalba oo ay ka shaqeynayso in ay qeyb ka noqdaan waan u oggolnahay waana wax wanaagsan oo habboon.

Marka qoondadooda oo ay hadda ku soo darsadeen halloo daayo, laakiin qoraalka qaabka uu noqonaayo iyo dastuurka qaab ka loogu darayo siiqada loo sameyneyo, ereygaa in laga fakaro aad baa loogu baahan yahay in laga fakaro, si ay hadhow cillad joogta ugu noqonin.

- **Qodobka 8(1):** Arrinta jinsiyadda, tusaale ahaan waxa jirta inan "tens" ka ciyaara hooyadiis waa "English" aabbahiisna waa "Australian" asaguna waxa uu ku dhashay dalka "America". Waa nin caan ah oo waala yaqaannaa. Waxa uu ka mid yahay nimanka waaweyn ee ciyaarta "tens" ka ku soo baxo. Inankaasi saddex jinsiyad buu leeyahay. Saddexdaba xaq buu ugu yeeshay, midna hooyuu ugu yeesahay, midna aabbe ugu yeeshay, midna wuu ku dhashay. Adduunyada ayaynu ka midnahay ma diidi karno shuruucda adduunyada ka jirta annaga aynu ku dhaqanno ma diidi karno. Dadkeennu

maanta waxaa la yiraahdaa illaa "2 million" baa bannaanka ku nool. Waxaa sii socota 4 million ilaa 5 million oo Soomaali iney bannaanka ku noolaan doonto in ayna lahaanin Soomaalinnimo in ayna yeelan sharci maaha. Ama aabbe ayuu ku noqonayaa ama hooyo ayuu ku noqonayaa ama dhalasho ayuu ku noqonayaa. Marka gabadhu waxa ay ka hadlaayeen taas ayaa ka mid ah. Carruurtoodu labadaa mid bey ku helayaan, ama in ay hooyo u tahay jinsiyadda Soomaaliyeed wuu ku heleyaa, in uu dalka ku dhashay wuu ku heleya, siduu aabbannimadaba ugu helaayo.

- **Qodobka 8**: Faqradda cusub, adduunyada waxaa jirta dad badan oo la soo qaadoo hooyadaaba asal ah oo waxaaba la yiraahdaa qofka waa in laga eegaa hooyada ee lagama eego aabbaha. Markaa sidaa darted, jinsiyaddu innagu inaynu soo xaddidno maaha oo dadkeena qaar u diidno. Sheyga labaad ee jira caalamku maanta dadbuu ku tartamaa. Adduunyada maanta waxaa la yiraahdaa "human resource" wax la yiraahdo ayaa manta jira. Haddeynu maanta ka fakarno afarteenan meesha joogta cidi kuma soo biiri karto, cidi kuma soo darsami karto. Haddeynu ku darsanno intaan wey kala tagi doontaa. Dhulkaan bannaan cidlada ah ayaa barrito loo talin doonaa. Sidaa darted, ha dhibsannina dadka soo koraaya haddii ayna jirin cillad kale oo siyaasadeed. Taasna waxaa qaabilsan qeybta socdaalka iyo qofkasta oo dalka soo galaya iyo waxa uu noqonayo qeybta socdaalka ayaa qaabilsan. Laakiin waa in aynaan ka cabannin imaanshiyaha dalka in aynu diidno qof innaga mida. Midda kale ee tusaalaha jirta waxa weeye. Waxaa jirta dadkan eynu leennahay ama Soomaali Galbeed ku nool, ama "Kenya" ku nool. Dalkaan waa dadkii u soo dagaallamay in ay xorriyaddaan gaarsiiyaan. Maanta ubadkoodii baa jooga. Kii aabbihii u soo dagaallamay in aynu niraahno maanta xuquuq kuma lihid waa gardarro oo ma wanaagsana. Dalkeena Soomaaliyeed maanta haddey cillad inoo timaado, dhammaantooda wey inagala qeyb galayaan. Duruufaha dhaqaalo iyo mid siyaasadeedba, meel kasta iyagoo jooga "senators" keena maanta kama tiirsana siyaasadda dowlada ka tirsan baa ina taageera oo Af- Soomaali inagu taageera, ama Soomaalinnimo inagu taageera ama haka soojeedeen ama carruurtooda haka soojeedaan. Sidaa darted, waxaan aad u soo dhaweynayaa jinsiyadda in aynu dad badsanno. Dad wanaagsan oo innaga mida in aynu ku weyno iyo kuwa ina taageeray in aan u diidno iska daayoo in dadkaas keensan.o ayaan muhiim ah, oo dhaqaalahooda ay la yimaadaan ,oo ay halkaan ku koraan, halkaan ubad ku dhalaan. Laakiin shuruudaha siyaasiga oo aynu ula macaamilno. Aad iyo aad baad u mahasantihiin. Ereyga yar diin ceyga in dastuurka lagu soo daro maaha. Xildhibaanbaa soo qaaday aad baan ugu mahdinayaa. Annagu diin ma cayno , barigaas waayahaa laguu sheegaayo meelaha qaarkood diinta lagu cayn jiray. Matalan waagii dastuurka la qoraayay laakiin maanta maaha dadka Soomaalida maanta diinta ma caayaan. Midda kale, yeynan ka dhigin in dastuurka waxa loogu daray ay tahay "cause" cay badan baa ku jirta ayaa looga talagalay.

17) **Xil. Cabduqaadir Cabdiraxmaan Dhure:**

Mahadsanid guddoomiye. Bismillaahi Raxmaani Raxiim, maaddaama waqti danbe aan joogno, qodobbo ama si kookan ayaan rabaa inaan u dulmaro Inshallaahu Tacaalaa. Marka koowaad, dooddaan waqtiga dheer qaadatay Cutubka koowaad 9 kaan qodob, waxaan halkaan ka dareemi karaa ahmiyadda iyo baaxadda ay leedahay shaqada inoo taalla ee inoo dhimman ama na hor taallo.

Arrinta kale, dastuurkaan iyo shaqadiisa waxaan u maleynayaa in aysan ahayn mid dadka lagu kala geynayo ama midnimada ummadda Soomaaliyeed lagu dhaawacaayo. Waxaa jira siyaasiyiin iyo dad farabadan oo arrintaasi si qaldan uga turjumaayo bulshada. Aniga waxaan aamminsanahay ama aan arkaa dadkaa ayaga ah balaayada u qeylo dhaaminaayo in ay abuurayaan bulshadu in ay ayagu kala irdhowdo, ama in waxa weeye midnimadii ummadda iney dhib gaarto iney abuurayaan. Intaa markaan ka soo tago. Guddiga waan u mahadcelinayaa labada guddi waxaan kula talinayaa dastuurkaan waxaa la rabaa inuu noqdo sharciga waddanka. Sidaasi daraadeed, qoraalka sida xilibaanadii iga horreeyay ay dheheen waxaad arkaysaa laba kalimo oo isku xiran iyo ka badanba, qoraalka marka intaa inuu ka qurux badnaado ama ka habboonaado oo qoraal dastuur lagu qori karo inuu noqdo ayaa aad iyo aad muhiim u ah. Sidoo kale, buugaagtaan loogu talagalay xilibaannada ilaa "archive" yadaan tagnay in aan helnana waan nagu adkaatay waan waynay ilaa aan annagu soo daabacanno oo aan meelo u tagnay. Haddii ay heli waayaan buuggii loogu talagalay in ay sharciga ka aqriyaan ayaduna waxaad mooddaa iney culeeys tahay.

- **Qodobka 1aad:** Mudane guddoomiye, Jamhuuriyada Fedaraalka markii la yiri qodobka 1aad, Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaal ah Muslim ah, aniga waxaan qabaa in la yiraahdo Islaam ah sida saxda ah xilibaannadii hore ay baraarujiyeen sidaas. Ilaahay baa wuxuu leeyahy **إن الدين عند الله الإسلام.** Islaamkaa in la qoro ayaan qabaa islaamka markii laqey binaayo waa uun labo, waxaa la yiraahdaa "sunni ama shiico" **suniga waa in halkaan lagu qoro** maddaama sunni aannahay. Sunniga in lagu daro waa sax. Mad-habka Imaamu Shaafici shacabkeennu waa heystaan, culimaduna waa aqriyaan, laakiin in lagu qoro dastuurka, waxaad moodeysaa madaahibta kale inta aamisan Maalikiyada, Xanbaliyada aaminsan in ay culeys ku noqoneyso ayaad mooddaa. Markaa ma qabo aniga in lagu qoro mad-habka Shaaficiyada hadii aan la oronaynin dowladda ayaa qaadanaysa madhabka shaaficiga. Tusaale ahaan, arrimaha caddaaladda, guurka, waxyaabahaas marka ay dowladu u baahato waxa ay ka dayaneyso waxa ay noqoneysaa mad-habka Shaaficiga. Tusaale ahaan, guurka marka aad tagto maxkamadaha caddaaladda adduunka, markaa takto wadammada Islaamka waxey ku leeyihiin mad-hab ay ku dhaqmaan oo gooni ah. Kaas ayaana maxkamadda yaalla, laguugu socodsiinaya, qodobkaas intaas ayaan qabaa.

- **Qodobka 2aad:** Islaamku waa diinta Dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaaliya. Maddaama waqtigu uu yar yahay, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed meelaha ay ku qoran tahay oo dhan waxaan qabaa in lagu daayo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, **sida ay ugu qorneeyd dastuurkii hore** ee loo beddelay in lasoo celiyo. Diinta dalka in lagu kabo diinta dalka, dadka iyo dalka Soomaaliyeed, saddexda in laka reebin oo lagu caddeeyo ayaan aamminsanahay.

- **Qodobka 3aad:** Mabaadi'da ama isla Qodobka 2(3), waxaa reebban cayda Diinta Islaamka waa qodob aad iyo aad muhiim u ah. Diinta Islaamka in la caayo iyo diimaha kale in lacaayo waa sax oo qodob dastuurka ku habboom ayaan qabaa in uu yahay fakar ahaantayda. Waliba waxaa sii dheer maanta "social media" dadka ku jiro waxay arkayaan dhallin yaro soomaaliyeed oo diin cay intey ka bexeen Ilaah iyo Rasuulkiisa caayaaya ayaa "social media" ku jiro. Halkaan waxaan qabaa in faqrad lagu soo daro oo ah diinta Ilaah baa noo soo dajiyay, rasuul buuna u soo dhiibay. Cayda diinta kaliya ma

aha ee ,  cayda Ilaahay iyo cayda rasuulka intuba iney reebban tahy, qofkii arinkaa ku kacana Shareecada Islaamka waxa ay ka qabto ayaa  la marsiinayaa  sidaa loo qoro ayaan qabaa.

- **Qodobka 3(5):** Ee ka hadlaaya haweenka. Haweenka mooshin bey keeneen waxeyna ka hadleen boqolkiiba soddon ( 30%) in la siiyo xilibaannadii hore sida ay dhaheen, wixii aan Shareecada Islaamka aana gaf ku ahayn dumarkeenna in la siiyo oo loo qoro waan qabaa. Sida loo fulinayo iyo sida ay noqoneyso  sifa wanaagsan  lagu qoro ayaan qabaa. Gabdhahana iney dagaal noqoto, gabdhuhuna dagaallamaan annaguna weerar iyo weerar celis inaan noqonno wax sax ah habayaraatee maahan. Waxaa muhiim ah in aynu annaga wax u oggolaanno intii beel caalam "UN" iyo hay'ad kale in ay gadaal ka maraan la dhihi lahaa, waa ilaaliya, xuquuqda dumarka ilaaliya la dhihi lahaa , inaan ilaalinno xuquuqdooda, matalaaddooda siyaasadeed aan siinno aad iyo aad bey u wanaagsan tahay.

- Mudane Gudoomiye **Qodobka 6aad**  ee ka hadlaya calanka iyo astaanta qaran iyo howlahaa. Astaanta iyo calanka in wax laga taabto maaha sidooda in loo daayo weeye. Duca halagu daro markaa tiraahdid caalamul islaami markaad eegtid  wadammo badan oo kamid waa yartahay wadan ay duco ku jirto. Duco muhiim maahan, waxaa muhiim ah calanka iyo heestiisa markaad eegtid in ay astaan qaran tahay oo saan u qoran tahay. Tilmaamta marka laga bixinayay ereyga "bey'cad" ma fahmin. Laakiin heestiiba waxey leedahay "qolobaa calankeedu   waa ceynoo calankeenu waa cirka oo kale "marka tilmaamta la bixinayo waa cirka oo kale la dhahay maxaa dhib ah ka dhacaayo. Dadkii waa wada fahmayaan "bey'cad" kaan la fahmi waayay magaran karo. Meel waxaa jirta geyiga ah aniga deegaankeyga ka mid ah "bey guduud" baa la yiraahdaa, magacaasbey leedahay  carradeeda wey guduudan tahay. Marka, bey-cad haddii la yiraahdo, waxaan u maleynaa wax blue khafiif ah in loola jeedo, laakiin ay noqoneyso nooc kale, **bey'cad ka in la saaro ayaan qabaa** calanka cirka oo kale inu yahay uun in lagu caddeeyo.

- **Qodobka 8aad:** Oo ka hadlaaya Shacabka iyo Jinsiyadda, faqradda 4aad, diidmada laalista iyo ka -qaadista jinsiyada laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed waala tiray, **sidii ay aheyd in halkan loogu soo celiyo oo ay sidaa ugu qornaato ayaan qabaa.**

- **Qodobka 9aad:** Mudane guddoomiye Magaalo Madaxda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa la yiri, waa Muqdisho, waa sax. Maqaamkeeda waxaa la yiri waxaa looga hadli doonaa Cutubka 5aad, asbaabta haddii la sheegi lahaa wey fiicnaan lahayd oo qodobkaa 1,2,3 ayaan dib ugu dhignay. Haddii ley dhahaayo wax asbaab ah meesha laguma soo qorin. Waxaan rajeyneynayaa oo anigu aan jeclahay Qodobkan 9aad faahfaahintiisa maqaamka Mugdisho in uu ku jiro Cutubkaan 1aad ayaan jeclaa.

**Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" - Guddoomiyaha Golaha Shacabka**
**oo soo xidhay kulankii 15aad ee labad aqal.** Xildhibaanad iyo senatarada gudoonka Meesha ku cidloobay waad mahadsantihiin, meeshu waa meel dadka dulqaadkooda lagu baran karo weeyi, dadkii dulqaatay waan u madacelinayaa. Doodii inoo socotay cutubka 1aad ee gudiga

dastuurka ay inoo soo gudbiyeen labadiisa qaybood maanta way inoo dhamaatay si Sharaf badan inoogu dhamaatay, waxaan lagu wareejinayaa doodii sida uu habraacu ina farayo guddiga qaabilsan ayaan ku wareejinaynaa, iayga ayaan ka sugaynaan kana codsanyanan inay ku soo dadaalaan, iyagoo wixii nurux ah iyo wixii siiqo toosin ah wixii xildhibaanada labada aqal soojeediyeen ku naashnaashiyey ayagaa nagu soo celin doono.

Markaa xildhibaanadeedna sharafta leh aad iyo aad baad u mahadsantihiin shaqo fiican baa la qabtay. Barito wataad maqlayseen shir aan caadi ahayn ayaa loo balan sanyahay aad iyo aad baan idinku mahadcelinayaa, guddiga waxaan leenahay shaqadii dheeriga ahayd la idiin doortay ku soo dadaala, xoghayaashana waxaan leenahay u gudbiya dhamaan hay'adihii ay khusaysay in loo gudbiyo laga soo bilaabo madaxweynaha, xukuumada, maamulo goboleedyada, maxkamada kuli sidii habraacu ina farayey, dhamaantood waa saxiixnay waxaan rabnaa in la wada gaadhsiiyo hay'adihii talo bixinta laga rabay aad iyo aad mahadsantihiin shirkiina waan inoo xidhanyahay.

**Diyaariyey:**

(1) Abdimajid Abdisalan Mohamoud
(2) Mustafe Mohamed Abdi
(3) Abdiwaaxid Iman Mohamed
(4) Ali Mohamed Rooble
(5) Yuusuf Abdilahi Hassan
(6) Abdiwahid Iman Mohamed
(7) Khalid Mohamed Deheye
(8) Mahad Abdikarim Jimale
(9) Dayah Ahmed Mohamed

**Tifaftiray:**

(1) Mohamed Deheye Ismail
(2) Ahmed Ali Mohamed
(3) Fahad Mohamed Omar

**Hubiyey:**

(1) Sen. Said Abdi Hussein
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

(2) Abdulkadir Mohamed Hassan
Xoghayaha Guud ee GMDHD

**Oggolaaday:**

(1) Avv. Burhan Aadan Cumar
Guddoomiyaha GMDHD.

(2) Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review
and Implementation Commission

KM-0, Degmada Shibis, Muqdisho – Soomaaliya

www.icric.gov.so